215

# DALKAYGA iyo DADKAYGA

XULKII KHUDBADIHII JAALLE SIYAAD
M.G.S.K. 1975



JUUNYO 1977

**Waxa soo saaray** :
Wasaaradda Warfaafinta & Hanuuninta Dadweynaha

F.A.

Jamhuuriyadda
Demoqraadiga
Soomaaliya

# DALKAYGA IYO DADKAYGA

## Xulkii Khudbadihii Jaalle Siyaad M.G.S.K. 1975

Waxaa soo saartay:
Wasaaradda Warfaafinta
iyo Hanuuninta Dadweynaha

Muqdisho
Juunyo, 1977



Jaalle Maxamed Siyaad Barre
Xoghayaha Guud ee X.H.K.S.
Madaxweynaha J.D.S.

# A R A R

Jaalle Maxamed Siyaad Barre Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Madaxweynaha Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliya waxaa caado u ah had iyo jeer in uu dadweynaha Soomaaliyeed toos ula hadlo, una jeediyo khudbado murti leh xigmad iyo daacadnimo ku dheehan tahay.

Waxay khudbadahaasi kaalin weyn ee aan la qiyaasi karin ka qaateen kicinta, baraarujinta, Hanuuninta iyo Sare u qaadidda garashada iyo wacyiga siyaasiga ah ee shicbiga Soomaaliyeed, waxayna runtii u tilmaamahayaan, tusahayaan Dadweynaha Danahooda xagga siyaasadda, Dhaqaalaha iyo Bulshadaba.

Khudbadahaas Jaalle Siyaad waxay caan ku yihiin sahlanaan, Caddaan, Xeeldheeri iyo koobniin, waxayna u ifiyaan dadweynaha Soomaaliyeed waddada dhismaha Bulshada cusub ee Hantiwadaagga ah, Bulshada tabcashada, sinnaanta, caddaaladda iyo horumarka si ay u xaqiijiyaan himilooyinka kacaanka, una hirgeliyaan Barnaamijka iyo Dastuurka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed. Sidaas darteed waxaa sharaf u ah Wasaaradda Warfaafinta iyo H. Dadweynaha in ay u soo bandhigto Shicbiga Soomaaliyeed khudbadahaan laga soo xulay khudbadihii qaayaha lahaa ee Jaalle Maxamed Siyaad Barre uu u jeediyey shicbiga Soomaaliyeed Sannadkii 1975.

Waxaan rajeynayaa in qof kastoo Soomaali ahi nasiib u yeesho in ay gaaraan khudbadahaasi, uuna akhristo si uu uga faa'iidaysto, ugana faa'iideeyo dalkiisa iyo dadkiisaba.

Wasiirka Warfaafinta iyo H. Dadweynaha.

Jaalle Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan.

# TUSMO


| | |
|---|---|
| Kobcinta garashada siyaasiga ah iyo kaalinta Warfaafinta | 1 — 22 |
| Abaartu waxay ina kala bartay Cadawgeenna iyo Saaxiibkeenna | 23 — 37 |
| Duullaan lagu qaaday Cadawga Shicbiga Soomaaliyeed | 39 — 57 |
| Sannadguuradii 4aad ee Ubaxa Kacaanka | 59 — 79 |
| Tababbarkii Koowaad ee Hantiwadaagga | 81 — 93 |
| Sinnaanta Ragga iyo Haweenka | 95 — 110 |
| Halganka Dhallinyarada Soomaaliyeed | 111 — 128 |
| Iid Wanaagsan | 129 — 135 |
| Same iyo Xume | 137 — 151 |
| Bare sare waxaa noqon kara ruuxii karti iyo aqoon u leh | 153 — 162 |
| Tartan Dhaqaale | 163 — 171 |
| Dhismaha Bulshada | 173 — 187 |
| Waa in ay soomaaliya fikradda ka xorowdaa | 189 — 202 |
| Haddii kalsooni la helo wax aan suura geli karini ma ay jiraanniin | 203 — 216 |

# Kobcinta Garashada Siyaasiga ah iyo Kaalinta Warfaafinta

KHUDBAD JAALLE SIYAAD KA JEEDIYEY GOLAHA MURTIDA 1975, KUNA SAABSANAYD HAWSHA XAFIISKA SIYAASADDU U QABAN LAHAA SHICBIGA SOOMAALIYEED IYO SANNADGUURADII 2AAD EE WARGEYSKA XIDDIGTA OKTOOBAR. 21.1.1975.

Jaallayaal dhammaantiin waad salaaman tihiin. Waana aan idinku mahadinayaa aniga iyo Jaallayaalka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayayaasha. Intaba sidii jaallannimada ahayd oo aad noo soo dhoweyseen.

Sidii halkaan looga sheegay, shirkan caawa ahi wuxuu ku lug leeyahay in laba xus mid laga dhigo. oo midna uu yahay hawshii siyaasadda ahayd ee sannadatan 1975ta Xafiiska siyaasaddu uu u qaban lahaa dadka Soomaaliyeed. iyo xuskii maalintii ugu horreysey ee af Soomaali lagu dhigay jaraa'idka. isagoo qaranku faafinahaya afkiisa· iyo hiddihiisa iyo dhaqankiisa· waxayna taasu ku toosan tahay wax aan micno la'aan ahayn. Waxay dadka maskaxda laga seexiyey oran jireen miskiin aan dantiisa aqoonninu waa ahalu naar, saas bey oran jireen kuwa maskaxda laga dulleeyey. Hadalka miskiinka la yiraahdo ee beentaa. ee dadka lagu lumiyo, maskax miskiina ayaa jirta, ee dad miskiinuu ma jiro.

War waxaa weeye waqti iyo dhaqaalo, wax badan baa markii kastoo la shiro ay shirkaas wax badanu ka qabsamahayeen, haddana ku dhex laallaaban oo ku baxaya. Wa-

xaa markaa lagama maarmaan ah in wixii leysu geyn karoba, oo lagaga baxsan karoba, ama hawl badan oo laga kaaftoomi lahaa, haddii mar keliya la qabto, ama xoolo badan, waqti badan oo isaguna lumi lahaa, markii leysu keeni karoba in leysu keeno. Taas oo la socota dhaqaalaha waqtigaa, dhaqaalaha dhaqaalihiisa iyo wax-qabashada iyo qiimaha hawlaha intaba.

Saas bey u jeeddaa in aannu kulminnay labadaan xus, waana ka dhigi karney mid caawa, tan kalena habeen dambe, mid kalena maalin kale, wax ku jabnaan lahaana ma ay jireen.

Laakiin munaasibad keliya inaannu ku wada xusno ayaannu doorannay annagoo beekhaaninta waqtiga iyo danta caamkaa, ee tawriga ah, ee laftigiisu u tirsanyahay, sidaasna aannu ku talo geleyno.

Haddii aan aado labadaas xus, bal hadde aan u horreeyo midka siyaasadda, maxaa wacay waxaan qabaa siyaasaddu in ay iyadu saldhiggii tahay, haddii hawlaha loo qabanayo Ummadda iyo dalka ee inta kalena ay ka turjubaaneyso. Sidaa darteed baanna ugu horreynayaa.

### *XAFIISKA SIYAASADDA MGSK*

Xafiiskakan hawshiisu goormay bilaabatay? Muxuuse qabtay? Maxaannuse hadda kula dardaarmeynaa? Aynu sidaa ku fariisinno, si ayan maskaxdu inooga habaabin ama tilmaamuhu inooga lumin.

Xafiiskaan hawshiisu waxay bilaabatay maalintii 21kii Oktoobar oo Kacaanku uu dhashay. Ujeeddada loo abuurayse maxay ahayd? Waxaa loo abuuray markii isaga ahaa, hadba heer ayey joogtey? wax walboo adduunka joogaana maalin walba waxay imaanhayaan horukac iyo isbeddel iyo cayilaad, haddii dadka wataa ayan aqoon waayin sidii ay u sii wadi lahaayeen. Waxaa markii iyada ahayd loo abuuray oo fikradaasu ahayd, ama wixii jirey oo runta ahaaba waxay ahayd in dad badan oo Soomaali ah oo dulmani, oo aan Xafiisyada iyo derbiyaalkaba soo jebin karinu in ay jireen. Waxay ahayd



ha loo abuuro Xafiis magaalada ku dhexyaalla ee aan gaar u lahayn, ciduna ilaalineynin oo qofkii Soomaali ah ee dulun tirsanaayaaba uu tegi karo, kuna qaylin karo, isla markaasna dadka Xafiiskaas loo xilsaaray waajib looga yeelay in ay G.S.K. dhex keenaanniin. Midda kalena waxay ahayd, go'aamada ka soo baxahaya Golaha Sare ee Kacaanka in ay gaarsiiyaan dadka oo ay yiraahdaan : «go'aankaas ayaa soo baxay», una fasiraan, una sheegaan ujeeddada laga leeyahay, labadaas siyaasadood ayey ku socotey.

Muddo ayuu Xafiisku ku socdey, markaasna muddadii markii uu ku socdey hawsha soo baxaysey ee waddanka horudhigiddiisa ahina aad bey maalin walba u sii badaneysey, una sii ballaaraneysey. Waajibku wuxuu haddana noqday Xafiisku in uu sii ballaarto oo hawshiisii ka sii kordhiyo intii horeeto. Markii uu waqti joogey oo hawshii ay ballaaratay, hanuunintii in dadka la gaarsiiyo waxa iyaga dantooda ah, digniintooda ama tilmaantooda. Waxay markaa doontay in Xafiisku uu laamo badan yeesho oo magaalada caasimaddaa uu ku yeesho, isla markiina bannaanka ama Gobolladana uu ku yeesho xarumo uu dadka ka hanuunin karo, kaddibna uu u gudbo Degmooyinka.

Waxaannu marka oran karnaa muxuu u qabtay Degmooyinka haddii ujeeddadiisu taa ahayd? Marka hawshii ballaaratay ayna u toostay tii ahayd dadka dulman dhegeysigooda, ama garsoorkooda, ama Gaarsiinta Golaha Sare ee Kacaanka, markii ay taayu gudubtay, waxaa soo kordhay haddana marar badanna meeshii ka muuqdey dacwooyin badan, ama cabasha badani in ayan ahayn wax cilmi ku fadhiyey, ee ay garashada siyaasiga ah, aaminsanaanta caddaaladda, Ummadnimada Soomaaliyeed maqnaan ay dadka badidooda ka maqan tahay maskaxdooda, in dacwooyin badan oo aan sal lahayni ay soo kordheen. Isla markiina in ay muuqatay dadkii in ay iyagu ay dhibaatadii abuuranhayaanniin, oo marka mujtamicii uu u muuqdey inuu isagu intuu iska reebi lahaa uu abuurto, dhibaato. Waxaa marka loo baahday in la kordhiyo garaadkoodii siyaasiga ahaa, in la kordhiyo isfa-

hamkoodii Ummad ahaanta ahaa, in la abuuro ama la cayiliyo Soomaalinnimadii, in la raadsho in la aaminsiiyo caddaaladda iyo musaawaadku waxa ay yihiin, in la abuuro wadadhaqan habboon oo Ummaddu ay ku wada dhaqanto lana fahamsiiyo.

## *KOBCINTA GARASHADA SIYAASADDA*

Taasu waxay noqotay lagama maarmaan, marka xafiiskii in la ballaariyo oo loo kordhiyo Gobollada iyo Degmooyinka, Tuulooyinka iyo waaxyaha hawlaha gaara leh ee waddanka intaba. Taas baa marka waxaa loogu bixiyey haddana wax ya yiraahdo : «Xiriirinta Dadweynaha». Waxaa isla markiiba timid haddana, dadka wax hanuunin hayaa oo hawshaas ama waajibkaas gudanahaya, waxaa looga baahan yahay iyaga naftoodu waa maxay? Lagama-maarmaan waxaa noqotay kuwaa bal marka hore in la kordhiyo garaadkooda, in la kordhiyo fahamka iyagu ay fahma hayaan Kacaanku meesha uu u socdo, waxa uu doonaayo, Ummadda waxa uu la rabo, danta Ummadda Soomaaliyeed meesha ay jirto, nolosha iyo habka wanaagsan ee dadka aadamigaahu in uu ku dhaqmo ku habbooni waa maxay? Waxay markaa kalliftay in tababarro badan la furo, kuwaas oo isugu jira kuwa tacliin dheer qaata iyo kuwa tababbar gaaban. Waxay kalliftay in la furo xarumo tababbar dheedheer ama tababbar Ummad badanu ay ka qayb geli karto in la abaabulo. Taa waxaa ka mid ahaa Xalane, xarunta hanuuninta dhallinyaradda, waxaa ka mid ah iyaduna xarunta Dugsiga tababbarka Boliiska, waxaa ka mid ah tababarro gaagaaban oo lagu sameeyo guriga shaqaalaha, waxaa ka mid ah tababarro gaaban ama wareegto ah oo laga sameeyo Goleyaalka Degmooyinka, ama ha ahaadeen kuwa caasimadda, ama ha ahaadeen kuwa bannaanka ahe. Waxaa ka mid ah kuwo tababbar khaarijka loogu diro, si dadka heerka tacliintoodu uusan sher ahayn bannaanka loogu diro, waxaa ka mid ahaa dad kale oo wareega, oo adduunka ku wareega, oo habka Dowladnimadu u dhisan tahay, ama bulshada hore u kacday meesha ay mareyso iney arkaan, oo awood u helaan bal adduunku meesha uu u socdo, ee ay ka baxaan maskaxda xiran, ama ku oodan waddan-



kooda keliya. Waxaa ka mid ahaa in laga qeybgeliyo dad badan oo ama dhallinyaro ah, ama haween ah, ama mutacallimiin ah, ama shicibweyne ah laga qeybgeliyo shirarka adduunka lagu qaban hayo, iyo meelaha lagu faalleynahayo danta Ummadda oo ama haween looga hadlahayo oo ama xubintii haweenku ay ka qaadan lahaayeen bulshadooda dhismadeeda, ama dhallinyaro xaalkeed la faalleyn hayo iyo waajibaadka dhulkooda ka saaran, ama lagu faalleynahayo siyaasad kale oo guud, ama mid Qaaradeed, ama mid caalami adduunkaaba, intaas in laga wada qeyb geliyo. Taasuna waxay u dheceysey dhammaanteed in lagu kordhiyo garashada maskaxda iyo fikradda Ummadda Soomaaliyeed, ama u noqon karta hormuud iyo macallimiin, ama hoggaamiyeyaal dadkooda kale oo badan, amba iyaga naftoodaba lagu cayiliyo maskaxdooda iyo garaadkooda aadamiga ah, siyaasiga ah, waddaniga ah iyo fiirada dheer intaba.

Aan marka iraahdo maxaa miraa oo ay dhaleen intaas oo idilu? Waxay dhaleen miro aynu oran karno aad bey u ballaaran yihiin. Waannu ku cilmi leennahay wax kasta oo wanaag ah oo la wado nooc kastaba ha ahaadeene, shaki kuma jiro in dhibaato lagala kulmahayo, iney idaaco la kulmaayaan, iney horistaag la kulmahayaan.

Marka Xafiisku inta uu dhibaato la kulmahayey aad bey u fara badneyd, dul ka wareenkuna aad buu u fara badnaa, wax-yeelladuna aad bey ugu badnayd. Waxay Soomaalidu ku maahmaahdaa «moqorka iyo afka dhuunta ayaa ka war qabta» ayaa la yiraahdaa, anigaa aad uga warqaba runtu sidey ahayd. Waxayna kallifeysey marar badan in ay inoo muuqato dadkannaga kuwii ugu qiimo roonaa uguna waddanisanaa, ugu ikhlaasanaa, ugu ikhyaarsanaa, uguna aadamisanaa uguna nadiifsanaa in aannu aragno iyaga oo xabbad ama waran dhabarka looga hayo, Wax badan baannu la soo kulannay oo ama ay taasu kalliftay. Soomaali-ku-dhuunte been u dhisay oo isagu abuuray, male uu wada allifay, balaayo uu isku toosiyey, ninkii la hor keeno oo iska mustaqiina, xog ogaalna aan ahaynu uu run u qaadan karey, amba kaa hantiwadaag-ku-dhuuntaha ah, ama Soomaali

ku-dhuuntaha ah, ama aadami ku dhuuntaha ah. Micnuhuna waxaa weeye intaa midna ma aaminsana marka aan leeyahay «ku dhuunte», wuxuuna aaminsan yahay keli ahaan wax-yeello iyo xumaan. Haddeyan saas ahayn maba isu quureen in uu xaqdi ku dhaqaaqo, waxaa la yiraahdaa : «wadaad loo sheeko xumeeyey waa mas'alo habaabaa», dad badan oo fiican oo ikhlaasa, kii dadka ugu naseexsanaa ama ugu fiic-naa bahal looga dhigay oo warmo loogu dhiibey waa dhici kartey.

Inkastoo dhibaatooyinkaas faraha badan ay dadkaas Xafiiskaas hawshiisa qaabbilsanaa ay soo mareen haddana is-weydiini waxaa weeye muxuu dhalay Xafiiskii? Waajibaad-kii ka saarnaa dalka, ama kicinta iyo hanuuninta Ummadda, habka wada-noolaashada fiican ee caafimaadka qabta, wa-laaltinnimada ah, jaallannimada ah, aadaminnimada ah, Soomaalinnimada ah, ilaa doorkee buu ka ciyaaray? Bal had-de aynu niraahno, Waxaan oran karahayaa halkaan ma ku tirin karo, waxaana garan karahaya qofkii maskaxdiisa dib geeya 21kii Oktoobar ama 20kii Oktoobar 1969kii Ummad-du heerkii ay joogtey, ee ay ka joogtey nabadgelyadeeda, ka joogtey dhaqaalaheeda, ay ka joogtey is-fahamkeeda, ay ka joogtey aadaminnimadeeda, ay ka joogtey Soomaalinnima-deeda iyo heerka maanta ay joogto, ninkii labadaa inuu isku xiro awood u hela baa garanhaya. Kii shalay wixii uu cunay aan xusuusaneyn waxba weydiinmeyno ee raalli hayska ahaa-do, hana iska hadlo ayaannu leennahay.

Waxaan marka ammaan u jeedinahayaa dadkii Xafiis-kaas hawshiisa ka qeybgaleen hab kastaba hawga qey galee-ne, oo xaqiiqo ahaan markii aan u tilmaamo, ma aan jecli qof inuu gaar ahaan jeebka ugu rito wuxuusan lahayn, ama qof kale wuxuu leeyahaye, ee aan hubo dad dhallinyaro ah, in ay ahaayeen hooyooyin, iney lahaayeen shaqaale, iney la-haayeen culumo, iney ahaayeen dad aad u fara badan, oo na-cabka waxmagaradka ahu uusan awood u heli karin inuu saas u sii fiiriyo, laakiin anigu aan ku cilmi leeyahay in ay kuwaas yihiin.



Kuwaas oo ahaayeen kuwii u kasay sida hagaagsan ee qumm-an ee danta Ummadda Soomaalida ah iyo danta aadaminnima-da ahuba meesha ay jirto, oo garan karaayey ujeeddadeeda.

## *BUR IYO BIYO*

Waxaan u gudbaayaa, maxaynu haatan fareynaa? Wa-xaynu haatan fareynaa waxaa weeye, hawshii aannu soo hay-ney 3 sano Jaallayaal waxay ahayd mid ku dhisneyd qiimo waddaniya, qiimo aadamiya, qiimo baraarujin iyo kicin Um-maddeennaa, ee cilmi kuma ayan dhisneyn markaannu run-ta u dhacno. Qorsheyn iyo jaangooyo saan u sheegahayo, ee ku dhisan xisaabaad ma ayan ahayn. Wixii maanta ka dam-beeya waa in wexeennu cilmi ku dhisnaadaan, waa in ay leeyihiin tilmaan sanadii loo yaqaan, qof walba oo haw-shaas yaqaan ama haya inuu u fuliyo waajibaadka la saa-ray, sida loogu qoray waa in uu u fuliyaa. Waxaa weeye shantii sannadood weynu oggoleyn danna weynu ka lahayn dadkaas Soomaalida ahi in uu isdhex cararo, oo isku dhex bulhaamo, oo qofna aan la fiijinnin ee la soo dhoweeyo. Wixii hadda ka dambeeyaa waxaa weeye in aynu u kala baxno bur iyo biyo, waddaninnimada iyo aadaminnimada midka aamin-san, wada-noolaanta midka aaminsan, midka ay daacad ka tahay Soomaalinnimadu iyo mideynteeda meel ay joogtaba, iyo khaa'inka dhugdhuglaha ahu waa in ay hadda kala ba-xaanniin, waqtigiisii waa dhammaaday dhugdhuglaha. Ma-xaannu u leennahay saas? Waxaannu u leennahay, shan san-nadood ayeynu soo dhoweyneyney, aynu waanineyney, aynu wacyi ku hayney, aynuna u tilmaameyney waddada xa-qa ah oo isagana dantiisa ah Ummad-weyntana danteeda ah, Soomaalidana nolosheeda iyo sharafkeeda ah. Ma garannin, weli waa dhugdhug leeyahay, marka maaha inuu hadda ina-gu dhex jiro. Inta isku aaminsan Ummadda Soomaaliyeed maslaxaddeeda ayna ka dhab tahay ee maslaxaddiisa iyo tan maslaxadda Soomaaliyeed ayan u sinneyn, oo markuu mas-laxaddiisa haystana guulwade Siyaad iyo ina adeer been ah yiraahda, markii maslaxadda Ummadda Soomaaliyeed oo khali yuhu ay soo dhacdona, haddey doonto ha dhacdo oran-haya, waa ineynu kala saarnaa. Kaasu meeshuu aadahayo ha

aado baannu leennahay. Waxaa weeye in aynu u kuur galno, waxaa weeye ineynu dhuuxno qof walba ninka uu yahay, shantaas sannadood muxuu soo qabtay, shantaas sannadood Soomaalida muxuu u taray? Imisaa buu wax lug gooyey, imisaa buu fidno abuuray, imisaa buu isku diray, imisaa buu wax dhimay, iyo imisaa buu wax taray? Waana in ay xisaabtan ku socotaa. Qofkii lahaa fadliga waxtarka waddankiisa iyo Ummaddiisa waa in uu xuquuqdiisii helaa, waa inuu dhoweyn helaa, waa inuu ka agdhowaadaa Xafiiska iyo waddanka hoggaamintiisa intaba, iyadoo qof uga sokeeyaa uusan jirin. Kii wax u dhimayna waa inuu gees iska istaagaa, hadduusan wax dhin dambe la imaanna waa inuu bulshadiisa ku dhex jiraa, waa inuu dad noqdo, hanuunaa, afmiinshaarnimada iyo dhugdhuglennimadana uu ku beddelo ikhlaasnimo iyo aadaminnimo. Waa inoo saase ha inoo yimaado hadduu doono.

Waxaynu kale oo aynu leennahay dadka mas'uuliinta ah oo hawsha loo xil saaray waa in ay hawshooda ku wadaan si ikhlaas ah. Ikhlaaska micnihiisuna waxaa weeye, si eex-la'aa na, si aarsasho-la'aana waa in ay hawshooda u fuliyaan si daacadnimo ah, Soomaalinnimo ah, bulsho caafimaad qabta, caddaalad ku dhisan, tabcatana ah, caddaalad iyo sinnaanna ku dhisan. Ninkaasu waa inuu gartaa waajibkiisa in ay tahay hawsha loo diray ee uu qabanaayo iney taas tahay. Haddii uu muuqdo nin xilkaas la saaray ee ku jowr falaya ama ka been sheegahaya waa inuu u duulo sidii banooni la haraatiyey oo Xafiiska ka dhex baxaa. Hadduu karti iyo awood xunyahayna tuurmo uma baahna, laakiin meeshii u dherer le'eg yahay waa in la geeyaa, waa in aan loogu soddohinnin howl uusan qaadi karin ee isaga ka weyn. Midda isaga le'eg waa in la geeyaa. Hadduu socon waayona waa in uu noqdo nin aan dantii Ummadda iyo horusocodkii Kacaanka is-hortaagin oo uusan ahaannin dhagax intaas horyaalla, ee waa in laga hor qaadaa. Waa in qofkaasu uu noqdaa nin hawlkar ah, waa inuu noqdaa nin u bisil ujeeddada Kacaanka, maamulkiisuna waa in uu ahaadaa kan sharciga ama sharciyaalka iyo mabaadii'da Kacaanku ku dhisanyihiin. Waa in



uusan noqonnin mid isagu jeebka kala soo baxaya caqli isagu uu leeyahay amba uu ka soo minguuriyey mid ajnabi leeyahay, amba uu dhaadhaca meelahaas uu ka maqlay uusan ku dabbaqin hawshaas Xafiiska Siyaasadda ee M.G.S.K. Mana ku dabbaqi karo waxyaabahaas dhalanteedka ah .

Xafiiskaas dadka ka shaqeeya hawshoodu waxa weeye fuliyeyaalka go'aamada iyo siyaasadda ka soo baxa labada Gole ee waddanka hoggaankiisa maanta haysa, waxaana weeye dabbaqayaalka mabaadii'da siyaasiga ah, mujtamaca bulshada ah ee Ummadda Soomaaliyeed ay leedahay, sidii loo tilmaamay, ee ma aha sidii isagu uu rabo. Waxaan ka digahayaa kana hortegahayaa dadku ineyan durbaankii hadda ka hor aannu u dul qaadan jirrey, ineyan isku dayin mar labaad in ay soo celiyaan, haddey soo celiyaanna ay u socoto Xafiiska dadka mas'uulka ah, ayaa xilku fuulahayaa, mana aha markii leysku cafiyi jiray oo waa lagu qabanhayaa, runtiina saas weeyaan. Maskax waa inuu ku socdaa xukunka Ummadda Soomaaliyeed, waana inuu mabda' ku socdaa waa inuu dariiqa mabda'a caalamigaa ku socdaa, ama ah caadada Soomaalidu ay leedahay ee bulshada ah, ama mabda' diiniga ah. Wuxuu dhabbe la yaqaan waa in ay ku socdaan. Markaan leeyahay Soomaali-xume waxaa weeye kan isku guda wada dantiisa iyo danta caamkaa ee Ummadda Soomaaliyeed, waxaa weeye kan isku guda wada dan qabiil iyo tan Ummadda Soomaaliyeed. War ma isgeli karaan? Waxaa weeye kan isku guda wada kooxkooxeynta oo wax kala wada, waxaa weeye kan dadka intii uu ururin lahaa oo isku duwi lahaa oo heshiisiin lahaa, oo gar xaqa u qeybin lahaa, midka foodda isu geliya. Markaas waxaan leeyahay hawsha waa in wadiddeeda ay saa ugu dhisnaataa, siyaasad cad iyo mabda' cad. Wuxuu ku habeysnaa maalin walba maalinta ka dambeysa danta Ummadda Soomaaliyeed in lagu habeeyo, looguna dagaalgao. loona jiiro dhibaato kasta oo imaan karta. si loo gaaro bulsho, Soomaali ah, xor ah, mid ah, simanna, tabcata ah ee caddaaladna ku dhisan. Wataa yacni tilmaantii ay wadatey.

Maalin walba maalintii ka dambeysey waxaynu qaa-

deyney tillaabo, sharcina weynu dejineyney, go'aan siyaasi-yana weynu qaadaneyney, ninkii waxgarad ahi dib ha u xi-saabtamo, inteynu go'aan qaadannay. Waddankakan kala bar oo bar wuxuu ku dhaqmi jirey sharci ajnabi ah. Kacaan-ku markuu dhalanaayey, caawana sharci ajnabi ku lug leh oo weli baaqi ah waxaa ka mid ah mid yar oo beeraha ku saab--san oo aannu dhammeyn doonno dhowaan haddii alle id-mo. Maalin walba waxaynu u dejineyney xagee dhiman, oo aan waajibaadkii Kacaanka kaga aaddanaa aan la qabannin? Ma tirin karaa inteynu ka bilaawnay? Cir buu leeyahay, dhul buu leeyahay, nabadgelyuu leeyahay, dhaqaaluu leeyahay, tacliin buu leeyahay, caafimaad buu leeyahay, bulshuu lee-yahay. Ma tirin karaa anigu? Nimanka inoo haya sharciga waan rajeynahayaa mar dhow iney inta sharci ah oo soo bax-day ee u soo baxday bulshada badan ee Soomaalidaa masla-xaddeeda, loogana oodjiidahayey ama lagu horistaagahayey daallin-xumaha weligiis isagu is-hor istaagayey bulshada ba-dan danteeda.

### *XEERKA QOYSKA*

Haddaan u gudbo taas, yacni go'aankaas siyaasiga ah oo ka mid ah intii go'aan ahayd oo aannu soo qabannay shan-tii sannadood oo aynu ugu daneyneyney Ummadda Soomaa-liyeed, ayuu ka mid ahaa. Hadalkaan iri haddaan halkan idiinku celin hayaa. Wuxuu ahaa : labada Gole, Golaha Sa-re ee Kacaanku iyo kan Xoghayeyaashu waxay gaareen go'aan ku saabsan mabda'aas dheer oo aynu soo wadanney oo ahaa midnimada, sinnaanta, iyo caddaaladda, iyo tabcashada Um-madda Soomaaliyeed, iyo horukeceedaba. Hadda waxay gaar-tay iyadoo maanta ay tahay maalin aynu ku abbaareyno dar--veelidda iyo horudhigidda haweenka adduunka, innaguna ku-weenna aynu ku taagnay inaanu daryeello dantooda iyo ho-rukocooda in sharcigii uu soo baxay, dhisahayey waxa la yi-raahdo axwaalu sharciga amaba sharciga reerka. Ha soo bo-xo. Markaas meelaha uu xasaasi noqon karey waxaa ka mid ahaa metelan qiimaha la kala siinayey qofka haweenka iyo qofka ragga oo la kala yareynaayo. Markaasna khaas ahaan



taabanayey xagga dhaxalka iyo dhaqanka kale oo la weheliya ee aad ka arki doontaan jaraa'idka markii uu ku soo baxo, xubin walba meesha uu ka taabanhayo. Aad buuna u ballaa-ranyahay.

Ujeeddadannaaduna waxaa weeye Ummadda Soomaali-yeed inaanu heerka maanta ay mareyso, mustawaha ay joogto, oo ay tacliinteedu joogto oo ay kacsanaanteedu ay joog to, oo garaadkeedu joogo ,wax u dhigma ineynu ku dhaq-no. Sidaas darteed, go'aankaas siyaasiga ayaa la gaaray. Waxaan iri markaan ku xijiyey, laakin wadaad-xume mu-xuu oran doonaa? Waa kaa hadalka meesha laga khaldaa-yaa lagana xumeynayaa, illeen isaga waa u caado inta xu-meyaal ah ee aan tirinaayey, tillaabadii la qaadoba iney dha-gax hordhigaan, intii kartidooda ah. Maxay oran doonaan baan iri· Waxay oran doonaan baan iri : «diintii baa la fara-geshay, durbaanna waa tumi doonaan, war ka kacaay war ka kacaay, balaa dhacdayey» wadaadxumuhu sidaas buu oran doonaa ayaan iri. Culumo ma sheegin, haatanna inaan ani-gu qumanaa baan halkaan ka muujin doonaa. Laakiin wa-daad-xume weligeen nabad ma annaan noqon, haddana ma noqon doonno, maxaa wacay ajnabi iyo isticmaar, iyo daba dhilif ayuu ku noolyahay, kuna shaqeyn jiray, kuna joogi jirey. Kuwaas iyo anigu saaxiib weligeenna noqonmeyno. Waxaan ka joogaa gabaygii ay dhallinyaradu tirineysey ka shaqeysa Raadiyo Muqdisho: «ninkii danta Soomaaliyeed isagu diidahaya derbiga madaxa ha ku dhuftee, maxaa iga galay» bey iga joogtaa.

Diintu waxay ahayd Towrad, waxayna u timid dad cawaan ah, waajibkeeduna wuxuu ahaa in ay cawaannima-daas Ummadda ka saartaa oo ilaahey u soo diray iney fikrad-dooda, iyo noloshoodii maslaxaddeeda in ay koriyaan. Wa-xaana loogu soo dhiibay Nabi Maxamed, caleyhi salaatu wa salaam, markii loogu dhiibayna waxaa la gudboonaatay laba: mid ciidan cadaw ah oo hub haysta in lala jahaado moovee si kalena aan diinta loo socod siin karin, iyo Um-madda mujtamaca bulshadu sidii ay u dhaqmeysey oo caada-

deedii, iyo dhaqankeedii, iyo hiddaheedii oo iyaguna ka horieeday diinta. Maxaa markaa lagu dhaqaaqay? Waxaa lagu dhaqaaqay, cadawgii hubka lahaa ee Dowliga ahaa in la-'a diriro, waa tii intii dagaal ahayd oo nabigu uu maray la tiriyey ama khulafadii laakiin bulshada caadadeedii ma lala diriri karey? Lalama diriri karin Jaalleyaal. Waxay ahayd in yacni ilaahey subxaanahu wa tacaalaa, Nabigii iyo khulafaadiiba in maalin walba la yiraahdo, iyadoo tilmaakhulafaadiiba in maalin walba la yiraahdo, iyadoo tilmaa-nta ilaahey wato, marba saas yeela, saas baa bulshadu ku nta ilaahey wato, marba saas yeela, saas baa bulshadu ku duubmeysaa, saasna hore ayey ugu soo kaceysaa. Maalintii waan xusuusnahaye, waxaan ku soo hal qabsaday war diinteenna miyaad ku aragteen baab leh wax ha la addoonsado? Maya, ha la xoreeyo moovaane. Micnuhu waxaa weeve markii diintu Towradda ahi oo islaamka ahu ay dhalatay waa leys addoonsan jirey waana leysu caddeyn jirey, waxaana lagu shaqeeyey bacdamaa caado qooma ay ahayd, sidii addoonnimada iyo dulliga, bacdamaa ay diinta ka hor ieedeen, in la tirtiro. Markaasaa loo jideeyey dhabbihii looga bixi lahaa oo addoonnimadu ay ku baabi'i lahayd ee caddaalad iyo musaawaad iyo sinnaanu ay ku dhalan lahaayeen.

Waxaan ka soo qaaday, culimadiina way ila fadhidaaye, haweenku waagaa isagaa waa la xabaali jirey, ciiddaa lagu awdi jirey. Waa tii sayidinaa Cumar yiri «dembi aan galay waxaa iigu weyneyd, markii gabadheyda oo iyadu ciidda iga tireysa anna godkeeda aan qodaayey», yacni jahaalannimadu intaas ayey le'ekeyd. Marka bacdamaa mujtamaca fikraddiisa iyo dhaqankiisa ku xiranu ay sidaas ahayd, waxaa la gartay in tartiibtartiib loo soo wado, sidii caqiidadaas foosha xun oo aadaminnimada ku fool xun, diintana ku foosha xun sidey u baabi'i lahayd. Yacni in, taas baan waxaan mar ku keenay, aayaduhu hadba sey isaga soo daba degahayeen, kuwo badan baan iri, boqolkii konton ma aan oran, xaalku sidaa kuma jiro ee iyagaa dhigteen, waxay u dhigteenna ma aqaan anigu, waxaana fiican run in la sheego, ayaa kuwo badani nasakhmeen. Waxaana isweydiis leh, maxay u nasakhmeen? Maxaa loo nasakhaayey? Maa tii hore loo daayo Waxaa loo nasakhahayey wacdigii, iyo hanuunintii, iyo



muslimiintii ayaa korortay oo meel sare ayaa la gaaray, kuwii xaqa ahaa baana loo soo deijyey markii dambe oo dhaqanka runta ahu ahaa.

Bal haddee aan isweydiinno, marka u horreysa, diinta horta yaa ka wakiil ah waddankaan taal? ayaan iri. Maalintii 21kii Kacaanku markuu dhashay baan iri: diintu koontorobbaan dambe gelimeyso», mana geleyso koontorobbaan dambe. Diinta mushtar dambe loogu noqon maayo oo lagu ma mushtari doono, ee ilaahey baa lagu caabbuda hayaa. Ilaa maanta xaggee baynu ka kala goyney innagu? Af miinshaarka warkiisa xagga u dhig, ajnabiga warkiisa xagga u dhig, daba-dhilifka warkiisa xagga u dhig, isticmaarka warkiisa xagga u dhig, innaguna muraad kama lihin maantoo dhan hadduu gabyahayo. Waana ku tashannay in ay dagaal nagu heynahayaan, waan u diyaar nahay in aannu la dagaallanno. Waa tahaye yaa ka wakiil ah diinta? Anigu waxaan qabaa Dowladdu in ay ka wakiil tahay, mas'uuliyadduna in ay iyada saaran tahay.

## *WADAAD-XUME*

Hadda ka horbaan waxaan iri : wadaad-xume iyo wadaad-fiicane, hantiwadaag-xume iyo hantiwadaag-fiicane, wadaad-yare iyo hantiwadaag-yare», lixdaas baan u kala qeybiyey, bal u fiirsada, waxaanna idinka baryahayaa in aad dhuuxdaan micnaheeda. Intaa markaan soo taataabtay, culimada waaweynna aan u deyn doono, iyagu iyagoo xaqa ku taagan, diintana ku taagan, iyagoo waddaninnimadana ku taagan, iyagoo culimannimadooda runtaa ku taagan, in ay si munaasiba u fasiraan oo wadaad-xume, dabadhilifka, dibusocodka iyo isticmaarka dadka la jira in ay la hadlaan, iyagaan ka sugahayaa, qowmiyaddii Soomaalida ahayd, iyo aadaminnimadii iyo markii ay isku waafaqaan.

Jaallayaal inta la xiray ama la xukumay imisaa wadaad baa ku jirta? Markaas marka aan idin leeyahay wadaad xume halkaad ku nebcaysan doontaan, wadaad ku ma jiro, waa dhici kartaa hal-hal wadaad-yare ahi inuu ku jiro.

Xaggee laga keenay? Qaar baa sey u saxiixaan magacoodii aqoon waayey, qaar baa aayad inta loo qabtay sheegi kari waayey, yaa soo dirsaday, goormuu diinta ka wakiil noqday, maba yaqaanne, oo micnaheedaba ma yaqaanne? Culimadii waaweyned maannu wax ka aragno haddii diin wax loo dhimay?War culimadii diiniga ahayd oo casiisiga ahayd xaggee baad ku aragteen wax ama la qabtay ama la xiray xaggee ku aragteen? War micnaha idiin baxahayaa marka waa maxay? Sow caddaan maaha, icticmaar iyo daba-dhilifkiisu dagaalkii ay ku qaadahayeen Kacaanka Soomaaliyeed inuusan hore u dhaqaaqin. Ummadda Soomaaliyeed ineyan noolaannin, sow dagaalladoodii noocyaha kala geddisnaa maaha? Kacaanku in uu tillaabadiisii xaqa ahayd qaaday, maxaa wacay dantii dabadhilifka, iyo isticmaarka, iyo dibusocodkuu taabtay. Hadduusan taaban ma uusan hadleen jaalle. Wuxuu u helay awood iyo geesinnimo inuu xaqii istaajiyo ee muujiyo, inuu simo Ummaddiisii ayuu muujiyey. haddeyan saas ahayn, isticmaarka iyo ajnabiga iyo daba-dhilifku ma qeyliyeen ee meel bey iska seexan lahaaveen. Runtiina saas weeyaan. Nin baa yiri, baa la yiri, markii sagaaro hortiisa balaw-balaw ka tiri : «War sagaaro sow ima barato, ma tuurto ma xirto, ma cuno, bal maxay iiga carareysaa, mey meesheeda iska taagnaato», buu yiri. Haatan sow dabadhilifka xun oo la dirsado iyo dibusocodka isticmaarka ka kumiyeysta oo ku xiranu, sow uma bartaanniin Kacaankani inuusan marnaba ka laabaneynin maslaxadda Ummadda. Marba isticmaarku meesha uu naga soo gelahayo waannu ku cilmi leennahay, waana ugu tala galnay in aannu hubkeeddii u diyaarinno, ama ha ahaado sharci, ama ha ahaado ciidan, ama ha ahaado fikrad, maskax fara baan oo inta wax tuujisay, lafa gurtay ee haddana sii lafa gurtay, wax maslaxad ah oo shakhsiya oo ay wataanna ayan jirin ayaa maamulka Ummadda Soomaalida haya, maalin walbana wixii ka soo baxa wax looga daba dhufan karo ma ay ahayn.

Kacaankaanu waxaa weeye mid hantiwadaag ah, waxaa weeye mid waddaniya, waana yaqaannaa waxa Ummadda Soomaaliyeed uu la rabo, mana ka joogsanaayo, mana aha qabiili ee haysku lug goynin. Qabiil waannu dilnay mana soo noqonaayo, tuugii inoo dhuundhuuntana meeshiisa ayaan ugu geli doonnaa. Waxaa weeye inta wacyiga Ummadda shaqaalaha ah, dhallinyarada iyo hooyooyinku ay ka garanhayaan dantoodu meesha ay jirto, dagaalkaas ayaannu ku jirnaa, waana gaareynaa. Ciidanka qarsoon oo mar walba ku biya keenahayana iyagu ma garan hayaanniin, laakiin innagaa tabceyna waana garaneynaa heerka uu joogo. Ma jirto, qabiilnimo ma soo noqoneyso, mana soconeyso. Daba-dhilif dibusocod, hadalka badan oo aan sheegayaa dadka in aan ku tuso weeyaan. Mar labaadkana intey iyagu ku arkahayaan in aan godkaagii sii qodo oo marka xoogaa ciida ka baxsho. Markii aan hadloba xoogaa ciida ayaan godkaagii ka bixin hayaa, marka aad ku xabaalmi doontaana waxaa weeye, marka abuurka aan abuurahayaa uu xoogsado oo kobco, kuna garto, maalintaa iyagaa ku qaban kuguna ridi doona godka. Marka barbarna godkaagii ayaan ka qodahayaa, barbarna Ummaddii ku dili lahayd baan abuurahayaa. Saas baan daba-dhilif ku leeyahay. Soomaali isku dirimeyno oo waannu heshiisineynaa, Soomaali xaqdiyimeyno oo waxaannu ugu dirireyna garsoor iyo caddaalad, Soomaali waanu mideyneynaa, adiguna waad firdhinaysaa Jaalle intaas lidkeed ayaad adigu sameyneysaa. Oo hadde marka ilaahey sow caadil ma aha, sow in aannu kaa adkaanno maaha marka. Waa hadal-ma-doonto in aannu kaa adkaaneyno.

## DAWLADDAA KA MAS'UUL AH DIINTA

Waxaan marka leeyahay Guddiyaalka iyo hooyooyinka markaad saas u hubsateen oo aan si bayaana idiinku sheegay, sharcigeennana aan leeyahay iyo diinteenna nin taaban karaa ma jiro, nin beddeli karaana ma jiro, ilaaliyaha waajibka iyo xaqa loogu leeyahayna Dowladda weeye, iyadaana ilaalineysa, nin kale oo dhex galana oggolaanmeyso, Jaallayaal runtiina saas weeye, quraanka Ilaahayna saas baa ku taalla in aannu annaku ka mas'uul nahay diinta iyada ah, ee nin kaloo ka mas'uul noqon karaa ma jiro. Ninkii isleh ama war la'aan, ama xog-ogaal la'aan waxbaa laga ba'shey

waa noo imaan karaa, ee beentiis weeye ee suuqa durbaan kuma tumi karo, hadduu ku tumo daallin aayadda illaahey dabamaray weeyaan. Wuxuu beenin hayaa: «addeecullaaha waa addeecu Rasuul wa uulul amarkum» buu beenin hayaa. Markii uu isku dayo inuu khilaafo aayadda Ilaahey oo nidaamka iyo horusocodka ummadda Soomaaliyeed uu horistaago, haka yaabin inuu ku nabadgelahayo.

Waxaan marka leeyahay markaad saas hubsateen xaqiiqdii wax ay ahayd, been sheeggiina aad ka jaahil baxdeen, dantiina saad u daafacdaan aqooda marka. Markaannu annagu leennahay dadku ha sinnaado, markaannu annagu u dejineyno maalin walba nidaam madaniya, waa mid aannu quraanka Ilaahey ugu xaq leennahay, ninkii garanayaa ha gartee. Waxaannu leennahay kii yacni wadaad yaraha aan ku sheegaayey, ama diin yaro aan ku sheegahayey ee aan sidiisa kale u xumeyn, waxaan garansiinhayaa, inta waddanka aynu ku dhaqno imisaa baa aayad quraanka ku taalla ah, Imisaa baanse ahayn, Intaa keliya ha garto hadduu caqli leeyahay, ha geeyo maskaxdiisa haddii uu wax garad yahay adduunka islaamka ah. Imisaa qodob ayaa lagaga dhaqmaa diinta waxa ku yaalla, Dhaqanka marka aan sheegahayo ma aha cibaadeysiga, ma aha Alle-aqoonsiga, taasu waajib bey dhammaanteen inagu tahay, laakiin waxaa weeye maamulka Dowliga ah iyo mujtamaca. Bulshadu maalintey hore u socotoba waxaa loo dejiyaa xeer, waana xeerkii. Markaynu innagu metelan miyiga joogno oo labo daqar isku dhufato, ma horey baa sharciga laga geeyaa? Marar badan waa la geeyaa labadii laga waayo in ay heshiiyaan, laakiin inta badan waxay u badan tahay in dhowr jeer ikhyaaru tiraahdo, «war saas yeela, bar baan ka tegey ee adna bar ka tag, heshiis sulux ahna la kala gaaro ee lagu kala baxo, sidaasuna waa xeer. War kanu miyuu san ka mid ahayn xeerarkii aynu ku dhaqmi jirney? Waxaan u jeedaa go'aanka aannu qaadannay xaq weeye, oo diin-ahaan buu xaq u yahay, waajib xaq ah ayaannuna sameynay. Mana oggolaaneyno in na looga leexdo, inuu xaq yahayna waxaa ka mid ah caa'iladii Ummadda Soomaaliyeed ay ka unkantay



ayaannu heshiisiineynaa, iyagii baannu walaaleyneynaa, iyagii baannu is-aaminsiineynaa.

Metelan haweeney 8 carruur ah dhashay, mid meeshaas taagan oo la arkay in loo eryo maaha, oo iyada iyo carruurteeda bannaanka loo tuuro. Taannu leennahay waxaa weeye, Jaalle maaha in aad Ummadda saas u dulleyso, haddii aad saas yeeleyso waa inaad horta xukun aad tagtaa, ee maaha in aad adigu tiraahdo «saddexdaadii dalaaqood ayaan kugu furay». Xaqeedii aaway, nolosheedii aaway, ilmaha noloshoodii aaway? Waxaa weeye tag xukun oo sharci tag ee ku xaqiiji in iyadu ay dambabtey, ha ka caddaato meeshaas, maahine ma aha inaad maallin walba inaad ilmo ku rarto uga dhaqaaqdo. Bal hadde aan ka soo qaado ninku 4 naagood waa guursan karaa baa diinteennu leedahay. Laakiin goorma? Waa mar alla marka uu kafaalo qaadi karo waxa iyadu xaqa ay ugu leedahay. War markaad faqiir tahay oo laba boqolle tahay oo aadan tanba masruufi karin, miyaa 4 naagood kuu bannaan tahay? Dembibaad geleysaaye. Waa markaad kari karto ayaa la yiri, intii kale oo sharuudaadka ahaa ma ka tegeysaa? Naagaha meher lama siiyo. Waxaa la yiri naa intee lagugu mehriyaa? Waxay tiri 50 halaad, markaasaa ninkii la yiri : «ma oggoshahay?, markaasuu yiri : «kolleyba siinmaayee isaga mehri!». Waxaa isweydiis leh meherkaasu bal horta ma ansaxay mase ma ansixin, su'aashu horta taas ayey ka muuqataa, maxaa wacay khiyaanuu ku bilaabay, run ahaantii, yacni guurkii khiyaano ayuu ku bilaabmay. Yacni miyeyan taasu dembi ahayn, ma islaannimaa? Ummad waluba wixii ay rabto ayaa ilaahey siiyaa, Ummad waluba wixii ay damacdo oo kheyrkaa ayey heshaahe bal hadde ogow.

Metelan abaar adag oo xun baa nagu dhacday, laakiin abuurtu maxay dhali doontaa? Wax alla wixii yimaada waxbaa ka soo daba baxa, dhan xooleheennii bey dhammeysay waana xaqiiq dhan dhaqaaleheennii ayey curyaamisay waqti aynu dhisi lahayn. Maxaa wacay wixii aynu ku dhisi lahayn baannu u gudbinnay dadka cayroobey, dhan waa dhici kar-

taa dad cayr ahi intey cudurka iyo balaayada ka imaaneysa, illeen markii macluushu timaaddo cudur oo dhanbaa isagoo geeddiya yimaadee ama mid hore u bukey oo muddo iska sii noolaan lahaa buu mindi raaciyaaye, waa dhici kartaa dad iney inaga baxaan. Laakiin maxaa ka dambeyn doona? waxaa ka dambeyn doona balaayo daa'iman ahi ma jirto. Haddaba maxay noqon doontaa markaa ka dib?. Waxaan aad u aaminsanahay in abaartaanu ina tababareyso, sida aynu dagaal u galno in ay ina bareyso ayaan filayaa, sideynu nolosheenna u daryeeli lahayn in ay ina bareyso ayaan filayaa, sideynu wexeenna isugu duno oo u abaabulno iney ina bareyso ayaan filayaa, waxay ina bareysaa adduunka, saaxiibkeen iyo cadawgeenna ayey ina bareysaa, waxay ina bareysaa Ummaddeena nafteeda kan ikhlaaskaa iyo kan khaa'inka ayey ina kala bareysaa. Waxaynu ku garan doonnaa siyaalaha loo gurmado, waxaynu ku garan doonnaa siyaalaha loogu xanuunsado, waxaynu ku garan doonnaa siyaalaha la inoo garab qabto. waxaynu ku garan doonnaa hawsha aynu qabsanno natiijooyinka ka soo baxa. Waxaan idiinku baaqay hadda ka hor war xooggeenna iyo fikraddeenna iyo awooddeenna aynu isu geyno, oo yay dhicin in walaaleheen baqtiyaan ee waxaynu leennahay aynu u wada gurno, mushaar, alaabo waxa aynu hayno, aynu muujinno gobannimadeenna iyo waddaninnimadeenna, dadkeenna aynu ka hananno inay dhintaan innagoo nool-nool, ayaan idin iri. Jaalle halkee baa Soomaali danteedu jirtaa, kee baa ilaahey u dhow, kee baa waddaninnimo u dhow, kee baa insaaniyannimo u dhow, kee baa Soomaalinnimo u dhow Jaalle?

Waxaan filayaa shantaas sano wixii aan idiin jeedinayey ee aragtideyda ama aan ka turjubaanahayey ragga ku jira Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayeyaasha, iyo kan Ummadda Soomaaliyeed ee ikhlaaska ah, weligey been-been idinlama soo hor istaagin, mana dhici doonto xaqa in aan ka dhuundhuunto. Kamana lihi dan siyaasiya, muraadna kama lihi oo u birtuman mahayo been iyo musaawaad inaan qof ku khaldo. Maya, dan kama lihi, kama lihi in aan noqdo kuwa isticmaarka raalli geliya iyo ajnabigaba. Maya, marka hore



Soomaali in aan raalli geliyo iyo Soomaaliga weeye waajibkeygu. Maahi diinlaawe aan ku cilmi lahayn waxa uu falahayaa haddey kheyr yihiinna inuu ilaah kheyr kaga helahayo, haddey shar iyo balaayo yihiinna inuu ilaahey ciqaab kaga helahayo. Diinlaawe iimaan la' maahi. Waddani xumana maahi, Ummadda Soomaaliyeed iyo waddanka Soomaaliyeed iyagaan u dhashay, iyagaan u joogaa, iyagaan u dhiman doonaa, wax kalena ma rabo. Runta, daacadda, ikhlaasnimada iyo mabda'a saalixa ah ee Ummaddaan Soomaaliyeed danteeda koobi kara waxay ku tahay qof kastoo Soomaali ah waajib inuu garto qiimaha ay leedahay.

Imisaa baa isticmaar na soo haystey? Imisaa baa nala kala gadaayey, imisaa baa nala qeybinaayey, imisaa baa qabiil naloo kala soocahayey, imisaa baa qiimahannaga leysku jebinaayey, imisaa baa rafaad soo maray, imisaa baynu foolxumo aragnay, imisaa baa dharbaaxo isticmaar nagu dhacday, imisaa baan dhagar isticmaar aynu soo joogney? Ma ilaahey baa inagula ballamay bey idinla tahay ama innagu aynu eed ka gallay Soomaali haddeynu nahay ineynu noocaas weligeenna ku jirno? Jaalle maya, ilaahey inoo dhammeystir muruq, maskax, dhul, barwaaqo iyo bad buu ina siiyey qiimo leh, keli ahaan innagaa garan weyney sideynu ilaahey amarkiisa u raacno oo uga faa'iideysanno wixii uu ina siiyey. Marka isticmaar iyo dabadhilifkiisa xun, kuwii isagu uu tababartay oo u hanqal taagahaya koobkiisii iyo qurunkiisii aranjaatada ahaa, jaalle ma kuwaas ayaannu garan weyney in aynu iska celinno oo ummaddeenna habeyno? Waa liidnimo, waa garaad-xumo, ma u oggolaaneyno marnaba Ummadda Soomaaliyeed qiimeheeda aadamigaa ayaa liita iyo garaadkeeda, weligey ma aan oggolaannin. Laakiin shan sano kadib ayaannu isku dayeyney in aannu idin garansiinno rntiinna iyo dantiinnu meesha ay jiraan.

## *HIMILADA KACAANKA*

Soomaaliya waxay ku jirtey xabaal shan sano mar laga joogo, weynuna garaneyney ineyan ciyaar kaga soo baxeynin xabaasha, laakiin marba qaar beynu ka soo saareyney.

Waxaan filayaa shanta sano in ay ka soo wada baxdo, maaha iney wada dheregto weli, laakiin garaadkeedu in uu gaaro siyaasiga ahu. Waxaannu ku hadleynaa in aannu qofka gaarsiinno garaadkiisa aadaminnimadaa, daafacaaddiisa xuquuqdiisa, aragtida dantiisa dhabbaha loo maro iyo farsamadeeda, siduu u barto in uu mustaqillo noqdo, inuu ka boxo in wadaan biyo lagu shubto uu noqdo, inuu ka boxo dabadhilifnimo in lagu sameeyo, inuu ka boxo in isagoo soo jeeda la gato, inuu ka boxo in la khiyaano, inuu gaaro heer sare oo uu dantiisa ku daafici karo, dhashiisa aayeheeda dambena uu ku sameyn karo. Waa taas siyaasadda micnaha aannu uga jeednaa, inuu wadajir ahaan u gaaro himiladiisa iyo hawadiisu in ay noqdaan in adigu aad noolaato, in isagu uu noolaado, inuu kaasu noolaado, in dhammaantood noolaato, maaha dadka Soomaalidaa qaar in ay baqtiyaan. Taasu kuma jirto siyaasaddeenna, buuggeenna kuma dhigna, mana aannu rabno, waxaa weeye Ummadda Soomaaliyeed dhammaanteed in ay noolaato. Haddana isla markii weynu ku cilmi lahayn oo idinkuba waa in aad garataan dadka Soomaaliyeed oo meel kasta iga dhegeysanayaa waa in ay gartaan. Dhiig miirato h a d a l k aa dhegeysanmeyso, ma rabno, maxaa wacay waad xooreysaa, xornimadaadu waxay ku siineysaa mustaqillo inaad noqoto oo isku fillaato. Markaad isku fillaatona inaad waajibka ilaahiga ah, siyaasiga ah, bulshada ah, dhaqaalaha ah, inaad cabbirtay ayey ku tuseysaa oo xor mustaqillo ah aad tahay. Haddenin in uu gacan sare ama uu indho waaweyn saas kuugu fiiriyo u bartay ma kaa yeelahayaa Jaalle? Ama fikrad gumeysiya, dhaqaale gumeysiya, tacliin gumeysiya, wax waluba gumeysi waa galaan. Nin gumeysi u bartay Jaalle kaa yeelimahayo. Marka inuu dhib inaga horreyo waannu garaneynaa, laakiin waxaa loo baahan yahay ineynu ka ilbaxno kuwaas oo marba lugohooda iyo afkooda iyo farsamada ay ku soo yimaadaan ineynu baranno weeye.

*DOORKA WARFAAFINTA*

Waxaan ku xijinayaa wargeysyada. Waxaan isleeyahay



hawsha wargeysyadu qabtaan aad bey u badan tahay, aniguna waraaq ma siyaarteene dadkaan siyaaran lahaa haddaan wax siyaaranaayo, maxaa wacay wargeys isma dhigee dad baa dhiga, qoreyaal baa jira, weriyeyaal baa jira aniguna iyagaan u leexan lahaa. Marka waxaan isleeyahay, waa ka ballaaran tahay baad moodda «Xiddigta Oktoobar» xaalku, ballaarkeedana in la siiyaa way ku habboon tahay. Waxaan isleeyahay waxaa ka mid ah Xiddigtu middeynu innagu shaqadeenna ku wadeyney bay ahayd, laakiin waxaan haddana isleeyahay waxaa jira qoreyaalka Xiddigta Oktoobar, waxaa jiraan isleeyahay weriyeyaalka soo ururiya hadalka ama soo fikira. Waxaan oran karahayaa Raadiyo Muqdisho dadka halakan maalin walba ka gaarsiiya Soomaalida, ama shantaas sannadood gaarsiinahayey niyada iyo qalbiga Soomaaliyeed ku hadlahayey ama garansiinahayey qiimohooda aadamigaa iyo qiimohooda waddanigaa intaba. Waxaan isleeyahay waxaa jira kuwo masawirleyaal la yiraahdo, waxaa jira kuwo tacliinta aragtida lagu tilmaamo oo ama kuwa derbiga lagu dhejiyo ama kuwa masawirkaba, wada filimada waxaa laga daawado ayaa jooga. Waxaan isleeyahay ciidanku aad buu u badan yahay. Magaca kulmin karaa marka waa kee baan isleeyahay. Anigu hadda ma hayo laakiin waxaan u bandhigahayaa qolada hawshooda ay tahay in ay magacii saxa ahaa u helaanniin. Xiddigtu waxaad mooddaa iney Joornaalka keliya tahay.

Aad baan u fahamsanahay ujeeddadiinna oo aan u ammaanahayaa, laakiin ujeeddadaasu meelo badan bey gacanta saareysaa, ee in la kulmiyo sow ma roona? Wax baa isku wada qoofalan, haddii mid maqanyahay kan kale uusan socon karin. Marka sidee bay, aniga lixdeyda lixaad oo kale yihiin, ayanna kala fuqi karin, marka mid keli ahi in isagu siyaaro qaato, kuwa kale ay lumaan, sidee iigu suuro geli kartaa? Yacni haddey taasu dhacdo, miyeynaan ku dhacaynin caddaaladxumadii aynu la dirireyney? Sinnaan-la'aantii miyeynaan ku dhacaynin? Sida inoo tilmaamanna qof walba wuxuu galo iyo wuxuu gooyo wuxuu ku garan karaa ama ku kordhin karaa markeynu u sheegno ee aynaan ka xasdin kana qarinnin.

Taa markaan ka gudbo waxaan u noqonhayaa weriye-

yaalka Raadiyo Muqdisho, fanka masawirleyaalka, filim wadeyaalka doorka ay ka qaateen Kacaankaan waa maxay? Dhammaantood waxay qabtaan hawlo kala nooc ah oo badan oo lagama maarmaan u ah xagga wargelinta, Hanuuninta iyo dhismaha Bulshada. Xiddigta Oktoobar magacyo badan bay lahayd, muddo badan waa soo socotey. Isticmaarkii talyaaniga ahaa baa abuuray : «Corrieera della Somalia» ayaana la oran jirey, afartaas baal buuna weligiis ahaan jirey. Waxaa ku xigey isticmaarkii Ingiriiska ahaa, afartaas baal buuna ahaan jirey weligiis., Waxaa jirey waqtigii musuqmaasuqa oo aynu soo marnay, iyadana afartaas baal buu ahaan jirey, 21kii Oktoobar markii Kacaanku dhashayna waxaa loo baxshay : «Oktoobar Star», ama Xiddigta Oktoobar· Sidaas darteed waxaan rajaynayaa in ay waqtigaan kacaanka iska beddesho sidii hore xagga tirada iyo xagga noocaba.

. . . . Aad baad u mahadsan tihiin dhegeysadkii aad i dhegeysateen, waxaanan ku soo xirahayaa :

Soomaaliya ha noolaato, Soomaaliya ha midoydo, dabadhilifku ha dhaco, gumeysigu ha dhaco, imberiyaaliyaddu ha dhacdo, wadaad xume ha dhaco, hantiwadaag-xume ha dhaco.



# Abaartu waxay ina kala bartay

# Saaxiibkeenna iyo Cadowgeenna

KHUDBAD JAALLE SIYAAD KA JEEDIYEY GEGIDA KUBBADDA CAGTA EE XAMAR, XIRITAANKII RARIDDII DADKII ABAARUHU TABAALEEYEEN 20.8.1975

Jaallayaal waad salaamantihiin dhammaantiin. Shirkaan waxaynu ku xuseynaa dhammeystirkii dadka Soomaaliyeed ee caydhu ay wax yeelleysay ama xoolohoodii ay ka qaaddady, aynuna ka soo rarnay xeryihii gargaarka abaarta ilaa meelihii ay ku dhisan lahaayeen aayohooda dambe· Kumana jiro dabbaaldeggii xiritaanka abaarta, kuma jiro misana dabbaaldegga aynu u dabbaaldegi doonno iyadana dejinta dadka aynu soo daadgureynay, taas oo ku tilmaansanaan karta in aynu sidii caado inoo ahayd, tartan u gallo, innaga oo mar labaad had walba fulineyna ama hirgelineyna tartankii xaqa ahaa, wixii qolo waluba ay ka qabto dejinta dadkeenna, barwaaqeynta dadkeenna· Markaan dejin leeyahay waxaa weeye arrin ballaaran, waxayna ku saabsanaan doontaa in ay dadkaasu degaan, aqallo yeeshaan, Dugsiyaal yeeshaan, Xarumo caafimaad yeeshaan, nal iyo biyo helaan, beero iyo baddana in noloshooda si wanaagsan looga dhiso, iyaguna ay dhaqan geliyaan habkii ay uga bixi lahaayeen foolxumada ay leedahday gaajadu.

Taasu waxaa weeye dejintii. Midda aynu xusayno waxaa weeye abaartii ama gargaarkii abaarta; galabta ma aynu xu-

seyno oo weynu ka boodnay in kastoo gartu ay ahayd in iyadu ay horreyso. Maxaa wacay marka aynu xuseyno gargaarkii abaarta iyo Ummadda ay dhibaatadu gaartay ee Soomaaliyeed farahana badneyd ee sidii aynu u ogeyn gaarayey 268.000 oo xerooyin gashay, luguna gargaaray muddo sideed ama sagaal bilood dhan, iyo markii ay ugu yaraato 950.000 oo qof oo Soomaali ah oo aynu ku gargaarnay ama xuduud beenaadyada iyo agagaarkooda, ama Tuulooyin kala duwan ee fara badan. Kuwaas oo ay habboonaatay in meelahooda wax loogu geeyo loona taro wixii loo tari karey, iyadoo loo geynayo biyo, daawo, cunno iyo wixii kale oo gargaar ahaa oo ay had walba u baahnaayeen. Waqtigaas oo aynu magaciisa ubixinnay «gargaarka abaarta» iyo kii ka horreeyey oo ahaa soo-ururinta ummadda dhibaateysneyd ee ku baahsaneyd waddanka gudihiisa, gaar ahaanna meelihii ama Gobolladii abaartu ay aad u dhaawacdady, waxaan filayaa dabbaaldegga aynu u dabbaal degi doonnaa wuxuu ahaan doonaa midkaan mid aad uga ballaaran. Maxaa wacay hawsha ayaa aad uga ballaarneyd, wax tarka dadka Soomaaliyeedna aad buu uga ballaarnaa; tan geeddiga ah Ummadaha adduunka ku nool waxtarkoodiina wuu ballaarnaa, Ummadda Soomaaliyeedna meel kasaba ha joogtee gurmadkeedii aad buu u badnaa, aad buuna wax-tar u ahaa, mana ku koobna Ummadda Soomaaliyeed ee waddanka dhexdiisa ku nool oo keliya, ee Ummad badan ee Soomaali ah ee khaarijka ku nool ayaa muujiyeen qiimohoo-dii waddaniga ahaa, iyo midnimadoodii Soomaalinnimada ahayd. Si aynaan marka qaldaan ugu dhicin, waxaa loo baahan yahay ineynu kala joojinno, hadba heerarkii dhibaatooyinkii ina soo foodsaarahayey ay kala ahaayeen, mid walbana waajibkeeda aynu marinno.

Sidaas darteed, waxaannu annagu u haysannaa ama aannu jecelnahay inaad u garataan dhibaatadii ballarneyd ee abaarta, ama dabada dheeru ay la timidi waxay u qeybsaneyd heer gurmad, badbaado naf ah iyo ururin Ummadda waddanka ku baahsan ah, ee ayan Ummadda Soomaaliyeed u kala harin, ciidan meel kale uga yimidna uusan jirin. Waxaana ku xigey xeryo-u-sameyn, aqallo u-sameyn, dhar siin,



daawo siin, cunno siin, iyo nolol-ku-soo-celis dadkii faraha badnaa, iyo u-tabaabusheysi wax-bariddoda, ama ha ahaato xagga maskaxda, ama ha ahaato xagga-cilmiga, ama ha ahaato xagga wax qabadka iyo shaqadooda intaba. Arrimahaas ayaa ku soo xigey oo hawl yar aan ahayn, socoteyna muddo dheer.

Xubinta saddexaadna waxay noqon kartaa guuritaanka ama soo-raridda dadkii xeryahaa ku jirey ee qaarna loo rarahayey beeraha, qaarka kalena loo rarahayey badaha. Xubinta 4aadna waxaynu ugu tala geli karnaa dejnta aynu dejinnay qolo walba meeshii ay aayeheeda dambe ku noolaan lahaayeen, Ugu dambeystii, dhabbahaas dheeru wuxuu ahaan doonaa midka aynu u dabbaal degi doonno, innagoo dhudhumineyna dadkeennu qiimaha iyo kartida uu leeyahay ee ay dadkoodii inta u hawl galeen, wixii ay u baahnaayeen u sameeyeen, haddana aynu ku eegi doonno haddii Alle idmo natiijooyinkii ka soo baxa. Waxay ila tahay waddadu sidaas bey u dheer tahay amaba ay u dheereyd.

Haddaba, haddaan u soo laabto dabbaaldeggii gurmadka abaarta iyo gargaarka abaartu wey dhiman yihiin, mana aynaan ka hadlin. Waxaynaan uga hadlinna waxaa weeye taas oo ah wax aad u ballaaran, una baahan in la ururiyo taariikho badan, magacyo badan, xoolo badan, dhibaato badan oo dalkaan soo gaartay. Gargaar iyo waxtar badan, xaqna ay tahay sidii caado inoo ahaan jirtey, in aynu ka run sheegno ammuuraha had walba la soo kulmahaya waddankeenna iyo Ummaddeenna. Maanta waxaynu joognaa heerkii ahaa raridda oo qur ah. Saasna waxaan rejeynahayaa inaad u garataanniin.

## *ISKU FILLOW ADIGU*

Haddaan taa imaado, jaallayaal, waxaan filayaa maalintii Kacaankeennu uu dhashay ayeynu ugu baaqnay Ummaddeenna, una soo jeedinnay in aynu ku dhisno fikraddeenna, ku abuurno Ummaddeenna, kuna shaqeyno habeen iyo maalinba mabda'a la yiraahdo «isku filloow adigu», oo micnihiisu uu ahaa ku tasho in aad keligaa tahay, hana ku tashannin in

bannaanka lagaaga imanhayo, wixii bannaanka kaaga yimaadaana ha ahaadaano gargaar., Laakiin ku dhisaalee mabda'aaga, dhaqaalahaaga iyo tabcashdaada gargaarka aad isu gargaareyso marka hore awooddaada iyo dadnimadaada. Waxaan filayaa fikraddaasu waxay ku arooreysey murtida ah : «biyo sacabbadaada ayaa lagaga dhergaa», amabase ah ninkii naftiisa iyo dantiisaba daryeela ayaa anfac leh, ama uu wax taraa kaalmaha bannaanku. Innaga oo dagaalkaas iyo fikraddaas dheer ku duulnay, waxaynu uga jeednay in aynu qiimeyno dadkeenna ineynu daryeello danteenna oo sare u qaadno dalkeenna qiimihiisa iyo sharaftiisa, in aynu garanno qiimaha aadamiga ah oo aynu leennahay iyo kheyraadka dalkeenna ka buuxa, iyadoo aynu isku tirineyno in aynu maskaxdeenno loogu fikiray si caafimaad qabta ku tashanno, ka gadaalna hawl gallo. Maxaa, aynu dib u noqonnee, inooga dhashay oo miro ah, oo ka dhashay fikraddaas? Imisaa dhibaato ayaa naga hortimid Kacaanku intii uu jirey, ee ahayd shanta sano iyo tobanka ama koow iyo tobanka bilood? Imisaa beynu ka guuleysannay oo u dabbaaldegnay. Wax ma garadka iyo isticmaarka caalamiga ahuba ay yiraahdeen: «kama gudbi doonaan dhibaatooyinkaas awoodna uma heli doonaan, oo caqli ku filan malaha, urursanaan iyo isku xirnaanba malaha, waxna tari ma doonaan, oo wax ma qabsan kari doonaan» Imisaa goorood beynu ka guuleysannay oo aynu ku ceebey--nay goobtii?

Dagaalkeennu kuma fadhiyin in aynu noloshooda keliya ka fikirno ee dagaalkeennu wuxuu ku fadhiyey in aannu barno gumeystaha iyo wax ma garadka wax hayaanadeeya, in aynu barno kuwaas Ummadda Soomaaliyeed qiimaha iyo dadnimada ay leedahay waa maxay? In aannu garansiinno Ummadda Soomaaliyeed in ay qiimo aadmiya iyo waxtar qoddo dheer in ay yeelan karto· In ay gudbi karto dhibaato kasta oo loo qaato in ay ku kufi doonto. Laakiin haddana ma inoo socon lahayd haddii aynaan wax cad oo dhammaanteen aynu wada naqaan aynaan ka dhigannin hoggaankii ina wada hayey, ma ay suuro geli lahayd intaas oo guulo ah ineynu soo gudubno, haddii aynaan u tilmaamin si cad oo muran ma doonta ah siyaasaddeenna, ama mabde'eenna aynu ku shaqeyneyno oo aynu ugu shaqeyneyno Ummaddeenna, sarena ugu qaadeyno karaamadeenna iyo dadnimadeena qarannimo? aynuna ku dhiseyno nolosheenna? Ma ay suuro gasheen baan isleeyahay, runtiina waxay ahaan lahayd, in kastoo aynu niyad sannahay, haddana dad kala baahsan oo qof waluba uusan aqoonin jahada loo socdo, iyo waxa la doonahayo, iyo waxa laga heli doono, iyo waxa la haysto, iyo waxa loo baahan yahay lama kala garteen. Taasina waxa guddoomiyey amaba hirgeliyey si wax tarnimo ahna u dhaqan geliyey waxaa weeye mabaada' cad, ujeeddo cad oo muran la'aan ah, iyo dan loo tilmaamay runteedu sida ay tahay iyo dhudhuminta ama ururinta, fikradda iyo ficilka Ummadda Soomaaliyeed. Taas baana hirgelisay, dhaqanna gelisay guulahaas. Taasuna waxay ku foorarsan kartaa mabda'a hawl iyo hantiwadaagga ah ee cilmiga ku dhisan, haddeyan saas ahayn sidii aynu isugu walaahoobi jirney ayeynu isugu walaahoobeynaa.

### *DAAD GUURAYNTA CAYDHA*

Jaallayaal, markii aan intaas guud ahaan u iraahdo, waxaan u soo noqonhayaa daad-guureyntii caydhii ee ay abaartu wax yeelleysay, hawshii laga qabtay. Guud ahaan Ummaddii Soomaaliyeed ee ugu qeyb gashay sida xammaasaddu ay ka buuxdo, ama ficilka iyo dadnimada, iyo qiimaha iyo qiiradu ay uga buuxeen, isla markiina waloow ay ahayd muddo laba bilood, ama toddobaatan maalmood ah, maantadatan aynu joognona aad mooddo sidii taa oo maanta la bilaabay, aan daalin, aan oomin, aan caajisin, hurdo-la'aan iyo guure intaba isugu darmeen, kuna soo hoyeen dadkii meelihii loogu tala galay, maantana welwelkeennu uu yahay, in aynu waxa ay u baahan yihiin siinno oo keli ah, laakiin iyaga ayaa dib u dhigay, ama reebay welwelkii geeddiga.

Waxay lahaayeen madax uu hoggaaminahayey Golaha Sare ee Kacaanka iyo midka Xoghayayaasha, wuxuuna lahaa guddi khaas ah oo aynu ugu yeernay Guddiga Gargaarka Abaarta, daad guureynta dadka abaarta, geeddiga, dejinta iyo

xooleynta intaba, oo Jaalle Cabdirisaaq Maxamuud Abuukar uu madax u ahaa, rag badanina ay kula jireen. Wuxuu lahaa dad ardo ah iyo macallimiin, ama macallimiinba aynu ugu yeernay ee ka socdey Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta aydinna ku cilmi leedihiin dhallinyaradeennii, kuwii dadkeenna ugu qiima roonaa, kuwii ka mid ahaa in ay taagnaayeen meel kasta, ama meesha wax laga rarahayey ha noqoto, ama meesha wax la dejinaayo ha noqoto e, iyaga oo gacantoodana ka taakuleynahaya gargaarka dadkaa, maskaxdadoodana ka kaalmeyn haya sidii ay runta u kasi lahaayeen.

Waxaa ka mid ahaa Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare, Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, dhallinyaradii kumaankunka ahayd oo iyaguna ku jireen iyo macallimiintoodii, oo iyaguna uga qeyb galeen si aan adduunka ka dhicin. Ma dhacdo dad jaamici ah, waqtiga aynu maanta mareyno in ay inta miyi aadaan ama ay dad masaakiin ah oo qaarkood uu buko, qaarkoodna uu jilicsanyahay ay gacmohooda ku qaadaan, ay aqalkooda dhisaan, ay daawadooda iyo kaalmooyinkooda u taraan, ayna tusaaleeyaan sidii ay ku noolaan lahaayeen oo ay naftooda ku dhisi lahaayeen Kama dhacdo adduunka ee waa Soomaaliya oo qur ah, meesha dhallinyarada Jaamiciyiinta ahi ay ka gashaa dagaalka. Waxaan taas u saarahayaa carrabka in aad garataan heerka Ummadda Soomaaliyeed ay isugu xiran tahay, mid Jaamici ah, mid mutacallim-ka-sarreeya ah, mid geel-jire ah, mid beeraley ah, mid suuqa jooga ee gaajeysan, mid derejo ama hawl sare waddanka u hayaa, wax alla wax ay ku kala duwan yihiin in ayan jirin bey kuu ishaareysaa.

Waxaa ka mid ahaa ciidammadda qalabka sida oo si joogto ah isugu dayeen amaba u taageereen, una hirgeliyeen guusha geeddiga Ummaddaas oo dhan ee faraha badneyd. Waxaan filayaa taasu waa hadal-ma-doonto, qof kasta oo Soomaali ah ayaana taa ka warhaya, markii ugu horreeyseyna ma ay aha. Lixdii sano oo aynu soo soconney dhibaatooyinkii aynu la kulmeyney, iyo waqtigii xataa aad u xumaa dhibaatooyinkii Ummadda ka hor iman jirey, doorkii ay ka



qaadan jireen mid hadal badan u baahan maaha. Waxa lagu dari karaana waxaa weeye «qofku markuu waajibkiisa guto looma mahad naqo», amaba mahadnaq uma baahna, «laa shuk ru calal waajib». Waxaase aad la-yaab u leh, markii aynu garannay geeddiiga dadka ceyroobay ee loo wadey meelihii ay aayohooda dambe ku dhisi lahaayeen, in ay muuqatay kharash badanu inuu nagu socdo, ama xoolo badanu nagu socdaanniin, gaadiid fara badan in loo baahday, dad badan in loo baahday. Markaasna aynu goosannay in aynu muddo gaaban, si aynu xoolahaa badan ee bixi lahaa ugu baajinno dadka Soomaalida ah, waqtiga dheeraan lahaana aynu u soo gaabinno, in aynu ku dhisno muddo 7 maalmood ah gegiyaal dayuuradeed ee cusub, jidad cusub, si wuxu ay u yaraadaan waqtiguna u soo gaabto. Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Wasaaradda Hawlaha Guud iyo shicbi weynihii oo la shaqeynahayey waxay gaareen in ay 7 maalmood ku sameeyaan gegiyaal dayuuradeed : nawaaxiga Marka oo loo yaqaanno «Ceel Axmed», waxaana ku degeen dayuurado xoog leh oo ahaayeen kuwii dadka gurahayeen oo dhawrka boqol oo qof qaadahayeen. Gegi dayuuradeed ee noocaas ah toddoba maalmood ku samee waxaynu u qaadan karnaa, inta micnaha garaneysa Ayrboorrada, waalli. Laakiin dal kaga dhabeeyey Soomaaliya ayaa ka jirta, ee dad kale oo ka dhabeeyey ma ay jiraanniin. Waxaa kaga libkeenay guuleysteyaalka iyo maddaaleyaalka farsama yaqaanka ah, iyo waddaniyiinta Soomaaliyeed oo yiraahdeen wax aan suuro geli karinu adduun ma jiraan, haddii qofka dantiisa dhisahayaa uusan isagu ka baqin, ama uusan caajisin, xaqiiqdiina saas bey ku soo baxday fikraddii ahayd wax aan la gaari karinu ma jiraanniin.

Waxaa ka qeyb qaatay oo si cad uga qeyb qaatay Wasaaradaha kale oo badan, Guulwadeyaalka, hooyooyinka, dhallinyarada oo ahaayeen iyaguna kuwii kaashanayey, garabsanaayeyna ciidamadooda qalabka sida, oo saarahayey dhigta iyo raarka, iyo maqaarka darinta iyo rida, iyo wax kasta diyaaradda loogu jaangooyey in ay geyso meeshii dadkaa la dejin lahaa.

Waxaa ka qeyb qaatay dhaqaatiirta xoogga dalka Soomaaliyeed iyo kuwa Wasaaradda caafimaadka iyo kaaliye vaalkooda, oo aan hubo haddii ayan qeyb door weyn leh ka qaadan lahayn in nabadgeynta dadku ayan fududaateen. Laakiin had walbaba gaarhaye bay ka ahaayeen, ama ka hortegabayeen dhibaatadii imaan kartey xagga caafimaadka aansena ku ekeynin intaas ee xooggoodana ku kaalmeynhayey markii rarid ay noqoto, ama markii ay dejin noqoto.

Waxaa kale oo ka qeyb qaatay dad kale oo badan oo shaqaale ah ee meeshii kasta, oo ama wax laga rarahayo, ama gaar ahaan loo dejinaayo qiima dheerna u lahaa dadweynaha oo aan kala har lahayn, dhallinyaro iyo waayeel, rag iyo haween, iyagoo siman oo heegan u ahaa. Waxaannu oran karnaa waa hirgashay fikraddii ahayd, ama murtidii ahayd, midnimo waa aasaaska xornimada, xornimona waa aasaaska sinnaanta, sinnaantuna waa aasaaska caddaaladda. Caddaaladda iyo intii hore oo aan soo sheegayna waa aasaaska tabcashada iyo isku-fillaanta. Kuwaas baana hir galay.

Jaallayaal, barbarkaasu waxaa weeye barbarkii dadka Soomaaliyeed ay qeyb weyn uga qaateen ama ay qeyb libaax uga qaateen.

Kama aan tegahayo ciidammada cirka ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo midka Boliiska. Kama aan tegahayo ciidammada Isgaarsiinta oo mar walbaba ka bixin hayey, ama ha ahaato Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta, tan Ciidanka Boliiska ama ha ahaato Xoogga Dalka Soomaaliyeed oo aan marna u kala harin in meeshii la joogoba iyo dariiqii la taagan yahayba, iyo meeshii wax laga qabanhayoba ay awaamiirta tebiso, hubsatona in sidii xaqa ahayd loo gartay. Mana ayan suuro gasheen isku-xirnaantaasu amaba degdeggaasu, haddii ayan agaasin wanaagsan ka lahayn dhankaas.

Waxaa hubaal ah in ay noqoneyso qaldaan, haddii aan ildiyaaradaha habeen iyo maalinba u taagnaayeen in ay ka socdey, ama Wakaaladda Batroolka Ummadda, oo qaarna ay loobo qolooyinkii kale ee faraha badnaa ee ama Wasaarad ka



buuxshaan baasinkii loo baahnaa, oo ayan saacado loo baahnaana ayan baaqannin, qaarna ay baabuurrada faraha badan ay ku shubahayeen habeen iyo maalin badroolka.

Dhammaan intii ka qeyb gashay aan iraahdo, Jaallayaal mahadsanidiin idin oran mahayee, waxaan idin oran hayaa garta markii aad isu geysaan kartdiinna, garaadkiinna, iyo wax-qabadkiinna, iyo fikraddiinna, iyo kama haraannimada waxa aad dooneysaan in aad heli kartaan, wax Alla wixii aad rabtaanniin. Taasuna calaamad ayey idiin noqon kartaa, baan idin leeyahay.

## KAALMADA MIDOWGA SOOFIYEETI

Waxay ila tahay geeddigakan dhankiisii kale aan imaado. Waxaa jira in markii ay abaartii dhammaatay aynan ka dhammaannin gargaarka xaggiisii, maxaa wacay dadku hadduu ceyr yahay gargaarka iyo kaalmaduba waa in ay socdaanniin, laakiin ay ka dhammaatay dadkii ceyroobay oo cusbaa ee xeryaha soo gelahayey, raxmana uu rabbi dalka ka di'iyey Anoo garanhayey ineynaan ku filleyn, go'aanka labada Gole, kan Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayeyaasha oo goostay dadkaa xeryaha ku jira in loo dhigo, ama loo daadgureeyo meel ay noloshooda dambe ku dhisaan, mar haddeeyan jirin xoolo dambe oo miyi ugu haray, ayaannu ku xisaabtannay go'aankaasu markii uu dhacay in xoolaha iyo gaadiidka loo baahan yahay iyo waqtiga ay qaadan kari doonto. Waxaynu ku tashannay in aynu innagu wexeenna qabsanno, bal hadde haddii ay keligeen inagu soo fakato, imisaa bilood beynu wadi lahayn? Xooggeenna waa isu geyn lahayn oo waa la hubaa ujeeddadeennana kama aynu harneen oo waa la hubaa iyadana, waana daba socon lahayn, waana aynu dhammeystiri lahayn geeddiga. Laakiin imisaa bilood bey inagu qaadan lahayd? Imisaa kumannaal oo bilyan bey inagu tegi lahayd? Imisaa dadkeenna rafaad iyo wax uun kaari lahaayeen? Imisaa baa geeddigaas dheer iyo socodkaas guuritaanka ah oo dhibaatooyin ah oo ina soo gaari lahaa? waxaan oran karaa ugu yaraan 6 bilood ayey nagu qaadan lahayd, amaba ka badan oo shaki kuma jiro. Maalintaas aynu saas

u ogaanney innagoo xisaabo ku soconna ayaannu waxaannu ugu baaqanay adduunka in dhibaatadaas naga hor imaaneysa dejinta, ama raridda dadka labada boqol iyo kontonka kun dhan (250.000). iyo dejinta dadkaasu waxa ay u baahan tahay ee boqollaalka milyan tegi doona in aannan ku filleyn. Waajibaadka aadamiga ah oo dadka ka dhexeeya innagoo tixgelineyna, una cuskaneyna waajibaadka aadamiga ka dhexeeya iyo is-gargaarka iyo is-garab-qabadka, oo innaguba aynu ka qeyb geli jirney, oo qolodii ba'san marnaba aynaan ka dhuuman jirin; ee qoladii kasta oo abaaru ku dhacdo; ama dhibaatoba ku dhacdo aynu qeybteenna ka qaadan jirney; Innagoo xeerkaas raad raaceyna ayaannu u yeernay adduunweynaha; oo waxaannu niri waxaannu idiinku yeereynaa taladaas baannu goosannay, waajibna ahayd in aannu goosanno; waxaannuna idinka rajeyneynaa in aad gargaar iyo garab-qabad noo fidisaanniin oo noo keentaanniin». Runtii, wax waqtigii munaasibka ahaa ama waqtigii ku habboonaa oo innagu aynu hawsheenni ku dhaqaaqnay, si furcaddi ah; si leexleexad aan lahayn inoogu soo jawaabay waxay ahaayeen Ummadda Itixaadka Soofiyeeti· Iyadoo ayan naga doonin socod badan, baryo badan· iyadoo waqti badanu uusan nagaga lumin ay yiraahdeen: Waxaannu idin siineynaa diyaarado waxaannu idin siineynaa gawaari, waxaannu idin siineynaa shaqaalihii ka sheqeyn lahaa, ama ha ahaato waditaankooda, ama ha ahaato hagaajintooda haddey wax noqdaan, ama ha ahaato hoggaankii wax xukumi lahaa». Waxay misana yiraahdeen, «Waxaannu idin siineynaa intaas kharashkii ku bixi lahaa inta ay dalkiinna joogaan, hawshaana hayaan in Ummadda Itixaadka Soofiyeedku ay tunka saareyso ee Ummadda Soomaaliyeed aan waxba laga dooneynin».

Waxay qaadatay hawshii, aynu awal u qorsheynay in ay lix bilood ugu yaraan naga qaadato, dhowr iyo konton maalmood, iyadoo mahadda ay leeyihiin Ummaddaas Soofiyeeti oo ahaayeen kuwii waqtigii munaasibka ahaa gartay waajibaadka caalamiga ahaa oo saarnaa, iyo saaxiibtinnimada labada waddan labadooda Ummadood ka dhexeysa· Waxayna ku sheqeeyeen iyaga oo guure, iyo qorrax, iyo dhaxan aan



midna u aabayeeleynin, iyaga oo aan cunno iyo raaxo midna aan nagu kallifeynin, aanna wax ina weydiineynin, in ay ku shaqeeyaan saacaddii aynu u qornay innagu, maalintii aynu u qornay meeshii aynu u qornay, dariiqii aynu u falno annagu in ay yiraahdaan kaas baannu qaadeynaa, ayna hirgelisay qorsheyntii hagaagsaneyd oo loo dhigay, iyo waajib-gudashadoodii wax-lama-haraanka ahayd ee ina gaarsiisay waqtigii in uu soo yaraado, seddax u jibbaar laba horteed in ay inoo dhammaatay hawsheennii. Waxaan oran karahayaa, taasu qiimaha aadaminnimada ayeynu ku qiimeyneynaa. Muddadaas kontonka iyo dhowrka maalmood ahayd, wax dhibaato ah ee geeddigaa ka dhashay inama soo gaarin. iyadoo aan ammaantaas siinahayo guddigii qorsheeyey, una qorsheeyey sida habsamida ah, oo baabbuur intaas oo dhan oo Kiiloomitir oo la idiin sheegay, ama intaas oo tan ah, oo dad iyo alaababa leh qaadayey. Sidoo kale diyaaraad sameynayey, ee hal dhibaato ahina ayan gaarin. ama boqollaalkaas kun oo qof oo meel u jirta markii ay ugu yaraato 1500Km. ama 2000 kun ku dhowaad ah geeddi ku tegahayeen, oo haba yaraatee wax dhibaata ahi ayan ku dhicin oo ayan kala kulmin. ama ayan ka iman wax shil ahi, waxay ila tahay waxaynu siin karnaa qiimo aad u ballaaran, oo aynu oran karno heer sare oo qorsha ah oo cilmi ku dhisan, heer sare ee fulin ah qorshahaa cilmiga ku dhisanaa. heer sare oo tacliin ku dhisan, oo ah qabashada waajibka ayaa dhammanba muuqday. Guddiga markeynu ka bilawno ilaa dadkii hawshaa wadey, amaba qolodii saaxiibbadeen ahayd oo diyaaradaha iyo baabuurradaba inagu kaalmeeyey.

Maalintii ay abaartu dhalatay haddaad xusuusan tihiin waxaan idin iri abaartaanu dhibaato weyn ayey dadkeenna u geysaneysaa dhaqaaleheenna u geysaneysaa. waana ay ina daba socon doontaa· Laakiin bal horta ogaada, dhammaan mugdi maaha. waxyeello keliya ma noqon doonto, waxay ahaan doontaa mid marka u hoorreysa ina shaqo barta, mid toosisa dadnimadeenna iyo qiimeheenna mid isku-xiritaanka iyo Ummad-ahaanteenna xaqiijisa, adduunkana baal cusub u furta ayey noqon doontaa. Haddeynu ka ilaalinno

kufidda, waxay noqon doontaa waajibaadkii kacaanku uu u ballan qaaday dadkiisa, qaarkii oo fulay bey noqon doontaa, farsamadeenna iyo kartideenna. Waxayna ina kala bari doontaa saaxiibkeenna iyo cadawgeenna waa tii aan ku soo daray, ama ha ku jiro gudaha cadawga Ummadda Soomaaliyeed, ama ha ahaado mid dibadda ka jira. Cadawga Ummadda Soomaaliyeed ee gudihiisa ku jiraa ee ku yaaqyaaqi doona marka aynu innagu boqoole iyo guure, harsi iyo hurdobeel, raraad iyo qorax; iyo dhaxan aynu u mareyney in aan badbaadinno nolosha qur ah ee Ummadda Soomaaliyeed xaqa ay u leedahay. Waxaad arki doontaan kuwo yaaqyaaqsanahaya oo dad idilna sheeganahaya; waxaa arki doontaan kuwo idinku likaacyoonhaya markii ay calooshoda buuxsadaan; oo calooshooda la ciyaar ah, oo dad kale ah baad arki doontaan. Waxaad arki doontaan kuwo dagaal inoogu dara oo dhabarka inaga warjeefaan. Waxaad arki doontaan saaxiibbo lillaahi ah, kuwo aadami ah, kuwo garta qiimaha nolosha aadamigu ama xanuunka uu leeyahay oo idin garab istaaga. ayaad arki doontaan.

Miyeynaan gaarin in aynu kala baranno saaxiibkeenna iyo cadawgeenna? Haa, weynu gaarnay. Maxaa wacay xaqiiqda ayaa muujisay, markii la ina gar gaarahayey mid waa ina dilahayey ee bal hadda ogaada. Waxaan jeclahay maskaxdiinna inaad dib ugu noqotaaniin. Ma waqti leys dilaabaa? Ma waqti leysku yaaqyaaqaabaa? Ma waqti leysku daacdaacsadaa baa? Xaggee aadday qiimihii aadaminnimadu Xagguu aaday waajibaadkii aadaminnimadu? Xaggee bey fikradaha loogu yeero kuwa dadka, oo dadku ku dhaqmo ama isugu tiirsado Qof dhimanhaya kelyaha qabso ee ku yaaqyaaq, kuna qosol, durbaanna ku sii tun ma xaq baa? Maxaa garab yiilley? Waxaa garab yiilley hiil iyo hooba kii kuu soo kacay. Haddaba waxay ila tahay in aan hadal yar ku soo koobo in aan mahad u celiyo saan Ummadda Soomaaliyeed geesinnimadeeda iyo dadnimadeeda, iyo guulaha ay gaartay ammaan u siiyey anoo anna ka mid ah oo aan yeeleynin in bannaanka la'iiga saaro, ayaan misana mahad waxaan u celinayaa Magaca Golaha Sare ee Kacaanka, kan Xoghayeyaasha



iyo midka Dowladda guud ahaanteeda, midka Ummadda Soomaaliyeed miyi iyo magaalo gudaha waddanka iyo khaarijkiisa meel kastaba ha joogee, yaqaannana qiimaha Ummadda Soomaaliyeed, iguna jiro dhiigga Ummadda Soomaaliyeed, aniga oo magacooda ku hadlaya ayaan mahad weyn ugu celin hayaa. Ummadda Itixaadka Soofiyeetiga oo dhan. Waxaan mahad u hayaa kal iyo laab ah Xisbiga Shuuciga Itixaadka Soofiyeeti oo lixdan sano ku dhawaad Kacaankii ugu horreeyey ee hantiwadaagga ahaa ee adduunka ka dhashay, kuna raddeeyey hoggaankiisa wanaagsan heerka uu marinaayo dalkiisa, iyo heerka uu ka marahayo taageerada iyo taakuleynta dadka xornimadooda u dirira, iyo kuwa u dirira noloshooda hagaagsan intaba, ayaan ku ammaanahayaa. Waxaan mahad u celinhayaa ballaaran madaxda Itixaadka Soofiyeet Yuniyon, hoggaamineysaa ee waajibkii caalamiga ahaa ee saarnaa, iyo kii saaxiibnimada ahaa oo labadeenna dad iyo labadeenna waddanba ka dhexeeyey u fuliyey si habsami ah iyo waqti munaasib ah intaba aad baan iyagana ugu mahadinhayaa.

## *WAR DHAFOOR BUU KU YAAL*

Waxay ila tahay una baahna hadalkaasu in aan aad ugu dheeraado. maxaa wacay Soomaalidu waxa ay tiraahdaa : «War dhafoor buu ku yaallaa». Hadalna waa hadal. wax la taabankaro. uguma horreeyo gargaarka maanta ah. Itixaadka Soofiyeeti wax tarkiisu. Ummadda Soomaaliyeedna taariikh dheer buu ku leeyahay haddii la doonana buuggag waaweyn baa laga dhigi karaa. Waxaan uga jeedaa taasu waxa weeye markii aynu aadno xag taclliimeed, markeynu aadno xag bulsho iyo dhaqaaleheed, markeynu aadno xag daafacaad iyo dhowrashada xornimada iyo qarannimada dadka Soomaaliyeed, markeynu aadno xag warsadeyn iyo dhaqaale, markeynu aadno farsame yaqaan, iyo qiimaha weyn ee aad leysugu diido oo ah aqoonta cilmiyahannimada farsamada. Markeynu meel kasta u dhaqaaqno waxaynu arkeynaa taageeradii iyo waxtarkii aan durbaanka beenta ahi uusan dabosoconnin Ummadda Itixaadka Soofiyeeti ay Ummaddaan Soomaa-

liyeed u fidisay. Waxaan filayaa tiro dheer uma baahna taasu balse waxaad mooddaa tanu in ay nooc gaar ahayd oo ay waqti gaar ah la kulantay ee Ummadda Soomaaliyeed welwel iyo walaac uu ka buuxay. Marka saas baan u siineynaa qiimaha gaarka ah, haddii xoolo ahaan la yiraahdo, xaqiiqo waxaa ah wixii la'ina taray wax aynu ku gudi karno ma ay jiraan, waana

wax aad iyo aad uga sii ballaaran. Laakiin tanu waxay noqoneysaa wax yar, laakiin waqtiga munaasibka ah khaaskana ahaa iyo waqtiga cariiriga ah ee innagu aynu mareyney ayaa qaayaha iyo qiimaha gaarka ah u yeelay. Iyaguna mahaddaas ayaan u celinhayaa. Waxaanaan hubaa, bacdamaa Ummadda Soomaaliyeed bowda qaawin iyo kibir ayan qaadannin, caadadeedu waxaa weeye in ay u abaalguddo midkii wax tara sida aynan u illoobeynnin kii wax u dhima, aynan isagana u illoobi doonin.

Sidaa darteedna waxaannu idin leennahay Jaallayaal Ummadda Itixaadka Soofiyeeti, Xisbigeeda iyo madaxdeedow idin leennahay ma noqon doono kuwa dhowrka carrab leh oo marna adinka adinkula hadla, marna meel kale kula hadla. Ummadda Soomaaliyeed waxay baaqi ku ahaan doontaa Ummad gob ah, Ummad sharaf leh, Ummad qiimaha aadamiga tixgelineysa. Ummad ka dhiidhida xumaanta, garatana kana abaal gudda wanaagga.

Waxay ila tahay intaas markii aan iraahdo, waxaan u soo noqon hayaa inta aan leeyahay waxa aynu oran doonnaa markii aynu dabbaaldeggeeda galno, intii wax inoo tartay oo dhan qolo aynu illoobi donnaana ma jirto, qolo aynaan xusi doonina ma jirto. Laakiin waqtigeeda munaasibka ah ayeynu sheegi doonnaa.

Waxaan ku soo xirayaa marka in aan iraahdo, shantii sano iyo barkii guulihii badnaa iyo dhibaatooyinkii aynu la kulannay, iyo dagaalkii aynu ku qaadnay guulihii aynu ka gaarnay ha idiin ahaato Ummadda Soomaaliyeedeey meel aad joogtaanba wixii aad dooneyso waad gaareysaa, haddaad u dagaal gasho. Haddaad ka sugto qolo kale in ay kuu qaba-



tona ma kuu suurtoobi karto. Garaadkaaga, xornimadaada, Ummad ahaantaada, tacabkaaga iyo dhaqaalahaaga, daafacaaddaada, qiimahaaga waddaniga ah ama aadamiga ah adiguu ku sugayaa, waana ay idiinku filan tahay jarribaad ahaan waqtigii aad soo goyseen wixii dhibaato ahaa oo aad la kulanteen, iyo markii aad duullaanka ku qaaddeen, sidii aad durbadiiba uga oohiseen, waa idiin caddahay baan idin leeyahay. Guulestayaal dhabbaha sidaas ah waa in aynu ku soconnaa oo aynaan mar ka hakinnin, aynaanna u qaadannin in aynu gaarnay wixii aynu rabney. Mana dhowa mana aynaan gaarin, waa sii hayn doonnaa, gaajo iyo gobannimo.

Soomaaliya ha noolaato! ha jiro ha joogo mabda'a hawl iyo hantiwadaagga ahi! saaxiibnimada Ummadaha hore u socodka ahi ha jireen hana joogeen! saaxibnimada Ummadda Itixaadka Soofiyeeti iyo Soomaaliya ha noolaato! Ummadda Soomaaliyeed tii barwaaqo iyo baraare la kulanta kuna keensata fikraddeeda, iyo xooggeeda, iyo aaminka dalkeeda ha noqoto!

Waad mahadsan tihiin Jaallayaal.

# Duullaan lagu qaaday Cadowga Shicbiga Soomaaliyeed

KHUDBAD JAALLE SIYAAD KA JEEDIYEY GEGIDA KUBBADDA CAGTA EE STADIYO KOONS.

7.3.1975.

Jaallayaal, dhammaantiin waad salaaman tihiin, sideynu xusuusan nahay mar 7 bilood laga joogo waxaynu ambabixinnay dad fara badan oo Ummadda Soomaaliyeed ka mid ah oo aan Xamar innagu ka ambabixinnay, Gobollada iyo Degmooyinkana laga ambabixiyey iyadoo loo diray duullaan ay ku duulahayeen cadowga Ummadda Soomaaliyeed, ujeeddadeeduna ay ahayd, sidii maalintii Kacaankeennu u dhashay bishii Oktoobar 1969kii aynuna guddoonsannay in aannu la dirirno cadawyaalka Ummaddeenna oo ahaa cudurka, gaajada iyo jahliga.

Duullaankaas Ummaddaas faraha badani ay u baxday, waxaa faa'iido weyn ah mahadna leh, guul leh in maanta dhammaantood iyagoo soo guuleystay ay ka soo noqdeen jahaadkoodii kana adkaaday ama mar alle markii ay ugu yaraato dhaawac ballaaran oo aan laga kici karin u geystay cadawgii Ummadda Soomaaliyeed ee 3da ahaa oo hore aynu u tilmaannay.

Waxaan aaminsanahay in qof kastaaba wixii uu doono in uu Ilaahay ka helo, adduunka uu ku nool yahayna uu ka helo. Markii aynu guddoonsaneyney cadawga Ummadda

Soomaaliyeed in aynu dagaal ku qaadno, dagaalkaasuna uu noqdo mid aan maalmo keliya soconnin ee ah mid taagan ilaa aynu ciribtirno ama aynu heerno boqontiisa.

Waxay inoo tahay maanta guul weyn in maanta duullaamadii badnaa ee aynu cadawkeenna ku qaadnay mid ka mid ah in aynu maanta u sameyneyno damaashaad dhaawaciisii iyo dhibaatadii aynu u geysannay, guushii iyo taageeriddii iyo darveeliddii dadkeenna aynu ka fakinnay cadawgaas.

Waxaan filayaa haddii aynu dib u raacno in maalintaas wixii ka bilawday aan sheegaayey ee Oktoobar 1969kii ilaa maalinkan maanta ah in aynu haynay dagaal, dagaalkaas oo midba heerkiisa ku imaanhayey oo mar uus ku imaanhayey ciribtirka aqoon darrida, midna uu ku imaanhayey xoreynta Ummadda Soomaaliyeed oo laga xoreeyo fikradda cadawgu uu hore ugu dhisay ama beenta ajnabigu uu madaxeeda ku abuuray, mar aynu ku dhaqaaqeyney xagga dhaqaalaha oo aan duullaan iyo Olole aan ku qaadnay, mar aynu ku qaadeyney Ummaddeenna leysku jari jirey, leyskuna baabbi'in jirey sidii aynu naftooda ku kala nabad gelinno, mar aynu ku dhaqaaqeyney hantideennii xaaraanta lagu haystey xaq darridana lugu cunahayey in aynu cadawga kala soo noqonno, marba iyadoo arrin gaar ah (leyn) ahayd, tii haatan ugu dambeysey ay tahay middii aynu Ummaddeenna Miyi iyo Magaaloba ha ahaatee aan isugu keeneyney, midkii aan Miyi iyo Magaalo Ummaddeenna ku heshiineyney. Waa teynu niri waxay ku jirtaa xornimadu, wuxuu ku jiraa horukacu, waxay ku jirtaa sinnaantu, waxay ku jirtaa caddaaladdu una ahaan kara fure lagu furo midnimada Ummadda Soomaaliyeed, xornimada Ummadda Soomaaliyeed, horukaca Ummadda Soomaaliyeed sinnaanta Ummadda Soomaaliyeed iyo caddaaladda Ummadda Soomaaliyeed, saas beynuna ku furnay. Waxay taasu ishaareysaa marka in ay ahayd xaaraan in Ummadda magaalada joogtaana ay ka faa'iideysato dagaallada lugu qaadayo cadawyaalka Ummaddeenna, Ummadda badan ee Miyiga joogtaana ayan marnaba ka faa'iideysannin. Taasu waxay ahaan lahayd qalad ballaaran, haddii aynu taa qaadanno. Innagoo marka waajibkeenni gudaneyna dhammaanteen,



waxaynu ku guddoonsannay mar 7 bilood laga joogo in aynu ku dhaqaaqno, in kastoo 5tii sanno iyo googgo'ii aynan ahayn in aan taageeradeenna iyo waxtarkeenna iyo ogaalkeenna iyo nabadgelyadooda iyo badbaadadooda iyo waxtarku aynan ka maqneyn dadka reer Miyiga ah, haddana inaynu duullaankii ugu culusaa ku qaadno 7 bilood mar laga joogo Miyiga dhexdiisa. Kaas oo u qeybsana in aynu gaarsiinno faa'iidada uu kacaanku lahaa.

Markeynu niri cadawga Ummadda Soomaaliyeed beynu la dirireynaa, maxaan uga jeednay? Cadawgii markeynu 3 ka dhignay, maxaynu uga jeednaa? Waxaynu uga jeednaa, Ummaddeenna wixii gunnimo ku hayey oo idil in aynu kala dirirno ama ha ahaato xagga nolosha, ama ha ahaato xagga khalaaqadda iyo aadaminnimada, ama ha ahaato xagga aqoonta, ama ha ahaato xagga caafimaadka wanaagsan ee dad--keenna. Taas oo ku foorarta in xornimadu ay noqoto mid taam ah ee ayan ahayn mid qarjaban, mid gees la', mid barbar laga illoobay iyo mid debcanba.

Haddaan u soo kaco kan reer miyiga ahi muxuu u socdey gaar ahaantiisa?Muxuu kaga duwanaa midka reer magaalka ah? Aad iyo aad bey uga sii qodda dheer tahay, ma ahayn keliya in xoolaha oo keliya la daaweeyo, ma ahayn keli ahaan in dadka keliya la daaweeyo, ma ahayn keli ahaan in loo dhigo farta sida ay u akhriyi karaan iyo sidey isugu darsan karaan, ma ahayn intaas ee waa ka sii qoddo dheereyd, waana ka sii ballaar weyneyd oo waxay ahayd ilbixin xidid dheer leh oo aan mar dambe ninna fujin kareynin; waxay ahayd caafimaad sal-dheer in laga shaqeeyo; waxay ahayd dhaqaale sal-dheer in laga shaqeeyo; waxay ahayd si yaasad xidid dheeri dhulka ugu mudanyahay in laga shaqeeyo, markii leys garansiinhayey iyaga qiimohooda walaalnimo, aadaminnimo, wadajirnimo, midnimada iyo wax qabsigu qiimaha ay leeyihiin iyo firirsanaantu qiimo darrida ay leedahay la kala sheegahayey. Waxay u socotey xoreyn maskaxdaa, waxay u socotey xoreyn caafimaadka ah, waxay u socotey xoreyn aqoonta ah, waxay u socotey xoreyn Ummad-

nimada ah siyaasadda ah, waxay u socotey xoreyn aan ninna ku tilmaami kareynin af iyadoo lugu sheegay.

Waxaan filahayaa una dhaafahayaa Culumada Jaamacadahu in ay gartaan qiimahaa ballaaran ee ay hawsha ciidamada naftooda hurayaalka ahu u soo qabteen Ummadda Soomaaliyeed, ka gadaal ay ka dhigaan buugag badan, haddii ay geesinnimo u heleen, in ay qalinka iyo warqadda is baraan, mar haddii waxa ay wax ku qoraayaanu ay yihiin afkoodii hooyo. Haddii aan ka taabto meel yar, waxaynu ku tilmaami karnaa warkaasu inuu sax yahay, dhallinyarada iyo shaqaalaha duullaankaas ku jiray ee naftood hurayaalka ahaa maxay bareen dadka? Ma waxay bareen daawada la daaweynhayey, ma waxay bareen farta Soomaaliga sida loo dhigo oo keliya Maya, waa ka qodda dheereyd Jaalle, waxay bareen sida cudurka looga hortago, waxaana metel looga soo qaadi karaa eeshii uu kaadidhiiggu boqolkiiba boqol uu dadka ku dhici jirey in maanta boqolkiiba labaatani (20%) ay ku hartay, kalka dhowna ay u baahan tahay 20kaasna in la khaarajiyo. Taas oo ahayd in la baray lana tusaaleeyey farsamadii iyo xeeshii ay iskaga daafici lahaayeen, waxaa laga tilmaami karaa in la baray habkii ay isku maamuli lahaayeen oo isugu maamuli lahaayeen, si dad badan ah oo jamac ah aanna aan ahayn qof keliya oo talada maroorsada. Waxaa la baray sidii ay Iskaashatooyin u sameysan lahaayeen ee ay cunnadooda dhulkooda uga soo saaran lahaayeen muruqoodana ay kula soo bixi lahaayeen, waxa la baray sidii ay isu aamini lahaayeen iyaga naftoodu oo ay naftooda ugu kalsoonaan lahaayeen, dalkooda ugu kalsoonaan lahaayeen, wada jirka iyo mujtamac nimadana ugu kal soonaan lahaayeen.

Maxaa la baray oo ka sii weynaa? Waxaa la baray qiimeynta la noolaanta iyo aqoonsiga Ummaddoodii degganeyd magaalooyinka, dib markeynu u sii raacno maxaynu oran kareynaa markaas? Ciiddankii aynu u dirnay miyiga oo dhallinyarada ahaa, haddii gees ahaan loo eego way ka mid ahayd hawshoodii in ay dadka baraan sida farta loo qoro iyo sida loo akhriyo intaba, laakiin maxaa ku lammaansanaa oo ciidankaas naftihuraha ahu sameeyey oo kale oo ka sii ballaar-



naa? Waa midda aan marnaba aan diidahayo in la illoobo, ayna xaaraan tahay in la illoobo, waxaana weeye, ilbixinta ballaaran, gees kasta oo loo raacoba.

Hawshaas taariikhiga ah Ummaddii abaabushay, dadkii qorsheynteeda iyo jaangooyadeeda lahaa, Ummaddii kormeerka iyo ilaalinta iyo qaladtirka lahayd, dadkii qabanaayey oo isagu gacantiisa kula jirey, waxaan oran karahayaa, ha gaarto mahadda Ummadda Soomaaliyeed guud ahaanteed. Waa dhici kartaa maanta oo aynu joogno, wax ma garad iyo daba-dhilif, sidii maalmihii aynu dhallinta u direyney bannaanka ay u murmahayeen oo ay u afmiinshaareyn hayeen, sidii markii aynu bannaanka geynay ay u hoos cararahayeen, sidey beenta u soo shubahayeen oo ay u lahaayeen : «mas baa cuna iyo dhurwaa baa carruurtii cuna» ee hooyooyinka daacadda iyo aabbayaalka daacadda ah ay qalbiga uga kicinhayeen oo ay uga jabin jireen ee ku jarribahayeen in ay gaariyaal qaataan orodna isa sii daayaan ilaa ay ilmihii soo arkaanna ay sabri waayaan, sidey beentaas daallimiintu u shubahayeen oo ay u kaxayn hayeen; waa guul haddii galabta ay halakan dadkii dhallinyarada ahaa, shaqaalaha ahaa, ciidammada ahaa ee halkan ka duulay ay ku soo laabteen iyagoo nabad qaba. Kuwii kaleeto qolowaliba ay Gobolkoodii ama Degmadoodii iyagoo nabad qaba ay ugu noqdeen. Waxaan shaki ku jirin, haddii wax weyn oo kheyr leh aad qabaneyso, waa imaaneysaa dhibi, ma ku gaari kartid mana ku heli kartid dhib la'aan, oo dhib waa in ay kuu timaaddaa, saa daraadeed; waxaannu leennahay intii dhimmatay oo sababta duullaankaas ama halgankaas xaqa ahaa ku dhimatay: «naxariistii Alla ha siiyo»; waxa aannu leennahay waxay ku hari doonaan qoraalka sharafka ee Ummadda Soomaaliyeed ay leedahay. Waxaan marka leeyahay Ummaddaas faraha badneyd aad iyo aad ayaa Ummadda Soomaaliyeed raalli uga tahay; anigoo afkeeda ku hadlahayana aan hubaa in aan ka run sheegahayo maanta in ay u hayaan qiimo ballaaran.

Waxa horteyda taagan gabdho qaba; maryihii, kabihii iyo sindiyadii Ummadda Soomaaliyeed ay hiddaha u lahayd,

waxa ii muuqata in ay dharkii iyo hubkii, hiddihii iyo dhaqankii; ajnabiga iyo isticmaarku in ay sii dhiman hayaan baa ii muuqata oo maalin walbana ay hirgeleyso tii Ummadda Soomaaliyeed ay lahayd. Waa waxa aynu ugu talo galnay inaynu iska daadinno qashinka safarka lagu keenay ee aynu qaadanno wixii aynu xaqa u lahayn ee fikraddeenna iyo Ummad ahaanteenna iyo dadnimadeennaba daryeelahayey. Kuwaasina waxay ka mid yihiin guulaha waaweyn oo aynu had iyo jeer maalinba, maalinta ka dambeysa aan gaareyno.

Waxaan qabaa dhallinyaradu, sidii horeyba aannu u niri in ayan u tegin oo keliya in ay dad wax u qoraan oo keliya, laakiin in ay u tageen sidii xaqa ahayd in ay u faa'iideeyaan ayna ka faa'iideystaan. Waxaana ka marag furi doona ilmaha dhallinyarada ah maskaxdooda, in ay faa'iideysteen oo ay maanta yaqaanniin dad badan oo Jaamici ah ama reer magaalba isku sheegahaya, wax aynan aqoonnin in ay maanta iyagu yaqaanniin, cilmi ayan aqoonnin in ay yaqaannin, in ay maanta yaqaanniin hiddihii iyo dhaqankii runta ahaa ee Ummadda Soomaaliyeed, waxa xaqiiqo ah haddii ayan xaq lahayn amaba aynaan nidaamka duqa ah aynaan daba geleynin, xaq inay iyagu maanta u leeyihiin Jaamacadda in ay wax ka dhigaan, in ay xaq tahay baan hubaa oo shakina uusan iigaga jirin.

Waxaan iyaga leeyahay oo dhallinyarada aan leeyahay, adinkoo buka ayaan duullaanka idiin dirnay. adinkoo geesinnimo iyo Soomaalinnimo iyo dhallinyarannimo qabtaan, waloow cudur leydinku abuuray oo shaki bushis ahna leydinku abuuray baad duullaanka gasheen. xaqiiqdii markii aad u tagteenna waad garateen in cadawgu marna uusan kuu oggoleyn guusha in aad gaartid, waad gaarteen guushiina. waad la soo noqoteen, maxayse taladiinnu noqon doontaa? Ma guushii aad gaarteen ayaa leydinka qaadi doonaa? Mise waa xafidan doontaan oo cawadga waa ka ceshan doontaan?.

Waxaan rajeynahayaa aanna idinku boorrin hayaa guushii aad gaarto oo aad dhib ku keento, geesinnimada iyo hawlkarnimada aad kula timaaddo. waddaninnimada aad kula timaaddo; qof gaari waayey oo dadnimo u waayey oo geesinnimo u waayey oo iimaanxumi ay u diiddey oo waddaninnimoxumo ay u diidday, yuusan kaa furan Jaalle, gobannimadii adigaa keensatay ee u diid, hana u oggolaannin inuu kaaga soo dhowaado, xaq beyna kugu tahay inaad taas yeesho. Waxa weeye guul aad gaartay aadna ku soo hoysey muruqaaga iyo maskaxdaada· fikraddaada iyo garaadkaaga. iimaankaaga iyo waddaninnimadaada iyo mabda'aaga adag aad ku soo hoysey ee yuusan cayaar kugu soo gelin. Waxaana lagama maarmaan ah inaad haysataa.

Haddaan weli sii socdo, dhallinyarada Soomaaliyeed guulaha ay maanta soo hoynayaan iyo kuwii hore ay u soo hooyeen, maxaa ka dambeyn doona? Hase yeeshe Kacaanka hantiwadaagga ah ee socda oo geeddiga ah, bulshada Soomaaliyeed ee dhismeysa, maxaa dhallinyarada Soomaaliyeed waajibaadkeedu uu noqonhayaa? Maxaase raasumaalka dambe iyo aayaha dambe uu noqon hayaa? Dhallinyarada Soomaaliyeed waa in ay garataa qofka maanta Soomaaliga ah ee Waayeelka ahi noloshii uu soo noolaan lahaa waa soo noolaaday, bulshadii uu ka mid noqon lahaa waa ka mid noqday, wixii isaga la qiima lahaa waa soo arkay. Haatanna waxa dhismahaya bulsho cusub oo aad adigu leedahay, waa dhici kartaa metelan waalidkaa in uu ahaa kuwa lagu tilmaamo hantigoosadka? waa dhici kartaa waalidkaa in uu noqon karey kuwii lagu tilmaami karey dhiigmiiratada, adiga iyo isaga waxba isagama kiin xirna Jaalle oo adigana bulshadaadii hadda ayey dhismeysaa, noloshaadii hadda ayey dhismeysaa, Ummaddaadii hadda ayey dhismeysaa, isaguna tiisii waa soo laastay oo horey buu u soo jirey laakiin, taadii hadda ayey dhismeysaa. Maxaad fali marka? Ma waxaad fali, hooyada metelan u hanqaltaageysa wixii horey looga soo gudbey dibna aan u soo noqoneynin sideeda, mise bulshada cusub ee Soomaaliyeed ee Hantiwadaagga ah ee caddaaladda iyo sinnaanta ku dhisan ee tabcaneysa ee isku kalsoon ayaad ka mid noqoneysaa oo hore ka geleysaa oo dhexda ka geleysaa oo meeshii aad ka mudan tahay aad ka joogsaneysaa? Waa maxay taladaadu Jaalle? Xisaabtan. Waxaan ku leeyahay Jaalle, markii aad la

murmeyso ama lagu leeyahay adigu carruur baad tahay oo waxba ma ogid, annagaa wax walba kuu og, annagaana daacad kuu ah iyo annagaa ku dhallay markii lagu yiraahdo, anoo weligey caado ayan ii ahayn, in aan waalidka iyo carruurta isku diro aanan doonayn in aan isku diro, laakiin, isla markiiba waxaan nebcahay in la habaabiyo ama dhallinyarada duur cidla ah loo tilmaamo ama wax aan lagu cilmi lahayn loo tilmaamo. Waxaad tiraahdaa : hooyo iyo aabbe waqtigiinnii waad soo cunteen, bulshada cusub haddaanan raacin waan hari doonaa, waana ceeboobi doonaa, waana aan lumi doonaa. Sidaas ku dheh Jaalle.

Waxaan leeyahay, waajibka ballaarani wuxuu saaran yahay maanta dhallinyaradu in ay iyagu guulohooda daafacdaan oo ayan ninna u oggolaannin, maxaa wacay, iyaga ayaa iska leh, nin ka qaadi karaana ma jiro, taariikhda ayaa u oggol, waqtiga aynu mareyno ayaa u oggol, nin u diidi karaana ma jiro. Waxaan isleeyahay, kuwii marka ilaa maalintii Kacaanku uu dhashay halganka ku jirey, gartayna fikraddaas iyo khiddadaas; kuwaas baa nasiib leh baan leeyahay. Waxaan isleeyahay waxaa hoogay ceeboobayna, aakhiritaankooduna madow yahay, kuwii maalintaas isku dayey in ay ka soo horjeestaan, kuwii aaminay ajnabiga «Saqaafadiisa». Ololahakan adinku aad duullaanka ku qaaddeen kagana soo guuleysateen, kuwa u waayey nafsad iyo geesinnimo, dadnimana u waayey, iimaankooduna u diiday, kuwaas baa dullobay. Dhallinyaradu waa in ay garataa, waana garteen intooda badanuye, laakiin kuwii shakigu ku jirey waa in ay gartaan guusha ay soo hooyeen maanta dhallinyaradii aynu bannaanka u dirnay ma lagu keenin si kaleeto, waxaase lugu keenay niyo waddani ah, waxaa lugu keenay niyo hantiwadaag ah, waxaa lugu keenay niyo iyo aaminsanaan dalka iyo Ummaddiisa, waxaa lugu keenay niyo garaneysa waajibna ay ku tahay in loo shaqeynhayo Ummadda kale, waxaa lugu keenay niyo aniga ka guurtay ee annaga u guurtey.

Haddaba waxaan leeyahay, waxaa kaleeto runtii hoogay, kuwii markii aynu Ololaha u qalab qaadannay Xamar ku



dhuuntay iyo magaalooyinka kale maxay maanta sheegi karaan? Maxay dhallinyarada billadaha dhabkaa qaadatay oo soo hoysatay hortooda ka oran karaan? Xaggeebey iskoolka ka gelayaan oo xaggeebey aadi doonaan? Waxaa u bannaan oo keliyuhu waxa weeye in ay toobad keenaan oo qirtaan dembigooda, haddana ay tacab bilaabaan si ay u higsadaan bulshada iyo dhallinyarada soo hoysay guulaha ee geesinnimaduna ku abuurantay, dadnimadu ku abuurantay, aqoonta dheeraadkaana gaaray, kuna gaari doona, shaki kuma jiro bashbash iyo barwaaqo Ummaddooda in ay ku furayaan.

Intaas waxaan ku xirahayaa in aan aad iyo aad ugu ammaano, meeshatan shirkaan ah Jaalle Cabdirisaaq Maxamuud Abuukar oo u ahaa guddoomiye Ololahakan, markii horena ahaa Wasiirka Waxbarashada iyo Barbaarinta, isla markiina sii wadey Ololahakan tabaabusheyntiisii iyo isku duwiddiisii. Waxaan aad iyo aad u ammaannahayaa Jaalle Dr. Maxamed Cali Nuur oo ah Xoghayaha Wasaaradda Caafimaadka, in aynan marnaba kala harin isaga iyo Cabdirisaaq soona maray meel kastaba oo ardaydu ay joogtay ama waddanka Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ka mid ah, iyaga oo garanaya waajibka la saaray iyo xilka, isla markiina garanhaya qiimaha loo halgamahayey wixii uu ahaa. Waxaan aad iyo aad u ammaanahayaa in Alla intii, Guddiyaalkii Xamar fadhiyey ka bilow iyo guddiyaalkii Tuulooyinka iyo waaxyaha iyo xubnaha dadkii ka shaqeynayey. Waxaan aad u ammaanahayaa dadkii Gobollada iyo Degmooyinka mas'uulka ka ahaayeen oo dhammaantood u weeciyey hawshoodii oo idil hirgelinta habboon ee Ololahakan maanta aynu ku qaadnay.

Waxaan rajeynhayaa, duullaankeennu halkaan kuma uu dhmmaanhayo, hawshii aan hadda soo qabannayna halka ma ku dhammaaneyso, waxaanna filahayaa dhammaantiin, in aad ka warqabtaan in macallimiinta, Guddiyaalka iyo madaxdii ka sarreysey ay amarna ku heleen, amarkiina fuliyeen, inteynan ka soo kicin meeshii ay fadhiyeen, in ay meeshii kastaba ka aasaasaan Guddiyaal iyagu ka ahaadaan is-

wadeyaal meesha ay waddanka ka joogaan ama meeshii ay iyagu ka shaqeynhayeen, bareyaal iyo caafimaad kalkaaleyaal ama ha ahaado mid xoolood ama ha ahaado mid dadeede, guulwadeyaal nabadgelyada iyo ammaanka Ummadda ka shaqeeya, kuwo ka wakiil ah siyaasadda iyo wixii la mid ahba in ay yimaadiin. Saa ay tahay ma aynu kaga hareyno intaa, inkastoo hadda hawlahakani ay sidaa ku soo dhammaadeen, haddana waajibkeennu waxa weeye, in aynu u sii haysanno usheenna ilaa ciribtirka runta ah ee aqoon darrida ah aynu dadkeenna kaga bixineyno, micneheedu waxa weeye hadda waxaynu barnay wax badan; dhaqaale; bulsho; caafimaad; aqoon iyo si kastaba, laakiin cilmigeenna waa in aan u gudbinnaa, goorteynu u gudbineyno waa in ay nqoto sidii aynu u tilmaannay oo horeyba aannu niri; dagaalkeennii taaganka ahaa oo aynu ku ciribtireyney aqoondarrida; dagaalkeennii taaganka ahaa oo aynu ku dileyney gaajada; dagaalkeennii taaganka ahaa oo aynu ku dileyney caafimaadxumada; waana in uu taagan ahaadaa; mana aha mid aannu ka harayno. Ololahakan; kaasoo oo ku taariikheysan ah oo aan keligii ahayn ilaa maalinntii uu Kacaankeennu dhashay; maalin walba Olole ayaan ku taagneyn; ilaa aynu gaarsiineyno guusha runta ah oo cadawgeenna baabbi'ineynona Ololahaa oo kale ayeynu ku taageynaa; innagoo hadba duullaankeenna ku qaadeyna meeshii inoo daran. Markaas aan iraahdo : dhammaantiin; Guddiga dhexe ee Ololaha ilaa xubintii ugu dambeeysey iyo barihii ugu dambeeyey inta ka dhexeysa iyo kii kastoo kaalmeeyeyba; aan iraahdo aad iyo aad baad u mahadsantihiin; mahadda Ummadda Soomaaliyeedna haydin gaarto; magaciinnuna ha ku dhigmo baalka dahabiga ah ee taariikhda Ummadda Soomaaliyeed.

Waxaan jecelahay in aan u gudbo ilaa maalintii shanta sano iyo lixda bilood laga joogo. Ilaa maanta duullaankeenna maxaan u haynaa? Maxaan u daali weynay? Maxaan u baqi weynay? Maxaynu u gaabin weynay? Maxaynu isu mahadinweynay? Maxay tahay sababtu? Waxay tahay sababtu; waxaynu ka guurnay fikraddii gunnimada; waxaynuna u guurnay fikraddii gobannimada; waxaynu ka guurnay fikraddii duqoowday; waxaynuna u guurnay fikraddii cusbeyd ee maamulka aadamiga maanta meel kastaba lagaga tashanaayo ama lagaga talinhayo ama loo geeddi yahay in la gaaro oo ahaa kii Hantiwadaagga, kii dibusicodka ayeynu ka guurnay; iimaan la'aantii beynu ka guurnay; anigeynu ka guurnay; iskaa wax u xad oo Ummadda dhiiggeeda cabbeynu ka guurnay; aqoon darridii beynu ka guurnay. Xaggeebeynu u guurnay? Waxaynu u guurnay tixgelinta nafteenna innaga aadami ahaanteenna, garashada xuquuqul insaanka iyo garashada sharafka. Waxaynu u guurnay garashada dhaqashada iyo tabcasho ayeynu u guurnay, waxaynu u guurnay mabda'a xalaasha ah ee hawl iyo hantiwadaagga ah.



Waa maxay marka motoorka ama quwadda wadda hawsheenna oo idilu waa maxay? Xaqiiqo ahaan waxa weeye nidaamka xalaasha ah ee hawl iyo hantiwadaagga ah. Awalba waan qasnaan jirney, waan qasnaan jirney, waa is xadi jirney, waa isu muruq buuri jirney oo been iyo qurun beynu isu shubi jirney, isticmaarkuna isagaa inoo talin jirey isagoo daaqadda inoo taagan. Maxaynu u diidnay in la'inoo taliyo? Maxaynu danteenna u qabsannay? Waan isku kalsoonaannay. Maxaa inoo keenay kalsoonida? Waxaa inoo keenay mabda'a xalaasha ah garadkiisa aynu garannay isagaa ina garansiiyey shakhsiyaddeenna, aadaminnimadeenna iyo qiimeheenna dadnimo, isagaa ina garan siiyey, waxa aynu ka heli kareyno dalkeenna, isagaa ina garansiiyey Ummaddeenna markii leysu geeyo, markii la walaaleeyo, markii la mideeyo, markii si xaq ah wax loogu qeybiyo iyo waxa ay gashiyo waxa ay goyso, kaasbaa ina garansiiyey. Ummadda aadamiga ahu xaggeebey ka timid marka, markii hantiwadaag laga hadlahayo waa in Ummadda aadamigaahi meeshii ay ka soo guurtay iyo maanta meesha ay mareyso la tilmaamaa.

Hantiwadaag wuxuu ka yimid hantigoosad oo caloosha hantigoosadka ayuu ka soo baxay. Hantigoosadkuna xaggeebuu ka soo baxay? Wuxuu ka soo baxay caloosha boqortooyada xunxunkaa. Boqortooyada xunxunkaahina xaggee ka

soo bexeen? Waxay ka soo baxeen calooshii beer goosashada iyo dhul goosashadii. Dhul goosadka iyo beera goosadkuna xaggee ka soo baxay? Isaguna wuxuu ka soo baxay calooshii qabiyaaladda iyo qurunka. Intaas oo dhabbe ah buu soo gooyey oo hantiwadaaggu intaas ayuu soo maray. Kaayuna waa mid Eurooba ka dhashay, waa midka adduunka kale ee hore u kacay ka dhashay.

Aan dib ugu soo laabto ee keennu xaggeebuu ka dhashay? Keennu wuxuu ka soo dhexbaxay calooshii qabiyaaladda. Bal hadde inta meel oo aynaan soo marin eeg, waxaynaan soo marin beera goosasho, waxaynaan soo marin boqortooyo yar yar, waxaynaan soo marin hantigoosasho. Intii oo dhan sooma aynaan marin, xaqiiqduna saas weeyaan. Calooshii qabiilka ayeynu inta ka soobaxnay ayeynu u boodnay hantiwadaaggii, fikrad siyaasiya, oo dhaqaale iyo bulshaba ah, tii ugu fiicneyd uguna cusbeyd maanta oo adduunka looga dhaqmahayey ayeynu u boodnay. Haddaba waxa ah nacasnimo meeshaas aynu ka nimid ayna tahay xaqiiqdii in aynu dumineyno aqalkii qabiilka intii Eurooba laga duminhayey hantigoosadka, innaguna aynu dumineyno aqalkii qabiilka kan aan ku beddeleynaana uu yahay aqalkii caddaaladda iyo sinnaanta ee hantiwadaagga, waa in aynu garannaa marka cadaawadda ina hortaagan ee aynu la dirireyno, waa ineynu ka ilaalinaa fikrad iyo hadal hadoofa oo duqoowday ineynu ku shaqeyno, inoona keeni karta ineynu ka lunno waddadii xaqa ahayd cadawguna uu dantuu rabey inaga helo.

Markaas, waxaan uga golleyahay cadawga koobaadu waxa weeyaan qabiyaaladda, meeshii maalqabeenka lala dirirri lahaa, waa jiraan wax maalqabeen isku sheega isuna qabaa oo isu citiqaada, waa jiraan, sida xaqa ah in loo garto dabaqalo kala sarreeyaa waa ay jiraan. Xaggeebeyse ku jiraan, waase xaggee meesha aan ka dooneynaa? Qabiilka ayey huwanyihiin isageyna ku hoos jiraanniin, waataas meesha dabaqaduhu ku jiraanniin, waa taa meesha uu ku jiro hantigoosadku. waa taas meesha uu ku jiraa burjuwaasiga xumi. Xaggeebuu cadawgu soo marahayaa, isticmaarku xaggee soo mara-



hayaa, jaajuuska xumi xaggee soo marahayaa, dabadhilifku xaggee buu soo marahayaa? Wuxuu ka soo gelahayaa hiddihii qabiilka Hantiwadaaggu riyo kuma dhallannin. Wuxuuse ku dhashay baarid la baaray ee cilmi ah Ummadda aadamiga ahu sida ay ku nooshahay, sida ay u dhaqmeyso iyo sida ay u macaamiltanto iyo waxa ka dhexeeya, sida ay u dhaqato dhaqankaas ay dhaqanhayaan ama tacabka ay tabcanhayaan sida ay u kala qaataan, cilmi baarid ah ayuu ku yimid hantiwadaaggu.

Markii uu saa darteed ku yimid oo culumadii waaweyneyd ay saas ugu hindiseen, markey baarid dheer galeen ka gadaal waxaa lagama maarmaan noqotay inuu soo socdo hantiwadaaggu. Mujtamaca aadamiga ahi ama bulshada aadamiga ahu inta ay iyadu isbeddeleyso oo ay hore u socoto inuu isaguna isla beddelo oo uu si cilmi ah isu beddelo, maxaa wacay, cilmiga runta ahu baaridda nolosha tacabka iyo wax wada qabsiga iyo wada socodka iyo wada noolaanta Ummadda iyo taariikhda Ummadda aadamigaa ayaa isku rakiban, saas ayuuna ku yimid.

Haddaba aynu ka soo qaadno maalintii hantiwadaagga la sheegay oo si cilmi ah loo sheegay, loona tilmaamay waddadii uu ku hirgelilahaa. Maxaa ka dambeeyey? Goormeyse ahayd? Ummadda aadamiga ahi imisaa bey isbeddel sameysay? Aqoontu imisaa bey isbeddel sameysay? Dhaqaaluhu imisaa buu isbeddel sameeyey, fikradda insaanku imisaa bey beddelmeysey? Fara badanaa oo aad u fara badanaa, maalintaas waxa la joogay waxay ahayd nolol ku siman Warshado yaryar oo welibo ku socda dhuxul iyo wax la mid ah. Maantana xaggee baa la marahayaa? Cirka dushiisa ayaa la degahayaa oo dayaxa ayaa la dul degahayaa, waana cilmigii oo meeshaa tegey. Fikraddii aadamiga ahayd habkeebey ula socotaa marka cilmiga dayaxa dul degey? Ma meeshii Warshadda dhuxusha looga shubaayey ayey weli dul taagan tahay? Maya, oo ma taagna. Qofka aadamiga ah fikraddiisu taa bey la socotaa oo la kortay oo sida cilmigu uu sidaa ugu korey ayaa dhaqaalihiina u koray, saas ayaa fikraddii qofka-

na u kortay, saas ayaa caafimaadkiina u koray; saas ayaa macaamilkii aadamiga oo dhamina uu u koray. Hantiwadaaggunа waa in uu la koraa ma aha meeshiisii inuu taagnaado; saasna waxaan uga wataa inuusan u ekaannin wax lagama hadlaan ah. sida dadka qaarkii khaas ahaan kuwo wax ma garadkaahi ama cilmiga sida xun uga turjubaana ay uga turjubaanaan, waxa weeye sayntifig cilmi ayuuna ku dhisan yahay. cilmi iyo sayntiifigna waxay ku yimaadaan baarid aan joogsannin ee maalin walba wax cusub la arkahayo, wax cusubina ay soo baxahayaan.

Haddaba waxaan leennahay mar haddii ay tahay lagama maarmaan ayna cilmi tahay cilmigiina uu ka yimid Ummadda bulshada ah dhaqankeeda iyo tacabkeeda iyo wax soo saarkeeda iyo aqoonteeda iyo taariikhda. waxaa lagama maarmaan ah inuu socdaa. Saa darteedna waxaannu leennahay hantiwadaaggu ma aha «dogmaatig» wax la yiraahdo ama lagama hadlaan maaha. hantiwadaagga cilmiga ku dhisanu wuxuu la socdaa baaris iyo taddawurka aadamigu uu sameynaayo. maxaa wacay, ficilka aadamiga iyo fikradda aadamiga, dhaqanka iyo garaadka ayuu ka yimid oo sal ku leeyahay. Kaasuna mar Alla markuu hore u dhaqaaqo isna waa in uu hore u dhaqaaqaa. Waxa ka horieeda oo cudur ahina waxa weeye wax «empirsmo» la yiraahdo micnuhu waxa weeye wax hore loogu dhaqmi jirey oo duqoobey ayaan haysanayaa saas weeyaan marna isagaas wax iga taabtaa ma jiraan. Isaguna waa qaladka kale. waxyeellada weyn. ee hantiwadaagga hortaaganna noqon karta. sida dogmaatiisimka beenta ah ee ka turjubaana xumada Marxism iyo Leniniisimada ay sida xun uga turjubaanaan ee ay u diidaan taddawurka iyo baaridda cilmiga ee la socota ibnu aadamka.

Markaan soo ururinno, hantiwadaag waa maxay, xaggee buu u socdaa? Hantiwadaaggu waxa weeye, Ummaddii dooratаa in ay ku dhaqan geliso, in ay ku dhisto dhaqaaleheeda, bulshadeeda iyo caafimaadkeeda ilaa ay gaarsiiso heer qof waliba uu gaaro nolol fiican, inuu cilmi fiican gaaro, in uu nabadgelyo fiican haysto, inuu cis haysto inuu sinnaan



haysto iyo in uu caddaalad helo, isagoo isagu kasbahaya tacabkii ka furan lahaa dhibaatada oo intaas hadda aan sheegahayey ka kaftoomin lahaa ama siin lahaa.

Mar haddii hantiwadaaggii saas yahay, waxaa jira dad dirirsiiya Diinta iyo hantiwadaagga oo iska horgeeynaya. Diinta Islaamku waxay leedahay Ummadda aadamiga ahu waa in ay sinnaadaan, waa in ay tabcadaan, waana in ay wax bartaan. Waatan la yiraahdaa cilmi doon «xataa fii Siin». Haddee «sentiifig» Sooshiyaalismna» waa cilmi. Muxuu cilmiga u diidi? Diinta Islaamka iyo hantiwadaaggu isma hortaagna baannu leennahay, mana dirirahayaan oo waa wada sheqeyn karaan, maxaa wacay, dhammaantood waxay ka sheqeynayaan mujtamaca aadamiga ah noloshiisa wanaagsan iyo horukiciisa ayey labaduba ka sheqeynhayaan. Halkaas baan hantiwadaagga ku deyn hayaa. waana ballaaran tahay taariikhdiisa iyo taladiisu. Waxaan dadkeenna uga digahayaana waxa weeye oo dhallinyarada aan uga digahayaa. labadaa munaafaq in ay aad uga digtoonaadaan. Labadaas munaafaq oo dadka ay soo dirsadaanu ay yihiin : wadaad-xume midka aan iri iyo hantiwadaag-xume sida uu u jiro Soomaali-xume. Waxaan leeyahay weliba dhallinyarada khaas ahaan: hantiwadaag-xume yuusan hantiwadaag yare idinka dhigin ee toos hantiwadaagsame u noqda. sida aan u leeyahay culimada dhallinyarada ah aan u leeyahay wadaad-xume intuu wadaadyare idinka dhigo yuusan idinku adcegannine. wadaadsame u gudba toos ahaan: Soomaalisame ha ku gaarsiisee. Taayuna waxa weeye wixii ku saabsanaa mabaadi'da.

Waxay ila tahay waqtigakan in ay tahay lagama maarmaan in aan taabto meelo khaas ah. Meelahaas oo aan uga jeedo : ayaamahakan durbaan ayaa isticmaarku tumahayaa sidii caadada u ahaan jirtey. Marba markii ay arkaan Ummaddii oo halgameysa iskuna tashataa in ay guul dhalineyso, maxaa wacay waxay u hanqal taagahayaan oo u boholyoobahayaan gumeysigii, waxay u boholyoobahayaan khiyaanadii ay dadka khiyaani jireen, waxay weli la tahay Afrika in ay

weli huruddo oo adduunku in uu hurdo ayey la tahay, waxay moodahayaan fikraddii in ayan korin, isku fillaantiina in ayan ballaarannin oo ayaantaan durbaanbaa la tumahayaa : Soomaaliyaa kan yeeleysa, Soomaaliyaa keer yeeleysa, Soomaali ayaa kan ku keceysa, Soomaali ayaa waxaas haysata iyo Soomaali ayaa waxaas noqon doonta. Isticmaarka caalamiga ah idaacadihiisa iyo jaraa'idkiisa ayey aad maalmahakan afkooda ugu jirtaa.

Horta su'aasha ugu horreysaa waxa weeye : war isticmaar maxaad rabtaa? Boqol geed baannu kaa bixinnay, boqol goobood baadna ku hoogtay, isticmaar baadna ahayd waadna dhimatay oo rafashaad ku jirtaa ee maxaad weli sii rabtaa? Maalin walba marka aad durbaan tumeyso, markaad isku duulineyso Ummad adigana caqli aan kaa rabin, aqoonna kaa rabin. Soow ma daashid oo ma ceeboowdid? Yacni waxaa weeye kaasu isticmaarka caalamiga ah, kaayoo maalin walba inuu dab shidaayo mooyee aan joogeyn. Waxaa weeye isticmaarkii Qaaradda Afrika xubin-xubin u gooyey, kii qeybqeybiyey aabbihii iyo hooyadii iyo walaalkiiba midba meel ku xiray weeyaan, kii Afrika iyo Aasiya iyo Ameerika Laatiin dulleevey weeyaan, kii ugu dambeystiina hadda sii dhimanhaya weeyaan. Maanlin walba markaad idaacadahooda xunxunkaa aad dhegeysato ama aad akhrisid jaraa'idkooda waxay hayaanniin buufin oo laba qolo ayey uun isku kicin hayaan ama dhowr qolo ayey isku kicin hayaan. Soomaaliyana horey bey u sheegtay oo dagaalkeedu wuxuu ku jeedaa isticmaarka ee dadka kale kuma jeedo manna ku jeedi karo.

Taas micneheedu maaha, haddii Soomaaliya ay xuquuq leedahay xuquuqdeeda ineyan dooneynin, laakiin waxay yeelin marka ay la noqoto ee maaha markii isticmaarku uu u tilmaamo. Ha isgarto isticmaarka caalamiga ahi oo beenta uu shubahayo ha garto.

Waxaa kaleeto oo aan halkaa uga gudbahayaa: aad iyo aad buu isticmaarku uga shaqeynhayaa inuu isgefsiiyo isagoo been ka dhex abuurahaya aan sal lahayn, iyadoo baqdinu ay u geyneyso iyo dan uu lahaa in ay ka lunto aad buu isugu da-



yahayaa wada shaqeynta Ummadda Afrikaanka ah iyo Ummadda carabta ah in ay kala fogaadaan. Xaajooyin ay dhici karto in ay ka dhexeeyaan laba Dowladood oo khaas ah in ay ka dhigaanniin xaajo Qaaradeed ee ay ballaariyaan waaweyneeyaanna.

Waxaynu leennahay Afrikaanku ma ka yeeli doonaa? Carabuse ma ka yeeli doontaa iyadoo ay ogyihiin sidii uu isticmaarku u qalaadahayey oo uu u qeybin hayey. Waxaan isleennahay; maya, kama yeeli doonaan, maxaa wacay ma noqon karto in ay illoobaan addoonsigoodii foosha-xumaa, taladoodii xumeyd in ay illoobaan, dhiiggooda haatan ay cunahayaan in ay illoobaan, dhallinyaradooda baagamuundada ah iyaguna ay carruurtooda ku korsanhayaan dalkooda in ay illoobaan, tacliintooda ay dulleeyeen in ay illoobaan, dhaqaalohooda ay furteen oo curyaamiyeen in ay illobaan, in ay ka hawa dhigaan cifashada iyo horukaca aadaminnimada ah iyo xoreynta Ummaddooda ee runta ah, in ay ka tanaasulaan ma yeeli doonaan. Ummadda Carabta ah iyo Ummadda Afrikaanku waa kuwii la soo wada gumeystey, waa kuwii haatan cadawga ama Isticmaarka cusub (neo-colonialismo) uu dul saaranyahay, waa kuwa laga hortaaganyahay dalkooda in ay ka abuuraan Warshado, beero iyo wax, wax tara. Oo iyagoo saas u garanhaya oo isku doon saaran ma ay ka yeeli beenta isticmaarka iyo abaabulkiisa iyo sirihiisa badan. Mase waxay ka talo qaadan doonaan jaraa'idkooda iyo Raadiyohooda ay been kaga afuufahayaan? Mase waxay gaareen heer iyagu kuwo ay leeyihiin abuurtaan? Kuwo iyagu ay iskula tiirsadaan oo ay taagtiisa iyo tabartiisa ay ku tusaan ma yeelan doonaan? Maxay yeeli doonaan Su'aal labaad weeye, laakiin waxaan hubaa Ummadda Afrikaanka ahu, siduu u qabo isticmaarku inuu u doqomeyn karo, inuusan u doqomeyneynin. Waxaan hubaa Ummadda Carabta siduu ugu cagajugleynaayo isticmaarku in ayan ka yeeli doonin ee wixii xaqooda iyo dantooda ay qabsan doonaan iyo siyaasaddooda intaba.

Sidaad ugu cilmi leedihiin dalkeenna abaarbaa ka dhacday, dagaalkeenna koobaadna wuxuu ahaa ineynu fakinno

Ummaddeenna nolosheeda wixii cudur gaar ahi uu u yimaado mooyaane, waan hubaa in aad ku cilmi leedihiin gurmadkeennii iyo daacadnimadeennii iyo niyadsamideennii, in aynu intii kartideenna ahayd oo idil ineynu gaarsiinnay ama aynu cadawgii, siduu ama inoogu qosli lahaa amaba inoo baabbi'in lahaa ineynu iska hor taagnay.

Waxaa hadda bilaabma haya in xeryohoo dhan la furo sidii aan horeyba u tilmaannay oo ay ka furmaan : Mudug, Galguduud iyo meelihii kale oo la isyiraahdo waa lagama maarmaan, bal hadde adinku garta caddadka intaa la'eg iyo kuwa faraha badan oo hadda xereysmi doonaan waxa ay u baahan yihiin bal hadde xusuusta. Bal hadde garwaaqsada qiimaha ay ku tegi doonaan xooleheenni ama dhaawaca weyn oo inaga soo gaaray xooleheennii dhammaaday, bal hadde xusuusta dhibaatada inooga timid dhulkii gubtey oo haatan in la dhireeyo mooyaane aan damac dambe laga qabin, bal hadde xusuusta dhibaatada ay la imaan doonaan. Bal hadde xusuusta dejintooda dadka markoodii horena reer miyiga ahaa, dejintiisa, magaaleentiisa, cunno siintiisa, daaweyntiisa iyo tacliimintiisu qiimaha ay inoogu fariisan doonto sida ay u ballaarantahay, waloow aynu ka helnay dad badan oo saaxiiba gargaar, haddana waxaan leeyahay 3 bilood baannu keligeen halgameyney, dhibaatadiina aynu wejiga saarnay, haatanna xaqiiqo ahaan culeyska ugu weyni innaga ayuu ina sugahayaa in aan qaadno. in kastoo ay saas tahay maxay noqon doontaa? Waxay noqon doontaa, dhibaatadu waa in ay ku bartaa sidii aad ugu tabaabusheysan lahayd midda dambe, taa ku haysana aad uga guuleysan lahayd. Marna uma qaadanhayo in dhibaatadaani inaga guul heshay, mana aha in aynu u qaadanno, waa in aynu u qaadannaa : dhibkii ina gaar, laakiin guul buu ina gaarsiin doonaa oo wuxuu ina bari doonaa sideynu ugu tabaabusheyn lahayn, sideynu ugu tabcan lahayn iyo sidii aynu cadawgeenna u dili lahayn ama ha ahaado kan ka yimaadda gaajada iyo cudurka iyo aqoon darrada ama ha ahaado midka siyaasadda iyo xornimada Ummaddee. Waxaynu hubnaa oo aan halakan isugu imaan doonnaa haddii Alle idmo innagoo leh : «ma'aragteen abaartii dhabbihii aan qaadsiinnay» weliba iyadoo kartideenna ay tahay iyo awooddeenna, aanna hubo oo aan ku kalsoonahay Ummadda Soomaaliyeed sida aynu aragnay xaqiiqdeedii in ay noqon doonaan kuwii ka adkaada, Ummaddoodana dhaxalsiiyaan barwaaqo iyo baraare.



Waxaan filayaa, hadalkii aan soo gaabiyo aanna ku soo gunaanado: Dhallinyaradii, Shaqalihii, Ciidamada qalabka sida, Madaxdii meel kastaba ha ka yimaadeene, Guulwadeyaalkii, dadkii ka qayb galay Ololahakanoow aad iyo aad baad u mahadsantihiin, waxaanan idiin rajeynhayaa anoo huba in aad ku dhigmi doontaan aadna ku dhiganteen taariikhda Soomaaliyeed baalkeeda dahabka ah aanna weligii tirtirmi karin, harina doona. Waana aad mahadsantihiin.

# Sannadguuradii 4aad ee Ubaxa Kacaanka

KHUDBAD JAALLE SIYAAD KA JEEDIYEY XUSKII 4AAD EE UBAXA KACAANKA IYO HAWLO KALE OO CARANKA LOO QABTAY.
19.6.1975.

Jaallayaal dhammaantiin waad salaamantihiin. Aad iyo aad beyna farax ii siineysaa in aan ka qeyb galo, muddo ka dib markii aynu soo soconney, habeenkaan loo dabbaaldegahayo sanadii afraad ee Ubaxa iyo hawlo kale oo aannu qabsannay ee iyagana dhammaadkoodii la xusahayo, waxaan aad u ammaanahayaa Wasaaradda Tacliinta ee sidii guddoonka Kacaanku uu ahaa u fulisay waajibkii la saaray ee ahaa tacliinta xubneheeda badan ee aan ku koobneyn in la tago qolka wax lagu barto, ka gadaalna barnaamijka wax barashada caadiga ah aan ku ekeyn ee sida Kacaankeennuba uu ku habeysanyahay u hirgelisay xataa xubnihii kale leyliga iyo abuurista bulshada wanaagsan, khaas ahaan xagga dadka dhallinyarada ah.

Tacliinteennu sidii horeyba aannu u niri, waxay ku habeysan tahay amaba aynu sheegeyney had iyo jeerba oo aan isu sheegney ilaa Kacaankeennuba dhashay, in ay tahay aasaaskii nolosha Ummaddeenna, dhaqaalaha Ummaddeenna, xornimada Ummaddeenna, la sinnaanta amaba sida aynu xaqa u leennahay la tartanka Ummadaha adduunka, maxaa wacay waxa ay saas ku noqotay waxa weeye qofku had walba intii garadkiisa cilmiga ah, siyaasiga ah, farsamada aqoonka ahu ayey haddana himiladiisu ay la egtahay, wax tarkiisu uu la egyahay, uuna qiyaasi karaa garan karaana qofka aadami-

ga ah ixtaadkiisu waxa uu yahay ama ha ahaato xagga noloosha la xiriirta ama ha ahaato xagga shakhsiyaddiisa iyo aadaminnimadiisa la xiriirta Yacni saas bey wax barashadu u tahay aasaas iyo saldhigba. Mana filaayo in taasu ay idinka dahsoontahay, mar haddii aynu garan kareyno culumo markii aynu aadno, ruuxu markii uu magacaas ku sifoobahayaa markii uu aqoonfiican leeyahay oo uu ku leeyahay xagga khaaska ah ee la xiriirta dadka fikraddooda ama kasmadooda aadaminnimada ah iyo ciska ibnu aadamka ka dhexeyn kara iyo dhowrmada Ilaahiis intaba. Hadduusnn taa gaarin culumonnimo ma loo yeeri karo.

Haddii la aado xagga dhaqaalaha: dhaqaale yaa dhalin kara haddaba, waxa dhalin kara ruux aqoonteed leh, aqoonteedana si uu ku yeesho waa in uu noqdaa insaan tacliin soo qaatay ee Dugsi ka soo baxay. Haddeynu aadno xag farsamo iyo wax qabsasho iyo cilmi nuuc kastaba ha noqotee, xaggee buu ka bilowdaa oo uu ka yimaadaa: «dugsibuu ka yimaddaa». Haddeynu aadno xag garasho, walow ay jiraanniin wax la yiraahdo u dhalasho oo qofka Ilaahay ku abuuro oo kasmada qofka ay u kala duwantahay, haddana si uu u garto ama uu u helo waxyaalaha, tabta hagaagsan ee uu noloshiisa ku abuuro ee xagga siyaasaddana haddii loo aado waxaad u garan kareysaa inuu qof aqoon dheer u leh Ummadda aadamiga ahi taariikheeda heerarkii ay soo martay ee kala duwanaa iyo halganka ay maalin walba ugu jirto dhismaha nolosheeda iyo daafacaadda sharafkeeda inuu u baahday mid dugsi ka yimid. Haddaba tacliinta Ummadda Soomaaliyeed marba si ayey ku habeysaneyd, teenna maanta ahi maxay ku habeysantahay? Waxay ku habeysantahay in la abuuro, caafimaad kaasuna waa kuma? Waa in uu ahaado mid maskaxda ka caafimaad qaba, niyadda ka caafimaad qaba, xornimada nafsiga ahna haysta oo qofku kalsooni naftiisa ah, Ilaahiisa ah, waddankiisa ah, Ummaddiisa ah ku abuurta in aynu dhisno, Ummad yacni isu haysa dhammaan ahaanteed tu qofka khaaska ahuna uu u garanhayo in uu qiimeeyo xushmeeyona qofka aadamiga ah oo kale, Ummad weyntana ay ku abuurantahay qofka shakhsiga ah in ay



dhowraan, xushmeeyaan, kaalmeeyaanna, in ay xaq tahay Ummad garaneysa in aynu abuurno weeyaan.

Markii ay dhalato marka fikradda saas ahi oo qof kasta oo innaga ah ay ku dhalato, waxaa xaqiiq ah in marka uu hagaagayo amaba hagaageyso saldhiggii sinnaanta, middii caddaaladda, midkii xornimada, saldhiggii tabcashada, saldhiggii sharafka iyo karaamada qofka aadamiga ahi uu u baahnaa oo ama adigu khaas ahaan aad u baahantahay keli ahaan ama Ummaddaada mar haddaadan keligaa ka noolaan karin ee ay tahay lagama maarmaan in aad iyaga la noolaato oo aad adiguba garan karto markii aad ku dhex jirto jawi ama yacni hawo iyo dabeyl caafimaad qaba. Xaggee ka yiyimaadiin intaasu? Waxay ka yimaadaan tacliinta.

Haddaba aan dib u sii laabto oo marka aan ubaxaygii aado. Xaggeebaa marka tacliinta aasaaskeedu noqon karaa? Amase bulshada aan sheegeyno aasaaskeedu xaggee buu noqon karaa? Aas aaska laga bilaabaa waxa weeye aqalka qoyska. Markii aannu isku taxluujineyney qoyska dhismadiisa wanaagsan, micneheedu wuxuu ahaa waa aas aaskii amaba unuggii bulshada caafimaadka qabta ay ka dhalan kartay. Haddii aynan dhismadiisu hagaagsaneyn, noloshiisu hagaagsaneyn, fikraddiisu hagaagsaneyn ma ay suuro gasho ilmo caafimaad qaba in ay ka yimaadiin,. Maxaynu ku xijineynaa marka? Markeynu taas ku boorrinno, ku hanuuninno oo xusuusanno habeen iyo maalin, Ummaddeenna aabbeyaalkeenna iyo hooyooyinkeenna, dhallinyaradeenna shaqaaleheenna, dadkeenna oo idil aynu xusuusinno macneheeduna waxa weeye : «abuura qoys caafimaad qaba», hooyo caafimaad qabta, aabbe caafimaad qaba, walaal caafimaad qaba iyo ilmo caafimaad qaba.

Maxaa ku soo xiga? Waxa weeye marka in dadkaas iyo aqalkaas caafimaadka qaba ilmihii ka yimid aynan marka suuqa ku hallaabin oo kuwo ba'sani aynan duufsannin, iyagana isla markiiba waa in la bilaaba habkii loo leylyi lahaa leyligaas oo isaguna ku habeysan dhismadii bulshadii caafimaadka qabtey. Waa teynu u bixinnay taa in aynu xaafaddii

walbaba ama xubintii walbaba ama tuuladii walbaba aynu ka abuurnay in laga abuurey meel lagu xannaaneeyo ilmaha yaryarka ah ee hadal baradka ah ee yacni fikraddooda aadamiga ah iyo kasmaduba ay bilaabmeen ama ay soo if baxayso, ilaa yacni la gaarsiiyo, ha yaraado laakiin isla markiiba kasmadiisu ay ka fiicantahay middii aan meelna haysan ee ahayd walaahowga ee isku dhex lunsaneyd.

Maxaa ku soo xiga? Waxa ku soo xiga kuwaan aad arkeyseen ee aynu ubaxa aynu ugu yeernay ee ka dhexeeya dhallinnyaradii iyo kaahii, kuwaas oo ah dadkii iyagana loo baahnaa in loo sii tababbaro, loo baahnaa in loo leyliyo lana dhiso khalaaqaddooda aadamiga ah aqoontooda tacliinta ah, Ummaddooda Soomaaliyeed iyo himilada iyo ujeeddada dheer ee dadkoodu ay u socdaanniin.

Kuwaasu si ay u gaaraan dhallinyaranimadii ama meelihii kale ee ahaa kheyraadkii iyo tacliintii ee Sare ay u gaaraan iyaga oo u soo leylyamay mar hore, kuna leylyamay dhabbihii xaqa ahaa ee bulshada Soomaaliyeed lugo dhisahayey. Haddeynu halkaa dhaafno, maxaynu u tegeynaa? Waaynu u tegeynaa dhallinyaradii ka waaweyneyd, kuwaa oo iyagana ay tahay waajib in aad iyo aad iyo weliba si sii qota dheer leysugu taxalujiyo tababbarkooda, leyligooda iyo dhismada fikraddooda, khalaaqaddooda, waddanninimadooda, Ummad ahaantooda. Sababtoo ah kuwa ugu liita marka la sii eego oo liidashadaasuna aynan ku xirneyn yacni dadnimo xumo iyo wax kale midna, laakiin la yiraahdo heerka ay ilmuhu ama dhallinyaradu ay joogaan heerka ah ama loo vaqaanno walaahowga, heerka maskaxda walaahowgeeda oo badan, yacni fikraddooda oo badan, wax qabadkooda iyo damacooda oo badan, iyaga oo aad iyo aad isula weyn, waaya aragnimadii oo dhammi ay ka maqan tahay, iyo iyagoo cilmigii runta ahaa qotodiisii aan weli gaarin. Markaana haddii aad u fiirsato waxa weeye qof weyn oo haddana var isla markiiba. Mar marka gaarkoodna in ay u qaataan in dadka ka waaweynu uusan waxba aqoonnin waxna garaneynin dad waqtigoodii dham-



maadayna ay u qaataan in ay yihiin, kuwa ka yar yarna; waxaanu waa carruure hadalkooda inaga daaya in ay yiraahdaan oo aad iyo aad loogu baahan yahay, bacdamaa ay tahay marka ay gargaarka u baahan yihiin aad u xoogga badan oo dadka wax garadka ah ee ka waaweyn ama ha ahaadeen mas'uuliin ama ha ahaadeen macallimiin ama ha ahaadeen waaliddiine loo baahan yahay in dhallinyarada aad loo kaalmeeyo ilaa laga gaarsiiyo heerka wax garadka amaba biseylka aadamiga ah.

**Markii aan intaas ka iri, bal** hadde aan u sii dego dadka waaweyn waa maxay waajibkiisu? Dadka waaweyn ee dhaafay heerkaas waajibkoodu waxa weeye in ay sidaa u kasaan korinta u geeddiga ah, ugu jirta halganka abuurista bulshada caafimaadka qabta ee ku dhisan, sharafka iyo karaamada ku dhisan, tabcashada ku dhisan iyo isku fillaantaba, marka waad arkeysaan oo waxa weeye marka xiriir dheer oo dhabbe ah oo isku daba tixan oo mid waluba uu heer leeyahay.

Haddaba haddaan dib ugu soo noqdo ubaxa aynu u dabbaaldegeyno, waxa aan filayaa in aad aragteen kuwii halkakan ka heesa hayey, waxayna ka mid ahaayeen ubixii Kacaanka la dhashay wayna hor kaca hayeen ubax, laakiin sidaas ayey yihiin oo keliya maaha ee haddana macallimiin weeyaan oo waxay gaareen heerkii iyagu ay ka gudbeen ubaxnimadii ayna ku dhammeysteen tacliintoodii loogu tala galay ayna u gudbaan marka in ay kaalmo aqooneed siiyaan carruur ama dhallinta walaalohooda ah. Yacni waa kaa habka wanaagsan ee ilmaha loo soo barbaariyaa miraha ay dhalaan. Mirahaas oo ah fikraddii ay ku heesayeen ama ay ina tusahayeen ayaa ahayd tii lugu soo ababiyey, tii lugu soo leyliyey markaasna ay bilaabeen in ay siiyaan walaalohood, mirihii macaanaa ee ka dhashay mana aha iyaga oo keliye ee boqollaal ama kumanyaal, iyagoo kale ah ee maanta u gudbahaya macallinimo iyo in ay iyagu meeshii lagaga soo bilaabay iyaga oo laga soo dhisay iyaguna in ay kuwo kale ka soo dhisaan ee markaana ay gaa-

rsiiyaan heerka iyagu ay marayaan iyo midka ka sii sarreeya ee ah Jaamiciga ama ka sii sarreeya ee ah aqoonyahanka ama sideynu tilmaannayba hoggaaminta waddankooda.

Waxaan leeyahay; ammaantaydu ha gaadho anigoo ku hadlahaya magaca Golaha Sare ee Kacaanka, kan Xoghayeyyaalka, kan dadweynaha caafimaadka qaba ee Soomaaliyeed guud ahaantiisaba, dadkii hawshaas waajibka ah la saaray shan sano iyo siddeed bilood mar laga joogo ee aan ka xusahayo Jaalle Cabdirisaaq Maxamuud abuubakar aanna ku xijinaayo kuwii habeen iyo maalinba heeganka la ahaayeen in ay fuliyaan waajibaadkaas muuqda suuro galkiisa ka shaqeeyey, dhibaatooyin iyo wax kastana kala kulmay, maxaa yeelay waxan xog ogaal u ahayn wixii dhibaato ahaa ee meesha yiilley, mar haddey ahayd amaba ku saabsaneyd abuuris amaba gudbin fikrad siyaasi ah, fikrad kacaan ah, fikrad abuuris qiimo aadmi ah ku dhisaaleysan, loona gudbinaayo qof kale oo adiga kula garad ah, kula caqli ah isla markiina inta badan lagu tababbaray ama ku abaabay kuna koray, kuna faa'iideystay hab ka duwan midka hadda aynu innagu wadno·

Haddaba aad baan ugu ammaanahayaa, waxaanan leeyahay : «guuleysteyaal wada geeddiga xaqa ah» ilaa aynu ka gaarno meesha aynu u jeedno.

Aan taabto mar haddaan tacliintii daba joogo qiimaha macallimka. Waxaan iri kheyr oo idilu, garad oo idilu, barwaaqo oo idilu, abuuris bulsho oo idilu siyaasad hagaagsan oo idilu, aqoonyahannimo cilmi oo wax lagu qabsado oo idilu, wuxuu ka yimaadaa macallinka. Haddaba dugsiyow macallin la'aan wax ma barta dadka, muxuuse kaaga duwanaan karaa aqallada la seexdo ama guryaha kale oo la seexdo oo makhaayaadka ah oo loogu isticmaalo maslaxooyinka kale? Marka haddee aynu dib u noqonno, aynu niraahno macallinka koobaad ee aabbaha iyo hooyada ah ee ku abaabiya dadka halka san oo aynu sheegeyney amaba aynu la dooneyno weynu ka faa'iideysan doonnaa innagu iyaga ayaannu dhiseynaa, iyaguna kuwii kale oo ka dambeeya ayey dhisi doonaan ilaa



Ummadda Soomaaliyeed ay ijrto, waa jiri doonaan inshaa'allaahuye.

Haddaan u soo laabto m a r k a xagga guud -anta **tacliinta, waxaan filayaa waad fahmi** kareysaan dhibaatada qalabka wax lagu barto. Waxaan leeyahay waloow dhibaatada badan oo aynu kala kulmeyney Dugsiyada dhismadooda ama tababbarka ama diyaar gareynta macallimiinta iyo ayadoo dhibaatadu aad u ballaarayd, welina ay ballaaran tahay awalna ay u ballaarnayd, haddana waa maxay risaaladeennu? Risaaladdeennu waxa weeye heerka aynu dooneyno waa in aannu gaarno, maxaa wacay waxa aynu qabsannay shantii sano iyo siddeedii bilood oo haatan la tilmaamahayey seddex laab in ay kusii socdaan, yaa inoo qabtay? Haddeynu ka sugno dad aadami ah amaba ajnabi ahse goormaa wax -ri lahayn? **Yacni kumanyaal qol** ayaa la sheegayaa in lagu sameeyey waddanka gudihiisa, yaa inoo qaban lahaa haddeyka sugno qorsheyntooda, jaan gooyadooda iyo kaalmohoodaba ka sugno dad kale? Xaggeebeynu adduunka, kasmada iyo xoogga iyo adduunka aynu ku sameynay, xaggeebeynu ka keennay? Waxaynu ka keennay iimaankeenna oo bal horta wuxuu ku soo baxay shirkii wuxuuna u jeeday oo uu ugu soo baxahayey wax ma garadka aan u oggoleyn nolosha iftiinka, aqoonta aadaminnimada ah, iyo wax garadka aan ilmihiisa u oggoleyn, kaas baanna ula jeednay markii aan khasab lahayn. Haddana gudubnay kaas oo Iskoolaadkiina diyaar gareynay, macallimiintiina waa sidoo kale. Magaca aan mar ka u bixineynaa waa maxay? Ma iskool khasab ahbaa? Maya Waxa weeye marka : «tacliinta deg degga ah ayaa la yiraahdaa, khasab maaha marka· Haddee hoosta waxa inoogu laaban midka aan waxba garaneyn oo doonahaya ilmuhu in ay berrito wax tar u noqdaanniin tacliintana waan u direynaa Waxan taa ka leeyahay; Tuulo kasta, Degmo kasta iyo Gobol kasta, metel ahaanna intiinnatan meteleysa Gobolka Xamar aragti ahaan aan u jeedinhayo ama aan aragti ahaan isu hor fadhino, laakiin aan u jeedinhayo dhammaantood intii ka qeyb gashay Dugsiyada tacliinta deg degga ah, hambalyo ballaaran Ummadda Soomaalida ah aan u dirno, intii ka

mas'uul ahayd ee qorsheynteeda iyo agaasinkeeda iyo isku duwiddeeda lahayd in aan ammaan ballaaran u dirno. Intii farsamayaqaanka ahayd ee iyagu isku duwiddeeda lahayd farsamayaqaanka ahayd ee iyagu gacanatooda iyo maskaxdooda ku hagaajisayna in aan u dirno ammaan ballaaran, Ummaddii Soomaaliyeed ee iyadu jeebkeeda tabarruc kaga dareenna in aan ammaan ballaaran u dirno, kuwii xooggooda iyo dadnimadooda kaga qeyb galeenna in aan ammaan ballaaran u dirno. Aanna isla markiiba aan anigu niyad ahaan anoo metelahaya Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayeyaashaba aan niyadeyda aan is iraahdo : «waxaad ka dhalatay, kana mid tahay, kuna dhex jirtaa, shaqaalena la tahay oo la shaqeyneysaa Ummad sharaf leh, gob ah oo garatay, waxa ay dooneyso; gaarina doonta waxa ay dooneyso.

Maalintii himilo aynu innagu lahayn aannu qabsannoba, waa in aynu u garannaa guul aynu lahayn gaarnay, waana in aynu isku mahadinnaa dhammaanteen. Markaasna waa in aanaan taas la seexan ee waa in aannu niraahnaa, maxaa inoo dhiman? Tan inoo dhimanna haddana maalin dambe in aannu ku dhaqaaqno. Waxa inoo yaallaa marka waxa weeye, sidii ay u kala waaweynyihiinba, dhismihii waddankeenna, aad buuna u qiimo leeyahay una ballaaran yahay, aadna waa u weynyahay, laakiin haddii laga eego markii Ummadi ay mideysantahay, markii Ummadi ay hawlaheeda qorsheysato, maxay la ekaan karaan dhammaantood? Waxba ma la ekaan karaan. Markii aannu Degmooyinka dad ka wakiil ah, khaas ahaan Gobolka Xamar, culumada, dhallinyarada Jaamiciga ah qaarkood, markaannu u direyney xeryaha dadka ceyroobay amaba Degmooyinka ay deggan yihiin ee xisaabtu aynan ahayn Jeexantii dhoweyd oo aad tagteen ee ay ahayd 250000 oo qof ugu varaan markii kuwa geesaha loo masruufo laga reebo. Maxaynu uga jeednay? Yacni waxaan jeclaan lahaa inaad dhab u baartaan maskaxdiinna oo dib ugu noqotaan, yacni maxaa adinka leydiin lug goynhayey oo safarkaas leydiin gelinhayey?Maxaa baansiinka iyadoo dadkeennii sidaas u gaajeysan yahay loo kharash gareyn hayey? Maxaase waxyaala



kale oo kharash ah aynu u gelayney? Sidaas isweydiis bey u baahan tahay iyo in aynu is-weydiinno. Ujeeddo la'aan miyey ahayd intaasu? Maya, ma aynan ahaynnin ujeeddo la'aan Jaallayaal, ujeeddaduna mid qura uun bey ahayd, midda qur ahina waxay ahayd markeynu isku duubannahay sideynu wax u tashan karno, markeynu fiirsannahayna sideynu u lumi karno, labadaas sifadood in aad kala garataan ayey ahayd ujeeddadu.

250.000 oo qof iyo dheeraad, markii docda kale loo rogona inta gargaarku uu gaaraa ay tahay milyan ama milyuun iyo laba boqol iyo googgo' qof ah, markeynu midowdayna waynu badbaadinnay naftoodii, markeynu ba'saneyna qof ba meeshiisa ayaa bahalku ku cuni jirey, abaarta, oonka iyo gaajaduna ay ku dili jireen. Waa kuwaa Ummaddii midoowdaa waxyaabaha ay gaartaa.

Haddaan ka soo qaado hawshii raridda bilowgeedii maanta ayaa lugu dhaqaaqay oo 300 oo qof ayaa maanta la soo raray oo Banaadir meel ka mid ah joogta caawa, berritona waa bilowgii ugu weynaa iyo caddadkii ugu weynaa intii aan raridda ugu talo galnay. Markii la xisaabtamay dadka caddadkaas la'eg wuxuu ku fariisanayaa in hawshaas oo socoto caddad shan bilood ah yacni raridda ah. Innaga ma inoo cuntantaa, shan bilood oo dambe in aynu geeddi ku jirno? Waxa weeye xoog iyo xoolo iyo xirfo waxa aan leennahay in aan isugu geynaa kuna dhammeynaa bil gudeheed geeddigaas. Waxa aynu uga jeednaana waxa weeyaan in aynu iyagana dhibka qaadno, khaladka micno darrida ahna aan ka qaadno, isla markiina hawlaha badan ee Ummaddaan Soomaaliyeed u yaalla si ay halgankoodii horeyba u sii qorsheystaan una sii wataan waa in aan waqti badani uusan kaga lumin, waana in aannu marka boobnaa oo waa in aan isugu geynaa wixii aan gaari leennahay, wixii aan xoog leennahay, wixii aan dad leennahay, si aynu ku bixinno culeyskaas ina dul saaran aannuna gees u dhigno. Waa in aan haddeynu Ummad aadamiya nahay garannaa ninkii wax inoo taray iyo kii wax inoo dhimay.Kan wax inoo dhimana waa in eeddannadu la jirtaa, sida kuwii Soomaali qeybiyey, gumeeyey, kala laayey, kala

dulleeyey, eeddannadu weligeed in ay la jirto xaq ay u tahay. Haddaannaan aarsaneyna niyad iyo fikrad ahaan eeddannadu waa in ay weligeed la jirtaa. Kii wax inoo tarayna maxaa la jirahaya? Haddeynu nahay Ummad nasab ah, sharaf iyo qiima leh, waxa la jirahaya abaal haynteenna, markii ay inoo gaartona in aynu u gudno innagoo taa ku meteleyna qiimeheenna aadamiga ah. Metelan waxay inoo soo dirtay markii dhibaatadaas ballarkeedu u yimid Dowladda Soofiyeet Yuniyon oo isticmaarka caalamigu uu inagu hayaanedeynhayo, 130 gaari oo dadkaa lugu soo guro, waxay inoo soo direen lix diyaarado oo middiiba ay qaaddo 200 oo qofood markii keli ah oo weliba iyagu ay isku qabaan wixii hagaajintooda ah iyo wixii ka jaba iyo bansiinkoodiiba iyo wadiddoodiiba. Bal hadde qiyaasa xoolaha ku baxahaya halkaas.

Waxaan isleeyahay, haddii dhibaato ku haysato, haddii metel baddaas liido la yiraahdo aad tagto oo aad tiraahdo ku mayro oo biyuhu ku liqaan adna aadan dabaal aqoonnin oo aad gacmaha taagto, qofkii kuu soo orda oo kaa baxsha biyahaas aad ku dhiman lahayd, muxuu kuu yahay? Kii kugu fiirsada oo kugu qoslaana muxuu noqonhayaa? Waa taa marka xaqiiqda in aynu ka gaarno loo baahanyahay. Waxaad arki doontaan dabadhilif xun oo kuwii citinta isticmaarka guran jirey ah oo leh : «Ruush muxuu inoo qabtay oo inoo taray». Markii nin kastaaba inaga dhuunto waqtiga aynu maanta mareyno. Xaqiiqdu waa taas walaalayaal mar. Mana aan ka hadlahayo wixii kaalmo ahaay oo aynu ka helnay oo ahaa boqollaadka ama kumanyaal daawo ahaa amaba cunno ahaa, dhaqaaleheenna heerkii ay ka cayaareenna ma aan ka hadlahayo, mana aan ka hadlaayo gobannimadeenna dhowrashadeeda wixii ay ka qabteen, ma aan ka hadlahayo hadeynu isku filannahay shantaas sano oo aynu halgameyney aqoonyahannadii inaga gaarsiiyey ama ha ahaato xagga dhaqaalaha aqoon-yahaanimadeeda ama xagga farsamada iyo aqoonta in ay boqolkiiba sagaashan (90%) iyagu ay wax soo bareen, ka hadlimahayo waxyaabahaas faraha badan laakiin taariikhda ayaa tirin doonta Soomaaliya ninkii wax u dhimay iyo kii wax u tarayba, mana la baabbi'in karo.



Waxa aan iyagana aan leeyahay : «mahaddeennu ha gaadho», innaguna dad haddaan nahay markii ay inoo gaadho ayaan u abaal gudi doonnaa.

Waxaan u soo noqonhayaa marka rariddii. Waxaynu fariisinnay abaartii dadkeennii ay layn lahayd in aynu taageerno oo aynu badbaadinno noloshoodii. Waxa maanta ina horyaallaana maxaa ay yihiin? Waxa ina horyaalu waxa weeye in aynu dejinno oo ay noloshoodii cusbeyd foolka saaraan, waxa weeye kii beerta falahayey intii aan Deyrtu ku imaannin in aan ka gaarsiinno, si uusan isaga naftiisu u ahaannin wax la masruufo oo miskiin ah daa'iman u noqon ee uu ugu gudbo ama wax barashadiisii, haatanba xeryaha waxbaa lagu baraaye, maxaa wacay waqti in uu inaga lumo ma aannaan dooneynnin amaba kii xoog lihi uu tacabkiisa u bilaabo. Haddeynu shan biloodsoconno Deyrtuna waa gudbeysaa Gu'giina waa ina gudbay. Mana anfacayso ee waa inta Jiilaalka lagu jiro amaba dabayaaqada guga lagu jiro, illaa wa illaaba waa in aan dhammeynaa furmadoodii. Waxa loo baahan yahay marka, in kastoo kaalmayaal saas ah oo qiimo leh aynu u helnay, haddana maxaa loo baahanyahay? Waxaa loo baahanyahay in aynu isugu tagno, dadkaasu waxay u baahanyihiin dhar, dadkaasu waxay u baahan yihiin cunno, dadkaasu waxay u baahanyihiin daawo, dadkaasu waxay u baahanyihiin guryo, dadkaasu waxay u baahan yihiin wax ay ku seexdaan, dadkaasu waxay u baahanyihiin tacliin iyo inta qofka aadamiga ahi uu u baahan yahay oo kulligeenba aan u baahannahay, waana dadkeennii. Marka kaalmo saaxiib ajnabi ahi ma ku filan tahay? Maya. Awooddeenna Dowladnimada ahse ma kula filannahay markii aynu isku taxallujinno keli ahaanteenna? Haddeynu fariisinno oo curyaaminno yacni inta kaleeto oo metelan tacliintaan dheer od aynu ka hadleyno, iyo dhaqaalihiiba yacni haa. Waan ku filannahay. Laakiin ma habboontahay halgankeennii dheeraa iyo dagaalkeennii in aynu fariisinno ma habboon tahay? Maya.

Waxaa dhergin kara gaarsiinna kara waxa ay doonaaninna waxa weeyaan Ummadda Soomaaliyeed oo isugu tagta, isu-

gu taggana : «hadal haan ma buuxsho» ee waa in aynan noqonnin hadal keli ah. **Waxa weeye waxtar wax qabad ah, waxa weeye qof maro keena, qof sariir keena, qof lacag** keena, qof xoog keena. Qofkii ka hara oo Soomaali ahina, waa qof aan Soomaalinnimada ku sifeysneyn ama aan haynin oo aan waxba tari karin.

Taasuna waxay tareysaa awalan, bal in aynu dhudhuminno oo tijaabinno midnimadu qiimaha ay leedahay, ayna inoo noqoto tababbar aynu innagu nafteenna ku tababbareyno, aynu dhasheenna ku tababbareyno midnimadu qiimaha ay leedahay, gargaarka iyo garab qabadku qiimaha ay leeyihiin xaqa ahi ayeynu ku jitaabineynaa, waxaynu ku gudbeynaa amaba aynu uga jeednaa dhibaato muddo dheer socon karta in aan soo gaabinno. Waxay ila tahay taasuna sida aan rajeynhayo khaas ahaan magaalooyinka iyo Degmooyinka aynan abaartu taabanninu; waan hubaa yacni qof aynan gurigiisa taabanninu ma jirto markeynu xaqiiqda u dhacno, laakiin haddana waa sii kala daran tahay in ay mar labaad ku kacaan sidii ay dadkaas walaalohood ah ee caddadka badan leh ay u dejin lahaayeen una masruufi lahaayeen muddada dheer ee horteenna taalla, maxaa wacay ilaa ay iyagu wax ka tabcadaanniin, waad garan kareysaan haddeynu maanta geyno inteynu qalabkii u geyneyno, inta aan guryo u dhiseyno iyo inta ay iyagu ay xirfaddii ka baranhayaan masruuf bey inaga doonahayaan. Marka inoogu horreysana dejin bey inaga doonahayaan, waxay inaga doonahayaan Iskoolaadkii in aynu u sameyno, waxay inaga doonahayaan meelihii caafimaadka in aan u sameyno, waxay inaga doonahayaa biyihii in aan u sameyno iyo wax alla wixii bulshadii jirtaaba ay u baahnaan lahayd ayey inaga doonayaan. Waxay inaga doonayaan masruuf iyo marasho intaba, waxay inaga doonahayaan tacabkii dheeraa oo aynu soo marnay in aynu kaamil yeelno ayey inaga doonahayaan.

Maxaa ka dambeyn doona? Intii ay marka ay wax kala soo baxaan oo iyagu ay isku fillaadaan, muddada ka horeysaa imisaa bey noqoneysaa? Aan hadde beer keliya aado, bal hadde Gu'gii gudub, bal haddana ku dar 3da bilood oo xa-



gaaga ah, 3da kale oo cunnadu bexeysona ku dar, waa 6, wax ma tabcadaha haddana kolleyba aynaan sii deyneyninna ku dar oo ay tahay in lugu sii wado masruufkii. Reer baadiyo ayuu ahaa oo ma yaqaan sidii uu beerta u falan lahaa oo meeshii uu ka fali lahaa, markuu abuuro ka dib oo uu ka fijin lahaa cawska inuu balkiiba gooyo ayaa suuro gasha. Yacni waad garan kareysaan marka waxa ina horyaalla.

Haddaba waxa loo baahanyahay marka si aynu guushii aynu rabnay u gaarno in aynu isugu tagno oo innagu taakulada ugu horreysa iyo garab qabadka ugu horreeya, si dhammaan ah in aynu u fiirinno. Shaki kuma jiro oo wey abaalgudi oo waan hubaa, shakina iigama jiro, dhaqaalaha ayey kordhin doonaan oo waan hubaa, bulshada ayey wax tari doonaan oo waan hubaa waddaniyiin weeyaan oo waan hubaa, cadawga ayey celin doonaan oo waan hubaa, tii gum ah ayey xoreyn doonaan oo waan hubaa. Laakiin waxa innaga ay inaga doonayaani waxa weeye waxtare meeshii ay ku noqon lahaayeen in aynu gaarsiinno weeyaan. Waxaannu u abaal hayn doonnaa aan mar labaadna u bandhigeynaa adduunka innagoo taabaneyna xaggooda aadaminnimada ah in ay wax inagala qabtaan geeddiga iyo dejinta iyo nooleynta Ummaddaas, sidii aynu innaguba mar kasta oo la'inoo baahdo in kasta oo aynu xoolo yareyn shantaas sano iyo barkaas kama aynaan harin meel tahluuko ay ka dhacday ee wax tarkeenna waan ka geysan jirney. Sidoo kalena waxaan weydiisaneynaa iyaguna in ay wax inagala qabtaanniin. Laakiin waxa la yiraahdaa qofkii isagu naftiisa kaalmeeya ayaa la kaalmeyn karaa ee bal horta marka ugu horreysa innagu waa in aynu u duulnaa in aynu is kaalmeeyno.

Intaasna taa baan kaga baxahayaa, waxaanna ku dambeysiinhayaa haraatidii abaartu ay reebtay in aan wax uun ka taabto. Metelan xaggaas abaartu ay u badatay waxaad mooddaa waxyaalo dhibaatooyin ahi in ay ka muuqmuuqdaan, waxaan jeclahay dadka dalkaas deggan ee walaaleheenna ah in aan uga tebiyo hadal tebiyahaan talo walaalnimo iyo tusaale maslaxaddooda runta ah saameeya iyo u warran aan uga warramahayo siyaasadda Kacaanka Soomaali-

yeed waxa ay tahay. Waxaan maqashiisnahay, abaari weli-geed dhibaato ayey la timaaddaaye, baahi bey la timaaddaa-ye in ay dhasheen dad qowleysato ah oo xoolaha qasha, ku-wo boobaan, mana ay badneyn oo aad baan ugu mahadina-yaa Ummadda Soomaaliyeed sidii ay isugu dul qaadatay abaartii xumeyd oo aannu soo marnay intii wax u hareen, laakiin kolleyba meel walba daallin waa joogaa, waxyaalaha hadda i soo gaaray waxaa ka mid ah in ay jiraanniin, kuwo isu guuxahaya oo waqtigii abaartii xumeyd waxyaalo inta is-ka gaargaareen isu guuxahaya oo leh waan aarsaneynaa ama-ba kuwo tuugo ah ama kuwo caqligoodaba ay ku dhacday, bacdamaa xoolo keliya ay yiqiinneen, haatan ayaa roobkii da'ay ee xoolo tabco, caqligiisana ay weli ku jirto duullaan iyo geel dad leeyahay in uu soo qaado oo soo dhaco.

Maxay dhalin doontaa taasu? Waxay dhali doontaa dhibaato ka dhex dhacda Ummadda Soomaaliyeed, waxay dhali doontaa dhiig, waxay dhali doontaa firir iyo sii kala dheeraad, waxay dhali doontaa in nabaddii macaaneyd ee shanta sano lagu jirey ee dhallinyaradii kortay ee cifatay, Ummaddii walaaloowday; in geed dheer la dul saaro. Wa-xaanna uga tebin hayaa Miikoroofonkaan : «walaalayaal garta, jaallayaal garta xaqiiqda», aakhiro iyo adduun waxa idinku waajib ah in aad badbaadisaan nolosha walaalkiin, sida innaguba aan u badbaadineyno, aannuna heeganka ugu nahay ayna ugu dul baqtiyahayaan. takhaatiirtii, shaqaalihii, askartii, Ummaddii iyo dhallinyaradiiba, si ay kuwo kale u noo-leeyaan kuuma bannaana adigana in aad disho naf nin Soo-maali ahi uu leeyahay oo waajibkaas oo kale ayaa ku saaran, waana aan kuu sheegeynaa oo farta kuugu fiiqeynaa ee si wa-naagsan u ogoow.

Waxaan leennahay, nabaddu wax macaan weeyaan, wey-nuna xasilinnay muddadii shanta sano iyo barka ahayd. fadligeeda weynna waxa lahaayeen dadka Soomaalida ah ee wax garadka ah oo culumo leh, oo madax leh, oo nabad doon leh, oo ikhyaar leh, oo wax garad leh ee waddaniyiinta ah ayaa abaalkeeda weyn lahaayeen iyo mas'uuliinta ku sha-qeysa intaba. Haddii Ilaahay weel kuu buuxsho oo caano iyo



barwaaqo kaaga buuxsho, leyskama haraatiyo oo haddaad iska haraatido Ilaahay waa kaa daadshaa. Weelka idiin buu-xa ha iska daadinnina baan idinkula talinhayaa Jaallayaal. Maxaa dabayaal oo Kacaanka Soomaaliyeed fali doonaa? Kacaanka Soomaaliyeed ruux ruux kale ee Soomaali ah naf-tiisa kibir iyo maslaxad tiis ah u gooyey, isticmaar soo dirid uu soo diray u gooyey,nabad naga helimahayo meel uu galo-na kama hari doonno ,lagana yaabimahayo taas. Hadduu doo-no haatan ha sheegto isticmaarkiisa ha u sheegto, laakiin ka-ma harayno, waana xaqiiqo in aan daba socon doonno.

Micneheeduna waxa weeye, oggolaan meyno in ciyaar lagu laayo dad Soomaali ah, in maslaxad doon diiri qaate ah oo iimaankiisii ka tegey, kiisii waddaniga ahaa lumay, tiisii islaamiga ahayd ay luntay, kiisii shakhsinimada iyo lamiirkii aadamiga ahaaba lumeen, in uu cayaar u gooyo yeelimeyno naf Soomaali ah, hadduu gooyona tiisuna waa in ay go'daa iyaduna. Waxaannu leennahay kuwaas moodahaya in la joo-go heerkii hore ee dadka xoolihiisa la qaadi jirey, waxan u tilmaameynaa in ay iimaankooda sugtaan si xalaal ahna ay wax ku tabcadaan, naftooda iyo tan walaalkood aynan khatar gelinnin, waxaannuna leennahay innagaa u hayna kheyraad iyo tabcashoba ee ha inoo yimaadeen, shaqo ayaan siineynaa, beerona waan u jeexeynaa, badna waan bareynaa si uu khey-raadka ugala soo baxo, waana uu noolaanhayaa, waase had-dii uu nolol doonahayo. Hadduu dhibaato iyo geeri doonaha-yona, bal ha dilo wixii ka dambeeya ha la arkee. Iyagana saas baannu leennahay, waxaanna kula talineynaa annagoo ku baraarujineyna waddaninnimadoodii, innagoo ku baraaruji-neyna islaamnimadoodii, innagoo ku baraarujineyna Ummad ahaantooda iyo qowmiyaddooda, innagoo ku baraarujineyna walaalahooda ku wareegsan ee addoonnimada ku nool, inna-goo ku baraarujineyna aqalladooda, carruurtooda, haween-kooda iyo habrahooda, waxaan leennahay : badbaadiya no-losha walaalihiin», nabadgelyo ku wada noolaada, garab iyo gaashaanna isu ahaada, cadawgiinnana aqoonsada midka uu yahay, mana aha kan walaalkaa ah oo kula deggan amaba kuu dhow ee waxa weeye midka ku gumeysanhaya, midka

ceebtiisu ku dul saaran tahay weeyaan, waxa weeye midka hore u kacaaga hortaagan, dhaqaalahaaga hortaagan, nabadgelyadaada hortaagan, cifashadaada hortaagan oo qowmiyaddaada la dirirahaya, sharafkaaga la dirirahaya. Kaa weeyaan cadawgaaga runta ahu ama mid xun oo Soomaali ah dhabcaalladaasna ka mid ah oo kula jooga ha noqdo ama isticbmaarka isaga soo dirsaday ha noqdee. Waa kaa cadawgaaga runta ahi ee haddii aad waran haysatona ku jeedi isaga, haddaad xabbad haysatona isaga ku jeedi, haysona haddaad xigmad haysatona isaga ku jeedi. Kalcagalada, jeclaanta dhoweynta kaalmaha iyo derisnimada sii walaalkaa, waadna ka faa'iidi doontaa aakhiro iyo adduunbee. Qoloovinkaasna intaas baan u farahayaa. Waxaanna ka rajeynhayaa in hadalkaasu ama taladaas walaalnimo oo aan jeedinhayo ee ka hortegahayo in dhibaato dib u timaaddo in qalbigoodu uu ku jilicsanaado aynu ku liibaanno aakhiro iyo adduunba.

Jaallayaal, waxaan hadalkeyga ku soo koobahayaa, markii aan Degmooyinka aan aad u ammaano hawlihii ay qabteen oo badnaa, mar kastana ay heegan u ahaan jireen oo ay qaban jireen, haddana waxay ila tahay in aan hoos u soo dego iyo waxyaalaha had iyo jeerba. Ayaantaan, xan iyo been xifaale iyo dhurrey ayaa xalayto oognaaye; intii kale kuma sii aan darahayo, maxaa wacay dan kama lihi, ayaantaan waxa la yiraahdaa oo durbaan lagu tumahayaa : «qabiilkii baa soo noqday, eexdii baa soo noqotay, garab qabashadii baa soo noqotay» iyo magaciisii baa soo noqday. Waxa kale oo la yiraahdaa dadkii Kacaaniinta ahaa sidii loo hal siibahayey waa dhammaadeen, waxa kale oo la yiraahdaa dadkii Kacaannimada markii hore xoogaa u soo hiyi kacay, markii ay arkeen xaalku in uu dhanaan yahay oo rajciyaddii ay madaxa la soo baxday; way dhuunteen baa la yiraahdaa. Waxaan Degmooyinka Guddiyaalka ka socda weydiinhayaa hadda ka horna waan idinkala hadlay, haatanna waan idin xusuusinhayaa, waxay ka dhalataa caddaaladdu reerka, waxaana ku xiga maamulku sidii uu u kala hooseeyo hadba ilaa dhalada uu ka gaaro. Markaannu dooneyney Soomaali caddaalad in aan u sameyno, waxay ahayd markii, bacdamaa Warshadda keliya oo



maanta jirtaa ama aynu u nimid ay ahayd shaqada Dowladda in aynan bixinnin shaqo Dowladdu oo aan Madaxtooyada laga bixin, Wasiir in uusan bixinnin, maamule iyo qof khaas ahina in ayan bixinnin oo aynu u dhigno nidaam cad oo aan leysugu qaldami karin; ninkii cilmi dheer leh oo Jaamacad ka soo baxay, ruuxii iskoolaadka dhexe dhammeysta, ninkii saani farsama u yaqaan oo shahaado u haysta qiimo leh, inuu Xalane saani u tago isaga oon ninna baryin, micneheeduna uu yahay xusuusin dib loo xusuusiyo hiddihiisa iyo dhaqankiisa iyo Ummaddiisa nolosha ay maanta ku nooshahay iyo waxa ay tahay oo laga meyro wixii ajnabigu uu ku soo tirtiray qaarkood ama wixii uu illoobay oo la xiriiray dalkiisa iyo dadkiisa iyo noloshiisa la xusuusiyo, in markaa dabadeed meesha uu aqoonta gaarka ah ku leeyahay la geeyo, isaga oo aan ninna ku mahadin.

Midkii iskoolaadka dhexe ka baxaana in aannu tartan gelinno, innagoo u saareyna dad badan oo guddi ah oo aan ku heshiin karin tuugo aanna is aamini karin, markaasna aan niraahno : «jaalle; qalinkaaga iyo maskaxdaadu ha ku meel mariyeen», ruux kale oo aad wax uga baahantahayna ma jiro, dadkii farsamayaqaan ahna sidoo kale in aan u qabanno guddi ballaaran oo farsamayaqaan iyo mas'uuliin intaba leh oo iyagana aynan ka suuro gelin in ay u heshiiyaan tuugo iyo khiyaano iyo garab qabad intaba oo imtixaan ay iyaguna ku gudbaan, qof walubana uu huro nasiibkiisa iyo aqoontiisa.

Waxaynu u guddoominnay shaqada aan cilmiga dheer dooneynin amaba aan looga baahneyn farsamayaqaanna aan ahayn iyadana in aan u dhiibno bulshada Soomaaliyeed, xaqna u lahaa, laakiin si musuqmaasuq ah ku gudba. Dhowr goorna hadda ka hor waan idin kala hadlay, waana idinku boorinhayaa, eeddayada kama hareyno oo eeddannadu waxa ay saaran tahay qof Soomaali ah qofkii xaqdiya amaba qofkii khiyaaneeyo, mana oggolaan karno umana dul qaadan doonno waxyaabaha xaq daradda la xiriira, mana oggolaan karno gabar Kacaan ah Guulwde ah ee shan sano iyo bar dagaallameysey, reerkeediina ay eryeen inanna ah in gabar aqalkeedii hurudday la siiyo, eeddannaduna ka harimeyso

kuwii sidaa yeelay, waana ay ka dabategi mar ay noqotoba oo ma ka hari doonto eeddannadu, mana qaadan karno in caddaalad xumo ceynkaasi ahi ay dhacdo. Intaad adinku shalayto Dowladaha ku eedeyn jirteen caddaalad xumo iyo qaraaba kiil in aad adinku yeeshaan ma ay suro gasho, waana ay dhacdaa xaafadaha ay khaas uga dhacdona waan tilmaami doonaa markii loo baahanyahay.

Waxaan aad u canaananhayaa Guddoomiyeyaalka Degmooyinka, maxaa wacay Guddoomiye ugama aannaan dhigin in uu caddaalad xumo ka wakiil noqdo, waxaan aad u canaananhayaa hooyooyinka waxaan aad iyo aad u canaananhayaa inta guddiyaalkaas ka qeyb gasha, waxaan canaananhayaa inta oggolaata caddaalad xumada oo maxay u oggolaanhayaan mey qeyliyaan oo noo sheegaan? Ilaa laga gaaro kuwa caaddiliinta runta ah, waddaniyiinta ah iyo kuwa iimaanka leh ilaa laga gaaro, waa in ay diidaan kuwa caddaalad xumada sameynhaya, waana in ay la diriraan boqol goorna waan idiin sheegay. Lana jirno wixii caddaalad xumo saameyso.

Hadalkaas waxa iga keenahaya, waxa ay tahay maalin walba maalinta dadweynaha ay maalintiisa tahay maalin walba uur xumo ayaan ka qaadaa, maxaa wacay wax aan ka talinnay oo laga leexday baannu arkeynaa. Waxaannu ka talinnay, war haddii wiil iyo gabar dhallinyaro ahi ay sinmaan oo ay shaqo u sinmaan, iyadoo xaqoodu uu siman yahay, haddana markeynu aadami ahaanta u fikirno, gabadha ayaa khatar u dhow iyada iyowiilka, war gabadha sii. Haddii laba qof midna ay ilmo dul saaran yihiin midna uu qoobfiniin yahay ay sinmaan, war midka ilmuhu ay dul saaran yihiin sii oo isaga u eexo waa xaqe. War haddii qof maalintii Kacaankaanu uu dhashay, isagoon wax uu noqon doono aan laga warqabin soo qaatay maradiisa inta soo xaytay oo lillaahinnimo iyo waddaninnimo ay keentay ilaa maantana ku taagan war mid shalayto yimid ha dhaafinnin. Caddaalad xumo ayaad sameyneysaaye. War Ummaddu sidii ay u kala liidato shaqada u siiya. Waan idin iri, waan idin iri oo haddana waan idin iri.

Waxaan idin iri, war Degmo waliba buug ha ku dhiga-



to dadka deggan, qof walibana waxa uu yahay dhiga, kii carruur leh dhiga. Buuggaas maxaa idinka haysta. Waxa leydiin qeybshey Degmo iyo Laan iyo Xubin, iyo Fallar. War Fallar walba ma dadka meesha deggan buu dhigi kari waayey? Yacni waa waxa qofna uu u qado qofna uu wax badan u qaato. Sidee ku dheceysaa sidaasu, xaggee joognaa innagu? Yacni maxay ku suuro geliweyday in intaa sameysaan oo xisaabtaan xubintii walba ay taqaanno dadkeeda, qof walba xaqiisa uu helo.

Qaraabakiil iyo eex anigu aan ka fogaaday, waad caqli yar tahay markaad damacdo in aad hoosteyda ku sameyso aad baadna u caqli gaaban tahay. Waxa aad baareysaana waa godkaagii run ahaantii. Baaridda ayaantaan aan ku jirnaana aad bey u ballaaran tahay, waxa ay ku soo baxdaana ha xusuusteen dhibaatooyin in ay la kulmi doonaan. Maxaa wacay caddaalad xumo aan ka dirirnay aan khatar u galnay, haatanna aan ugu jirno,adigu in aad sameyso oo aad ku sameyso Ummadda, taasu wax kuu suurtoobahaya maaha. Weli tuugo ayaad nagu haysaa, laakiin kuwii kaa daba taga ayaannu nahay, maxaa wacay ciidanka xalaasha ahu waa badan yahay.

Haddaan ahay nin Kacaan ah haddaan ahay nin Lillaahi ah, haddaan ahay nin hantiwadaag ah beenloow noqonmaayo ee ceebta aad leedihiinna waa in aan sheegaa kheyrka aad leedihiinna waa in aan sheegaa. Kheyrka aad leedihiinna waa fara badan yahay oo ma tirin karo, ma aan tirin karo maxaa yeelay aad buu u tiro badan yahay, maxaa yeelay shan sano iyo dheeraad beynu soo goynay. Ma wixii aad qabateen baan anigu tirin karaa. Waxa aan marar badan fahmahayaa markii aan mar marayo xaafadaha iyo markii aan meelaha cunnada laguqeybinhayo aan tago, waxaan filahayaa dadkii dagaallami jirey oo aan aqoon jirey midna ama waxba kama arko. Ma markii hore ayey been inoo sheegahayeen oo waa dhuunteen oo Kacaanka waa ka hareen, ma la haraatiyey oo waa hareen oo xaafadihii baa laga eryey madaxnimadii baa laga eryey, guddiyaalkii baa laga baxshey? Ma aqaan anigu. Xaggee wax ku jiraanniin Jaallayaal? Ma garan anigu. Meeshaanna waxbaa ku jira, Cabdulqaadir iyo

Xafiiska Siyaasaddana aad baan u kiritikaareynhayaa. Waana in dib loogu noqdaa xaalku sidaa ma noqin karoe. Shan sano qofkii ila soo dagaallamahayey waa in aan aniga iyo isagu iskumeel ku dhimannaa, kii shalayto yimidna jahannabadii waa in uu aadaa. Ma dhici karto mana oggolaan karno sanadii walba in dad hor lihi ay soo dhashaan. Waxaynu noqoneynaa mabda'laaweyaal, oo waxa aynu sheegeynaa been bey noqonhayaan, markii kii soo dhintay maanta marada laga qaato. Ma tagoogada muruqa ka dhufso kana dhaqaaq miyaa? Maaha mana noqon karto Jaalle. Aniga habartii caleenta wadajir soo qaadatay baa saaxiibtey ah ee maaha gabadhii ciddiyaha caddeysata ee maanta timid. Haa walaalo ayeynu nahay, ha timaaddo hana soo shaqeysato, laakiin taasbaa ani saaxiibtey ah.

Run beynu wada hadleynaa. Waddankaanu waa in uu qofkii wax u tarana u abaal gudaa, qofkii wax u dhimana waa in uu ka aarsadaa, qofkii aan waxba ahaynuna ha ku dul noolaado hana iska noolaado, ninna waxba yeelimahayee. Waa in ay fushaa mabaadi'daasu, mana aha in lagu koriyo mid shalayto dhashay, looma diidahayo kheyrka, loomana diidahayo tartanka, horusocodkana loo diidimahayo, kartidiisana laga inkirimahayo, laakiin maaha inuu xabaalo kii shalayto soo dagaallamay oo kii isaga dhaliyey in uu xabaalo maaha fikradda liciifka ah oo fikrad carruureedka ah oo aan ku dhisneyn cilmiga iyo mabda'a midnaba.

Taasuna sidaas bey noqoneysaa, waxbaa kacsan meeshaas, waxaanan leeyahay dib ha loogu noqdo. Waxa aan leeyahay dadkiinnii soo halgamay oo Lillaahidii weli qaba waxaan idin leeyahay ha oggolaannina in aad calanka dhiibtaan, hana yeelina ayaan idin leeyahay anigu.

Waxaan ku celinahayaa, dadka maamulka hayaa, waa in ay iyagu dadkaa iyaga ah xuquuqdooda mariyaan ayna tixgeliyaan. Cuseyb beynu abuureynaa, kaah beynu abuureynaa, ubax beynu abuureynaa, dhallinyaro ayaan tababbareynaa, Ummad beynu kicineynaa. Taasuna waa xaq, waana sameyneynaa, laakiin micneheedu maaha kii soo abuuray in la dilo oo fikradda qaldanu meeshay ka imaaneyso meeshaas weeyaan. Kii soo abuuraynа waa in uu fadhigiisii helaa.



Waad mahadsantihiin dhegeysadkii aad i dhegeysateen; Waxaanna leeyahay Soomaaliya ha noolaato, Soomaaliya ha midowdo, dabadhilifka iyo diiri qaataha iyo isticmaar aaminaha iyo isticmaarka caalamigaahina ha dhacaano, kan la jiraana ha dhaco.

# Tababarkii Kowaad ee Hantiwadaagga

KHUDBAD JAALLE SIYAAD U JEEDIYEY ARDAY XALANE KU JIRTEY.
3.9.1975.

Marka iigu horreysa, dhammaantiin waad salaamantihiin. Waxaan maanta si kedis ah idiinku imid tababbarkakan loo baahnaa aanse hubo qoladii Golaha Sare ee Kacaanka wakiilka ka ahayd in ay idiin sheegeen wixii ah aragtida Golaha Sare ee Kacaanka iyo ujeeddadii tababbarka labadaba.

Wixii aan ku sii kordhin karo ayaan aniguna isku dayahayaa in aan ku sii daro ujeeddooyinkaa laga lahaa tababbarrada ceynkaan ah, haddii loo eego sida sare ay uga socdaan Xaruntaan, ,si ka hooseysana uga socdaan Gobollada iyo Degmooyinka, sida aad uga war heysaanniin.

Taas oo ku saabsan shantii sannadood oo aynu soo gudubnay sidii ay u qorsheysneyd Kacaanka waajibaadkiisa, ayna ku dhisnaayeen oo shantii sano ee horena lagu talo galay waxyaalihii ba'sanaa ee Kacaankaba sababihii dhaliyey ka mid ahaa in la baabba'sho ama ha ahaadeen sharci isticmaarku uu dhistay ama kuwa hantigoosadka ahi ay sameysteen ama ha ahaadeen waxyaalo dhibaatooyin badan u keenahayey bulshada amaba firdhinhayey ama ha ahaadeen maamulkii halleysnaa oo sida foosha xun u dhisnaa ama ha ahaadeen waxa shicbiga uu iska leeyahay oo si baas loo maamulahayey oo aan danta Ummadda weyn ahayn.

Waxay ahayd waqtigaas shanta sano ah oo Kacaanku

jirey tala galkeedu in wixii qalloocnaayoo idil la toosiyo ama la baabba'sho ee hor taagnaan karey hore u socodka Ummadda Soomaaliyeed dhismeheeda siyaasiga ah, keeda dhaqaalaha ah iyo keeda bulshada ahba. Shanta sano markii ay dhammaatona wuxuu ahaa qorshuhu in loo gudbo si loo hantiwadaageeyo siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshada waddanka intaba.

Waxaan filayaa labadaas heer waad gaarteen. si aad ku kala garan kartaan mid waliba waxa uu noqon karo. Markii shantii sano aan xisaabtannayna waxaa noo muuqatay in hawshii la rabey shantaas sano gudeheeda ayan hirgelin in kastoo waxyaalo badan la qabtay meelo badanna laga qabqabtay. tababbarro badan oo bannaanka lagu qabteyna ay jireen, laakiin haddana natiijadii ka timid ama faa'iidadii ka timi aynan sidaas u badan oo aynan noqonnin wax qancin kara shantii sano natiijadii uu reebay Kacaanku. Markaas baa wuxuu noqday guddoonku in loo jeesto tababbar run ah, iyadoo dhaliilku uu ka imanhayey xaggii koritaanka fikradda siyaasiga ah ee mujtamacu inuusan gaarin heerkii la doonahayey ama la rabey dadkii gaar ahaan in ay horukac yaal u noqdaan ama baraarujiyeyaal dadka hantiwadaageyntiisa ay ka muuqatey in aynan u qalmin hawshaas in ay qabtaan kana bixi karin waajibkii laga doonahayey in ay qabtaanniin. Taasuna kuma xirna niyad xumo ama dhib kaleeto, laakiin waxay ku xirantay markii baarid qota dheer lagu sameeyey, hirgelintii oo aan la waafajineynin waaqiceedii ama runtii aan la waafajineynin· Yacni fikraddii iyo niyadii waa ay jiraan, laakiin haddana gaarigii hore uma dhaqaaqahayo ee meshiisii uun buu taagan yahay.

Marka si sidaas looga baxo waxay u baahatay in marka Ummad ahaan shan sano ka dib haddey muuqatay tala galkeenni meeshii la rabey in uusan gaarin, in marka tababbar rasmi ah in la galo, laguna qabto tababbarradaas iyagoo dhowr heer ah waddanka gudihiisa; mid sare mid dhexe iyo mid hoose intaba, ujeeddaduna ay tahay awalan caddadka dadka baraarujinta ama dhiiri gelinta ama dagaal gelinta loo yaqaanno in la baro hab ku toosa ujeeddada dheer ee Kacaan-



ka Hantiwadaagga cilmiga ku dhisan oo u qeybsanaan kara awalan mabdi'ii oo ay si qota dheer u fahmaan. marka kalena ay u fahmaan sida loo dhaqan gelin karo mabdi'ii illeen mabdu'u maaha wax leysaga sheekeystoe loomana sameynine. Mar seddexaadka in la baro sidii ay u abuuri lahaayeen Ummad hantiwadaag ah una dhisi lahaayeen saddexdaas qodob isagoo u qeybsan in la baro tababbarku sida uu u socdaana sidaa weeyaan. Yacni tan waxa xaqiiqdeedu tahay hantiwadaag cilmi ku dhisan oo run ah ayuu ku soconhayaa waddanku· Qorshihiisii hore oo Kacaanku ku dhashayna sidaas buu ahaa kaa buuna ku socon doonaa.

Haddana waxay aasaas kale u sii tahay in sida ay mabaadii'du tilmaameyso naf ahaanteedu uu ku qorsheysanyahay hantiwadaagga cilmiga ku dhisan ee dalkaanu; xaqiiqada dalku uu leeyahay. Yacni runtiisa oo aan been lagu dhisin, lana socota fikraddooda, la socota hiddohooda, la socota dhaqankooda, la socota nuucooda iyo wax yaalaha u gaarka ah, la socota hawadeeda, la socota dhaqaaleheeda, tixgelineysana cadaaweheeda sidii ay isaga daafici lahayd ee aan been been lagu dhisin. Oo markaa yacni dhaqan gelinta amaba hirgelinta hantiwadaaggu uusan noqonnin mid bacad ku dhisan amaba fikrad hadoof ah ee ay tahay middii runta ku dhisneyd.

Innagu hantiwadaag baan dhiseynaa, laakiin waxaan ku dhiseynaa innagoo soo qaadaneyna xididkiisii dhulka uu kula jirey oo uu ka helahayey nacfiga dhulka ku jira iyo geedka salkiisii oo aan soo raaceyno iyo laanta Soomaaliyeed baan ku dhiseynaa ayaan idin iri. Wixii gaari kara amaba maskaxdoodu ay gaari kartona analysis in ay sameeyaan ama biseyl siyaasiya yeelan kara amaba mid cilmiyuhu waxay ka dhigi karaan buug waaweyn· Micnuhuna wuxuu ahaa haddii aynu dhaqan gelinta hantiwadaagga soo qaadanno mid qolo kale ay hadda ka hor ku isticmaashay, micneheedu wuxuu ku dhigmi karaa in aynu geed laantiisii aan jebinnay uu noqdo, markaasna innagu aan soo qaadannay geed laantii sannaan lahayn, markaasna ay qalloocatay dabadeedna ay jabtay. ka dibna in ay qallasho ayey noqon kartaa. Laakiin haddii laan-

tii geedka ee ku fooradhey Soomaaliya dabeecaddeeda khaaska ah iyo waxyaaleheeda kaleba aynu ku dhisno, jirriddiina salka ku hayey, xididkiisiina uu dhulka ku jirey, waxay ahaan doontaa inuu baxsho ubax, caleen baxsho, mirona uu dhalo, markaana hantiwadaaggu uu hirgalo ayey noqon doontaa ayaan hadda ka hor idin iri, haddii aad xusuusan tihiin, marka micnuhu waxa weeye hirgelinta ama dhaqan gelinta hantiwadaaggu iyo hantiwadaagga aasaaskiisu laba xaajo weeyaan, dad baana isku qasa qaskaasuna wuxuu ka yimaadaa in ay hantiwadaagga derbi madaxa ugu dhuftaan ee uu jajabo marnana uusan hirgelin.

Taasu waxa weeye facaadaha aynu ka hayn, Afrika waa laga bilaabay hantiwadaag meelo badan waana ay baabbe'een oo waa hirgeli waayeen. Qaaradda Aasiyana meelo badan baa laga bilaa-bay waana baabbe'een oo waa hirgeli waayey dhismihii Hantiwadaaggu. Waxay noo ishaareysaa marka in ay isku dayeen in ay u hirgeliyaan si aan waafaqsaneyn ama aan ku toosneyn dabeecaddeedii khaaska ahayd iyo xaqiiqdeedu sidii ay ahayd oo ay u fikireysey ama dhaqankeedu sidii uu ahaa ama dhaqaaleheedu sidii uu ahaa, ama biseylkeeda siyaasiga ahi sidii uu ahaa ama garaadkeeda cilmiga ah ballaarkiisa aan ku habeysneyn. Markii ay rati buubaal ah alaab saareenna, hadde ratigii alaabtii waa xooray, hantiwadaagna meeshaas ayuu ku baabba'ay.

Taasu in ayan dhicin baanna uga jeednaa in aannu xaqiiqda Ummaddaan tixgelinno tillaabadii la qaadahayoba, in la tixgeliyo cadawga hantiwadaagga Soomaaliyeed ka dhashay uu leeyahay ee aan marna madaxa laga bixin ee ku wareegsan meel kastabana ka soo geli kara iyo in aan cadawgaa la siinnin hub uu ku baabbi'in karo hantiwadaagga Soomaaliya ka dhashay, in uu tixgeliyo garaadka siyaasiga ah ee dadka Soomaaliyeed heerka uu joogo. Taasna halkaas baan kaga gudbahayaa.

Waxaan u kacahayaa marka waddamada soo korahaya ama waddamada gunnimada ka soo baxay laakhiin gobannimadoodii aan taam ahaan u gaarin markii laga eego xag dha-



qaale iyo mid cilmi intaba iyo xataa xag siyaasadeedba oo xornimadoodii isticmaarka caalamiga ah ka qaateen kana uu guuray iyo ciidamada qalabka sida oo kuwaasu ay abuureen markuu isagu ka guuray awalan dhaqdhaqaaqii xornimodoonka ahaa heerkee bey ka galeen Ciidamada qalabka sidaa, in kastoo isticmaarku uu abuuray. Mar labaadkana waxa weeye xaggee bey ka yimaadeen dadka ka mid ah ciidamada qalabka sidaahu?Mar saddexaadkana waxa weeye haddii isticmaarkii guuray roolkee bey ciyaarahayaan iyagu, bulshadaas hore u dhigiddeeda iyo dhismadeedad? Waa waxyaalaha cusub oo dersiga kalaasigga ah «clasico» ee hantiwadaagga aan ku jirin haatanna in ay galaan sandulle ay ku tahay, maxaa wacay wax waaqic ah oo cusub oo dhashay weeyaan.

Marka ugu horreysa waloow isticmaarku ama hantigoosadku uu abuuray, xaggee bey ka yimaadeen? Ma dad kudlad sare oo raasumaali ah ayey ka xusheen, mise waxay ahaayeen dad si kale ku yimid? Awalan shaqaalaha qalabka loo dhiibto waxay ka imaan hayeen dadka dadweynaha ah oo fiqiirka ah kudlad sare kama ay iman jirin. Waa hagaag ee dhaqdhaqaaqii xornimadoonka ahaa qeybtee bey ka qaateen? Waxay ahaayeen quwaddii ugu xoog badneyd in xornimo la gaaro, maxaa wacay kuwa keliya oo urursan bey ahaayeen oo ama kulmin karey xoolaha iyagu ay leeyihiin ama war bixin karey oo dhaqdhaqaaqa xornimadoonka war sugan siin karey mar haddii isticmaarku uu ku shaqeysanhayey oo ay Xafiisyada la joogeen oo ay ciidamada u hayeen oo ay nabadda u dhowrahayeen oo ay wax walba iyagu u hayeen: xogtooda wey ogaan kareen, marka xigtana waxay ahaayeen kuwii dabadhilifka isticmaarka u adeega oo xornimada ka hor jeeday kuwii si qarsoodi ah u cabburinaayey bey ahaayeen, si waxa muuqdaa ay u noqdaan waxa xornimada doonaha oo keliya. Sababtuna waxa weeye in ay ka yimaadeen mujtamaca ballaaran ama dadweynaha faqiirka ahba ee ayan ka imaannin kudladaha xoolaleyda ah.

Haddeynu xoolaley niraahno, anigu aad baan u diidaa haddii run ahaan la tuujiyo xoolaleyda, laakiin waxaan u jee-

daa kuwa isu qaata oo beecushariga haysta, kuwa turjubaannada waaweyn ah, kuwa karaaniyaalka waaweyn ah kama ay mid noqon jirin ciidamada qalabka sida, waxay ka mid ahaan jireen leynkaas ama safkaas. Marka yaa iman jirey oo ciidamada qalabka sida ka mid noqon jirey? Waxaa ka mid noqon jirey kuwa faqiiriinta ah, sababaha ugu waaweyn oo taa dhalineyseyna waxay ahayd brobagaanka ama idaacada isticmaarka oo caayi jirey waxa la yiraahdo : Militariisimka marka ninkii xoogga cilmi ah isticmaarka hoostiisa ku yeeshay ama xoogga xoolaa ku yeeshay, yacni cey bey la ahayd inuu ka qeyb galo ciidamada qalabka sida, sababtuna waxay ahayd idaacadii isticmaarku uu sameynaayey, mar haddii quwadaha ay ka baqaan ay noqotay in ay idaacad foolxun ku sameeyaan dheehii ay dheehday maskaxdooda bacdamaa ay dhallinyaro ay ahayd qofka dhallinyarada ahi waa saamaynhayaa maalin walba, maalin walbana maskaxdiisa iyo garaadkiisa waxbaa dheehaya.

Marka wey ku soo dheehantay, taasuna waxay dhalineysey dadkii xoogaaga xoolaha ah haysan jirey ama beecusharo ha ugu tagto ama hawlo isticmaarku uu ugu talo galay ha ku yimaadeene, waa ka hanqal taagi jireen ciidamada qalabka sida geliddooda.

Marka yaa geli jirey ciidamada qalabka sida? Su'aashuna halkaas bey ku jirtaa. Waxaa geli jireen kuwa dadka danleyda ah amaba hantiyaraha ah ama shaqaalaha dadkaas hoose ah oo aan isticmaarka iyo quwadda la shaqeysataa wax qiimo ah la lahayn. Ciidamada qalabka sida, isticmaarka hoostiisa haddey mar meeshaas ka yimaadeen waxay ahaayeen kuwii isla markiiba la noolaa bulshada la cabburinaayo oo la dul fuushan yaahy, markaana dhegeysan hayey oo ku dhex noolaa, maalin walbana maqlahayey; oohintooda, cabaadkooda, xanuunsigooda iyo taahooda illeen iyaga ayey ka yimaadeene, markuu maalintii shaqadiisa soo dhammeysto ayuuna iyaga ku dhex nqonhayey.

Marka intey iyagu taahaan, intey iyagu xanuunsadaan oo dhiigmiiradka lagu sameynhayaa uu taabto dadka dadweynaha ah ama shaqaalaha hoose ayey iyagana taaban jirtey maxaa wacay bulshadii iyagu ay ka yimaadeen bey ahayd ee kuwo bulsho kale oo gaar ah mid sarena ah ma ayan ka imaannin dabaqdna kuma ayan jirin iyagu. Marka saas bey weligood u ahaayeen dad dadkaas la nool, markaasna garanhaya dhibaatadooda kuna cilmi leh, waxa ay uga sare maraanna aynan jirin. Isla markiina waxay ahaayeen haddan xog ogaal, yacni hayaanadda gumeysiga, caddaalad xumada dhiigmiiradka lagu sameynhayo bey haddana xog ogaal u ahaayeen oo barbarka kalena ay kala socdeen isticmaarka qiddadihiisa iyo kudladda la shaqeysa isticmaarka qiddaddii kasta oo ay maalin walba dhisaan bey haddana xog ogaal u ahaayeen, markaana waxa abuurmahayey niyad amaba fikrad dagaal ah oo uurkooda ku abuurmahayey iyo maskaxdoodaba, yacni in ay maalin uun aarsadaan.

Maxaa ka abuurmay taas? Waxaa ka abuurmay dadweynaha iyo ciidamada qalabka sida, kuwii la shaqeysan jireyna ay ama uga dambeeyeen ama ay la socdeen, in ayan marnaba saf la noqonnin isticmaarka iyo dabaqadihii uu dhisay ee ay saf la noqdaanniin dadka dadweynaha ah. Tan saddexaad oo la tixgelin karo, waxay iyaduna noqon kartaa dhaqaalaha iyo maamulka ciidamada qalabka sida maxay ahaan jireen? Bacdamaa dabaqad hoose oo aan qiimo lahayn ee adeega ah loogu talo galay in uu liito ayey ahayd. Maxaa kale oo imaanayey? In ay diidaan, dhibsadaan, nebcevstaan, kana hor yimaadaan, maxaa kale oo ku abuurahayey? Waxaa ku abuurahayey iyagoo arkahaya dadkooda iyo dalkooda la baabbi'inaayo, ayaa haddana la oran jirey adigu xaq uma lihid iyaduna waxay abuureysey caro iyo dagaal niyada iyo maskaxda ah ayey ciidamada qalabka sida ku abuureysey. Yacni intaas oo dhan markii aan isku soo tuujinno, waxa ka muuqata fikrad cusub, isla markiina waa xaqirnaa oo caddaaladdii iyo musaawaadkii loo dirirahayey waa ka maqnaa oo meesha kuma uusan jirin oo adeege ayuu ahaa la nool dabaqada laga faa'iideysan hayey. Taasna waxaan jeclaan lahaa in dhab loo fahmo. Waa tan aad looga doodi jirey: «askari hantiwadaag ma dhalin karaa mase abuuri karaa».

taas taariikhda ayaa tirtirtay waana dhimatay waqtigeedii. Markaasna si heerkaas cusub cilmi ahaan loogu fariisiyona waxay u baahan tahay in laga derso waddamada soo koraha-ya; ciidamada qalabka sida salkooda ama aas aaskoodu xag-guu ka yimid, markeynu gees dhigno hantigoosadka xaggee ciidamada qalabka sidaahi ka abuurmeen? Marka saas baa jawaabtii kuugu fududaaneysaa.

Waxay ka abuurmaan dabaqadaha sare ee burjuwaasiga ah ayey ka abuurmaan, maxaa wacay dantii burjuwaasiga daafici mahayo nin aan burjuwaasi ahayni oo inuu galo loo-ma oggola, sarkaalna ma uu noqon karo, sarkaal xigeenna ma noqon karo, ciidamada daa'iman joogana ma noqon ka-ro. Saas bey marka ciidamada qalabka sida ee waddamada hantigoosadka ahi ayan iyagu ugu ekaan karin kuwa wadda-mada dhowaan isticmaarkii ka xoroobay maxaa wacay isku meel kama ayan imaannin. Kuwaasna markii aad eegto wey kuu muuqaneysaa in ayan ahayn quwad ama waxa ka hor-jeeda, quwadda weyn oo cabburineysa dhaqdhaqaaqa sha-qaalaha waddama hantigoosadka ah, waxa hortaaganu oo cabburinaaya ciidamada qalabka sida weeyaan. Xukunkii hantigoosadku sharciga u sameeyaa, xukunka burjuwaasiga isaga la mid ah ayuu xoolaha siiyaa, xukunka burjuwaasigu wuxuu u sameeyaa xoolaha iyo xukunkaba ciidan daafaca ee gaar adag ka haya.

Yuu noqon kara marka ciidankaasu daacadna u noqon kara? Waxaa noqon kara ama shuruucdii xumeyd oo ay dhi-geen ilaaliya yuu noqon karaa? Wuxuu noqon karaa dad ka yimid burjuwaasiyada waddamada hantigoosadka ah, had-dii borooleetaariyaadka laga keeno ma ay daafeceen ee iyaga ayey ku jeedin lahaayeen bunduqdooda iyo dagaalkooda.

Imberyaaliyadda caalamiga ahi, si ay xukunkeeda u sii wadato ee dadka ay gumeysaneysaa uusan hore ugu soo kicin dhaqaalaha ayey ka baqtiisaa, sidaa darteedna dhaqaa-le weynu uusan ka dhalannin dalalkaas, isla markiina in aan cummaal ama shaqaale uusan dhalannin urursami karo ama wax qaban kara. Markaana ay ku soo hartay ciidama-



da qalabka sida shaqaalaha urursan ee wax qaban karaa in-uu dagaal ku qaado isticmaarkii iyo kudladihii isagu uu sa-meystay intaba.

Taariikh ahaan markii dib loo raaco taddawurka dadka aadamiga ahi ay soo sameeyeen ilaa samankii qarniyadii ho-re aad buu u dheer yahay, mar walbana nidaam baa dhalan-hayey, marba waxa korayey fikradda dadka ee siyaasiga ah. dhaqaalaha ayaa kordhahayey, farsama aqoonta ayaa kor-dheysey, isla markiina bulshada maalin walbaba habka wa-da dhaqanka iyo wada noolaadkeeduba si buu u abuurmaha-yey. Yacni marka aan fikireyno waa in aynu garannaa heer-ka Ummadda Soomaaliyeed meesha ay joogto waa in aan ga-rannaa. Xaggee joogtaa? Waana in aan gees dhignaa meeshii aan ku sheegahayey tadawurkii dheeraa oo Ummaduhu ay soo sameeyeen, innaguna meesha aynu joogno marka waa in aan xaqiiqsannaa. Markii aan hubsanno meesha aan joono-na, halkaa geeddi waa in aan ka bilawnaa.

Geeddigeennu marka keebuu noqonhayaa? Innagu wa-xaan joognaa qarniyadii hore, waxaan joognaa qarnigii qa-biyaaladda waxaynu joognaa qarnigii reer baadiyannimada: haddana waxaannu aaminsannahay hantiwadaag in aan dhi-seyno oo aan dhisi karno. Waa hagaag, marka ma ii suuro ga-shaa anigoo hantiwadaag dhisahaya in aan barbarkaan mas-kaxdeydana docdatan aan qabiil ku haysto. barbarka kalena hantiwadaag in aan ku haysto? Waajibkii waa cadyahay, is-kumana qasna, mar hadduu cad yahayna qof kastaaba inuu u hoggaansamo fuliyona weeyaan. Haddii uu biriqbiriqleeyo oo isagu uu waxyaabo shakhsiyaad ah soo geliyo amaba kooxo soo geliyo ama fikrado liciif ah uu soo geliyo, ama nin jecley-si uu soo geliyo hantiwadaag maaha ee waa in laga takhallu-so iyadoo aan geed loogu soo qabban. Hantiwadaagga kuwa ah ama loo xulaa sida qaalibka ah, waxa weeye awalan dadka mabdi'iga ah ee aan maalin la nool aan ahayn, daneys-taha aan ahayn, maslaxadaha gaarka ahna aan daba socon-nin. Waxa weeye yacni kuwa loo xulaa kuwa u dul qaadan kara dhibaatada, adkeysina u yeelan kara dhibaatooyinka ka hor imanhaya.

Kuwa loo xulaa waxa weeye, kuwa ku geesinnimo geli kara khatar kastoo ay galaan mabaadii'dooda in ayan iibinnin oo ayan geddin oo aan laga beeneynin. Kuwa yacni loo xulaa oo ama dad amaba ehel u noqdaa, waxa weeye kuwa u garanhaya fikrad ahaanna u gaaray heer ay waddani ku noqdaanniin. Markaana shakhsi iyo guruub iyo qabiilba waa dhinteen. Mar haddii aynan ahayn sidii aan u sheegahayey inna halkan ku hayso in kalena halkeer ku hayso, taas oo mid socon karta ahayn, aanna la socon karin waddaninnimada.

Haddaba aas aas bey leedahay marka, intaas marka aan tirinhayo. Awalan qofka hantiwadaagga hoggaamiyeyaalkiisa ka mid noqon hayaa waa in uu leeyahay shakhsiyad dadnimo iyo qiimo qofnimo, asluub qofnimo waa in uu leeyahay, xishood aadaminnimo waa in uu leeyahay, waana in uu leeyahay abuuris, yacni aadaminnimada markii aan sheegahayey waa in uu yahay qof waxa xunna ka dhiidhiyi kara, waxa sanna daafici kara qiimo kastaaba ha ugu fadhidee. Shakhsi ahaan iyo qiimo ahaanba waa in uu u yahay qof nuucaas ku tilmaansanaan kara. Metelan beenlow hantiwadaag ma noqon karo, kuwa uu hoggaamiyona qof lugu daro maba ahee in laga khaarajiyo weeyaan, diradiraaloow hantiwadaag ma noqon karo kamana qeyb geli karo, isla markiina in la khaarajiyo weeyaan oo kudladaha kolleyba ama hanuuniyeyaalka ah ama hoggaamiyeyaalka ah marna inuusan ku darsamin weeyaan.

Shuruudda labaadna waxa ay tahay in uu yahay waddani. Wadaninnimo micneeheedu waa maxay? Waxa weeye ciiddatan innagu aynu ku dul dhalannay metelan, Ummadda Soomaaliyeed ay ku dul nooshahay. Waa hagaag, waddankii kaa weeyaan. Waddankuna dad buu leeyahay, dadkiisuna markii uu kula qaali yahay weeyaan. Qaali marka uu kula noqon karaana waxa weeye markii aad gaarto heer fikraddaada siyaasiga ahi ay laacdo heer aadan kala jecleysan karin laba qof oo Soomaali ah, heer aad u dagaallameyso sharafkooda iyo noloshooda iyo dhaqaalahooda iyo siyaasaddooda iyo horre u socodkooda, heer ay kugu abuuran tahay markii ay u baahan tahay naxariis aad u dagaallanto, markii ay u baahan



tahay daaficidna ay sidoo kale kaa tahay. Waxa weeye marka fikraddaada ay ku abuurmi karto niyad aaminsan sinnaanta iyo caddaaladda, markii ay kugu abuurmi karto garasho in wax la tabcado oo tacab la sameeyo, markii aad garato in waddaninnimadu ayan abuurmi karin haddaan ciidankeedii la sameynin, ciidankeeduna sidii loo sheegahayey ay yihiin shaqaalaha iyo midnimada Ummadda.

Labadaas qodob markuu yeesho, haddaba qofku Kacaan buu noqon karaa, maxaa wacay Kacaanka micnihiisu waxa weeye dhibaatadii dalkaas dhex tiilley in la baabba'sho. Kacaan Hantiwadaag ah waxa suuro gasha xataa inuusan noqonnin, laakiin waxa suuro gasha Kacaan wax dhalan roga in uu noqdo (riformista), laakiin Kacaan micnihiisu waxa weeye dhibaato jirtey in aad saarto Marka micneheedu waxa weeye qof Kacaan buu noqon hayaa Haddii uu Kacaan noqdo labadaas aas aasna uu hore u lahaa, hantiwadaag fiican buu noqonhayaa, waana laga dhigi karahayaa xataa hadduusan barannin, waana baran karaa waana noqon karaa, waana dagaal geli karaa. Saddexdaas qodob hadduusan lahayna hantiwadaag ma noqon karo, wuxuuna noqon karaa anti-hantiwadaag ama wuxuu noqon karaa wax aan jirin oo aan qiimo lahayn, waxaynuna ku tilmaami karnaa dibusocod.

Marka haddii aas aaskii taa ahaa adinka halakan leysugu kiin keenay aadna xusuusan tihiin in dhammaantiin aad tihiin dad shaqaale ah. Haddii ay sidaas tahayna waajibkiinnu waa maxay marka? Waajibka ugu weyni waxa weeye, war haddii anigu aan uba yeeshay nasiib, kuwii Ummadda Soomaali weynta ah in ay ka qaadaan dulliga weyn oo haya dhaqaalaha siyaasadda iyo bulshada ay kala diriraan haddaan nasiib u yeeshay. Haddaba markaan saa iraahdo, waxa iigu xigaa waxa weeye waxa aad baraneysaan ee ah mabdi'ii uu Kacaanku ku socon lahaa hantiwadaagga ahi, waana in aad u fahamtaa in ay u baahan tahay barasho iyo garasho. Barasho, baro yacni waxa lagu barahayo micnahana garo oo dhedhemi, marka aad baraneysona xusuuso weligaa Ummaddaadu heerka ay joogto iyo dhibka ay ku jirto, kan buka xusuuso, kan ooman xusuuso, kan gaajoon xu-

suuso, kan jaahilka ah xusuuso, kan la gumeysanhayo xusuuso, kan ooyahaya xusuuso, markaasna waxa kuu dhadhamahaya waxa aad baraneyso. Haddii aadan sidaa u dhedheminnin, waxba ma aadan dhedheminnin.

Isla markiina xusuuso «kontrodikshanka» adduunka ka taagan ama tanaaqudka iyo iska hor imaadka adduunka ka taagan. Maaha hantwadaaggeennu «National» mid ku koobanwuxuu ku koobanyahayna waxa weeye : «Internationalismo» hantiwadaaggeennu waana mid caalami ah, mana aha mid khaas ah, mana ku koobnaan karo keligiis. Hantiwadaag xero kuma oodna ee waa caalami, adduunkana waa u furanyahay, waxaana weeye dagaal caalami ah oo weligiis socon doona.

Haddii innagu aynu nasiib u helnay, innagoo aad u dambeyna in aynu garanno in aynu dagaalkaas galno Ummaddeennana aan ku gaarsiinno meel ay ku noolaato, haddana waa in aanu u aragnaa xaqiiqdiisu sida ay tahay. Waxaa dhici karta waxtarkeenna aan adduunka caalamiga kale aynu wax u tarnaa in ayan maaddiyan markii la yiraahdo uusan aad u ballaarneyn, laakiin jiritaanka Kacaanka hantiwadaagga ah ee Soomaaliya ka hirgalay aataar weyn buu bixin hayaa oo xagguu shacaaciisa u bixin hayaa, xagga kalena shacaaciisa wuu u bixin hayaa.

Waxaana ah marka lagama maarmaan in aad garataan, mana aha keli ahaan dalkeenna iyo dadkeenna oo keliya in aan sare u qaadno, laakiin waxaa ina saaran mas'uuliyad caalami ah oo aan leennahay ee hantiwadaag ah. Yacni hantiwadaaggu Afrika ha ku fido, Aasiyana ha ku fido, waana in uu ku fidaa. Innagana siyaasad ahaan bey dan inoo tahay waxa weeye deris cadaw ah yeelo ama mid saaxiib ah yeelo. Hantiwadaag hadduu noqdona deris saaxiib ah ayaa yeelaneysaa, marka waxaa kuu sameysmay baase ama gundhig nabad gelyo ah iyo hirgelin run ah, weliba ujeeddadii aadamiga ee dheereyd ee raadkiisa uu doonahayey xataa waxaa kuugu sameysmay deyr daafacaad ah oo aad ku nabad gasho, markii waddan keliya ee Afrikaan ahi uu hantiwadaag qaato, markuu mid kale qaatona deyr kale ayaa kuu sameysmay, mid saddexaad hadduu qaatona mid kale ayaa ku sameysmay.

Intaas markii aan iraahdo; aan idin iraahdo waad mahadsan tihiin, dhegeysadkii aad i dhegeysateen. Waxaanna rajeynahayaa in tababbarkii koobaad ee hantiwadaagga ayaan u bixineynaa', laakiin inuu ku soo baxo qiimaha qof qof iyo kudladba uu yeelan karo, kana bilawdaan adinku itixaad run ah oo midnimo ah.

Waxaan rajeynhayaa kuwii si fiican uga soo baxa in aad noqotaan, waana mahadsantihiin.

# Sinnaanta Ragga iyo Haweenka

KHUDBAD JAALLE SIYAAD KA JEEDIYEY GOLAHA MURTIDA MAALINTII HAWEENKA DUNIDA EE 8DDA MAARSO.

9.3.1975.

Jaallayaal, waad salaaman tihiin dhammaantiin. Sidii caadada inoo ahaa jirtey in aynu u dabbaaldegno maalintaa qaayaha leh ee lagu xusahayo maalintii garaadka insaanku uu gaaray dadku in ay isku mid yihiin, isku xaq yihiin, isku xoog yihiin, iskuna garaad yihiin. Innagoo marka taas tixraacayna waxaannu u jeedineynaa; fikradda hagaagsan ee aaminsan xuquuqul-insaanka, isla markiina garatay in ay ka faa'iideysato caqliga iyo xoogga dadka aadamiga ah dhammaantiis, si ay iyagu markaas faa'iidadii ka dhalata dhammaantood ugu gaaraan baraare iyo barwaaqo. Waxaan u direynaa salaan kal iyo laab ah, innagoo ku hadleyna Ummadda Soomaaliyeed magaceeda.

Isla markiina waxaannu u direynaa salaan taa oo kale ah, haweenka adduunka ku nool oo iyaguna ka mid ahaayeen in wixii xaq darri ah laga tanaasulo ee xaqa la aado. Isla markiina intii ka dambeysey amaba ka horreyseyba, had iyo jeer ibnu aadamka horukaciisa iyo noloshiisa qeyb libaax ka qaadanhayey. Waxaan filahayaa in dabbaaldeggu amaba ujeeddada dheeru ay markii horena ahayd haatanna ay tahay inta garaadkoodu uu gaaray dadka aadamiga ah uu u shaqeeyo dantiisa sidii uu ku abaabuli lahaa, sida waxa aadaminnimadu ay dooneyso ama ibnu-aadamkoo dhami uu u halgamahayo, lagu gaari lahaa sidii ugu fududeyd. Taasuna marka

waxay u dhexeysaa in ayan suuro gelin, haddii dadka qaar uu wax qabto in aan la wada gaari karin ama aan la wada gaareen heerkii la doonahayey ibnu aadamku in uu ka gaaro nolosha wanaagsan, caddaaladda uu ka gaaro, caafimaadka uu ka gaaro, cilmiga uu ka gaaro, sinnaanta uu ka gaaro, haddii qaar laga tago oo la yiraahdo : «iyagu wax tar ma aha, wax garad ma aha, waxba xuquuqa ma laha, citibaar iyo cis ma laha», maxaa keenay in ay dhalato fikraddaasu? Waxaa dhalatay, sidaan horeyba u tilmaannay mar badan in dadka aadamiga ahu uu maalin walba soo goynhayey heer adag oo noloshoodu ay ahayd kaas oo ku saabsanaa garaadkooda siyaasiga ah, aqoontooda cilmiga ah iyo wax qabadkooda iyo dhaqankooda iyo wax qabsigooda ama macaamilka dadka aadamiga ah ka dhexeeya. Markii maalin walba ay fikraddaasu siyaadeysey ama awood sii yeelaneysey ama tacabku uu sii siyaadahayey waxay had walba ishaareysey ama ay had walba soo garaneysey meesha dulkeeda kaga jiro oo himiladii la lahaa ama dantii la rabey oo dheereyd laga tegahayo ama aan caqliga garaneynin ama garaadka siyaasiga ahi uusan dherer la' ekeyn oo gaarin ama wax soo saarka iyo tacabkuba ayan gaarin ama aan cilmiga iyo farsamadu aynan gaarin ayaa maalin walba dadka aadamiga ahi ay tebahayeen markaas ayey isku dayahayeen, meeshii hore ay u illoobeen in ay marka kabaan ee hagaaiyaan. Haddaba marka waxaan isleeyahay haddii ay dib u raacaan fikradda waxay marka ka imaaneysaa heerarkii badnaa oo dadka aadamiga ah horukaciisu u soo bislaanahayey oo marba uu heer soo socdey, kaas oo ahaa, innagu dhowaantaan waxaynu aad isu bari jirney waxa u dhexeeya hantiwadaagga iyo hantigoosadka, laakiin maxaad ka ogtahay? Waxa ka horreysey aadamigu in uu soo maray marxalooyin dheerdheer oo dhibaatooyin badan uu kala kulmahayey ama dhibaato badan uu isagu isu geysanhayey, taas oo ah dagaalka nolosha iyo macaamilka aadamiga oo qof waliba uu damcahayey inuu isagu uu nolol fiican helo, laakiin kuwa kale uu illoobahayey, ayaa ka horreysey oo magacyo gaar ah leh oo loo yaqaanno waqtigii beer goosashada, waqtigii qabaa'ilka iyo dhagax hoos gelidda, waqtigii dhagaxa, waqtigii birta, waqtigii tuurashada ugaadha, waqtigii miraha gurashadooda,



waqtigii tabcashada dhulka, waqtigii xoolaha tababbariddooda iyo isticmaalkooda la gaaray oo aadamigu uu soo gaaray, waqtigii ka dambeeyey oo boqortooyada yaryar iyo waqtigii ka dambeeyey oo haatan Ummadaha badidoodu ay ku jiraan ayna yihiin kuwa hantigoosadka ah ee ahaa dad yar oo kudlad ahi in ay iyagu buursadaan ama ay gurtaan dadka kale wixii ay tabcaan iyo wixii ay fikiraan iyo wixii ay muruqooda ku qabtaan oo loo yaqaanno : «hantigoosad» yacni markeynu ka hadleyno meelahaas iyo heerarkaas la soo gooyey. Kuwa maanta joogaa waa maxay marka oo dhaliyey fikradaha aynu hadda ka hadleyno?.

Waxa weeye, kan hantiwadaagga ah, kaas oo ah fikraddii ugu dambeysey cilmigana ku fadhiyey, dadka aadamiga ahina aakhirkiisa dambe in uu wada gaaro ay tahay lagama maarmaan, ayna wax celin karaana jirin, qolo hadda maanacda ama sababo kale dhalisa oo ay waqtigii la gaari lahaa ku sii gaabiyaan ama tillaabadeeda iyo orodkeeda yareysa iyo qolooyin durbadiiba ku dheereeyey, kolleyba tan la gaari doonaa taas weeye.

Maxaa lagu gaari doonaa? Waxaa lagu gaari doonaa waxa weeye, qof kastoo aadami ahi waxa uu jecel yahay inuu helo caafimaad ku filan, in uu helo waxa uu aadami ahaan ugu baahan yahay, inuu ka kaaftoomo waxyaalaha aadamiga la socda ee ah : wax bursashada, xanta, iyo dhaca. Maxaa waxaas oo dhan keenahaya markii aan maskaxdeenna dib ugu noqonno? Waxaa keenahaya itixaad jira oo Ummadda oo bulshada dhexdeeda ku jira. Maxaa keenay dadku in ay isu qaataan hub oo islaayaan, ixtaad baa jira oo in qof kastaaba ay gaarto dooneyso qofna uu daafacahayaa, yacni waa kaa bulshada aadamiga ah iska hor imaadka waxa u keenahaya.

Marka maxaa taas baabbi'in kara dadkana waxa ay rabaan dhammaantood gaarsiin kara, marka hore waxa weeye in ay dhalato fikrad bal horta garaneysa, waddadaasu, waddadii lagu gaari lahaa waxa la doonahayo in ayan ahayn ee waddada lagu gaari karaa ay tahay mabaaddii' saaiix ah oo Ummaddu ay is barto ka gadaalna gaarsiisa maskaxdiisa heer

sare oo u diida waxa xun oo idil iyo wax yeellada oo dhan xaqirka oo dhan, caddaalad xumada oo dhan, kala sarreynta oo dhan, wax alla wixii la mid ah oo qofka aadamiga ah dhibahaya ama xaqiisa luminhaya, fikrad diideysa waa in ay dhalataa, markaasna Ummadda waa in ay ku abuurantaa, ka gadaalna ay u tilmaantaa habkii ay waxa ay jecel yihiin ku gaari lahaayeen oo ah fikrad urursan, muruq urursan, niyad urursan iyo tabcasho ay u foofaan iyo cis lagama maarmaan ay tahay in dhammaantood ay isu qabaan oo qofku dhowro dadka badan, dadka badanina ay qofka dhowraan, taasuna ay tahay mid niyo ah oo qofku uu leeyahay : waa waajib taasu in aan yeelaa.

Waxay taasu la imaaneysaa, markaa in ay noqoto qofku in uu u shaqeeyo dadka badan, dadka badanina qofka in uu u shaqeeyo, markaasna ay ka gudubto nin tooxsigii, boobkii iyo dhiigmiiradnimadii iyo wixii la nuuc ahaa oo dhan oo maskaxda qofka kastaaba ay ka guurto ayaa loo baahan yahay.

Haddaba markaan dib ugu laabto, fikraddaanu markii ay dhalaneysey waxay ku socotey in la gartay oo cilmiga cusub ee ku foorara cilmiga hantiwadaagga ah, ahaana siyaasaddii cilmiga ku dhisneyd ee ugu dambeysey uguna fiicneyd, in ay garatay, in ay tahay lagama maarmaan in sida dadka aadamiga ahi ay doonahayaan sida lagu gaaraa ay ugu horreyso in la garto qiimaha qofka aadamiga ah. Marka qofka aadamiga ah la leeyahay maaha nin cad, maaha nin madoow, maaha mid yar, maaha mid weyn, laakiin qofka aadamiga ahu waa caan baa la yiri, waxa koobi karaana ay yihiin Ummado aan qiimeynin aadaminnimada in ayan heshiin kareynin, haddii Ummaddu ayan heshiinna in ayan suuro geli karin in ay wax wada qabsadaan, haddii ayan wax wada qabsanninna in ayan tabsan kareynin, haddii aynan dhammaantood taladii iyo hawshii iyo fikraddii, iyo ciskii iyo caddaaladdii u sinneyn, haddana ma ay suuroobeyso oo micnuhu wuxuu noqon hayaa in barna hawl qabtaan, bar fikiraan, barka kalena ayan waxba qaban waxna aynan fikirin ee ay noqdaan, sida alaabada lugu isticmaalo oo kale, sida haatan-



ba hantigoosadku u yiraahdo; gabdhuhu waxa weeye quruxdii guriga iyo hantii ilmaha, markaasna ay maqneysiin hayaan maskaxdoodii fiicneyd, ay maqneysiin hayaan muruqoodii. ay maqneysiin hayaan taladoodii. ay maqneysiin hayaan qaybtii ay ka qaadan lahaayeen bulshada aadamiga ah, dhismadeeda ama ha ahaato fikrad ama ha ahaato muruq iyo talo intaba.

Hantiwadaaggu bacdamaa uu yahay cilmigii ugu dambeeyey xaqana ahaa, sida ay kuwaan kale, miduba maalintii ama heerarkii la soo maray oo dadka aadamigu soo gooyey oo aan hadda aan tirin hayey oo ay jiri jirtey waqtigii loo yiqiin beer goosi oo ay dhacday in markii dadka aadamiga ahu bartay habka beeraha loo fasho, in ninkii markaa muruq lahaa ama afmiinshaarka aad u dheereeya ahaa uu awood u helay inuu dad ijaarto, markaasna isagu uu beero waaweyn goosto, markaasna ay u shaqeysaa Ummad farabadani, markaana uu siiyo ijaar yar oo aan u dhigmin hawshii ay u qabteen. Waqtigaas markii la soo gudbay, dadku bacdamaa ay caddaalad xumadaa la kulmeen, arkaayeenna tacabkoodii oo dad yari ay ku ladan yihiin ay dhalisay in ay iyaguna la diriraan oo ku kacaan markaas, maxaa wacay, mar walba awooddu waxay jirtaa Ummadda badan xaggeeda. Markaana waxa ku soo xigtey in beera goosigii ay abuurmeen ee Ummad badan la gumeystay, kuna tabcaday dhulka faraha badan, beerahana loogu tabcay. Iyagiibaa marka waxay is bideen midba mid inuu wada qaato wixiisii, markaasaa waxa dhasheen boqortooyooyinkii yaryarka ahaa oo loo yiqiinney : «feudalisimka». Waxaana dhashay kuwaasu in ay kuwii kale ka sii dareen oo cadaadintii dadka faraha badan leh ama shaqaalaha ah ama beeraleyda ah ay aad u sii badiyeen, bacdamaa damaaciga aadamigu, haddaad maanta wax hesho, berri intaad maanta heshay ka badan baad sii dooneysaa. Ma qanco qofka aadamiga ahu in xabaasha lagu rido mooyaane, haddii aynan jirin fikrad saalax ah oo celineysa damiirkiisa iyo damaciisa intaba. Waxaa dhalatay marka, in kuwaas boqortooyada ee yaryarka ahu ay isku afduubeen kuwo badan oo beeraley ah, markaasna ay aad u cadaadiyeen.

Maxaa ka daba dhashay? Cadaadintii dadka badan, beeraleyda ama shaqaalaha waxaa ka timid dadkii in ay dhibsadaan wixii oo ay ku kacaan dadkaas yar oo ku dul noolaa? Yey garabsadeen? Waxay garabsadeen kuwii, kuwaa u shaqeyn jirey oo iyaguna shaqaalaha u ahaa, laakiin, heerka sare joogey oo metelan u ahaa : Karraaniyiinta, Injinyeerrada, Xisaabiyeyaalka, u ahaa adeegeyaalka oo cilmigoodu yarehe sarreeyey, kuwaas oo loogu yeeri jirey kuwii hantigoosadka. Hantigoosad sidii uu ku dhashayna sidaa ayey ahayd.

Markii ay isu tageen shaqaalihii badnaa iyo beeraleydii badneyd iyo kuwii iyaga ka hoos shaqeysan jirey oo sida badan siinhayey dadka xuquuq ka fiican tii hore, haddii loo eego, laakiin isla markii iyaguna abuuray kudlad sare oo iyaguna noqotay dhiigmiirato, dadka badanna xuquuqdooda lumisa. Maxaa ka soo dhexbaxay iyada? Waxaa ka soo dhexbaxay hantigoosadkii markuu xoogsaday oo kudladdii xoolaleyda ahayd iyo tii daafeceysey oo xoolaleyda ka dhex dhalatay oo xukunka iyagu haysteen, waxa ka dhex dhashay isla markii dad culumo ah oo fikiraa ah oo weligood waa socon jireen waana jiri jireen dad yacni ku dadaala caddaaladda iyo sinnaanta, dad xaq darrida neceb, dad aadamiga xaqirkiisa iyo dulleysigiisa neceb, waxa ka soo dhex baxay culumo aadaminnimada qireysa jecelna, lagama maarmaan ahaanna ay ugu muuqato in aan aadaminnimada jiriddeedu ayan micno ku fadhiyin, haddii aan caddaalad la gaarin. Kuwaasina waxay ahaayeen culumadii hindiseen hantiwadaagga cilmiga ku dhisan.

Haddaba fikraddaasu markii ay dhalatay mar haddii caddaalad iyo sinnaan iyo tabcasho fara badan ee qof walbaba faa'iidadeedu ay gaareyso la fikiray oo fikradda ay ku jirtey, lagama maarmaan bey ahayd marka xaqirkii dheeraa in la baabba'sho oo awalto loo yiqiinney dadka badan ee shaqaalaha ah ama beeraleydaa in uu ku dhacahayey, laakiin isla markii dadkaa badan ee shaqaalaha ama beeraleyda ahaana iyaga dhexdoodana xaqir baa ku jirey oo ahaa rag iyo naago oo ahaa in ay iyagu kala sarreeyaan, in ay kala fadli leeyihiin, in ay kala xaq leeyihiin iyo in ay kala mudan yihiin. Marka



hantiwadaaggu markii uu dhasay muxuu yiri? Wuxuu yiri xaq darridii shaqaalaha iyo beeraleyda ku dhex jirtey, iyo xaq darradii hantigoosadka iyo Ummadda faraha badan leh ee masaakiinta ah dadweynahana in badan lagu hayey, intuba waa in ay lumaanniin. Waa in ay dhalataa fikrad la yiraahdo magaceeda : «hantiwadaag cilmi ku dhisan» kuna habeysan dadka aadamiga ahu inuu wixii uu soo saaro oo uu tacabkiisa iyo shaqadiisa ku keensaday in si xaq ah loogu qeybiyo ee aan la kala boobin. Waa marka ay ku fariisaneyso oo ay leedahay : «waxaad shaqeysato qaado ee wax aadan shaqeysanin ha damcin», waa marka fikraddu ay saas leedahay, yacni qof laga damcaana ma jiro, qof damcaana ma jiro wax uusan isagu shaqeysan. Marka maxay guddoomineysaa? Waxay guddoomineysaa dhammaan in la wada taliyo, waxay guddoomineysaa dhammaan in la wada shaqeeyo, waxay guddoomineysaa caddaaladda, wixii la soo saarona la qeybsado iyadoon qofina qof ka badsan. Bal horta fikraddu aasaas bey leedahay oo ragga iyo haweenka hadalka aan leennahay yuusan hadoof ku dhicine, waa inuu cilmi ku fadhiyaa sidii uu cilmi ugu yimid, illeen cilmi buu ku yimide haddoof isagama imaannine. Marka waataas meesha ay salka ku haysaa ayna ku aas aasantahay. Haddaba maxaa fikraddu inooku yeereysaa? Inoogu-ma yeereyso rag iyo naago. Fikraddu waxa ay inoo sheegeyso oo inoogu yeereysaa waxa weeye rag iyo haweenba in dhammaan ummaddu ay wada shaqeysato sidaan u sheegayey. dhammaanteedna ay wax weyn soo saarto, dhammaanteedna wixii ay soo saartona si caddaalad ah u qeybsato.

Haddaba innagu bacdamaa aynu ahayn Ummadihii ka baxay hantigoosadka habka uu ku dhaqmo, kuwii dagaalka haddeer lagu hayo in hantigoosadkii lagu celiyo, kuwii dagaalka xoogga leh uu ku hayo, kuwa aan weliba garannin aadamigu waxa uu u baahan yahay ama halganka xaqa ah ee in uu galo loo baahan yahay, kuwa aan weli garanninu ay dagaalka ku hayaan, haddeynu joogno waxa lagama maarmaan noqotay in aan dhabbeheenna jeexanno oo aan niraahno : «mabdu'u saas buu leeyahay ee isagii waa in aan dhaqan gelinnaa», mar haddeynu mabda'a aynu qaadannayna xaq

darro ma aaminsanin, ciska aadamiguna waa in uu noqdaa halhayskannaga waqti kasta oo aan wax qabaneyno caddaaladdu in ay sal tahay iyo qiimeynta aadamigu. Sidaa darteed-na innagu rag iyo haween waa isku mid : «Soomaali ma yahay oo keliya», iyo qof aadamiya ma yahay mise ma aha, wax kalena ma ay jiri karaan.

Marka taa in aynu sharci ahaan u fulinno una fariisinno; gumeysiga iyo wax ma garadka dabada ku hayeyna in aynu niraahno : «jaalle sharci ahaan saas weeye, haddaad ku dambawdona, waxa aad mudan tahay baad qaadeysaa». Wakaa innagu inta aynu gaarnay oo keli ahi.

Marka haweenka Soomaaliyeed waa in ay ku dhisaan fikradooda, sida cilmiga ah oo aan hadda u sheegahayo, taariikhduna ay dooneyso, mabda'una uu doonahayo ee waa in ayan ku dhisan rag iyo naago tartankood. in sidaas ay noqoto waxay dan u tahay ragga, waxay dan u tahay carruurta' waxay dan u tahay haweenka waxay dan u tahay bulshada Soomaaliyeed oo horusocodka ah iyo horusocodkeedaba. Inteennatan oo rag iyo haweenba leh haddeynu dhammaanteen is raacno oo ku dhaqaaqno ineynu tabcanno, wax fara badan beynu soo saareynaa. haddii inteennaasu aynu hadda dood u fariisanno oo niraahno : «war mashaakilkaan ayaa ina dhexyaale sidee ka yeelnaa» ee qof waliba uu ra'yigiisa sheego waxaa dhici karta talada san in aynu helno, maxaa wacay inteennaasu ma wada gefi karno. Hadde qofka soo saarahaya yuu noqon karaa? Yuu yahay qofka ku jaan goyn kara nin baa soo saari kara ama gabar baa soo saari karta? Qof kastaaba waa u suuro gashaa in uu ra'yiga xaqa ah soo saaro.

Haddaba waxaan halkaa uga jeedaa, innagu Soomaali haddeynu nahay, haweenkannagu, waa in ay taariikhdooda ku cabbiraan taariikhdaas dheer ee aan u soo sameeyey ee ayan ku cabbirin herdansiis ragga iyo haweenka. Tartan ha jiro, raallina waan ka nahay tartan in uu jiro, maxaa wacay waxaan rabnaa raggu in ay tartamaan, haweenku in ay tartamaan, dhallinyaro in ay tartanto, shaqaaluhu in ay tartamaan oo qof waliba qofka kale in uu ka dheereeyo ayeynu jecel nahay



waana mabda'a aynu dooneyno. Laakiin tartankaasu ha ku dhisnaado wax dhalis, tabcasho, wax barasho, waddaninnimo. Kacaannimo, hantiwadaagnimo si fiican dadka ugu degtay fikraddoodii ha ku dhisnaato.

Waxa weeye rag iyo haweenba in aynu dagaalkeenna kordhinno, fikraddeenna in aynu kordhinno, in aynu sare u qaadno oo raadinno in aynu garanno mabaadi'da saalixa ah. Yeynaan sheeko ku joogine qof kastoo innaga ahi waa inuu raadsho bal inuu barto, siduu isagu hawlgalkiisa ama niyadiisa iyo fikraddiisa ugu toosiyo habka wanaagsan oo waajibka waddaniga ah ama waajibka Ummadda Soomaaliyeed ah uu u gudan karahayo, maxaa wacay markii u dhab u kaso shaki kuma jiro in ay siineyso iimaan buuxa, waxay ka xoreyneysaa maskaxdiisa fikradaha liciifka ah, waxay ka xoreyneysaa niyadiisa damaaciga waxa la yiraahdo, waxay niyadiisa ka xoreyneysaa oo siineysaa adkeysi weyn in uu ka kaaftoomo cunnada foosha xun iyo nolosha foosha xun, waxyaalaha qofka aadamigaa qiimihiisa hoos u dhiga oo idil ayey u oggolaaneysaa, maxaa wacay garaadkiisii iyo qiimihiisii aadamiga ahaa markii isagu uu kaso garaadkiisuna uu kordho waxay garansiineysaa haddana siineysaa hubkii uu ku doonan lahaa wixii uu rabey isagoo u maraya dhabbihii xalaasha ahaa xaqana ahaa.

Taasu waa iga guud. Gaar ahaan waxaan rajeynhayaa, haweenkeennu in ay aad u gartaanniin. Sharciga metelan guriga micnihiisu waxa weeye in guriga la dhiso, kaas oo ah unuggii ugu horreeyey ibnu aadamka jiriddiisa, kaas oo ay ka imaaneyso. Hooyadii, Aabbihii, ilmihii iyo aayohoodii dambe iyo ilmohoodii dambe habkii ay u noolaan lahaayeen ayna u dhaqmi lahaayeen ee haddana dhaqankoodu u ahaan lahaa mid faa'iido leh, mid edeb leh oo wax ku ool u ah aadamiga ee aan waxyeello u ahayn. Haddaba dhaqankaas fiicanu sideebuu ku imaan karaa? Waxa uu ku imaan karaa waxa weeye, hooyada iyo aabbaha labadaba in ay ka timaaddo ay dadaal aad u ballaar sameeyaan, ujeeddadooduna ay tahay in ay dhisaan unuggaas bulshada in uu noqdo mid kheyraad leh, iyaguna inta ay jiraan oo adduunka ay jiraan ay ku gudbaan xii-

so iyo niyadsami iyo wadajir ee ayan ku gudbin dhibaato iyo qaxar iyo is daba jiitan iyo is haaraan iyo is khayaano iyo ba- laayoba aynan ku jirin. Waa kaa yacni sharcigu meesha uu u socdaa ama sababtuu u habeynhayaa unugga reerka ee Um- madda Soomaaliyeed.

Markaas, haddii aan xagga afmiinshaariinta u leexdo. Ayaan dhoweyd metelan markii go'aanka la soo saaray, wa- xa la kacshey buuq. Yaa kacshey oo ay ahaayeen kuwii kac- shey? Waxaa rag ugu liita ayaa la yiri: «gartii ciil ka yeeshee» aniguna waxaan isleeyahay dad waxa ugu liita qofkii aan gar- tiisa sheegan aqoon. Yacni yaa runtii kacshey oo xaqiiqdii maxay ahayd? Xaqiiqdii waxay ahayd dabadhilifyo aan wad- daniyiin ahayn ee iyadoo la adeegsanayo oo sidaas ku yimid, isku dayeen in ay khalaankhal waddankaan ka ridaanniin xa- silloonaantiisa iyo nabadgelyadiisa, in ay dhib iyo balaayo u abuuraan, ujeeddadooduna ay ahayd Kacaankaan socda ee Ummadda Soomaaliyeed danteeda daryeelahaya la daba ged- diyo. Waxa is weyddiis leh: waddamada Islaamka ah midka oggolaanhayaa waayo in waddankiisa dabadhilifyo la soo jiaartay ay daba geddiyaan? Ma jirto, qolowaliba waddan- kooda in ay dabadhilifyada ka celiyaani waa waajib saaran waana ay ka celiyaan. Dabadhilifyadu waxay jecelyihiin in aan diinta laga hadlin, laakiin waan ka hadleynaa innagu, maxaa wacay Ilaahey subxaanahu wa tacaalaa Diintiisa wu- xuu ku yiri : «nin nin u wakiil ahi ma jiro ee nin waliba wu- xuu yahay Alluu la hortegahayaa ayuu yiri»; marka nin aan wakiil ka dhiganeynaa ma jiro kamana yeeleyno, ujeeddaduna waxa weeye dadkannaga in aan jahalada ka saarno xagga Diiniga ah iyo xagga siyaasadda intaba, ma rabno innagu bulsho jaahil ah oo ninkii rabaaba uu sidii wadaantii wax ku shubanhayo, ma aan rabno. Dadkannagu marar badan buu ahaa koley wax lagu shubto, markaanse koloynimada waa in aan ka saarnaa. Ujeeddadaas dheeru, waa waxa aynu carruurteennii iyo macallimiinteennii iyo dhaqaatiirteennii, iyo shaqaaleheennii iyo caskarteennii aynu baadiyo ugu rarnay weeyaan, si aan jahaalada uga saarno oo aannu ni- raahno jaallayaal dhammaantiin wax barta dantiinnan gar-



ta, dhammaantiinna dantiinna iyo Ummad ahaantiinna daa- faca. Ma jirto wax meel ugu xereysan dad yar oo kudlad ah. Haddaba markaan taas leennahay, waxa is weydiis leh : Diinta Ilaahey muxuu u keenay? Ma isagaa ka muraad la- haa in dano uu ku qunsado Maya Ilaahey dan kama lahayn oo Ilaahey waa isku filanyahay. Marka yuu uga dan lahaa Ummaddiisa uus abuuray in uu ku daryeelo buu u keenay, wuxuu uga jeeday in ay iyagu ku kala nabad galaan, wuxuu uga jeeday in ay iyagu tabcadaan, wuxuu uga jee- day in ay iyagu ku dhaqmaan, wuxuu uga jeeday in ay iyagu aadami ahaan maslaxaddooda ugu gartaan. Haddaba aynu isa su'aalno : «haddii ay saas tahay nin beddeli karaana uu- san jirin, haddii laga reebo ninka xume la yiraahdo» magac kasta ha ku yimaadee. Ninkii marka ka shaqeeya maslaxadda Ummadda in ay lunto oo baabba'do miyuusan gaal ahayn oo kalaamka Ilaahey miyuusan daaba marin, ujeeddadii uu lahaa miyuusan beeneynin, miyuusanse markaas tuug da- badhilif ah ahayn? Ama ha soo dirsado istcimaarka caalami- ga ahu ama qolo kale ha soo dirsato, mar haddaan helay awooddii aan ku garan lahaa hab ama xaq wixii Diinta Ilaa- hey u keenay asaan ku dhaqahayo Ummaddeyda. Yacni wa- xaa lagama maarmaan ah waa xubin aasaaskii diinta ka mid ahe waa in aad garataan ee aad diiddaan in aad noqotaan : kolay alaabta lagu rito», ma ayu nihin koley alaabta lagu rito ee aadami ayaan nahay, marka aaddaminnimada waa inaad fahamtaan.

Maxaa hantiwadaagga culumadii keentay kala dan la- hayd? Waxay u keentay Ummadda aadamiga ah xuquuqdee- da, sharafkeeda iyo nolosheeda in lagu hagaajiyo. Oo maxaa kale oo loo keenay? Muxuu ahaa ninkii keenay? Wuxuu ahaa qof caalin ah, taariikhda aadamigana awood u helay in uu barto oo yaqaanno, sancooyinka ama cilmiyaalka dheerdheer in uu barto, isla markiina cilmigaasu u siiyey awood in uu baaro dadka aadamigaa wada dhaqankiisa tacabka u yaalla sida uu ugu macaamiltamo, siduu isu xaqiro. Wuxuu ka door- tay marka in uu keena falsafad la yiraahdo : «hantiwa- daag cilmi ku dhisan» oo micneheedu ay tahay, sinnaan, cad- daalad iyo shaqeys- oo hawsha yaan lagaa badin.

Bal hadde aan isweydiinno, maxay isku diideen labadaasu, ma ii sheegi kartaan? Haddii labada fikradood dhammaan ay u socdaan, bulshada aadamiga ah wanaaggeeda iyo horukaceeda iyo nolosheeda hagaagsan, maxaa dhibaato ah oo ku jira marka? Dhibaato kuma jirto ee dhibaatada yaa gelinhaya? Waxaa gelinhaya nin dan daafacahaya uu leeyahay. Wuxuu la mid yahay kan qabiilka xun oo aynu la diireyno oo aynu Ummaddeenna rabno in aynu ka rarno abaarta aanna dooneyno meel doog ah in aynu u rarno, midka la diiraaya weeyaan. Innagu ma ka yeeleynaa maxaa garaadka Ilaahay inoo siiyey, maxaa dad Ilaahay inooga dhigay, haddaannaan awood u lahayn in aannu kala garanno waxa xun iyo waxa san? Marka micneheedu waxa weeye, Soomaaliya, nin kastaa ha gawgawleeyo hana gucleeyo ee waa hantiwadaag cilmi ku dhisan siyaasaddeedu Diinteeduna Islaam weeyaan. Ninkii innaga shahaado na siin lahaayow inoo diid haddaad doonto, shahaadadiisa ha iska haysto hadduu rabo, kheyrkii uu inoo hayeyna hayskala tago. Horeybaan u diidney gunnimo ama dan xarig ku xiran yahay mana rabno, xornimo oo keliya ayaan dooneynaa innagu, nin noogu cagajugleeyaa ma jiro, nin durbaan noogu tumaana ma jiro oo taasu runtii weeyaan. Ma islaannimaa oo yaan u haynay oo ammaano inoogu dhiibtay awalto, ninkee buu ahaa ninka noo dhiibtay innaga? Nin noo dhiibtay ma jiro, waxa weeye Ummaddannada Diinteedii, innagaa daafacaneyna innagaa ku maamulaneyna, innagaana gaar ka haysaneyna, ninkii sida innagu aan u wadno aannuna aaminsannahay sidii Ilaahey u keenay in ay tahay, ninkii si ka duwan u keenay isagaa ku shaqo leh ee innaga wax inagama gelin, maxaa waxay waannu gaarnay oo maskaxdannadu waa gaartay, fikraddannadu waa gaartay, damiirkeennu waa ina gaarsiiyey xornimada micneheeda in aannu dhedheminno, addoonnimona ma rabno innagu ninna ka yeelimeyno.

Aan u soo noqdo hantiwadaag. Hantiwadaag waxa weeye cilmigaa aan ka soo sheekeeyey oo culumada caalimiinta ahi ay dhigeen aadamigana ah, aaminsanna xuquuqul insaanka iyo sinnaanta iyo caddaaladda. Waa hagaag yeynu iyada aynu uga rabnaa shahaado in ay ina siiyaan in aynu nahay iyo in kale? Cidnaba, nin aan uga rabnaa ma jiro, maxaa wacay nin aan dartii u qaadannay, qolo aan dartood u qaadannayna ma jirto ee waxay nala tahay in ay tahay cilmigii ugu cusbaa cilmiyada maanta jooga ayna inta wax garan kartaa ay ku hirgelin karto horukeceeda orodka dheer leh oo ay daneheeda ku toobi karto. Saas baan u garaneynaa. Hantiwadaagxume salkiisu xaggee galaa? Isticmaar iyo hantigoosad buu galaa ee meel kale ma galo oo halkaas ayuu u socdaa. Waa barasho been ah ee mid ka dhab ah maaha taariikhda aynu dib u sii baarno hantiwadaagxumeheennu meesha uu ka yimid, xaqiiqo ahaan halkaas ayuu u dhammaan doonaa. Marka waxaan leeyahay cudurku meesha uu ku jiraa taas weeye, Soomaalixume meesha uu ku jiraa taas weeye, hantiwadaag xume meesha ayuu ku jiraa oo kaas weeye, wadaadxume meesha ayuu ku jiraa oo sidaas weeye yaryare yaalkuna meesha ay ku jiraan meeshaas weeye. Marka dagaalku yuu dhex joogaa? Wuxuu dhex joogaa Soomaali same, hantiwadaag same, wadaad same iyo wadaad xume, Soomaali xume iyo hantiwadaag xume. Innagu siyaasaddeenna aan u soconnaa waxa weeye? markaan taariikhda iyo cilmiga dib u raacnona aan hubo in aan ku adkaaneyno, xaqiiqdiina ay saas tahay, dadkeenna diintiisuna waa Islaam, siyaasadda aan ku dhaqmeyno oo aan ku korineyno dhaqaaleheenna ku dhiseynona iyo adduunkeennuna waxa weeye tan hantiwadaagga ah ee ma aha kan hantigoosadka, mana dooneyno hantigoosad iyo wixiisa. Cid aan gumeysannona ma dooneyno, cid in aan ka sarreynona ma rabno ee waxaan rabnaa in aan la noolaanno, waxaan rabnaa in aan la sinnaanno, si caddaalad ahna wax ula qeybsanno. Sidaas baan dooneynaa innagu.

Waxaan u nahay xor baan u nahay dadkannaga, dhib kasta oo ina haysta waannu ka baxaynaa shakina kuma jiro oo wax daa'iman ahi ma jiraanniin, dhib kastoo ina haystana waxaa naga saari kara Ummaddannada Soomaaliyeed, wax kale oo naga saari karaana ma jiraanniin.

Aan ku soo gunaanado hambalyo diirran in aan gabdhaha Soomaaliyeed oo dhan u diro, hooyooyin iyo qolo

dhallin yar iyo kuwo carruur ahi aniga gabdho ayey ii wada yihiin kulligood. Waxaanna u rajeynhayaa in ay noqdaan kuwii garta qiddada, fikradda saxa ahna ku dabbaqa oo caddaaladda iyo sinnaanta ah. Kuwii sida xaqa ahna uga qeybqaata ay noqdaan, saa horeyba way uga qeybqaadan jireene, laakiin fikrad iyo cilmi ku dhisan in ay qabadka iyo garadka horudhigidda ama barwaaqeynta Ummadda Soomaaliyeed ay qeybtooda ka qaataan.

Waxaan haddana u duceynhayaa sannadka sannadkiisa kuwii aad iyo aad ay u kortay fikraddooda siyaasiga ah, aqoontooda cilmiga ah iyo kheyraadkooda nolosha intaba in ay noq daanniin iyagoo Ummaddooda la socda.

Haddaad horey u weydeen fursad, haatan ayaad haysataane, si aad qeybtiinna xaqa ah : talada dalka, hore u dhigidda iyo dhaqaalaha Ummadda aad qeybta xaqa ah uga qaadataanniin. Waxay ila tahay taasu waxay ina sii fareysaa in aad loogu tabaabusheysto in la abaabulo meelaha gaar ahaan inta kormada fikraddu ay sii badaneyso meelaha haweenka faraha badan leh oo aan shaqada haysanninu ay ka heli lahaayeen in la tabco ayaa lagama maarmaan ah.

Waxaan aad iyo aad ugu ammaanahayaa dadka dhibaatadu ay haysato magacoodana aan ugu mahad naqahayaa, dadaalkii ay dadaaleen haweenka Soomaaliyeed meel ay joogaanba oo ama xooggooda ama xoolohooda ama tacab iyagu ay la tabceen iyo abaabul iyo agaasin wanaagsan ay ku keeneen uguna deeqeen ilaa maalintii dhibaatadaasu ay bilaabatay, dadkooda in ay u gargaaraan. Xilkaas ay kaseen micnihiisu waxa weeye fikraddooda siyaasiga ah iyo qiimohooda waddanigа ah oo koray weeyaan. Waxaanan u rajeynayaa, in ay horeyba waa u ahaan jireene, haatanna ay heegankooda ay sii adkeeyaan.

Waxaa ku soo xirahayaa, waqtigakan haatan aan mareynaa waxa weeye waqti aan fududeyn, dhibaatoovin badan ayaa dadkeenna hortaalla, dhibaatadaas waxaa keenahayaana wax weeye; horukaceenna qiimaha dheer leh oo qolona maslaxad ay lahayd duminaya, maslaxadda Ummadda Soomaaliyeed adkeynhaya. kuwo hinaasi ah oo aan inoo quurin kartideenna iyo garaadkeenna iyo horusocodkeennaba aan inoo quurin ee ka hinaasaya, kuwo garaadkooduba uusan gaarin oo kuwa aynu innagu ilbixineyno la siman oo la caqli ah; la fikrad ah, la biseyl ah waxa weeye isticmaarka caalamiga oo gumeysi iyo dagaal ama ha qarsoonaado ama caddaan ha ahaadee kula soo dhaqaaqa. Marka dhibaatooyinka kale ee ama dhaqaale la xiriirsan ama mid dabiiciya la xiriirsan, waxa kor saarani waxa weeye : meesha aynu gaarnay waa meel sare, maaha mid aynu u fariisaneyno ama isku mahadineyno oo aynu oraneyno : «waa dheregnaye aan seexanno», mana dhowin mana dhergin inta dadkeennu suuqa uu daadsanyahay, inta dadkeennu uu gaajeysanyahay, inta ay shaqo la'yihiin ma dhowin mana aynaan gaarin, laakiin micneheedu waxa weeye, inteynu tillaabooyinkii aan qaadnay iyo guulaha aan soo hoynay aynaan ninna inoo quurin, ninna uusan u maleyneynin ineynu gaari karno. Micneheeduna waxa weeye marka, intii aynu kheyraadkeenna badinno cadaawaddeennuna waa badaneysaa, laakiin innagana maxaa badanhaya? Waxaa badanhaya tabyaqaannimadeenna mar haddeynu inta jarribaad gelinnay, garaadkeedii iyo wax qabadkeedii aynu aragnay miro faa'iido leh in ay dhaleen, haddana waxa inagu sii diraya qiiradeenna iyo geesinnimadeenna ineynu is daafacno oo si ragannimo leh isu daafacno baa innagana inoo soo badaneysa. Marka mar walba innagaa taaka ka horreyna cadawga. Taakada aan uga horreynaana waxa weeye oo ay noqon kartaa taako mabdi'i ah oo insaanku markii uu mabdi'i yahay geesi weeyaan, waxa weeye taako iimaan ah maxaa wacay innagii baa isku kalsoonaannay, dalkannagii baan ku kalsoonaannay, Ummaddannadii baan ku kalsoonaannay, waxayna keeneysaa geesinnimo.

Oo marka wax kastoo la keenaa maxay inaga dhibahayaan? Waxba. Wax ay inaga dhibahayaani ma jiraanniin runtii. Micneheeda, kama wato in aan dhib la'inoo geysaneyn laakiin dhibkii kastoo la'inoo geysto waxaan u qaadaneynaa guul, maxaa wacay dhib kastoo naloo geystaaba wuxuu inoo noqonhayaa tacliin aynu qaadannay oo aynu u

birtumannay sideynu cadawga aadamiga ama cadawga xornimada ama cadawga caddaaladda ama cadawga mabda'a san aynu kula diriri lahayn hubkeedii uun buu ina siinhayaa, markii walbaba.

Waxay ila tahay, yaanan ku fogaannine aan ku dhammeeyo hadalkeyga hambalyo haweenka adduunka, hambalyo haweenka Soomaaliyeed, hambalyo Ummadda Soomaaliyeed.

Waxaannu leennahay cadawga Ummadda Soomaaliyeed ha jabo, isticmaarku ha dhaco.-

Waad mahadsantihiin.



# Halganka DHallinyarada Soomaaliyeed

KHUDBAD M.G.S. EE KACAANKU UU U JEEDIYEY DHALLINYARADA 15.5.1975

Jaallayaal waad salaamantihiin, waxay inoo tahay farax weyn mar labaad in aannu halkaan shir ku qabanno Kacaanka u jeeda dhallinyarada Soomaaliyeed ee muddo dheer soo tixnaa. Taas oo aynu uga jeedno in dhallinyarada Soomaaliyeed Kacaankeedu uu jiri jirey ilaa muddo aynaan innagu xusuusan karin, laakiin ayaan darrada ballaaranu waxay ahayd in aan la tirin jirin ama aan la qori jirin ama la tixgelin jirin, markaasna ay dhici kartey in taariikhda Ummadda Soomaaliyeed guud ahaanteedu ay xabaalanto, sida ay hiddaha iyo dhaqanka iyo dadka Soomaaliyeed Ummad ahaantiisuba ay u xabaalneyd, isla markiina Kacaannadii is daba joogga ahaa aan marna lana qiimeynin, lana taariikheynin, si ay dhallinyaradii qarni kasta joogtaa ama sano kasta joogtaa ay ugu hirato taariikhdeeda iyo tan Ummaddeeda.

Marka sidaa darteed waxaan isleeyahay tan aannu xuseynaa waxa weeye middii aynu ku geesinnimo gelineyney, ku ururineyney, ku muujineyney Ummadda Soomaaliyeed socodkeeda joogtada ah ilaa uu ka gaaro heerka uu doonahayo, kuna xoreeyo dalkiisa iyo dadkiisa dhammaantood ama ha ahaato xag siyaasadeed ama ha ahaato xag dhaqaale, ama ha ahaato xag bulsho, ama ha ahaato xag mideyn Ummaddiisa sheydaanku uus qeybasday.

Waxaa halkaas su'aal ka furmeysa taariikhdu maxay tartaa? In la xusuusto wixii la soo gudbay maxay tartaa? Yeyse

wax u tartaa oo faa'iidada ay leedahay waa maxay? Waxay wax u tartaa, Ummaddu maalinwalba waa jirtaa waana joogtaa, qof shakhsi ahise waa socon karaa, waa dhiman karaa, waana tegi karaa, laakiin dalka iyo dadku weligood waa jirahayaanniin. Haddaba haddii wixii qiimo ah oo wanaagsanaa aynan taariikheynin, dhallinyaradeennu sideebey ku garanhayaan wixii dadkii hore ay soo mareen? Sideebey ugala harayaan wixii kheyraad ahaa amaba faa'iido ahaa hadhowtona u tixraacahayaan ama ay wax ugu qabsanhayaan.

Haddaba waxaan filahayaa in taasu ay qiimeyn u baahantahay keli ahaan gaar ahaan markii aan ula jeedo, dhallinyarada wax barataa in ay marka arkaan buugta ay wax ka akhristaan oo ajnabiga ah ama isticmaarka ah in ay ka arkaan taariikh dad kaleeto oo ay buugaagtaas ka akhristaan, qiimo dad kale, wax tar dad kale, aqoon dad kale, micneheeduna waxa weeye : way dhisteen iyagu taariikhdoodii, innagana teennii waa la xabaalay, waana la baqtiiyey, qiimihii aynu xusuusan lahayn ee Ummadeheennii hore ama kuwii dhexe ama kuwii dhowaaba markeynu qori weynay, markaas ayey ahayd in qiimaha Ummadda Soomaaliyeed ay leedahay ama xubinta ay kaga jirto aadami ahaan iyo dad ahaanba in ay muuqan waayaan, waxaynu ula jeednaa marka xuska maanta ahi inuu muuqan waayo in ay tahay gef weyn oo taariikhda Soomaaliyeed laga galay, waana in aan ka soo bilowno inteynu xusuusanno qiimihii waddaniga ahaa, kii aadamiga ahaa, qiimihii, garaadka akaa, kii maskax furnaanta ahaa oo Ummadda Soomaaliyeed ay lahaan jirtey in aynu xusuusanno innagoo ku soo xireyna midka aynu maanta joogno ugana jeedna kuwa inaga dambeeyaan in ay iyaguna sidaas oo kale ay u xusaan taariikhooda, ka gadaalna ugu hirgeliyaan qoomba qoonka ka dambeeya dhigmada iyo qiimeynta taariikhda ama wixii ay hore u soo mareen ka gadaalna uga faa'iideystaan aakhirka dambe.

Ujeeddada weynu maxaa weeye? Maaha hadal iska hadoof ah, maaha yacni Soomaalinnimo jeceyl oo keliya, laakiin taariikhda aadamiga oo dhan baa sida ku dhisan, waxa aynu innagu maanta qabaneyno, waxaa ka faa'iidaysan doona kuwa dhalan doono qarniyaalka soo socda. Innagu waxaan ka



faa'iideysaneynaa qarniyaalkii inaga horreeyey wixii la soo qabtay fikrad ahaan, falsafad ahaan, dhaqaale ahaan, farsama ahaan, dad ahaan, iyo qiimo ahaan, intaba. Haraatidii ama wixii ay faleen Ummadihii inaga horreeyey, haddii aadami ahaan guud ahaaneed aan u iraahdo ama Soomaali ahaan, ayeynu ka faa'iideysaneynaa.

Shaki kuma jiro taariikhdu in ay saas u dhismeyso ama facaadduba, waxa weeye waxa innagu maanta aan faleynona shaki kuma jiro in ay Ummadda dambe u sii toobalcaareyso ama u sii goob xaareysaa in ay iyaguna ku sii dhistaan danahooda iyo hore u kacooda guud ahaantiisa.

Intaa markaan ka soo faalleeyey taariikhdii, waxaan uga noqonhayaa xaggeebuu ka bilowday halganka Ummadda Soomaaliyeed ama dhallinyarada Soomaaliyeed in ay gaarto xornimadeeda, in ay gaarto qiimeheeda aadaminnimada ah, in ay la dirirto inta ka horjeedda. Xaggeebey ka soo bilowday? Ma aynu garan karno, maxaa wacay ma dhigneyn wexeennu, intense sheekada ku hayno waxaynu ku xireynaa Axmed Gurey waqtigiisii oo uu u halgamay Ummadda Soomaaliyeed in ay xornimo ku noolaato, waxaynu ku soo xijineynaa Sayid Maxamed Cabdulle Xasan oo isaguna xornimo halgankeeda u bilaabay, waxaannu ku soo xijineynaa Kacaankii waddaniga ahaa ee Soomaaliyeed ee nimankii yaraa ee dhallinyarada ahaa ay qeylo bilaabeen ayaga oo dad yar ah isticmaarna dulsaaranyahay, waxaynu ku soo xijineynaa midda haatan aynu mareyno ee Kacaankeenan.

Maxaynu isugu wada kicineynaa waxaas oo idil? Waxaynu isugu xireynaa waxaannu aaminsannahay, haddeynaan Kacaannada ay Ummadda Soomaaliyeed ay hore u soo martay aynaan soo wada qaadin ee aynu keynu joogno oo keliya ka bilowno waxaynu xabaaleynaa taariikhdii Ummadda Soomaaliyeed, waxaynu dumineynaa qiimihii Ummadda Soomaaliyeed, waxaynu illoobeynaa qaxarkii iyo dhibkii aynu soo marnay, waxaynu kala aqoon waayeynaa cadawgeennii

iyo saaxiibkeennii, lagama maarmaanna sidaas bey u noqoneysaa in ay isku tixantahay taariikhda Ummaddeennu.

Jaallayaal intaa markii aan ka hadlo, dhallinyaradu waxay ugu toosantahay Ummadda aadamiga ah. waxayna ugu toosantahay waddamada waa soo korohayaan la leeyahay, waxay ugu toosanyihiin dalkeenna Afrika ama Soomaaliya haddeynu u soo degaandegno. Waxa weeye adduunku habeen iyo maalinba Kacaan ayuu ku jiraa. qofka aadamiga ahi caadiyan wuxuu xaq u leeyahay ama uu maalin walba u dadaalaa nolosha markaas uu ku noolyahay. ilmihiisu mid ka fiican in ay ku noolaadaan, dhaqaalihiisu in uu koro oo xornimadiisu taam noqoto. siyaasaddiisuna ay noqoto mid garan karta ujeeddada iyo aayaha dambe kana talin karta, mid u gogol dhigi karta waxa soo socda muddooyinka ku soo food leh.

Haddaba waxa weeye dhallinyaradu, tii u ahayd hoggaanka. tii garaadka u ahayd. tii nolosha u ahayd, tii dhiigga u ahayd. in ay Ummaddaas kiciso maalin walbaba. Waxaana weeye haddaan u soo dego teenna Soomaaliya. maaha Kacaankeennu mid doonahaya in uu fadhiyo, Kacaankeennuna waxa weeye mid hore u socod ah, waxa weeye mid halgamahaya, waxa weeye mid garanhaya waxa maanta aynu haynno waxa ay wax u tari doonaan. waxa weeye mid geesinnimo gelinaaya amaba u dhashay runtii markii la eego dhallinyarada Soomaaliyeed in ay maanta dagaalkeeda ay qaadato. xubinta ay iyadu leedahayna ay hesho, in Kacaanka hawshiisa. tacliintiisa. siyaasaddiisa. Ummadeyntiisa iyo asluubtiisa wanaagsan in ay u habeyso in ay noqdaan kuwa berri waddankooda ku hoggaamin karahaya wadda xaq ah. kuwa garashadooda siyaasiga ah iyo tooda aqoonta ah iyo midda cilmigaaba laga dhergiyo waqtiga munaasibka ah, si ay hadhoowto u noqdaanniin kuwo u hoggaansama amaba hoggaamiya Ummadooda kuna hoggaamiya hab wanaagsan ee ay adduunka uga geli karaan meel qiimo iyo tixgelis wanaagsan leh oo ama Afrika ay uga geli kararahayaan ama kuwa hore u soo kacahaya ay uga geli karahayaan. ama Ummadaha innagu aynu ka mid nahay oo Jaamacadda Carabta oo kale ka mid tahay aynu xubin fiican uga geli lahayn, waajibka ina saarani



waxa weeye in aan kuu tababbarro in aad qof qiimo leh noqoto ama dalkaaga wax kaga tar ama dalkii kale oo aad joogtaba wax kaga qabso. laakiin qofka dhallinyarada ah ee Soomaaliga ahi waa inuu gaaraa aqoon sare ee siyaasad iyo cilmiba leh si labaduba ay meel sare u gaaraan.

Haddaba Jaallayaal, waxa aan leeyahay marka Kacaankeennu waxa weeye midka daryeelahaya dhallinyarada Ummadda Soomaaliyeed. Muxuu u daryeelahayaa dhallinyaradaas oo aan u kala soocneyn rag iyo haweenba. taas oo mid keliya ah, magacoodana la yiraahdo: «dhallinyaro» ee aan la eegeynin ma ragbaa mise waa haween, bacdamaa aan wada hubno in ay marka ay wada jiraan bir adag yihiin oo aan ninna uu-can jebin kareynin bacdamaa aan ognahay in ay wax wada qabsan karaanniin. Saabaan u leennahay Kacaankeennu sidaas buu ku habeysanyahay, waxaana lagama maarmaan u ah in ay u gartaan sidaa halgankooda mutaxarrarka ah iyo nolosha.

Haddii aynu eegno dhallinyarada. waxay ka soo gudubtay waqti foolxun oo waddankeennu uu soo maray oo aynu ugu yeeri karno waqtigii mugdiga, waqti aan jaho iyo jid loo koco aan lahayn. waqti aan meel loo jeedo iyo meel laga jeedo aan la aqoonnin, waqti ay foolxumeyd nolosha Ummadda Soomaalidu iyo ujeeddadeedu intuba. Haddii aynu soo marnay waqtiyaalkaas xun xun. shaki kuma jiro in uu waqtigaas madoobaayu uu ku reebahayo dhallinyarada gaar ahaan kuwa Iskuulaadka Sare ku jira amaba Jaamacadda ku jira in waqtigaas madoobu uu raad ku leeyahay. Waxaa marka is weydiin leh dhici kartaan waalidkii amaba dadkii waaweynaa in ay waqtigaas madoobaa iyagu moodhayaaniin waqti fiican inuu ahaa. in ay moodahayeen dan in ay haysteen oo ay maleysanhayaan in taasu u fiicneyd, in ay haatan durbaan u tumaan kuwa suuqa jooga oo xunxunka ah oo aan ugu yeerno dadxunka Soomaaliyeed ee weli u hangal taagahayaan wixii hore, in qaarkood ay dalalka ajnabiga ah ay ka guuxaanniin oo been ka shubaanniin iyagoo ka indha la'aayaha dambe ee Ummadda Soomaaliyeed iyo ilmeheeda intaba. maxaa wacay caqligoodu uusan dherer la ekeyn. fikraddoodu ayan dherer la ekeyn. biseylkooda siyaasiga ahina ayan gaari karin, aadamin-

nimadooduna ayan gaari karin, u indho lahayn adduunku heer uus marahayo iyo meesha uu doonahayo adduunku in uu gaaro iyo kuwa Soomaaliyeed in ay xaq u leeyihiin in ay u tartamaan meesha sare in ay tagaanniin, taas baa jiri kareysa.

Haddana isweydiis waxa leh, dhallinyarada xubintee-du waa tee marka? Ma waqtigii madoobaa bey u hanqal taa-geysaa? Ma kaas bey qiimeyneysaa Ma qashinkii bey qiimey-neysaa? Ma qabiilkii bey qiimeyneysaa? Ma tuugadii bey qii-meyneysaa? Ma garab qabadkii bey qiimeyneysaa? Ma qa-raabakiilkii bey qiimeyneysaa? Ma eexdii bey qiimeyneysaa? Maxay qiimeyneysaa dhallinyaradu? Ma waqtigii madoobaa bey qiimeneysaa? Mise waxay dhiseysaa oo u daneyneysaa aayaheeda dambe, mar haddey nafis fiican ama nasiib fiican ay yeesheen in ay ku dagaallamaan ayey u guntanhayaan. Xa-qiiqdu waxa weeye qofka Soomaaliga ah oo u guuxahaya waq-tigii dambeynta oo u guuxahaya qaraabka kiilka oo u guuxa-haya shahaadadii shanta boqol lagu gadan jirey oo u guuxa-haya wiilkii ama gabadhii shaqo la siiyo aniga ayaa Ilaah kuu ah la oran jirey, ama gabadhii shaqo la siiyo caawa ii imow la oran jirey maantana nin dhihi karaa uusan jirin ee meeshii ay rabaan shaqadooda ay ka gelahayaan, tacliintoodana iyaga oo aan waxba ka bixinnin dhankii ay rabaan ay ka wadan ka-raan oo aqallahooda iyo Tuuloovinkooda iyo meel kastaba la geeyey.

Marka wiilka iyo gabadha muxuu yahay waajikoodu? Ma waxa weeye qiimaha ballaaran oo ay gaareen in ay minti-daan oo ku diriraan una diriraanaa mise waa si kale? Waxaan isleeyahay qaldaan waa ka imaan karaa waalidka dadka waaweyna waa ka iman karaa, aataar foolxunna waa ku reebi karaa waqtigii madoobaa, maxaa wacay indhohooda iyo mas-kaxdoodu ma gaarto sanooyinka soo socda Ummadda Soomaa-liyeed meesha ay tegi doonto iyo adduunku meesha uu mari doono, maxaa wacay jahala ballaaran ayaa ku dhegtay qalbi-gooda, iyadaana maskaxdooda madoobeysey, iyadaa niyad-dooda madoobeysey, iyadaana dulleysay, laakiin aayahoodu waxaan isleeyahay dhallinyarada wey ka duwantahay, waana ku waajib dhallinyarada adduunkoo idil xaajooyinka ka soc-



da waxa wada dhallinyaro weeyaan. Midka aynu maanta u dabbaaldegeyno ama aynu ku xireyno Kacaanka maanta kii-sii horeeto, dhallinyaro ayey ahaayeen kuwii sameeyey ee ma ay ahayn kuwii waayeelka ahaa, iyagoo indhuhu ka awdanyi-hiin oo xameetiyu ka saaran tahay aqoondarrona ay u geysay ayey isticmaarka dabada kaga xirnaayeen ayeyna ka kumiyey-san jireen, oo misana hoos jiifi jireen, laakiin dhallinyaradii waa ay diidday waxayna tiri: «yeelimeyno» oo aayaa Ummad-da Soomaaliyeed baan dhiseynaa, xornimo iyo madaxbannaa-ni ayaanna dooneynaa.

Kuwii iyaga ahaa ee isticmaarka hoos jiifi jirey haddey garanhayaan in Ummadda Soomaaliyeed ay xornimo gaari kar-to oo caqligoodu dhanyahay aqoontooduna la egtahay, fa-caaddooduna ay la egtahay, qiimahana ay garanhayaan oo ja-halo ayan ku dul fadhiyin way yeeli lahaayeen iyaguna oo da-gaalka ayey wax ka geli lahaayeen, laakiin aqoondarro ayaa u geyneysey.

Haddaba waxa aan leeyahay marka dadka waalidka ah ama waayeelku waa in ay gartaanniin waxa maalin walba Ummadda Soomaaliyeed inteeda wax garadka ahi ay u shee-gahayaan ee ah tilmaanta hagaagsan, in ilmohoodu ay tahay lagama maarmaan in ay ka xoroobaan dhibaatooyinkii ay iya-gu soo mareen ama haatanba adduunka hortaagan. Waxaan-nu oraneynaa Jaallayaal hadalkii oo urursan, dhallinyaradu waa in ay marka naga khasabtaa hoggaanka una dhufato xag-ga Ummadda Soomaaliyeed si ay gunnimada uga baxaanniin. Innaga khasbimeyso oo diyaar baan la nahay in kastoo cirro iyo duqownimo nagu taallo, haddana beentood weeye oo ni-yadaan dhallinyaro ka nahay, iyagaanna la jirnaa, iyagaan la dan nahay, iyagaanna la qoom nahay, runtiina saas weeye. Maxaa wacay waxaan aaminsannahay in duqowgu uu caqliga ku jiro ee cumriga kuma jiro, caqliga duqoobay ama ha ahaa-do mid dhallinyaro ah ama ha ahaado mid waayeela, caqligoo-du markii uu duqoobo, markuu jaahilyahay, markuusan qii-mo waddaniya lahayn, markuusan siyaasad ahaan u bisleyn, markuusan garan karin aayaha dambe waxa uu ka noqon ka-ro, markuusan facaadda la socon karin, markuusan fikireynin,

markaas baan u haystaa in uu duq yahay ama ha dhallinyaraado amaba duq ha ahaado hadduu doonee.

Haddaba waalidkoow maxaa kuu dan ah? Waalidkoow waxaa kuu dan ah, waxa aad rabto ood ujeeddaba inta aad nooshahayna in aad wax cunto, in aad jiif hesho, in aad noolaato, in aan ciduna ku hayaanadeyn oo aan ciduna wax kuu dhimin. Marka aad jiidato adiguna, waxaa dhallinyarada amaba carruurta ah oo adiga kaa beermay in ay helaan kaana dhaxlaan kheyraadkii aad u abuurtay, isxaanka aan ilmeheenna u dhaafi karnaana waxa weeye in aynu garab iyo gaashaan u noqonno halgankooda iyo dagaalkooda hore u socodka ah dagaalkooda cilmi kordhiska ah, dagaalkooda ay u dagaallamahayaan biseylka siyaasaddooda iyo jahadooda waddaniga ah in aan ku garab qabanno weeyaan, maxaa wacay dhaxalka ugu weyn oo aan siin karnaa kaa weeyaan.

Jaallayaal, waxaannu leennahay marka, haddaannu soo ururinno, dhallinyarada adduunku, innagoo innagu keennakan xuseyna ayaan leennahay dhallinyarada adduunku waa in ay ku dadaalaan, waana in ay ku dagaallamaan taas oo waa in dhallinyarada intii wax taqaanna hawsha waddanka loo dhiibaa, waana in aan laga xereysannin oo aan dad iska farfadhiyin meeshii, waana in iyaga looga wareegaa maamulka iyo talada waddannadooda. Afrika gaar ahaan waa in ay taas ku dhaqaaqdaa, haddey dooneyso gunnimada weli dul saaran ee cusub in ay ka kacdo. Haddii ayan saas yeelin oo aan dhallinyarada la geesinnimo gelinnin, haddii aan loo leylyin, haddii aan loocarbinnin in ay berri waddankooda si fiican u hoggaamiyaan Afrika addoonnimo ma ka baxeyso ee been weeye waxa la sheegahayaa mana socon karaan. waxa socodsiin kara oo qur ahina waa dhallinyaradeeda mutacallimka ah oo xornimadeeda u soo celin kara, iyadaana noloshiiqiiradii Qarannimada ama Qaaradnimada ay ku jirtaa. Haddii dhallinyarada Afirka aan loo oggolaannin in ay hore u socoto iyadu ee laga dhowro xukunka iyo maamulka waddankooda micneheedu wuxuu ahaan hayaa addoonnimada cusub ee isticmaarku uu ku doonayo in uu Afrika dul saarnaado. Alle mahadi ha ku gaadhee, waxan u soo jeedinhayaa kuwa



Soomaaliyeedow Ilaahay dulligaas weydinka dul qaaday oo idinma dul saarra, waddankiinnana adinka ayaa leh nin aad uga gabbaneysaanna ma jiro, maamulkiisana adinka ayaa iska leh ee wax ka qabsada ayaan idin leeyahay, ha idinku daydeen dhallinyarada Afrika iyo tan Aasiya tan adduunkubee, hore u socda.

Jaallayaal intaas aan ku gudbo in aan ka hadlo oo weli u sii noqdo xaggii halganka xornimada, xaggii halganka madaxbannaanida, xaggii halganka midowga Ummadda Soomaaliyeed, xaggii halganka Kacaannimada Ummadda Soomaaliyeed. Waxan oran karahayaa Jaallayaal; Soomaaliya waa la gumeeyey, waana la qeybiyey, waana la baabba'shey oo isticmaar baana sal u ahaa ilaa maantana dhagaxyadiisii iyo warmihiisii buu la hortaaganyahay.

Waxaan idin xusuusinahayaa mid keliya, waad nala joogtaannine ma hortaagnaan karaanniin oo wax Ummad qiimeheeda iyo dadnimadeeda celin karaa ma jiraanniin, xornimadeeda iyo mideynteeda wax is hortaagi karaa ma jiraanniin. Maxaa loo daafici waayey xornimadii Viednaam, 30 sano ayaa la dilahayey, 30 sano ayaa la baabbi'inaayey oo hub aan lugula isticmaalinu ma jiro ee maxaa looga hor istaagi waayey xornimadeeda? Aynu ka soo qaadno Afrika ee imisaa bey gun ahayd, aakhiritaankeeda maxay u dhammaatay? Xornimo ayey u dhammaatay, waxaana ugu raad dambeeyey Angoola, Musambiig iyo Gini Bisaaw iyo kuwa haatan wejiga ku sii haya xornimadoodii. Isticmaarkii ballaarnaa oo xoogga weynaa muxuu u joogi waayey yaa ka waday dalka? Dadkii dalka lahaa baa ka waday, xaqiiqdiina sidaa weeyaan.

Waxa weeye Kacaanka Ummadda Soomaaliyeed ee boqollaalka sano ku sinnaa waxa uu u dhutinhayaa waa maxay? Wuxuu u dhutinhayaa Ummadda Soomaaliyeed ee la gumeeyey lana qeybiyey inuu isu keeno oo uu mideeyo xoreeyona weeyaan waxa uu u dhutinaayey, waana in ay socotaa taasu. Isticmaar beentiis weeye iyo dabadhilifkiisa xornimada iyo mideynta Ummadda Soomaaliyeedna waxba kama qaban karaan, mana joogin karaan, waxna kama tari karaan, way dhi-

ci kartaa maantadatan aynu joogno in aynaan taas ku guuleysan. Laakiin aakhirutaankeeda dambe way ku guulaysan doontaa. Waana in ay gaartaa, shakina kuma jiro in ay gaari doonto. Maxaa wacay adduunka wax Ilaahay keeno waxa ugu qaalisani waxa weeye xornimada. Xornimadana qofka doonahayaa wax ka adkaan karaa ma jiraanniin, hub ka adkaan karaana ma jiro, haddii laga adkaanaayo Viednaam iyo Kamboodiya ayaa laga adkaan lahaa, beentiis weeyaan. Waxa ka adagi waxa weeye qiimaha iyo qiirada waddaniga ah, Soomaaliya waa in ay midoowdaa waana in ay xorowdaa, ama ha rabeen ama hadiideene.

Koow markii aynu u gudubno tan kaleeto Afrika waa in ay midoowdaa waana in ay xorowdaa nin hor istaagi karaana ma jiro. Lacag ha ku baxsheen, ha kala gadeen ha kala leexleexiyeen been ha u kala sheegeen Diin ha ku kala qeybiyeen; midab ha ku kala qeybiyeen, magacyo kale ha u baxsheen, af lugu hadlo oo isticmaarka naftiisu uu dhalay ha ku qeylqeyliyeen haddey doonaan, laakiin aakhirutaankeeda waa in Afrika midoowdaa waana in ay xorowdaa dhammaanteed oo idili.

Waxa weeye, markii aan u soo dego adduunku waa in uu aayihiisa dambe gaara, waana in Ummadda aadamiga ah ee adduunka ku nooli ay nabad ku noolaataa oo qolo kastaba iyada loo daayaa aayeheeda dambeeto in ay u taliso, siyaasaddeeda in ay u taliso, dhaqaaleheeda iyo iyadu sida ay wax u dhisaneyso iyadu in ay u taliso, isticmaarka caalamiga ahi waa in uu ka dhex baxaa si ay u dhistaan gurigooda oo ay u maamushaan. Waxa weeye marka in Ummadda aadamiga ahi ay aakhirutaanka ay gaartaa nabadgelyo caam ah ee adduunka u siman dadka aadamiga ahina ay noqdaan kuwo wax is tara, kuwo is garabsada iyo kuwo wax is weydiista waa in ay noqdaan.

Ummadda Carabta ah aan u soo socdo weli aanna gaarno runteedii waa la qeybiyey, waana la baabba'shey, haddana been been ayaa lugu kala duldullaalaa, haddaana la sii kala gadgataa ee maxaa iyagana aayohoodu noqon doonaa ama



ha qeyliyaan ama yey qeylinnine, ama been ha shubeen ama been yey shubine, ama raadiyeyaalkooda ha soo daayeen ama yeynan soo deynine, laakiin runtu waxay noqon doontaa in dhallinyarada Ummadda Carbeed ay aakhirutaankeeda isu tagto, waana midoobi doontaa, waana xoroobi doontaa, aayohoodana iyaga ayaa ka talin doona, qiimaha ay leeyihiin ee Ummad ahaantaana wuxuu ahaan doonaa mid xubinta uu kaga habboonyahay adduunka uga fariista, laguna ixtiraamo luguna dhoweeyo ayey noqon doonaanniin.

Ujeeddadeennu marka waa maxay? Ujeeddadeennu waxa weeye, Jaallayaal shan sano iyo bar ayeynu soo soconne, shantaas sano iyo barkaas, aynu soo halgameyney wax badan oo aannu qabsannay ayaa jira, loomase baahna in aan halka ka tiriyo wixii aynu soo qabsannay, waa dhici kartaa dad badan oo dhallinyaro ahi in ayan ku cilmi lahayn wixii badnaa oo aynu qabsannay, laakiin inooma aha caado wanaaggii Ummaddannadu ay qabsatay in aan sheegsheegno ee waxaa caado inoo ah wixii inaga dhiman ineynu isku guubaabinno dabadeedna in aynu qabsanno, taasna waa in aynu caado ka dhigannaa. Maxaa wacay waxa la yiraahdaa : «laa shukru calal waaiib» oo micneheedu uu yahay in aan lagugu shugrin waajibaadkaaga markii aad gudato, mana lagu faantaano, afkana laguma taagtaago ee waxa weeyaan waxa inaga dhiman in ay inoo muuqdaan si aannu u qabsanno una dhammeystiranno

Waxaan uga socdaa taayi, waxa weeye Jaallayaal, waqtiga aynu intaa soo gudubnay, in kastoo aynu wax badan soo qabsannay, waxa inoo dhimanina aad bey u badan yihiin oo weli iskuma hayno isku filnaan, waana in aan gaarnaa heerkii aan kaga bixi lahayn in aan baahnaanno, waa in aan isku fillaannaa, waa in aan tabcannaa wexeenna; xaggii tacliinta waynu ku cilmi leennahay waad ku cilmi leedihiin meel fiican in aan ka mareyno, mana u aaba yeeleyno waana gaarsiineynaa, laakiin dhaqaalihii xaggee baan ka mareynaa, waxaynu sheegannay, nahayna kuna sheqeyneynaa, ahaanna doonnaa Ummad hantiwadaag ah. Saldhigga hantiwadaaggu waa maxay? Waxa weeye dhaqaalaha, haddii dhaqaaluhu uusan dhisneyn oo qofku baahanyahay hantiwadaag maaha, muslim maaha,

gobna maaha, sharafna malaha, dad uus yahayna ma jiro oo qof xunweeyaan. Marka waxaa ah lagama maarmaan in aynu dhammaanteen dhallinyaro iyo waayeel in aynu u jeesanno dhaqaaleheenna in aynu dhisno, in ay noqdaan shaqaaleheenna, beeraleydeenna, dhallinyaradeenna, rageenna, haweenkeenna dhammaantood, iyo ciidamada qalabka sida in aynu isugu tagno in aynu dhisno dhaqaalo rukumo dheer-dheeru u xabaalanyihiin ee aynu kaga kaaftoomi karno in aynu u baahanno Ummad kaleeto.

Waxaan taas uga golleyahay Jaallayaal in aad ku tashataan dhallinyaradiinnu in aad noqotaan kuwii ku dagaallama dhaqaalaha, waana in aad la dirirtaan wixii dhaqaalaha kufinhaya, waa in aad meelihii xunxumaa iyo waqtigii madoobaa dadkii ku soo koreen ee iimaanka la'aa ee Ummadda Soomaaliyeed boobahaya aad ka celisaan oo dagaal dheer ku qaaddaan ee maaha in aad ka dhuundhuumataanniin, waana in aad daafacdaanniin dhaqaalaha Ummadda Soomaaliyeed oo waa in aad dhalisaan Ummadda dhaqaaleheeda iyo horukaceeda intaba, waa in aad gelinka hore haddaad iskool dhigato kan dambe wax dhaqaalaha wax u tarahaya aad qabataa.

Si aad taas Jaalle ku dhalisona waxaa loo baahan yahay in aad dadweynahaaga adigu aad ka dhalatay, una dhalatay, kana mid tahay, una noolaandoonto in aad fikraddooda iyo garaadkooda siyaasiga ah sare u soo qaaddo, maxaa wacay qofku hadduusan maskaxda ka xoroobin ma ay suuro gasho in uu gacantana ka xoroobo, inuu caloosha ka xoroobo ma suuro gasho, inuu sharafta ka xoroobo ma ay suuro gasho. Waa in uu maskaxda ka xoroobaa. Maskax xor ah, maskax biskootay, maskax musuqmaasuqii ka kortay, maskax qiimaha aadamiga garaneysa, maskax qiimaha waddaniga garaneysa, maskax berri micneheedu uu ku dhisan yahay ee maalin la nool aan ahayn, taas uunbaa dhaqaalaha siyaadin karta, taas baa dhalin karta midnimo, taas baa dhalin karta is jeclaan oo walaalkaa aad jeclaato, taas baa ku garansiin karta kheyraadka aad leedahay iyo qiimahaaga aadamigaaba. Waana in aad ku dadaashaan Goleyaalka in aad tagtaan dhallinyaradiinnu oo duruus ka bixisaan, waana in aad soo kicisaan Ummaddiina oo duullaan gelisaan ee maaha in aad markii aad iskoolaadka ka baxdaan in aad meelaha iyo baararka aad fariisataan oo Kacaannimo maaha taasu. Kacaannimadaas iyo sidii aad shalayto uga soo guul keenteen, sharaf uga keenteen, ugu xoreyseen Ummadda Soomaaliyeed markii aad miyiga aaddeen oo aad u gargaareyseen Ummadda reer miyiga ah, waa in aad haatanna magaalooyinka aad u gashaanniin, waa in aad Goleyaalka tagtaan, waa in aad dadkiinna hannuunisaan oo waxa aynan aqoon garansiisaan, waana in aad ku xirnaataan goleyaalkiina dadkiinnana aad wax ka bartaanniin, waa in aad xornimada micneheeda aad garansiisaan.

Jaallayaal marka aan taa leeyahay, isla markiina waxa weeye, Goleyaalka qolada maamushaana iyo Xafiiska Siyaasaddu waa in ay ku dhaqaaqaan dhallinyarada xarunteedii in ay Goleyaalka ka sameeyaan, si ay u helaanniin meel ay ku ururaan, meel ay ku hadlaan iyo meel ay ku fikiraanniinba, sida Goleyaalka dhexdooda looga sameeyey Xafiisyadii iyo Goleyaalkii hooyooyinka ama haweenka, isla markiina waa in dhallinyarada looga sameyaa, waana in ay noqotaa dhallinyaradaasu tii ku dagaallameysey aqoonta kordhiskeeda, marna tacliinta iyo kor u soo qaadka cilmiga Ummadda walaalohooda in ay ku dagaallamahayaan, si ay u midoobaanniin isku meelna wax uga arkaanniin, marka kalena waa in ay ku diriraan daafacaaddooda Kacaanka iyo guulaha ay gaareenba, maxaa wacay beerta falmeysayu waa tii iyagu ay mireheeda guran lahaayeen. Intaas ayaanna kula dardaarmahayaa dhallinyarada.

Aad iyo aad ayaan u ammaanahayaa, si qodda dheer oo niyo ah baan u amaanahayaa dhallinyarada Soomaaliyeed ilaa waqtigakan ama waqti horeba oo Kacaamada badan oo is daba joogey ama shantii sano iyo barkii uu Kacaankaanu jirey xubintii ay ka qaateen ee ahayd xubinta geesinnimada, xubinta hoggaaminta ah, xubinta xarakada ah, xubinta Kacaannimada ah, iyo xubinta waddaninnimada ah oo ay ka qaateen ee ay ugu dambeysey middii Ololaha aynu kaga qaadnay miyiga ee ay Ummaddoodii beeraleyda ahayd, Um-

maddoodii reer miyiga ahayd iyo wixii kaleba ay bareen nolosha micneheedu waxa ay tahay, ay bareen tacliinta micneheedu waxa ay tahay, ay bareen caafimaadka waxa micnihiisu uu yahay, ay bareen dhaqaalaha micnihiisu waxa uu yahay, ay bareen nabadgelyada micneheedu waxa ay tahay, ay bareen hore u kaca micnihiisu waxa uu yahay, ay bareen Qarannimada micneheedu waxa ay tahay. Aad beyna ugu Ammaananyihiin.

Waxa kale ee ammaan ballaaran mudan aanna u leexinhayaa gaar ahaan haweenka Soomaaliyeed, markeynu run sheegno Ummaddeenna Soomaaliyeed qolada ugu horreysa ugu Kacaansan, inoogu geesiyoon, inoogu qiimo weyn oo aynu maanta qireynaa waxa weeye haweenka, weliba hooyooyinka. Marka waxaan rajeynhayaa, anigoo aad isu leh, shaqaaluhu muu ka hormaro hooyooyinka, dhallinyaradu mey ka hor marto hooyooyinka, maxaa ku dhacay anigoo is leh, ayaan haddana waxaan leennahay wax badan bey soo tareen, waxaanna rajeynhayaa waqtigu in uu bisleeyo ee haatan bacdamaa xarakada dhallinyarada iyo dhiiggii cusbaa ee karahayey uu ku jiro, in ay wixii tegey waa tageene ay wixii hore ay u qabteen oo wanaagsanaa bootin hor leh ku sii daraan, iyagoo soo gaabinhaya meeshii la doonahayey in waqti yar looga gudbo, dhabbihii dheeraana ay soo gaabiyaan.

Ururkeenna maanta ahi, maaha urur qabiil, ururkeenna maanta ahi maaha mid maslaxad gaar ah lagu qabsanaayo, ma aynu ururneen haddii uusan jirin qiimo kuwaas ka sarreeya. Waxa ina daaweyn karaa, isu keen keeni karaa, iskuna keen xiri karaa waxa weeye mabda' saalixa innagoo ku shaqeyna oo Ummaddeenna ugu horseedna dhabbaha xaqa ah oo ay wax ku gaari karto, dhabbahaas salkeedu ama kursiga ay ku fariisan kartaahi waxa weeye waxa mabda' la yiraahdo, haddaan mabda' jirin maslaxad ma leysku raaci karahayo, mana lugu heshiin karo.

Mabdu'u marka muxuu noqon karaa? Mabdu'u wuxuu noqon karaa qiimaha waddaniga ah. Qiimaha waddanigaana markii la yimaado qof waliba sidee u arkahayaa? Qofbaa



waddaninnimadii wuxuu u arkahayaa isticmaar hoosta in laga galo, qofbaa fulaynimo ay haysaa oo is leh isticmaarka haddii lala hadlo adduunka oo dhan baa isku soo dumahaya, qofbaa diyaar u ah inuu dhinto oo dagaal galo. Haddaba waddaninnimadii ayaan isku siloo arkeynin, laakiin maxaa leysugu imaan karaa? Waxaa leysugu imaan karaahi waxa weeye mabda' siyaasi ah oo salkiisu yahay waddaninnimo, inuu ahaado mid saalixa weeyaan salkiisu oo hadda ka hor la jarribay, lana hubsaday cilmina ku fadhiya inuu socon karo, Ummadda aadamigaana uu u horseedi karo hore u kaca dhaqaale, horukaca siyaasadeed, horukaca fikradeed, horukaca qiimo aadaminnimo, hore u kaca tabcasho, horukaca isku fillaashada, wax kale oo hore wax u dhigi kara oo aan intaas ahaynina ma ay jiraanniin.

Waxaana weeye kaasu midka ah hawl iyo hantiwadaagga ah, runtiina taas weeyaan. Mana ay suuro gasho hawtulhamag in lagu socdo. Adduunka hadda ka hor boqol goor baan ka hadlay nin igu beeniyeyna ma hayo. Kii igu beenin lahaana dibusocodweeyaan, isticmaar Soomaali aan dan ka lahayn weeyaan, dhallinyaradeeda mid baqtiinhaya weeyaan, midka dulliga u socda weeyaan, wax ma garad weeyaan kan u hanqal taagahayaa dulligana weeyaan. Wax igu beenin karaana ma jiraanniin. Adduunka siyaasadaha ka socda oo dhaqaalaha lagu dhisaa waxna lagu dhaqaa, bulshada lagu dhisaa, tacliinta lagu dhisaa, caafimaadka lagu dhisaa, bulshada hagaagsan oo nadiifka ah lagu dhisaa, waxa weeye siyaasad. Siyaasaddaasuna ma hantiwadaag baa, ma hantigoosad baa? Waa tee midda Ummadda Soomaaliyeed lagu hoggaamin karahayo? Tan Ummaddeenna isu geyn kartaa tee weeye? Tan beddeli karta qabiyaaladdii iyo qurunkii tee weeyaan? Waa tee tan beddeli karta tii is dulfuulkii? Tan gumeysiga eryi kartaa tee weeyaan? Tan iimaanka yeelan kartaa tee weeyaan? Tan arki karta dhallinyaradaan ubaxa ah qiimohooda tee weeyaan? Tan dhulka kheyraadka ku jira arki kartaa tee weeyaan? Siyaasadda arki kartaa waa tee? Tii hantigoosadku maxay shalayto u arki weyday? Tii ka sii xumeyd ee gumeysigu maxay u arki weyday? Weligood ma ay arkin Jaallayaal.

Tan arki kartaana waxa weeye tan hantiwadaagga, iyadaana garan karta qiimaha aadamiga.

Waa hagaag, marka waxa weeye, taasu maxay u suuro gelineysaa? Waxay u suuro gelineysaa wax wanaagsan iyo hilinka toosan, maxaa wacay cilmi run ah ayey ku dhisan tahay ee been kuma dhisna, dan shakhsiyana kuma dhisna, dan kudhadeedna kuma dhisna, koox kuma dhisna, dulfuul kuma dhina, dhiigmiirato kuma dhisna ee waxay ku dhisan tahay maslaxadda caamka ah ee Ummadda Soomaaliyeed buu ku dhisan yahay ama Ummadda aadamigaahiba ay ku dhisantahay, waa kaa waxa isagu uu u fidahayaa, wixii kalena ay u sii dhidhimanhayaan. Markey kudlad joogto waa in ay dhimataa, markey joogto dan caam ah oo ballaaran iyo caddaaladna, sinnaan marka ay joogto, tabcasho marka ay joogto, dhowridda qiimaha aadamiga ah iyo garashadiisa markii ay joogto, waa in ay ka sare martaa midda kudladdaa, midda dhiigmiiratada ah, midda dulfuulka ah, waana in ay xabaashaa oo taasu dhimataa (hantigoosadka), tanuna (hantiwadaagga) waa in ay sare u soo kacdaa. Sidaas beyna adduunka ugu fideysaa, tan kalena ay u baabba'eysaa, xaqiiqdiina sidaas weeyaan.

Marka kan isku keen duwi karaa kaas weeyaan. Haddaba waxaa su'aashu ku jirtaa hirgelintii, sidii aan hadda ka horba u niri hirgelintii mabda'a hawl iyo hantiwadaagga habkeebeynu ku dhiseynaa? Ma waxaynu soo qaadaneynaa waddamo kale wixii ay ku soo dhaqmeen? Mise markii aynu guntii runta ahayd ee cilmiga ku dhisneyd qaadanno ayeynu ku dhaqan gelineynaa daneheenna runta ah, dabeecaddeenna caddaanka ah iyo Ummaddeenna fikraddeeda, hiddeheeda iyo dhaqankeeda iyo Diinteeda miyeynu ku dhaqan gelineynaa? Mise meel kale ayaan u jiideynaa? Waa khalad Jaalle, markii aad meel kale u jiiddo, Ummaddatanu hab ay u fikirto ayey leedahay, dadkaanu hab uu u dhaqmo ayuu leeyahay, Ummaddaan wax u gaar ah oo iyadu ay iska leedahay baa jira, haddii mabda' kasta oo yimaada aan taa la tixgelinnin micneheedu waxay noqoneysaa wax aan sal lahayn, waxay noqoneysaa wax baabba'ay. Ma rabno teennu in ay baabba'do. Saa darteedna waxa weeye ujeeddadeennu in aan dar-



yeello Ummaddeenna maslaxaddeeda. Ummaddeenna maslaxaddeeduna waxay ku jirtaa in ay hiddeheeda iyo dhaqankeeda iyo Ummad ahaanteedu in ay dhammaantood soo kacaan oo ay soo korto, oo ay cayisho, in ay aqooto, in ay caafimaaddo, in ay xorowdo iyo in ay midowdo weeyaan waxa aynu dooneynaa. Waxaana mideyn kara haddii la tixgeliyo hiddeheenna iyo dhaqankeenna.

Sidaa darteed, hawl iyo hantiwadaag mabda'a ku dhisan weeyaan mabde'eennu, wuxuuna wataa Diintiisii Ummadda Soomaaliyeed ee Islaamka ahayd, wuxuu wataa dhaqankii Ummadda Soomaaliyeed, wuxuu wataa dabeecaddoodii u gaarka ahayd, wuxuu wataa dhaqankoodii, tacliintoodii iyo wixii iyagu ay lahaayeen oo aan waxba laga tageynin, waana wanaajineynaa, waana cusbooneysiineynaa oo waqtigakan aynu maanta joogno ayeynu gaarsiineynaa oo la simeynaa ee maaha in aynu hoos u dhigeyno.

Marka Jaallayaal, taasuna waa in ay noqotaa tillaabadii amaba hoggaankii iyo dhabbihii iyo mabdi'ii aynu isku garan lahayn waa in ay noqotaa. Waana in aynu ku beddelnaa marka innagoo garan kareyna dhibaatooyinka Soomaaliyeed ama waxa horukaceeda hor taagani waa maxay? Koow midda ugu horreysa meesha duleelka ahayd oo laga soo geli jirey oo isticmaarku ka soo geli jirey, dabadhilifku ka soo geli jirey, xaggee bey ahayd? Damaacigu ka soo geli jirey, qaraabakiilku ka soo geli jirey, eexdu ka soo geli jirtey, iimaan la'aantu ka soo geli jirtey, xaggee bey ahayd? Waxay ahayd keli ahaan qabiyaaladda, waxay ahayd Gobolleysiga, eexda, iyo khiyaanada iyo caddaalad xumada iyo sinnaan xumada aabbohood kuwaas bey ahaayeen iyo hooyadoodba, waana in kuwaayu baabba'aan oo hantiwadaaggu uu beddelaa oo ka qaadaa booskoodii.

Kaas baana tixgelinaaya qofka aadamiga ah qiimihiisa ee aan tixgelineynin qofka wejigiisa iyo yuu yaqaanna iyo waa kuma ee qiimo gelinhayo muxuu galaa oo gooyaa, kaas baa garanhaya qofka aadamiga ahi waxa uu mudan yahay in la siiyo, kaas baa oranhaya : «qof qof ku dul nooli waa in uusan jirin ee waa in qof kastaaba wixii uu goosto qaataa», wixii

uusan goosannin kii goostaa waa in uu qaataa, waana in aan leysku dul noolaan mabda'a hirgelayaana kaas weeyaan.

Jaallayaal guuleysta waad ku guuleysateene. horeyna u socda. halgankiinna Kacaanka ah wada, daafaca Ummaddiinna daafaca abuurista aayihiinna dambe, tacliinta xaggeeda, bulshada xaggeeda. guubaabinta iyo kicinta Ummaddiinna Ummad weyntii ah. Daafacana Kacaankiinna. Waana aad mahadsantihiin.

Soomaaliya ha noolaato. dhallinyarada Soomaaliyeed ha noolaadeen. shaqaalaha Soomaaliyeed ha noolaado, beeraleydu ha noolaato; reer guuraagu ha noolaado. hooyooyinku ha noolaadeen. horusocodka adduunka dhammaantii ha noolaado. dibusocodku ha dhinto. isticmaarku ha dhinto, gumeysigu ha dhinto. qofkii qof Soomliya doonaaya ama aadamiya in uu dul fuulo doonahayaa ha dhinto.-



# IID WANAAGSAN

## KHUDBAD JAALLE SIYAAD U JEEDIYEY SHICBIGA SOOMAALIYEED IYO UMMADDA ISLAAMKA OO DHAN CIDDII CARRAFO EE SANNADKII 1975.

Maalintaan iidda islaamka ah. waxaan hambalyo niyad sami ah u diraayaa dadka Soomaaliyeed oo idil meel uu joogaba anigoo u rajeynhayn dhammaantood Ciid wanaagsan.

Waxaan kale oo iyadana u dirayaa salaan diirran iyo iid wanaagsan intaba, maalintaa qaayaha ummadda islaamka u leh oo ummadaha islaamkoo dhammi ay u kulmayaan in ay Ilaahood caabudaan ama ay iyaga naftooduba, maalinta uur xaarka la oran karo ama ay weydiisanaayaan cafis Ilaahey. ama ha ahaato XAJKA oo Islaamkoo dhammi isugu imaanayo Sideynu uga war hayno ama ha ahaato iidaha. qolo kasta ama Dowlad kastaaba ay ku iidayaan guryohooda iyo waddankooda. iyadoo meeshaas ay ka muuqato amaba la filaayo sida xaqu uu yahay; qof kastoo islaamihi inuu xusuusto Ilaahey, inuuna isla markaasna qadderiyo ummadda aadamiga ah, isla markaasna cafiyo, waxaana loogu yeeraa maalmahanoo kale : «maalmihii heshiiska. cafiska iyo is-afgaradka». Iyagana waxaan u dirayaa dadka islaamka oo adduunweynaha, salaan kal iyo laab ah oon u rajeynayo dhammaantood meel kastaba ha joogeene. in sanadan sanadeeda kuwii ku gaara nabadgelyo iyo barwaaqo iyo baraare iney noqdaan.

Ummadda Soomaalida ah gaar ahaan, meel kastaba ha joogeene. ama khaarij ha joogeen ama dalka dhexdiisa ha joogeen ama kuwo dhibaatooyin ay gaar ahaan u hayaan, ay-

nuna oran karno : «isticmaar dhibaato ka weyni ma jirto» ay qaarkood hayaan ha noqoto ama abaarta xun oo hadda jirta, kuwa haatan dhibaatadeeda la kulmayaan ha noqotee, waxaan Ilaahey uga baryayaa in uu dhibaatada ka fujiyo, kuwa addoonsiga lagu hayona in Ilaaheen xornimo ugu yabooho, inta dhibbanna oo haatan abaartu ay heysona, Ilaah baa gacan weyne, isagaa ka fujin kara ee inuu ka fujiyo. Isla markaana waan hubnaa in ay jiraan dad badan oo buka iyo kuwo badan oo isbitaal ku jira, iyagana naxariista Ilaahey inuu siiyo oo dhibaatada ka qaado.

Intaa kaddib, sida Ilaaheyba uu u yiri oo ku yiri Qur'aankiisa, maalintan iidda ah ee weyn ee caalamiga ah, waxay gartu tahay; dadku 12kii bilood wixii la soo maray inuu dib u xusuusto, wixii dhib ahaana, Ilaah baa ka feydi karee, Ilaah inuu ka baryo inuu ka feydo, wixii dhib ahaayoo isagu uu geystayna inuu Ilaahey ka baryo in laga cafiyo, wixii dhib ahaa oo isaga loo geysteyna inuu ka cafiyo walaalkiis, niyaddiisana uu u jeediyo in ay dhalato ama ay dhashaan; is-afgarad iyo heshiis iyo nabad qalbiga ah iyo wada noolaanta intaba.

Haddaan xoogaa ku noqdo tan abaarta, sidaynu u ogsoonnahay dad aan ka yareyn 90 kun ayaa xeryaha ku jira amaba intaa ku wareegaaya oo ku dhow dhow, waana aynu hubnaa muddooyinkaan soo socda dad badani iney xeryaha geli doonaan. Kuwaas oo aynu ognahay shaki inuusan ku jirin in xoolihii ay ku noolaayeen ay dhaafeen, in kastoo dhibaata badan ay abaartu dalka u keentay, haddana sidii mar hore aan u sheegay, wuxuu noqon doonaa dadaalkeennu in aynu taageerno dadkeenna, kolleyba wed mooyee, watatocoow inuusan wax u noqonnin.

Waxaa fiicnaan lahayd inaan abaaru jirin, qof walibana uu meeshiisii iyo xoolihiisii uu heysto, laakiin hadde waxey ila tahay tanu mid aannu innagu celin karno ma ayan ahayn, jarribaadaha Ilaahey bayna ka mid tahay, marka haddey timidna shaki wuxuusan ku jirin, wixii ummaddiisa deeqi karaana waa ILAAHEY. Balse innaga waxa la ina faray dadka



hadda kolleyba abaartu aynan heynin ama dadka mas'uuliinta dadka u ahu iney iyagu intii taagtooda ah aynan berri quluubtooda eegin ee ayan waxba la harin oo aynan berri isdhihin haddaan saas yeeli lahaa waxaa dhici kartey iney sidaa noqoto.

Isla markaa, waxa ah lagama maarmaan, dadka naftooda abaartu ay heyso ama xeryaha ku jiraa ineynan qalbiga iska jebinnin oo aynan u qaadannin inaan loo dagaallameynin. Dowladda Soomaaliyeed ee maanta joogta maaha danteedu inay aqallo dhisato, maaha danteedu iney Dowlada kale la jaalto oo ku raaxeysato ee waxa weeye : «Dowladdii shicbiga», shicbiga ayeyna u shaqeyneysaa, wixii waddanku uu leeyahayna iyagey ku taageereysaa, marka waa iney taas niyada ku hayaan wixii gaareyna wey gaareen, wixii aan gaarinna wey u soo socdaan wixii ummaddeennu ay leedahay.

Waxaa aad iyo aad loogu baahan yahay, qof kastoo Soomaali ahi inuu iska dhigo xildhibaan oo weliba gaar ahaan waxaan hadalkeyga ku sii leexin hayaa, dadka niyada xun ee isku daya iney markanoo kale ka faa'iideystaan, iney damiirkooda aadamiga ah dib ugu noqdaan, in ay ummadnimadooda Soomaaliyeed dib ugu noqdaan, in ay isla markii naftooda khatar dareemaan ee ay raadshaan iney xilkas noqdaan ee aynan isku dayin iney ka faa'iideystaan dadka Soomaalida ah oo loo gargaarayo ama xoogaagii ay Dowladdu ugu tala gashay in dadkaas lagu nooleeyo ineyan dhex ka siib ama adigu ka xooleyso caqligooda ay ka saaraan.

Waxaan saas u leeyahay aakhiriyo adduunkaba dadka liita, qofkii ka faa'iideysta kolleyba dulli baa u dambeeya oo xoolihii uu ka kasbaa kuwo meel la tegahaya maaha, laakiin runtu waxay tahay haddii uu si xilkasnimo ah oo waddaninnimo ah uu u dhaqmo, wuxuu helayaa damiirkiisa oo xor noqda, oo niyaddiisa uu ogyahay inuusan eed gelin ee uu abaal ummaddiisa u galay, isla markiina wuxuu helayaa, shaki kuma jiro naxariis Ilaahey.

Laakiin wax kale ayaa sii jira, waxay u badan tahay inuusan ku nabad gelin oo markaa isagoo Ilaahiis ku jowr falay

oo Ummadii ku jowr falay oo waddankii ku jowrfalay, haddana inuu ciqaab la kulmo wax kaga xummaan karaa ma jiraan ee markaa meel walba ka hoog weeyaan. Marka anigu waxaan isleeyahay, qolada xoogaa hunguri weyn oo meelahaas iska jooga oo damaaciga ahoo wax badso istiraahda, waa iney inta damaaciga uus gelaayo ee markaana meesha faa'iidadu ay jirto, waa iney aadaan baan leeyahay oo ah iney taageera buuxda siiyaan mas'uuliyiinta waddanka oo u baahan maanta, wax kale markaad u weydo, niyaddaadu iney tahay mid ka xanuunsaneysa, waxay heleysona diyaar ula ah iney ku taageerto.

Dadka Soomaalida ah oo xereysan baan weli ku noqonayaa, ama haatanba ay suuro gasho iney ka maarmi waayaan xeryaha, maaha saan u sheegayba, markii hore qalbiga ay iska jebiyaan, waxa weeye markan haatan la joogo, qofkii markaa xanuun hayo isagana laga daaweynaayo mooyee, intii kale markey ka soo kaakacdo macluushiyo dhibaatada, in ay hawadooda geeyaan berri sidey u tabcan lahaayeen, waa iney hawadooda geeyaan sidey haatan u noolaan lahaayeen, wax barasho, wax qabsasho, isu gargaarid iyaga dhexdooda ah, waa in aynan ka muuqannin is liidid, sidii ay yihiin dad ay ugu dambeyso. Waxaan uga jeedaa, xeradu mudday ahaaneysaa, laakiin xerada waa laga bixi doonaa, marka laga baxaayona, waxaa la geli doonaa nolol hor leh iyo tacab hor leh, marka sidii naftaada iyo damiirkaaga iyo iimaankaaga saad u geesi geliso ayaad berri howshii ku fool saareysaa.

Waxaan shaki ku jirin Kacaanku wuxuu isku dayi doonaa amaba uu yeeli doonaa haddii Alle yiraa in dadka mar labaad la dejiyo, habkii ay ku noolaan lahaayeenna loo qorsheeyo beeraley ama ha ahaato bad aha ha ahaato camal kalebec, haddee, markaa qof dhowr bilood meel fadhiyey oo curyaan noqday, suu wax u qabsanaayo ma aqaan anigu, waxaa markaa lagama maarmaan ah iney haatan ragannimadooda iyo dadnimadooda iyo qiimihii iyo gobannimadii ummadda Soomaaliyeed lagu yiqiinney iney dhammaantood isu xilqaamaan oo kii liita ama xannuunsanna ay iyagu dhexdooda isgarab qabtaanoo is kaalmeeyaan, kan kalena inuu wixii kale uu qaban karo uu qabsado si uusan u yeelannin dabeecad wax ma



tarto ah, wax ma qabsato ah jiif ku quudato ah si uusan u yeelan.

Metelan waxaan ka wadaa, waxaannu jecel nahay, in kastoo Dowladdu ay shaqaaleheeda ay meel kastana geyneyso dadkeedana u gargaareyso, laakiin waxaannu ka jecel nahay dadka xeryaha ku jiraa iyaga naftoodu iney is maamulaan, iney ka ilaalsadaan dadka ama dhagrahaya ama maamulxumaa ay ka ilaalsadaan iney iyagu qeyb ka qaataan howsha qabadkeeda xerada dhexdeedaa ayaan rajeyn hayaa.

Waxaan u farahayaa gaar ahaan eray ugu jeedinayaa madaxda howlaha abaarta hayaa in ay, wax waliba wexey ama ka hagaagaan ama ka hallaabaan qorsheynta wanaagsan ama jaangooyada wanaagsan, waa in ayan wexey u qaban lahaayeen dadka ayan berri u dhigin, waxey maanta u qaban lahaayeen waa iney berri wax ku toosan ay ahaadaan, waxaan leeyahay waa ineyan daqiiqad dib uga dhigin, waxa weeye intuusan waajib saaran weli gudannin, waa inuusan haweysan hurdo iyo nasasho midna. Dadka mas'uuliintaan leeyahay ama ha ahaato shaqaale maamulka gacanta kula jira ama ha ahaato madaxda Agaasinka iyo isku duwidda iyo qorsheynta shaqadoodu ay tahay, ama ha ahaato kuwa raashinka haya ama u diraaya ama u qeybinaaya dadka ama u xannaaneynaaya oo u keydinaaya ha noqotee.

Waxaan rajeynayaa ineyan ku muuqannin ummadda Soomaaliyeed iyo Kacaankeed midna iyo maamulayaalka shaqaaleheedu midna dad aan dantooda qabsan aqoonnin ineyan ku muuqannin, ee dad dantoodana qabsan yaqaan daddkoodana taageeri yaqaan iney ku muuqdaan.

Haddaan dib u soo laabto xoogaa oo aan ka gudbo abaarta, anoo citiqaadahaya, Ilaahey weyska weyne'e inuu gacantiisii weyneyd barwaaqo ku soo daadin doono, waxaan leeyahay welwelka weyn maanta waxa innagu haya, sida aynu dadka u dejin doonno ama sidii wixii aan ku dejin lahayn aan u heli doonno, innagoo ku kalsoon haatanna ayna soo gaareen waxyaala badan oo taageeri u ah oo dadka adduunka ku nool ama Dowladaha adduunka ku nool, haddana shaki wu-

xuusan ku jirin, dhibaatada weynu way sii jiri doontaa; habka dadka loo dejiyo hadhowto, si ay mar labaad noloshoodii u fool saaraan, qalabka lagu dejin karaayo, xoolaha lagu dejin karaayo iyo noloshooda dambe sida loo tabcaayo, waa welwel aad u ballaaran, maantana inaan hore ugu sii fikirno ilaa waqtigakanna inaan u birtumanno loo baahan yahay.

Waxaa lagama maarmaan ah in qof walboo innaga ahi, ha ahaato mas'uuliinta sare ama ha ahaato mas'uuliinta kale ee meelaha kale joogta, amaba dadka Soomaalida ah guud ahaantiisa, welwelkeennu marka inuusan ku koobnaannin dadka xereysan iyo abaarta haatan joogta, laakiin waa in fikraddeennu aad u sii shisheysaa oo ilaa meel dheer ay sii taabato sidii dadka loo hagaajin lahaa hadhowto ama loo dejin lahaa ama sidii abaartan dhibaatada weyn oo ka soo baxeysa harraatideedu wey iman doontaa, markii la gudbo dhibka hadda jooga, sidii iyadana looga gaashaaman lahaa oo waddanka horudhiggiisa iyo noloshiisa looga gaashaaman lahaa.

Waxaan filaayaa hadda ka horna inaan soo diray wareegtooyin madaxduna ay wada heysato aan ku tilmaamahayo in shaqadii aan la gelinnin walaahoow iyo isku qas in aan la gelinnin in mas'uuliinta joogaan xeryaha, kuwa joogaan Degmooyinka, kuwa joogaan Gobollada ilaa xarunta dhexe dadka howsha abaarta loo xil saaray iney si toos ah ay u fuliyaan, iyadoo u qeybsanta, maaha micneheedu waddankoo dhammi inuu fadhiisto oo dhammaanteen abaarta aan ku jeesanno, waxa weeye howlihii kale oo waddankuna waa in ay socdaan waana in tababbarkii iyo tacliintiina socdaan, waa in Ololihii uu socdaa, waa in nabad gelyadeenna ilaalinteeduna socotaa, waa in aan dagaalkii aynu horeba ugu jirney sidii u heynaa, waxeyna taasu ku suuro geli kartaa markeynu si fiican u qorsheyno howsha oo dadka qoloba meel munaasib ah aan ku aaddinno, in kastoo aan iri; koow marka ugu horeysa waa in la darveelaa dadka ceyroobay ama xereysan, maxaa wacay naftooda waa in la fakiyaa, laakiin micneheedu ma aha dhammaanteen inaannu dul tuuranno oo waddankii intiisii kalena fariisato, shaqada waddanku waa iney sideedii u socotaa dad



u qalma, xil kasnimo, waddaninnimo iyo aadaminnimo iyo daacadnimo waa iney maamulkii u wadaan si isdaba joog ah, kala go'aan lahayn ee la hubsaday. Iyadana markaan intaas iraahdo aan ku laabto, marka maalintaan weyn ee iidda ah.

Waxaan Ilaahey ka rajeynayaa dhibaatada dalkeenna heysa inuu ka qaado, ummadda Soomaaliyeedna waxaan u rajeynayaa; sanadaan aynu kolley abaarta la kulannay, sanadeeda dambe ama noogu dhalato bishatanu ama maalintanu inagu soo aaddo innagoo barwaaqo iyo baraare ku jirna.

Intaas waxaan ku sii darayaa inaan inta Soomaalida ah oo dadka fiican ah oo abaartan ka soo qeyb gashay, xataa waddanka iyagoo ka maqan ee niyadooda waddaninnimada ahu ay quwi ay tahay oo tabarruc ummaddooda Soomaaliyeed u soo dhiibay ama kuwa xooggooda iyo xoolohoodaba dalka dhexdiisa ugu tabarucaaya ama kuwa ka xanuunsanaaya xataa yey xoolo bixinnine, waxaan u celin hayaa mahad ummadda Soomaaliyeed magaceeda iyadoo dhammaanteed ummadda Soomaaliyeed aanan af la gaari karin, aanna isleeyahay waad ku hadli kartaa magacooda niyadsamidooda, aad iyo aad ayeyna u mahadsan yihiin aad beyna inoo taabaneysaa dadnimadooda iyo iimaankooda iyo waddaninnimadoodu. Caado ahaanna hadda wax cusub ma aha oo waa u ahaan jirtey Soomaalidu, mar kastoo ay dhibaato ay timaaddo iney far keliya ay noqoto, meelna ka soo wada jeesato ayna markaas daafacdo : sharafkeeda, dadkeeda iyo qarankeeda intaba.

Waxaan mar labaad ugu dambeysiinayaa, inaan inta haatan ladanna hambalyo u diro iyo duco sanada sanadeeda kuwii kheyr ku gaara iney noqdaan, inta dhibboonna aan Ilaahey u baryaayo inuu ka qaado iidda barakada leh fadligeeda.

Salaan iyo nabadgelyo korkiinna ha ahaato.

# XUME IYO SAME

KHUDBAD JAALLE SIYAAD U JEEDIYEY CULUMO TABABBAR U DHAMMAADAY 17.6.1975.

**Jaallayaal waad salaaman tihiin. Aqoon is weydaarsigaa**ni waxa weeye kii 4aad, haddaba shantii sano iyo barkii aynu soo soconney, wixii aynu is oran karno oo kororsiimo ahaa ma aan wada gaari karo in aan u sheegsheego mid mid, maxaa wacay waxaan aaminsanahay mid mid si aan ugu sheego in loo baahan yahay buug in aan soo qaado ama intii buug ahayd oo laga qoray haddaan iraahdo waan aqriyahayaa, waqti dheer bey inagu qaadaneysaa. Laakiin bal hadde rukumada ama xubnaha waaweyn aan wax ka taabto.

Maalintii Kacaanku dhashay waad xusuusan tihiin in aannu ka ballan qaadnay dadka Soomaalida ah: war bixin in aan siinno. Maxaan u yeellay taas? Ayaantaas waxa aannu niri uma aannaan imaannin in aannu ku maslaxeysanno, sidii dhici jirtey waddanka, umana aannaan imaan Ummadda Soomaalidaa in aan wax ku yeello, umana aannaan imaannin in aan meel iska farfariisanno ee waxaannu u doorannay mashaakilkaas aannu dhex gallay, in aan Soomaalida oo innaga indhahannaga ay inala ahayd si xun in loo maamulahayey, haddey tahay siyaasad, dhaqaalo, bulsho; diin; nabadgelyo iyo wax kastaba aan u arkeyney maamulku in uu ahaa mid xun, Ummaddaana aayeheeda dambe uu baabbi'inhayey, innagana ay sidaa inoogu muuqatey innagoo nafteennu Ummadda Soomaaliyeed ka mid ahayn ama kuwii qalabka u siday oo loo sameeyey xornimadooda ama gudo ama bannaan ha noqotee ilaaliyaan, waxa inoo muuqatey in

xornimadaasu ay jaban tahay, in sharafka Soomaaliyeed uu jaban yahay oo aayahooda dambe uu mugdi ku sii socdo. Saas darteedna innagoo tixraaceyna waajibkii ama dhaartii aannu ku dhaarannay Ummadda Soomaaliyeed in aan ugu shaqeyneyno si daacadnimo ah in aannu xukunkaa beddelno.

Marka waxay ahayd waannuna caddeynay himiladannada waraaqdii caddeyd oo koobaad oo Kacaanku uu soo saaray in aannu u shaqeyno, sida aan had walba isleennahay danteeda ayey ama ha ahaato maamulka gudaha ah ama ha ahaato maamulka khaarijka ah ama ha ahaato xubnaha nolosha Ummaddaan la xidhiidha ee kala geggeddisan intaba.

Waxaan marka u horreysa aad u su'aalahayaa Jaallayaal kan Culumaa'u diinka ah ee haatan i hor fadhiya in ay dib inta waraaqdaas u qaataan : «maxaa la qabtay maxaanse la qaban in ay isweydiiyaan». maxaa ka dhiman ballankii aan qaadnay? Ballankaas nin nugu kallifayna ma jirin, awoodna kuma aannaan dooneynin, lacagna kuma aan gadan sidii dad ka loo laaluushi jirey. Ballankaas innagaa qaadnay innagaana isa saarnay. Marka maxaa ka hirgalay Soomaalida ayaa tiraahda «hunu'hunu'i hadal maaha himbiriirsina wax arag maaha», yacni xaqiiqda iyo waaqici ahaanta in loo gudbo ayaa la rabaa. Marka maxaa ka hirgalay maxaase ka dhiman. Awalan waxa ugu horreeyey in aannu dagaal ka galnona ay ahayd, dalkaan nabadgelyo in ay ku noqoto ee Ummaddaan leysku jaray innagu aan ku dadaalno intii kartidannada ah, innaga oo garabsaneyna dadka Soomaalida ah oo fiican oo ama islaamka fiican ah oo Ummaddiisa leysugu dhiibay qoryaha, mindiyaha iyo niyo xumada iyo cadawtinnimada in aannu bal ku dadaalno in ay taasu baxdo. Markii ay u baahan tahay wax sheeg iyo waanona in aannaan kaga bakheylin kana daalin; markii ay u baahato in xukunku uu socdona oo isagu uu Ummadda kala nabad geliyona in aannu ku adkeyno xukunka innagoon maslaxad kaga dooneynin, laakiin iyaga nabadgelyadooda iyo dantooda u yeeleyna.

Waxaan filayaa, waa jiraan ilaa al aankaan meel meel yacni qof waalan oo qof kale wax u dhimaa waa jiraa haddeynu guud ahaanta u eegno nabad gelyada xaggeeda, laakiin filimaayo duullaamadii waaweynaa ee halka hubkooda laga dhiibi jirey in ay weli ay socdaan. Waxaynu isku daynay, kagama aannaan harin intaase in aannu niraahno innagu Ummadda Soomaaliyeed ama gun ha ahaato ama xor ha ahaatee weysugu kaanna mid, ruuxii wax u dhimana meel kastaba ha uga dhimee kolleyba eeddannadu waa daba socotaa, sidii ay inoogu suuro geli lahaydna kolleyba kuwo eeddaas ka daba taga ee guta ayaan noqon doonnaa. Marka aynu saas leennahayna Ummadda Soomaaliyeed baan ula jeednaa, meel kastaba ha joogtee, wax ay inoogu kala duwan yihiinna ma ay jiraanniin.

Waxaynu u dhignay sharciyaal aan leennahay sharci ruux Soomaali ah meel uu joogaba, sharciyaalkii gaaladu ay dhigi jireen oo xuduudkaas beenta ah wixii ka shisheeya sharcigu ma qabto ahaana ma jiro ee ruuxii Soomaali ah oo qof Soomaali ah ama Qaranka Soomaaliyeed wax u dhima, innagu waan daba soconnaa sharciguna waa qabanhayaa mana deynaayo, intii uu geystayna waa loo geysanhayaa.

Haddii aan u gudbo xagga caddaaladda, caddaaladdu way badan tahay oo miduna waxa weeye maamulka iyo caddaaladdiisa, miduna waxa weeye caddaaladdaan caadiga ah oo Ummaddii meel ku nooliba ay u baahan tahay qaanuun ay ku kala nabad gasho ama ay ku kala xaq baxdo. Waxaynu isku daynay intii awooddannada ah in aynu niraahno : «war qaanuunku waa ka sarreeyaa dadka ee qaanuunku dadka kama hooseeyo ee qof walba waa ka sarreeyaa, sababtuna waxa weeye qof walba waa u dan in qeynuunku uu dhowrsanaado, maxaa waxay maslaxaddiisa ayaa ku jirta iyo nabad gelyadiisa,xuquuqdiisa oo uu ku helo ayaa ku jirta, qof walbabana ay mas'uul ka tahay in ay dhowrto, kii mas'uul ka ahaana ay tahay in uu dhowrsiiyo, marka maaha in dadka qaar ka hooseeyo qaanuunka qaarna uu ka sarreeyo. Qaanuunku waa in uu noqdaa midka kala fariisinhaya Ummadda ama kala agaasimahaya oo qof walba waddadiisii ama xuquudiisii ama waajibaadkii la faray u caddaynaya.

Saa darteed waddankaan sharciyaal badan baa lagu dhaqi jirey, waxa aynu maamuleynaana waa Dowlad, waa waddan, waana qaran, qarankana qof waliba si buu u fikiraa oo si uunbuu wax u arkaa, laakiin wixii hagaajin karaa waxa weeye qaanuun la wada dhigtay ee markaa fariisin haya ee marka qof loola jeedaa uusan jirin ama qof loogu ixsaan falayaa uusan jirin ama qof wax loogu dhimahayaa uusan jirin oo qofka shakhsiga ahi uu indhaha ka maqan yahay, indhahase lagu hayo Ummadda oo dhan danteeda in loo dejiyo qaanuun. kaas oo geli kara dhaqaale, bulshada, tacliinta, siyaasadda, caafimaadka, nabad gelyada iyo wax alla wixii nolosheenna lagama maarmaan u ah. Maanta sharci ajnabi ma jiro. talada Kacaanka ugu horreysey waxay ahayd qaanuun qaabbilsan waddankaan in la sameeyo oo la socda Ummaddiisa habka ay u fikirto. habka ay u dhaqanto, xeerkeeda iyo xamaaskeeda waa in loo sameeyaa. Marka waxa weeye, Ummaddaas xeerkeedu waa saldhig oo markii sharci la dhigahayo haddii aan taa la tixgelinnin sharcigaas mid xalaal ku fadhiya maaha, marka aan xalaal leeyahay yacni Ummadda danteeda kuma fadhiyo laannu leennahay oo mar hadduu Ummadda danteeda ka hor jeedo xaaraan weeye wixii la sameeyo.

Tan kale oo labaadna waxa weeye, Ummad kastaaba waxay leedahay Diin, yacni waxa weeye in mar walbaba saldhigiisu uu yahay oo la tixgeliyaa Ummaddaas Diinteed. Tan seddaxaad oo la tixgeliyaana marna ayan ka furan kareynninna waxa weeye aan sharci lagu dhigi karin. laakiin dadka aadamiga oo idilu ay haddey la dhacaan ama ay u riyaaqaan oo ay raalli ka noqdaan ama ay nebceystaan. Metelan waxa jira hab loo dhaqmo oo marka qofku indhihiisa ku dhufto uu dhibsanaayo iyo waxyaala kale oo badan oo dadka aadamigu ay mar kastaba dhibsan karaan iyo wax ay mar kastaba u riyaaqi karaanniin, mana qorna oo sharci qoran maaha. laakiin waxa weeye mid la socda dadka shucuurkiisa iyo fikraddiisa oo ama raalli geliya ama caro geliyey iyo uurxumo. Seddaxdaas baa saldhig looga dhigaa qaanuunka markii la sameynaayo. Qaanuunka waddanku ku socdaana waxa weeye mid



waddanku uu leeyahay oo Ummadda Soomaaliyeed ay leedahay salkana ku haya Ummaddaas maslaxaddeeda, tacliinteeda, taqaaliiddeeda, diinteeda, dhaqankeeda, xeerkeeda; nolosheeda, hawadeeda, dalkeeda iyo fikraddeedaba iyo taariikhdeeda.

Meel aan qaanuun u sameysneyn maanta ma jiro. Waxaan filayaa in uu rukun aad u culus oo daryeelahaya buuxid ahaan dadkaas qof walba xuquuqdiisa inuu helo waajibkiisana inuu guto.

Haddaan u gudbo marka xaggii tacliinta oo qaanuunka aan ka baxo. Waxaan isleeyahay tacliintu saldhiggaa weeyaan. Ummad kastaaba xagga karaanka iyo garadka xaggiisa ah, cifashadeeda, caafimaadkeeda, dhaqaaleheeda iyo dhowrmada aadamiga tacliintu saldhiggeeda weeye. qofkii aan wax aqooni waxa weeye wax nool oo xoolaha wax yar ka duwan. Waxaynuna isku daynay tacliinta in aannu ka bilowno aasaaska oo ah midka ilmaha yar yarka ah oo hadal bartay, wax ka dheeruse aynan jirin, in kastoo taagteenna wax dheer ninna inuu u hanqal taago ay ka mid tahay nacasnimadu ama daliilnimada kuwa ugu waaweyn in ay ka mid tahay maxaa maxaa wacay hawo beenaad buu ku noolaadaa hawo beenaadna wuu ku lumaa, intii aynu gaarnay aynu ka bilaawno aas aas iyo saldhigna aan uga dhigeyno, waajibkuna uu yahay in ay sii fiddo sanadii walbaba, markii ay bartaan hadalka in ilmaha xaafaddii kastaaba ama tuuladii kastaaba ay isu geyso ilmeheeda, laguna siiyo wax alla wixii tilmaan ah oo iyaga dantooda ah ama dadnimadooda, ama khalaaqaddooda aadamiga ah dhismadeeda in lagaga bilaabo. Taa waxaa ka mid ah metelan diinta fikraddooda oo leysku dayo in la koriyo, iyadoo had walba lugu toosinhayo habka hagaagsan ee nilosha aadamiga ah. Waxa weeye markii ilmaha halkaas leysugu keeno in asbuuciiba taqtar loogu yeero oo markaa la ogaado carruurtaasu waxa ay ku sugan yihiin oo haddii uu jiro cudur khaas ahi in laga daaweeyo oo ay isku daaran karaan ama midkii gaar ahba laga daaweeyo.
oo ay isku daaran karaan ama midkii gaar ahba laga daawee

yo, marka Dowladdu in ay ku yeelato ilmahaasu si ay ku badbaadaan, kormeer joogto ah xagga caafimaadka. Waxaana weeye ujeeddadu in laga celiyo ilmihii waxyaalaha dhibaatooyinka badan u keenahaya iyo ciidda ay cunaan iyo dhibaatooyinka kale oo ilmuhu la kulmaan oo badan, muddayacnimada ay subaxdii suuqa iyo meel kastaba ay galaan oo ay suuro geli karto in ay jirro ka qaadaan amaba baabuur jiiro amaba waxyaale kale ay sameeyaan, si waxaas oo dhan lagaga maanoco in meelaha aan tilmaamay (Xannaanada carruurta) lugu xannaaneeyo luguna abaabiyo.

Taas ujeeddadeedu maxaa weeye? Waxa weeye in si wanaagsan loo soo dhoweeyo carruurta, khalaaqaddooda oo la hagaajiyo, caafimaadkooda oo la sii daryeelo iyo si diyaar gareyn loo sii diyaargareeyo si ay hadhowto u noqdaanniin arday wanaagsan ee tacliinta si fiican u qaadata.

Hore haddeynu u soo kacno oo aynu soo aadno Iskoolaadka hoose ujeeddada dheer baa waxay tahay; waa in aan tacliinta dad yari aynan lahaannin oo awood u heli kara, waana in ay gaartaa dadka Soomaalidaahi meel ay joogaanba, waa in ay tuulooyinka tagtaa oo waa in ruux kastaba agtiisa loo dhigaa, maxaa wacay ma keeni karo meesha dheer carruurtiisa awoodna uma laha, waana in lagu boorriyaa : «war ilmahaaga iskoolka gee». Marka Iskoolaadka hoose in la gaarsiiyo ilaa meeshii u qalmi karta macallin shibcigu uu xoolihiisa siiyo in uu wax u dhigo intii u suuro gasha.

Waxaana lagu soo xijiyey in iskoolaadka dhexe lugula dagaal galo meeshii ay ka qabsami karaan amaba ay ka furmi karaanba in laga furo, iyada oo aan ku xirneyn Degmo iyo Gobol iyo midna aan ku xirneyn, laakiin meeshii qabsan karta, haddii tuulada 25 ilmood oo iskoolaadka hoose dhammeeyeen laga helo, waa in laga furaa iskoolkii.

Aynu soo gaarno Tacliinta Sare, waxaynu gaarnay in aynu niraahno meeshii ay ka socon karto iskoolaadku inteeyan Jaamacad aadin, micnaha kuwa Sare, oo xaggee ka socon kartaa? Iyadana in ayan xad ku lahayn meel hebla iyo meel hebla kale, laakiin ay xad ku leedahay dadka meesha ku nool.



Waxaan filayaa Jaamacadaha haddii aan marka imaado, waad ka warhaysaanniin waana aad maqasheen baan filahayaa anigoo ka hadlahaya, sida iyo heerka ay hadda joogto iyo himilada aynu u soconno oo aynu dooneyno in aynu gaarno. Tacliintu intaas iyo habkii dheeraa oo aan soo sheegayey oo ka bilowga ahaa hoostaas ilaa uu gaaro xadka laguma joogsadee looga baxo iskoolka, markeynu gaarno ma intaas baa tacliinteennu? Maya. Waxaa garab yaalla tacliintii kale oo ama nafsadda la xiriirtay oo diidayuuradeed (Aeroporto) dhisanmeysid, haddii aadan farsamadadka haddaan la tababbarinna aqal dhisanmeysid, gegooyin dayuuradeed (Aeroporto) dhisanmeysid, haddii aadan farsama_ dooda hore u soo barin amaba aadan dadkaaga ka soo saarin farsamayaqaanno waxyaabahaas hagaajiya. Sidaa darteed Iskoolaadka farsamaduna waa in ay geestooda u socdaan oo aan kuwa kale wax uga xirneyn, saa iskoolaadka hoose uun baa ka dhexeeya'e, laakiin mar iskoolaadka hoose haddii la soo dhaafo way kala leexdaan. Intaanan ka bixin tacliintaas tooska u socota aan hadde taabto maxaa dhib ah oo inaga hor yimid? Waxaa dhib ahaa oo inaga hor yimid waxay ahaayeen in markii Kacaanku dhashay aynaan macallimiin haynin. Marka iskoolaadkii aynu sameyno, siyaasaddiina aynu sidaa u dhisno. laakiin xaqiiqdii maxay tahay? Yacni qofkaan qof wax barahayaa waa macallim, haddee aaway macallinkii? Xaqiiqdii waxay ahayd marka macallin waa jirey laakiin macallin kastaaba markii uu xoogaa barto oo maskaxdu xoogaa u furanto, waxa laga dhigi jirey ama dhiisi ama nin qaraabo ayaa kexeysan jirey oo Agaasime Guud ka dhigan jirey (Direttore Generale), iyagana wax daneyn jirey qiimaha ay leeyihiin, waxa ay dalka u tarahayaan, wax citiraaf ah, wax aqoonsi ah midna ma ay jirin. Inta ka hartaana shoobbaro iyo halaayo iyo qeylo ayey ku jiri jirtey, maxaa wacay meel aan nololi oollin bay ahayd lagana cararo. Dadka keliya oo tegi jireyna waxay ahaayeen kuwii nafta kula cararahayey oo is lahaa ayaamo aad ka sii shaqeysatid, laakiin daa'im ahaan dad baan rabaa anigu in aan wax baro, khasbo, kasbona nin macallinnimo ugu joogi jireyma uusan jirin, dhibaatada ba-

dan oo aynu la kulannay ma ayan ahayn guryaha, mana aynan ahayn iskoolaadka iyo sameyntooda, ma aynan ahayn albaabta, laakiin xaqiiqdu waxay ahayd macallin waxa la yiraahdo xaggee laga doonaa. Maalintaas beyna ina kalliftay qiimo kasta ha ugu fadhido Ummadda Soomaaliyeed, iyadoo ruux kastaaba uu garan karo kharashka ku baxahaya, laakiin waa in aan macallimiin sameynaa, waana in aynu hagaajinnaa Ummaddatan, laga rabo Ummad Soomaaliyeed oo loo yaqaan adduunka indhihiisa dadka ugu dambeeya cilmi ahaan, in ay Ummad isku tirineysa in ay cilmiyahanna ay yihiin, la sinto ama kaba hormariso dadka laga doonahayo ma ay suuro gasho dhulka in lagu jiidjiido, mana ay dhici karto ee waa in qiimaha ay leeyihiin la siiyaa.

Waxa aan isku daynay in aan dhaqaalohooda hagaajinno, waxaan isku daynay macallin war adigu ilmaha u tagoo sabbuuradda wax ku xarxariiq keliya maahee waa in uu amal iyo himilo leeyahay. Waxaannu ka furnay Jaamacad Macallinnimo oo la eyli ah inta Jaamacada oo kale oo macallimiinta keliya takhasus u ah. Macallinkii waajibkiisa xaqa ah waddanka ka soo gutaana uu tegi karo oo takhasus uu ku soo sameyn karo isagoo Jaamici ah, ayaannu ku dhisnay. Marka tajriibtii iyo hagaajintii, marka bal horta qofka la yiraahdo macallim, maxaynu ku sifeyn karnaa? Waxaanu ku sifeyn karnaa kan mugdiga dadka ka keena ee iftiinka keena weeyaan runtii. Taas weligeyna waan qabi jirey, haddeerna waan qabaa, marka bal horta aqoonsigaasu markii uu jiro, haddana wixii kale oo xuquuq ah oo ay lahaayeen in la siiyo isla markiina tababbarkoodu kaamil in uu ahaado, sanadiibana in ay sameeyaan imtixaanno iyo tababbar joogto ah, si ay u kordhiyaan aqoontooda. Maantana waxa ku jirta meelaha macallimiinta lugu tababbaro 1500 oo meel ah, 750 meel ah iyo 1200 oo meel ah. Isku kexee marka adigu intaas, waxa weeye 3450 oo macallimiin ah, qaarkoodna xalay ayey ka bexeen qaar kalena ayaamahakan ayey ka bixi doonaan, in kale waqtiyaalka ka dambeeya ayey ka bixi doonaan. Laakiin waxa weeye ujeeddadeennu in aynu gaarno, haddii Alle ka dhigo shanta sano oo soo socota macallim ajnabi ah in aannaan u baahannin meel kastaba ha ahaatee.



Waa hagaag, xubintaasu waxay u baahan tahay in aan dib u xusuusanno, adinkuna waad ogtihiin oo xog ogaal kuwa u ahi adinka weeye ee maxaa la oran jirey, maxaase Soomaaliya loogu diiday Jaamacad in loo sameeyo oo Kacaanka ka hor maxaa Jaamacadi u sameysmi weyday, maxaa iskoolaad badani u sameysmi waayeen, maxay u noqotay meel yar in laugu xareeyo iyo kolleejooyin xunxun ah oo dad khaas ah carruurtooda oo keliya lugu xereeyo maxayse ahayd ujeeddadu? Yaa abbaan u ahaa? Yaa abaabuli jirey waxaa kuna shaqeyn jirey? Isticmaarku wuxuu oran jirey iyo carruurtiisu waxay ahaayeen : «Jaamacado haddaad sameysaan, carruur ama dad idiin gala ma haysaan», oo kuwa hadda inoo galay yaa ina siiyey, ma dad baa inna siiyey oo noo soo dhoofiyey? Guri aad gelisaan uma haysaan oo daaro waaweyn in la dhiso ayaa la doonahayaa, mana dhisi kartaan, haddaad dhistaanna masruufkeedu wuxuu u baahan yahay wax cirka ka weyn iyo dhulkaba. Oo hadda ma iyagaa inoo masruufa, ma iyagaa xoolo nagu siiya? Ma iyagaa carruur ina siiya, guryahannaga ma iyagaa inoo dhisa? Micneheedu muxuu ahaa? Micneheedu wuxuu ahaa har oo ii baahnaaw weligaa, weligaa kaadix ii ahaw, weligaa dabadhilif ii ahaw, weligaa i daba taagnow, xaqiiqdiina sidaas bey ahayd. Maxaannu innagu marka u yeeleynaa? Waan garannay qiddadaas, ujeeddaduna waxa weeye in aan baabbi'inno qurunkii ay buugtooda ku dhigteen oo xaqiiqda iyo aadaminnimada iyo dadnimada iyo qiimo in aannu leennahay in aannu tusno oo aan ku beeneyno waxa ay sheegahayaan.

Aan u leexdo marka, in aannu qaadno bey ahayd Olole ballaaran ee qof walbaba siiya awood uu isagu sirtiisa ku sameysan karo, isla markiina xaq buu u leeyahay inuu kororsado aqoontiisa. Oo sidee ku kororsanhayaa? Soomaalida haddeynu dib isugu raacno waad garaneysaan in loo sameeyey si loo hor istaago. Kaasu miyuusan cadawga Soomaaliyeed ahayn, runtii imisaa buu tahluuko iyo jahalo ku reebahayey dad islaan ah oo Ummad ah oo weliba dadkiisii ah. Marka waxa noqotay lagama maarmaan in aan niraahno; war dadkaanu maaha in juhalada lagu hayo ee waa in laga saaraa, xaq bey-

na u leeyihiin, afkooda hooyona waa in ay wax ku bartaan. Waxa kala furi waaayeyna, isticmaar shan meelood buu Soomaalida u qeybiyey, wuxuuna uga jeeday shan diinood in uu siiyo, wuxuu ula jeeday shan af in uu siiyo, wuxuu ula jeeday shan tastuur in uu siiyo, wuxuu uga jeeday in uu is illoowsiiyo? Muxuu ugu guuleysan waayey ujeeddadiisaas xunta ah? Muxuu u kari waayey isticmaarku? Muxuu u heli waayey dantiisa oo uu u kala furi waayey? Waxa uu mari waayey isaga iyo xoolihiisa iyo xooggiisii iyo xirfaddiisii dheereyd, waxa uu mari waayey labadaa xaajo ayey ahaayeen midu waxay ahayd diintaas islaanka oo uu u kala fujin waayey. Oo rag yacni waddaniyiin ah islaam ahina ay ku shahiidi jireen. Tan labaadna waxay ahayd Ummaddaas qowmiyaddeeda Soomaalinnimada ah oo isku xireysey iyo afkooda hooyo oo isku xirnaa oo aan marnaba ninna beddeli karin. Aas aaska iyo waxa uu isticmaarku uu rabey iyagoo duullaankoodu uusan ku koobneyn in ay inta qabsadaan gumeystaan ka gadaalna gumeysiga sidii caadada u ahaan jirtey ay kheyraadkooda kala baxaanniin oo la baabba'sho Ummaddaas Soomaalida ah hiyigeeda iyo ujeeddadeeda, laakiin maxaa baabbi'in waayey? Waa kaa aas aaskii iyo rukumada loogu dhici waayey baabbi'iskooda. Ummad ahaanna sidaas bey isugu dheggantahay, tastuur, taqaaliid, xeer iyo xamaasba sidaas ayey isugu dheggan tahay oo ciduna ayan u kala fujin karin.

Waxaa lagama maarmaan noqday, dhibaato kasto oo dhaqaalo ah, dhibaato kasta oo isticmaar ka imaan doonta, dhibaato kasta oo wax ma garad ka imaan karta, dhibaato kasta oo ka imaan karta kuwii isticmaarka wax la masruufan jirey, kuwii maskaxda iyo niyada laga ba'shey ka imaan karta iyo kuwii gumoobayba, wax kastoo ka imaan kara : waa in la dhigo afka hooyo oo weliba uu hirgalo Ololeyaalna lagu qaado, qofka Soomaaliyeedna uu wax barto. Adduunka waxa ugu xun oo qof lagu dulleeyaana waxa weeye maskaxda markii laga dilo lagana dego iyo qalbiga oo laga tirtiro qowmiyadiisa, dadnimadiisii, aadaminnimadiisii iyo qiimihiisiiba markii laga tirtiro. Waxa weeye markii qiimaha dalkaaga iyo dadkaagu ay kula foolxumaadaan, qiimaha dadka kale iyo dalka kaleba ay kula fiicnaadaan. Run ahaantii marka dalkaaga iyo dadkaagu ay kula foolxumaadaan, beenta isticmaarka iyo ajnabiguna ay kula fiicnaadaan. Waxa weeye marka aad qalbiga ka gumeysan tahay, marka aad maskaxda ka gumeysan tahay, markii aad tacliinta ka gumeysan tahay, markaad ka gumeysan tahay wax alla wixii adiga aadami ahaan iyo nolol ahaan iyo cifasho ahaan iyo dad ahaan oo aad xaqa u lahayd oo Ilaah ku siiyey, markii aad iska qaaddo amaba isticmaarka iyo ajnabigii kaa qaadaan, iyagoo doonahaya in ay kugu daneystaan.



Waa taa af Soomaaligu sidii uu ku hirgalay, maantana waxaan filayaa nin rumay wata oo tima weyn oo buug iyo qalin wata oo saaxiibkiis ama walaalkiis magaalada jooga waraaqdiisa u soo dhigahayaa in uu jiro.

Tacliintii waxaannu niri waa bilaash nin lacag ka bixinaayana ma jiro. Waxaannu niri tacliinta kuwa ay xaqiiq tahay oo agoonta ah oo hooyo iyo aabbe midna lahayn iyo kuwa kaleba ay u sinnaadaan. Waana taas sida sharcigu ku fadhiyo. Kulligood xaq bey u leeyihiin in ay wax wada bartaan, waana in Dowladdu kafaale qaaddaa ayna wax bartaa. Intaasu naguma fillaannin ee waxaannu niri : «tacliintu waa khasab» oo ninkii aan geynin ilmihiisa waa dembiile. Waxa la yiraahdaa : sheegid ama aqoonsi cudurka qofku uu qabo, waa bilaash isaguna», lacag laga bixinaayona ma ay jirto. Qofkii bukaa waa tegahayaa taqtarka oo xaq buu ugu leeyahay mana diidi karo inuu eego, hubsadona caafimaadkiisa. Kaba dhigba in uu marka cudurkiisu weynyahay qasabna ay noqoto inuu seexdo Isbitaalka lacag la'aan. Caafimaadku saas buu qiimo noola leeyahay, tacliintuna saas bey qiimo gaar ah inoola leedahay, haddaannaan sidaa u fududyenin wax ma garadku isna daaweynmahayo, waxna barimahayo ilmihiisa.

Xagga dhaqaalaha haddaan aado, wax aynu ku faanno ma joogno kumana faanneyno, tan lafteedana kuma faaneyno, laakiin waxaan modeynaa waajib aynu gudannay in ay tahay. Waxanse isleeyahay war inta hadda la qabtay ma laga badin karey? Haddaan isa su'aalo Maxamed ahaan haah baan

leeyahay, haddana kolleyba tillaabo hore waa jirtaa ee tillaabo dambe ma jirto laakiinse waxa weeye inta maamulka isla haysaa isku si ma u fikireysaa? Danta Soomaaliyeed isku si ma u arkeysaa? Danta Soomaaliyeed isku si ma ugu jeeddaa? Danta Soomaaliyeed isku Lillaahi ma ugu tahay? Maya. Aqyaan darro wax ma garad baa halkaa ka jooga. Kolleyba curyaamis iyo hakis waa ku jiraa. Laakiin sida nooga muuqata ama aan ugu tilmaameyno ama aannu ugu qornay shuruucda iyo wareegtooyinka iyo xeerarka haddey raacaan inta aynu sameynay saddexdeed ama afarteed baannu sameyn lahayn, shakina kuma jiro.

Waxaa dhacda in kastoo kheyrka waxa san iyo waxa xun ay uun aakhirka waxa sami ay adkaadaan, laakiin haddana daallinka weligii waxa aad mooddaa in uu jiro sidii uu u ibuundhuuntoba. Haddii aynu aadno xag Warshadeyn intii taagteen ah waan dhadhaqaaqnay meel fiicanna waa inoo mareysaa haddeynu aadno dhinaca baddana intii tabarteen ah waan nuuxnuuxsannay oo dadka badaha wax ku leh beynu ku sii darmeynaa, haddeynu aadno xag macdaneed kolleyba maanta waxaannu oran karnaa weynu haynaa raadadkii aynu ku dagaal geli lahayn. Markaan isku soo koobo taas, waxa la oran karahayaa; Soomaaliyu haddey garato ma u baahantahay cid in loo baahdo mooyaane? Xaqiiqo ahaan waxaan leeyahay maya maxaa wacay cidna uma baahna haddey daneheeda garato. In ay baahi baxdona fureheedu waa maxay? Fureheedu waxa weeye in ay iyadu fikraddeeda ka garato baahibixiddeeda ayna ku dadaasho in iimaanku ku sugnaado, in ay aaminta dalkeeda iyo dadkeeda, hanqal taagga badda ka shisheeyana in ay ka soo noqoto, in ay hoos isu fiiriso, in ay garab iyo gaashaan inta isu noqoto sidii loogu qorsheeyo ay daacadnimo u maamulato daneheeda. Intaas oo keliya ayey dooneysaa oo fure kale oo ay u baahantahay ma jiro.

Ayna marka siyaasaddii aadno, dhaqaalihii, tacliintii caafimaadkii iyo nabad gelyadii yaa dhala dhammaantood. Kulligood siyaasadda ayaa dhasha oo ay ka farcamaan, markii siyaasaddu ay ba'santahay wax hagaaga hayaa ma ay ji-



raanniin oo Diintaa lugu tumanhayaa, dhaqaale ayaan jiri karin nabad gelyo ayaan jireynin, tacliin baan jireynin oo wax hagaagaa ma jiraanniin markii siyaasaddu ay ba'santahay. Siyaasaddu markii ay qasantahay wax walibana waa qasmahayaan oo jid iyo jaho ayey kala waayahayaan. Laakiin markii siyaasadda loo habeeyo dhabbe cad oo aan leysugu qaldami karin, kuna habeysan sidii aan sheegahayey mujtamacaas dantiisa iyo masladdiisa oo keli ah. Oo marka maslaxadda qofkuna waxay haddii dadka lugu jamciyo u noqotaa maslaxadda caamka ah, maxaa yeelay maslaxadda qofku maaha in ay ka sarreyso tan caamka ah. Markaas ayaa la helayaa in marka la fariisiyo nabad gelyadii, maxaa wacay waxa laga fikirahayaa maxay yihiin? waa Ummaddaas ama bulshadaas maslaxaddeeda, maslaxaddaas haddii loo dhabbagalona imisaa meelood bey geleysaa? Tacliin bey gashay, nabad bey gashay.

caddaalad bey gashay, dhaqaale ayey gashay, horukac kale ayey gashay. Yacni ciskii iyo sharafkii insaanka karaamadiisa oo la dhowro ayey gashay. Waxaas oo dhan oo ay geleyso yaa habeynaaya? Siyaasaddii baa habeyneysa. Haddaba waxay ila tahay in aan u dhacno Diintu waxa ay ina fareyso, haddeynaan Ummaddeenna u shaqeynin, haddeynaan innagu is cisin, haddeynaan innagu is dhowrin, haddeynaan is dhowrin, haddeynaan innagu midoobin, haddeynaan Ummad ahaanteenna iyo sharafkeenna iyo karaamadeenna haddeynaan ku diririn diintii ma aynaan fadli yeelin, maxaa wacay intaa Diinta ayaa ina fareysa.

Culumada waan ka faalleeyey anigu, waxaana aan jeclahay in aan ku noqdo wadaad sameyna in aan tilmaamo, wadaad xumena in aan tilmaamo. Wadaad xume waxa weeye nin caalin ah oo diinta aad u yaqaan caalinna ah laakiin munaafaq ah oo iimaanka Alle ka qaaday, waa kaa wadaad xumaha anigu aan sheegaa horta oo waddankiisa gadanaaya oo dhiiggiisa gadanaaya oo sharafkiisa iyo karaamadiisa gadanhaya.

Wadaad xume waxa weeye ninka fidnada ka shaqeeya, waxna isku dira isagu tacliiq leebaxshaa isagu tacliiqdiisuna

weligeed fidno ayey u dhutineysaa; Ummadda waa kala fogeeyaa, waa hadal badan yahay, waa xishood daran yahay, waa galgal badan yahay, waa faan badan yahay, waa is tus badan yahay. Xafiisyada lagama waayo. Waa kaa waddaad xume.

Wadaad same kee weeye marka? Wadaad same waxa weeye midka caalimka ah, ninka waddaniga ah, ninka iimaanka leh, nin diin leh oo daafacahaya Ummaddiisa, waddankiisa, qoowmiyaddiisa, sharafkiisa, karaamadiisa, aqoonna u leh waxa uu sameynaayo weeyaan.

Oo hadde ma wax leys ag dhigaabaa? Mase isku qasmi karaan? Yaan la kala soocinse sidee loo dhihi karaa. War waa kala sooceynaa, adinkuna kala sooca oo carruurta ayaan bareynaa oo reer miyiga ayaan bareynaa mid waliba tillaabada uu u socdo.

Maxaa lagu kala yaqaan labadaas ruux? Waxa lagu kala yaqaannaa, haddaanan taas sheegin baan dambaabi lahaa, calaamooyin ayey kala leeyihiin lugu kala garto. Wadaad same waxa lagu yaqaannaa in uu weligii ka taliyo midnimada, wuxuu ka taliyaa nabad gelyada, wuxuu ka taliyaa is jeclaanta, wuxuu ka taliyaa is cafiska, wuxuu ka taliyaa shaqada, wuxuu ka taliyaa caddaaladda, wuxuu ka taliyaa walaalnimada, weligiina ficilul kheyrka ayuu ka taliyaa shaqo kalena ma qabto. Wax Allaale wixii fiican wanaagsan kan ka horjeedana waa la diriraa oo col bey yihiin. Wuxuu ka taliyaa waddaninnimada, waxa ku irta qiiro dadnimo iyo qiimo aan la koobi karin, waana xishood badanyahay oo caadadiisuba waa xishoodka, waxa xunna waa ka xishoodaa oo afxumada ayuu ka xishoodaa. Waa kaa midabkiisu, qurux badanaa udgoonaase. Waa taa tilmaanta wadaad same laga bixin karo.

Waxa aan ku war qaatay in intii aad ku jirteen aqoon is weydaarsiga ay aad idiin xiisa gelisey oo wax yaalo badan oo markii hannaanka la joogay si kale loo fasiri jirey in aad fahamtaan garataanna aad gaarteen, waana aad ku wanaagsaneydeen, aad baana la'iiga sheekeeyey in ruux kastaaba uu si fiican u dhegeystay duruustii halkan leydinka siinahayey waxaanna rejeynhayaa in aad wax uun ka faa'iideysateen qolooyinkii idiin imaan jireen. Iyaguna waa iiga war warrameen in ay aad idiinka faa'iideysteen wax yaalo badan, isu imaadkuna wuxuu taro kuwaas weeyaan.

Waxaan aad u ammaanayaa marka qolodatan hawshii qabanqaabinteeda iyo dhibkeedii lahaayeen, adinkana waxaan aad idiinkugu hambalyeyn hayaa, sida niyad samida ah oo aad isugu taxalluujiseen aqoon is weydaarsigaas oo aad wax u faa'iideyseen wixii idinla kulmay, adinka naftiinnuna wax uun kororsateen. Waxaan aamminsanahay, xukunka waddankeennu waa xukun Ummaddu ay leedahay in uu noqdaa. Saas darteedna Ummadda oo idil waa in laga qeyb geliyaa, tababbarkeeda talo weydaarsigeeda iyo ka war bixinteedaba, isla markiina waxaan aad u aamminsanahay Alle mahadi ha ku gaadhee maanta haddeynu halkaan baabuur kaga baxno, subaxa dambe Hargeysa ayeynu tegi karnaa, haddeynu doonno oo maanta sidii hore maaha waddankeennuna waa isku sii xirxirmahayaa, waxaan uga jeednaana waxa weeye war dadkeennu haddeyan is aqoonnin, qof walba kibir iyo qab been ah ayuu meel la fadhiyaa, waxa weeye culumada iyo mas'uuliinta iyo ardada iyo haweenka, war ha la socdo oo ha leys barto oo caqliga ha la is weydaarsado oo ha la munaaqashoodo, oo qof walba ra'yigiisa ha cabbiro, oo qof walba ra'yigiisa ha la dhegeysto oo ha la qiimeeyo.

Waxaan marka aad ugu ammaanahayaa qoladatan, sidaan u sheegay tababbarkaanu kii 4aad weeyaan, waanuu socon doonaa aqoon is weydaarsigaanu. Waana in aynu maalin kasta wadnaa si aynu isu fahamno ama aynu u garanno ujeeddadeenna dhammaanteen. Dhammaanteenna waa in nafteenna iyo Ummaddeena daryeello. Waadna mahadsantihiin.

Wa salaama caleykum wa raxmatullaahi wa barakaatuhu.

# Bare Sare waxaa aqoon kara ruuxii karti iyo aqoon u leh

KHUDBAD JAALLE SIYAAD U JEEDIYEY BARAYAASHA JAAMACADDA QARANKA 3.7.1975.

Jaalleyaal waad salaamantihiin dhamaantiin, haddii la eego Degmooyinku ama waddanku sida uu u habeysanyahay maamulkiisu, wuxuu ka soo bilowdaa Tuulooyinka ilaa uu ka soo gaaro Goleyaasha, micnuhuna waxa weeye in tuulada dadka deggani ay ka qeyb galaaniin maamulka waddanka oo ay ka talo dhiibtaan, maamulaanna isla markiiba. Marka markii dadkaas iyaga ahu ay waxooda maamulayaan Wasaarado ama Wakaalado, ama Xafiisyo kale ayey soo dul mareysaa amaba soo dhex mareysaa ilaa ay meesha ugu sarreysa timaaddo oo aynu oran karno Goleyaalka Maamulka waddanka. Haddii kale waxay ka tegeysaa Guddiyaalka Sare amaba Golayaasha Sare oo ilaa qofkii bey taabaneysaa. Micnuhuna waxa weeye Wasaarado ayey sii dhex mareysaa oo iyadu waa heykal dhisan, iyada ayeyna taabaneysaa dadka ku dhex jiraa in ay ka hadlaan, kana taliyaan, kana ra'yi dhiibtaan wixii kasta oo maamulka waddanka ah.

Taasuna waxay u muuqataa in aynan kudlad yaru maamulka iyo taladaba yeelan, marka waan ku faray ee yeel oo keliya aynan ku fadhiyin laakiin ay ku fadhido Ummadda oo dhani ay ka qeybgasho qolo kastabana ay heer kaga qeybgasho. Qolo maamulayaalka Hanuuninta Dadweynaha kaga qeybgaleen, qolo qaybaha kale ee kala duwan kaga qeybgaleen, qolo tuulooyinka kaga qeybgaleen, qolo Wasaarad ahaan kaga qeybgashay, laakiin ictaadku uu yahay in qof kastaaba si uun uga qeybgasho maamulka iyo qorsheynta waddanka ee danahiisa lugu fulinayo.

Bulsho kasta oo adduunka ku noolu Jaamacaddeedu in ay ku leedahay, aas aaskeeda ama xididdada dhulka ugu jira oo ay ku qotontaa in ay yihiin Ummadda dhulkaas deggan tacliinteeda iyo hiddeheeda iyo dhaqankeeda iyo hawadeeda iyo waxeeda oo idil, in ay ku dhisan tahay baannu aaminsannahay. Dalkakan iyo Ummaddaan hiddeheedii iyo dhaqankeedii iyo tacliinteedii iyo wexeedii oo idilu in ay wada xabaalan yihiin oo isticmaarku uu wada xabaalay adna ay waajib kugu tahay in aad soo wada saarto waa kuu ceeriintahay, waana kuu ugub oo adiga ayey marka ku ijrtaa, marka aynu ka hadleyno bulsho ama aynu ka hadleyno dhaqaalo ama aynu ka hadleyno siyaasad, intuba aas aas bey leeyihiin aas aaskooduna waddankaaga weeyaan, macallinna adiga ayaa u ah adigaana tacliin ka bixin kara, adigaa buugag ka dhigi karta, adigaana nin kasta oo isla qiimo weyn oo ajnabiya uga qiimo weyn haddaad yeelato kartidii amaba sidaa in aad u garato ay kuu suuro gasho.

Ruuxa baraha Sare noqon doona waxa weeye ruuxa u leh karti iyo dadnimo iyo qofnimo qiimihiisa u leh baa noqon karahaya. Micnuhu waxa weeye midka shahaadada markuu qaatay aan is dhihin habartii Nabi dhashay dhameysay ee tacliintiisa sii wata, maxaa wacay waxay u furtay albaabkii cilmiga shahaadada uu qaatay cilmigiise ma wada baran. Albaabkaana isaga ayaa heli kara in uu hore u galo, hadduu meeshiisa joogona waa heli karaa. Marka kan baraha runta ah noqon karaa noqon doonaana kaa buu u dhammaan doonaa. Waxa weeye kanalbaabkii furmay sii guda galay. Guda galkaasu muxuu u baahan yahay? Wuxuu u baahan yahay inuu dhibaatooyin badan u bareero, inuu hurdo la'aan u bareero, inuu akhris badan u bareero, inuu baarid badan u bareero inuu doonid badan u bareero iyo inuu illaa wa illaa ka gaaro guntii cilmiga. Markaana uu dadka wax ugu tari karahayo.

Waa maxay himiladeennu? Ma in dhowrka xubnood oo Jaamacaddeennu ay ka koobanto oo Xamar ku yaalla oo keliya aan sameynaa? Mise waxa weeye in aynu gudbinno furuucda Jaamacaddu ay tahay oo aan Gobollada qaarkood



u gudbinno, kuwii qaadan kara? Marka waxay su'aashu dhalatay markaas. War yaa wax qabsan kara? Ummad ku nool meel oo Qaran ah sida ay wax ku qabsan karto oo danahooda ay ku koobi karaanu waa sidee? Markii wax kasta la sheegona bal horta waxa wax tari waa qof, qof qofkiina dad badan ayey ka koobmaan, si ay wax ugu qabsoomaanna waxa weeye in ay is garanhayaanniin sidooda bannaanba oo ay hal af ku wada hadlahayaan, in fikraddoodu ay mid tahay, cadawgooda in ay yaqaanniin, saaxiibkooda in ay yaqaanniin, dantoodu meesha ay jirto in ay yaqaanniin, awooddoodu meesha ay jirto in ay yaqaanniin, waxa u suuro gala dalkooda in ay yaqaanniin oo ay jirto garasho bal horta waxa aad doonevso iyo waxa kaa hor istaagi kara amaba kaa hor taagan.

Marka waxay u baahatay mideyn fikradeed amaba is garansiin. Maalintaas bey ahayd siyaasaddu inn lagu bilaabo Xaruntaan Xalane dadka khaas ahaan maamulka Ummadda haya ee shaqaalaha sheegta ayna ku qaataan duruus magaceeda aan u bixinnay : «is af garad» iyo awalan in iyagu is aqoonsadaan, markaasna wada noolaantaas ay wada nool yihiin ay tusaaleyso amaba ay barto qof waliba wuxuu galo iyo waxa uu gooyo, qiimaha aadamiga ah ee uu leeyaha, qiimaha cilmiga ah ee uu leeyahay, qiimaha siyaasiga ama aragtida siyaasiga ee uu leeyahay in balhorta dadkii ay iyagu is bartaan oo tuhunkaan is yasidda ah ama isla weynaanta ah oo beenta ah dhalatayna oo ama isticmaar abuuray amaba noloshii horeeto iyo nidaamkii hore ka dhashay, bal horta in laga tanaasulo, tanaasulkaas oo keeni kara isku dhafnaan, is dhex gal, wada noolaan, munaaqasho laga wada munaaqashoodo danaha waddanka iyo dadkiisaba, sheeko iyo is garashoba in ay ka yimaadaan.

Metelan waxaa suuro gasha laba adinka oo kale ah. Kacaanka ka hor, midna inuu cirka isla joogey, iyadoo runtu aynan sidaas ahayn ee mid isagu maskaxdiisa ka sameysatay ay ahayd; midna uu u arkahayey wax aan wax garad ahayn ama aan qiimo lahayn amaba aan wax aqoonnin, marka bal si taasu ay u lunto labadii qof isku meel in la keeno weeyaan. Markaasna mar haddey isku meel joogaan, shaki kuma jiro

waa is baranhayaan, innagoo ka duuleyna : «is arag aqooni kama horreyn amaba qiimeynu kama horreynin». Dadka aadamiga ahu markii ay isu yimaadaan si ay wax u wada qabsadaan amaba ay wax tar isugu noqdaanniin waxa shardi ah in ay isu yimaadiin, haddii ay isu yimaadiinna waxa sharad ah in ay hadlaan, munaaqashoodaan, doodaan, sheekeystaan.

Taas waxa ka dhalanhaya markaas wax citiqaad la yiraahdo, meeshaana kala faa'iideysi labada qof ayaa ka dhasha amaba adduunku uu kala faa'iideysto. Haddaba dadkii isku dan ah, iskuna maslaxad ah si ay wax u wada qabsadaan ayana u egtahay in ay wax wada qabsadaan, soow marka in ay is arkaan oo is bartaa maaha, si loo lumiyo citiqaadkii beenta ku dhisnaa loona gaaro labadaas qofi in ay kala faa'iideystaan. Waana marka aan shakhsiyad ka hadleyno. Innagoo fikraddaas ku duuleyna ayaannu garannay in Xaruntaan dadka maamulka Ummadda u haya in leysugu soo ururiyo, had walba intii isu imaan karta, markaasna loo sameeyo awood ay iyagu isku baran karaan.

Isla markiina waxa jirta waddanku nidaam siyaasiya oo cad inuu ku joogo, marka nidaamkaasna in laga doodo, laganа murmo, lagana baxsho duruus, loona helo awood lugu garto amaba lugu dhedhemiyo ka gadaalna qof waliba uu ra'yigiisa ka dhiiban karo kana faa'iideysan karo. Tan kalena waxa weeye hawlo badan oo la hayo oq aan dhab loo aqoonnin baa jirey. Dad badan oo shaqaalaha Dowladda ka mid ahina in badani daaqadaha ayey ka soo geli jireen oo qaraaba kiil iyo gacan qabad bey ku yimaadeen, laakiin dad hawl ahaan tababbarro u soo qaatay ma aynan ahayn, taasuna waxay u keeni jirtey in uusan qofkii gudan karin waajibkiisii iyada oo ay u geyneyso aqoon darro maamulkii ku saabsan, mar hadduusan wax soo barannin. Markii uu gudan waayona in ay ku dhalinceysey cuqdado, taasuna ay u keeneysey inuu af miinshaar noqdo ama beenloow noqdo amaba muddamdam noqdo, amaba uu qiiq isku qariyo iyo habaasba, maxaa wacay lamiirkiisana waa garanhayaa inuu duleel weynu ku jiro, awooddii iyo aqoontii uu wax ku qaban lahaana malaha.

Taana waa in laga gargaaraa oo la yiraahdo muddada



uu halkaan ku jiro ha loo kordhiyo aqoontiisa maamulka xaggiisa ah. Metelan haddeynu eegno adduunka hantigoosadka ah, waxa jira wax la yiraahdo xubno xubno amaba dabaqad ayaa jira. Daqadahaasna mid waliba nuuceeda ayey u sacotaa, waloow siyaasadda guud dadka ah kudladda sare ee xukunka haysa ay u habeyso si ay mabda'aas hantigoosadka ah oo ay haysato ku daafacdo. Waxay ku shaqeeyaan in ay kudladahaas amaba xubnahaas hawshaas amaba maamulka Ummadda haysa mid waliba in ay meel ku xiran tahay dhabbe gaar ahna loo sameeyey, si ay berri mid waliba meeshaas loogu tala galay ama waajibkii iyo daafacaaddii mabda'aas ay uga soo baxaan meeshoodii.

Taas aas aaskeedu wuxuu ahaa qeybi, metelan aan ka soo qaado cuqdadaha ay abuuraan waxa ka mid ahayd in caskarta dadka ah in la yiraahdo : «adigu siyaasad shaqo kuma lihid, wax kalena shaqo kuma lihid, adigu gaarhaye ayaad tahay, nidaamkaas baadna gaar ka hayneysaa, waddankana gaar baad ka hayneysaa, dhabbahaaguna halkaas ayuu ku jeedaa, meel kale oo aad ku leexan kartona ma jirto, sidii faraskii labada maqaar indhaha loogu xiri jirey halkaas ku toosnoow. Waxa la abuuri jirey fikrad ah dadka kaleeto laga dhaadhiciyo, caskartu in ay yihiin dad oo hawlaha hoose ka mid ah, in marka la xaqiraayo oo cilmigooda iyo kartidooda iyo aqoontooda iyo garaadkoodda intaba, si dadku aynan u qiimeynin uguna muuqannin. Khaas ahaanna dadka mutacallimiinta ah ayaa aad loogu abuuri jirey.

Xubnaha kale oo metelan maamulka ahna sidaas oo kale ayaa mid walba meel wejiga loogu saari jirey, yacni waxay ahayd tanaaqud iska horjeedis ah, si mid waliba uu meeshiisa isula buuro keligii inuu yahay kii keli ahaa. Isla markiina ay isugu dirsan yihiin marnabana aynan u heshiinnin. Haddaba Xaruntan waxan u keenna dadka in aannu baabbi'inoo tanaaqudkaas. Aan gees dhigo marka waddamada hantiwadaaggu maxay u arka hayaan? Waxay u arkahayaan in ay tahay lammaanad ama daafacaadda tan ugu ballaaran mabda'a iyo jiridda waddanka hantiwadaagga ahi in ay yihiin Ciidamada qalabka sida in ay yihiin. Mar tanaaqudka muxuu

kanu leeyahay muxuuse kan kale leeyahay? Kanu wuxuu leeyahay fikrad iyo siyaasi ahaan, wuxuu u arkahayaa dadkaas ka mid ah metelan Dowladda hantiwadaagga ah in xubnaha badanu ay dhammaantood meel isugu yimaadaan mid kastaabana uu midka kale u noqdo kaalmo run ah ee qolo ay ka xiran tahay maamulka waddanka iya ka talintuba aynan jirin. Marka cuqdad jirtaa ma jirto haddaa u fiirsatid waddamada hantiwadaagga ah. Waddamada hantigoosadka ahna waxaan filayaa intiinna badanu in aad ka soo baxdeen Jaamacadaha bannaanka Jaraa'idka iyo buugta wixii aad ku arki jirteen, waad garan kareysaan sida ay iyagu u tusaaleyn jireen kala fogeynta ama qaar ceebeynta.

Haddaba innagoo tixgelineyna fikraddaasna, bal ninkaan kaakiga cuqdadda ka qaba oo hore loogu fasiri jirey inuu yahay wax ku dhegahaya oo ceeb ah amaba foolxumo ah ama si kaleeto ah, bal ha dhedhensho oo ha arko in aaney wuxuu waxba ahayn ha ogaadee, sida ninkaan sarkaalka ah oo ciidamada qalabka sida ka mid ah aannu uga dhignay metelan Guddoomiye Degmo markaana uu sii wado maamulka waddanka, kanna xaggii farsamada militeriga ha ka qeyb galo, hana arko, hana barto; markaasna labadaba mid kastaaba ha barto labada dhinacba. Taana marka tanaaqud iyo cudur midna ma jiro. Sababta kalena middaas bey ka mid ahayd.

Sababta kale oo meesha ku jirteyna waxay ahayd, waxaannu nahay dal yar, waxaannu jebinnay nidaam iyo hab hantigoosadku uu dhisay uuna ku dhisay dalkeenna, isagoo ku daafacahaya danihiisa waaweyn ee isticmaariga ah amaba hantigoosadka guud ee caalamiga uu ku daafacahayey, shaki kuma jiro marka in aynu garan weyno markii aan la dirirnoba innagana kolkeenna la'i[illegible]ala dirirahayo. Waxay ahayd ciidanka waddanku uu leeyahay in qof kastaba yaqaanno aqoon in kastaba ha ula ekaatee oo uu daafacaadda waddankiisa in uu wax ka barto. Waxaannu keennay xagga dhallinyarada amaba ardada in aannu Degmooyin badan ka keenno oo aannu u abuurno «sport» lugu tartamo leysuguna yimaado, innagoo is lehdantuna ay inoogu muuqato maalintii qofka Soomaaliga ahu



uu dad badan bartoba, xil kasnimadiisa iyo dadnimadiisaba wey siyaadayaan ama saaxiibnimadiisa iyo garaadkiisu waa siyaadahayaan. Waxa aynu ka shaqeynay Gobollada Jamhuuriyaddu ay ka kooban tahay in aannu ka keenno dad markaasna aannu dejinno, iyadoo Dowladdu ay ku filleydna aannunu niraahno 14ka Degmo ee Xamar miduba ha qaadato Gobol dadkiis, mana aannu yeeleyno Xarumaha hanuuninta ee Gobolka Xamar in la seexiyo luguna masruufo ee waxaannu dooneynaa ilmihiiba in reer loo geeyaa aannuna uga jeedno, ilmihii walbaba in ay yeeshaan walaal cusub, saaxiib cusub, aabbe cusub iyo hooyo cusub, sandullena ay marka dambe noqoneyso in labadii aabbe iyo walaalihii faraha badnaa ee qoloba gees u lahayd, in ay haddana saaxiibaanniin ay sandulle ku noqoneyso, si leysugu soo dhoweeyo garaadkooda iyo fikraddooda. Taasna waloow aannu ugu yeernay Ololaha ciribtiridda aqoon darrida reer miyiga oo aannu galnay, iyada keliya ma aynan ahayn oo siyaasad kale ayaa ku gudo jirtey, ahayd dadka reer magaalku ha ka tago magaalada ee miyiga ha qabto oo dhallinyarada reer magaalkaahi ha tagto miyiga hana arkeen Ummaddoodu waxa ay ku nooshahay iyo waxa ay yihiin, xeerkooda, xamaaskooda, dhaqankooda, maamulkooda iyo sida ay u socdaanniin.

Micneheeduna waxay ahayd, markii ilmihii aan geeyey kii aan ka kexeeyey Xamar Afmadoow markii aan geeyey in ay uga daba tagaan hooyadii iyo aabbihii oo ay markaa ay la kulmaan reerkii ay ilmihii ku tirsanaayeen, halkaasna macruufo iyo is barasho ay ka siyaadaan in hadhowto ay noqoto in qolada reer miyiga ahu ay ka daba imaan karaan sida haddaba dhacday oo ay magaalada imaan karaan intii ay qoladannadii reer hebel ahayd yaa arkay oran lahaayeen ay yiraahdaan reerkii ardaygaas ina hebel hebel ah ayaan u jeedaa, sida haatanba dhacday oo ay guryaha ugu yimaadaan. Markaasna ay ka dhalato wax la yiraahdo is barasho is qiimeyn iyo kala faa'iideysi ay Ummaddii ay kala faa'iideysato, waxa salka weynu haddana sii ahaa, qiddadatan ballaaran ee ah dadweynaha kala qarsoon in ay si habboon isugu yimaadaan markaana is qiimeeyaan.

Waxa weyn oo kaa oo idil wax tar ka dhigi kara cilmiga caadiga ah waxa weeye qof lamiirkiisa dhismihiisa iyo dadnimada ahaa, waddaniga ahaa iyo fikraddiisiba aynan dhismin, cilmigii uu bartay wax tar noqonmaayo ee wuxuu noqon doonaa mid xun oo calooshiisa u shaqeyste ah, qiimo uu yeelanhayaana ma ay jirto oo xataa cilmi siintii ilmaha amaba ardayga macallimku uu cilmiga siin hayey, waxa wax tarkeelu ku fadhiyahayaa ama ay qoto dheer yeelan kareysaa, keli ahaan marka ruuxa baraha ahu uu garanhayo wiilkaas ama gabadhaas wax bariddoodu, qof kastaaba habka uu wax u qoraa amaba nuuca qoraalkiisu uu u muuqdaa wuxuu weligii ku xiran yahay macallinkii wax u bilaabay wax baridda. Hadduu taagtaagay fartiisa, isna sidii buu u taagtaagayaa, hadduu leexleexiyo sidii buu u leexleexinhayaa, micnaha tiisii uun bey noqonhayaan. Markii uu dheehay macallinku qofka habkii uu wax u barahayey amaba qormadu nuucii ay u muuqaneysey, maxaad ka fileysaa maskaxdiisa imisaa buu dheehi karahayaa? Aad bey u ballaaran tahay.

Haddaba is weydiisku waxa weeye, dhaliil ma jiraa mise ma jiro? Waxaynu soo marnay waqti foolxun oo isticmaar ah, waqti ka dambeeyey oo haddana isticmaarkii cusbaa uu dhibaato badan inoo geystey, waxaynuna soo gaarnay heer dadkeenna laga dhigo dabaqado oo la kala fogfogeeyo iyadoo ama cilmi lugu kala fogeynhayo amaba dhaqaalo-waxay dadkeennu soo mareen heer ay iska yaaceen, iyadoo dantu ay ku khasbeysey oo tacliin is wada khilaafsan ay adduunka kala yimaadeen. Waxaynu soo marnay metelan waqti dariiqooyin xagga diiniyada haddii la aado kala duwanu ay dhasheen, marka iyaguna ay keeneen tanaaqud iyo iska horjeed. Jawigaas saas u wada qallafsan ayeynu ku jiri jirney. Xaqiiqdeenna markii aynu eegnona waxaynu nahay dad ku nool dal haddii ay ka xoogsadaan oo si fiican uga xoogsadaan gaarsiin karo nolol wanaagsan, kaaftoonna gaarsiin kara iyo isku fillaan.

Dadkeenna waxa aynu ku mideyn karnaana waxa weeye fikrad, laakiin fikradda markii aynu ka siinno waxaan ka dhaxli karnaa quwadda in aynu isku tiirinoo, xoolaha in aynu isu geyno, markaana awood aannu u helno waxa aannu dooneyno in aan ku dhalinno oo aynu ku gaarsiinno dadkeenna heer ay wixii ay rabaan ay ku helaan. Ma aan qabno markii aynu dabbakheyno nidaamka hantiwadaagga ah in lugu tilmaamo amaba lugu jaangooyo midabka qofku uu leeyahay, dharka uu qabo midabka uu leeyahay iyo cimriga uu jiro qofku in lugu jaan gooyo ma qabno ee waxaan qabnaa in lugu jaan gooyo qofka fikraddiisu waa sidee, kartidiisu waa maxay, aaminkiisu waa maxay, waddaninnimadiisu waa maxay, shakhsiyaddiisu maxay la egtahay? Waxaan qabnaa in qof kastaaba, wixii laga cabbirtaa ama lagu tilmaamaa in ay yihiin sidee buu u fikirahayaa, sideebuu ugu diyaaryahay ka qeyb galka halgankaas, sideebuu ugu diyaar yahay wax tarka dadkiisa, sideebuu uga tanaasulay qaabkii iyo beentii iyo isla weynaantii keligiis ahayd, sideebuu waaqicinnimadii ugu soo noqday, iyo xaqiiq ahaantii ee uu uga tanaasulay been sheegga iyo khiyaal ku noolaadka?

Haddaba waxay ila tahay, markii halkaas aan mareyno, dadka mutacallimiinta ah waa maxay mas'uuliyadda saa'idka ah oo saaranu, maxaase saaray mas'uuliyadda dheeraadka ah? Mas'uuliyadda saa'idka ah oo saarani waxa weeye in uu ka mid yahay bulsho Kacaan ah oo halgameysa oo dooneysa in ay xoroowdo oo dhaqaalaha ka xoroowdo, tacliinta ka xoroowdo, nabad gelyo hesho, sinnaan iyo caddaalad bulsho ku dhisanna ay gaarto, dagaal dheer oo aad u qiimo dheeruna uu ku jiro. Haddaba isagu wax aqoon buu u yahay. Haddaba maxaa u keenay mas'uuliyadda saa'idka ah oo dadka kale ka duway? Waxa taa u keenayu waxa weeye aqoontiisa iyo cilmigiisa oo Ummaddaas Soomaaliyeed baa wax bartay, marka waajib bey ku tahay wixii ay bartay inuu u celiyo oo uu ugu celiyo shaqadiisa, ugu celiyo taladiisa, ugu celyio daadalkiisa, ugu celiyo barid ama gargaar iyo waxa uu dheeryahay oo iyagu aynan garaneynin. Wax walbana waxa ugu culus waqtiga ay wax kastaaba ay qiimaha leeyihiin, dadkeenna maanta joogaa waxaan filayaa in ayan ka baxsan karin mas'uuliyaddooda taariikhiga ah. Haddaba waxay ila tahay in aad sidaas u fahamtaan in ay ku habboontahay sidii aad waajibkiinna ku gudan lahaydeen.

Tan kale waxaan idinkula talinhayaa oo aan talo ahaan idiinku jeedinhayaa, in aad si aad wax ku ool u noqoto, naftaada, Ummaddaada iyo waddankaagaba aad tix gslisaa dhibaatooyinkii badnaa oo la soo maray, markaasna ay khasbeysey in wacyiga iyo waanadu ay bataan, gefafkana turaal badan iyo sabar badan loo yeesho, shanta sano markii ay dhammaatona in loo gudbo heerkii dhismada ee laga boxo heerkii wacyiga iyo waanada loona gudbo dhaqaalaha dhismadiisii iyo bulshada dhismadeedii runta ahayd, tacliinta dhismaheedii runta ahayd. Waxaana timid in sannadkii shanaad markii aynu goynay aynu xaqiiqadii ogaannay in ay rajciyaddii madaxa la soo kacdo oo dhaqaalihii dhaqaaqi waayo. Oo maxaa la yeeli marka?

Meeshatan waxaa jirtey qorsheyn jaan go'an oo aan leysugu soo noqoneynin, waqtigii loogu tala galay in dhismo run ah la gaarona waxaynu gaarnay fikraddii hore oo ahayd waa waajib in dadkaa marka hore xaqiiqada laga dhaadhiciyaa iyo ujeeddada. Maxaa eg marka? Waxa eg marka qofkii aan la socon karinu Kacaanka inuu ka dhex boxo, yacni ninbaa isagu aad u cilmi dheer mutacallimna ah waase dibusocod, kaasna waxa ka fiican jaahil daacad ah oo waddani ah, xaqiiqadiina taas weeyaan.



# TARTAN DHAQAALE

KHUDBAD JAALLE SIYAAD UGA JEEDIYEY GOLAHA MURTIDA SHAQAALAHA WARSHADAHA WADDANKA OO IN MUDDO AH TARTAN DHAQAALE U SOCDEY. 5.3.1975.

Jaallayaal waad salaaman tihiin, aad iyo aad baan ugu faraxsanahay in aan ka soo qeybgalo tartan muddo soo socdey, kana dhex socdey Warshadaha dalka, shaqaalihiisa iyo maamulkiisa lagu xirahayo. Xaqiiqo ahaan faraxeyga aad u ballaaranu wuxuu ku jiraa ururka iyo iska warqabidda, isla markiina himilada meesha u wada jeedda ee Warshadaha meel ku oolkooda iyo hawshooduba aad u kula duwan yihiin, haddana ay leeyihiin wax la yiraahdo itixaad iyo urur iyo wada tashi iyo haddana wada qiimeyn guud, qolo waluba bal wixii ay qabatay iyo meeshii ay gaartay.

Shaki wuxuusan ku jirin in horukac jiro, horukacaas oo kolleyba aan la qiimeyn karin ee ka badan wax waraaq lagu dhigi karo ama af laga sheegi karo. Waxa weeye shaqaalaha Ummaddatan Soomaaliyeed ee horey u kala firirsanaan jirey, in ay isku soo dhowaadaan, in ay ka doodaan dantooda caamka ah oo dabakhadooda ah, sida ay noloshooda hore ugu dhigi karaan, nolosha dhashooda iyo waajibaadka waddaniga ah sidii ay uga bixi lahaayeen ama u gudan lahaayeen.

Talo isweydaarsigaasu waxaan isleeyahay waxa weeye salkii ama aasaaskii wax ka dhismahayeen, qofka aadamiga ahu sidii uu u afgarto qofka kaleeto ama uu u qiimeeyo qofka kale intaas oo aadamiga khalaaqaddiisa la dhisan oo gees taalla nolosha aadamiga ama horukiciisa, salkeedu waxa weeye;

is-araggooda iyo wada hadalkooda, haddeynan is-arkin ama aynaan wada hadlin, ma ay suuro gasho in labadaas qof ama Ummaddaasu guud ahaanteeda in ay is qiimeyso ma ay suuro gasho. Waxa suuro geliyaana waxa weeye, danta caamka ah markii laga hadlayo ee danta shakhsiguna aynan ka fogeyn oo aynan ka furnaan karin, dadku in ay had walba kulmaan isla markaasna ay kulankaas ka dhalato bulshadaas wada jirkeeda, bulshada oo dhibka haya dersi ku sameysa ama baarta sidii ay uga bixi lahayd. Marka waxaan isleeyahay, qiimaha ugu ballaaran waxaynu saari karnaa kulanka muddo markii la joogaba dadka shaqaalaha ahu ay kulma hayaan. Waxaana aad uga sii qiimo dheeraan lahayd, haddii kulanku walow uu jiro uu intaas ka sii badan yahay kana sii ballaaran yahay ee uusan xoogaa keliya ku koobneyn ee shaqaalaha waddanka uu ka dhexeeyo kulankaa iyo war isweydaarsigaas iyo wada tashigaas, markaad taas qiimeysaan ayaad runtii wax soo saarka aad ku hadleysaan ama aqoon kororsiga aynu ka hadleyno ama maamulka caaddilka ahu, markaa keliya ayuun buu suuro gelayaa.

Intaas guud ahaan markaan idhaahdo, oo aan idinku guubaabiyo, idinkuna geesinnimo geliyo, kordhiya baaridda iyadoo marka hore qorsheysan, si qolo waluba u garato cadka ama meesha la dheer yahay oo qolada kale ay ku fiican tahay, isla markiina hela ama gaara heer fikradeed ee aad qoladii ama Warshaddii ama Waaxdii Warshadda ama xubintii warshadda ee iyadu ku gaartay caqligeeda iyo cilmigeeda amaba dadaalkeeda ku gaartay, in loo oggolaado in ay noqoto tan la sheegsheego, iyadoo ujeeddadu ay tahay; iyaguna waa quman yihiine, in lagu geesinnimo geliyo in ay weli hore u sii socdaan oo kordhiyaan sababtii ay ku gaareen meeshaas sare, dadka kalena, in ay ku daydaan ay habboon tahay, sida iyaguna ay u gaari lahaayeen.

Farax bey ii tahay in Warshaduhu sannadkii 1974tii ay ka koreen heerkii ay joogeen 1973dii, waxaanna rajeyneynaa 1975ta, in ay sii fiicnaadaan, saasuna ay noqoto taagan sida ay uguba dhisaaleysan tahay khalaaqadda aadamiga iyo Ummad kastaaba in maalinba maalinta ka dambeysa ay kordhi-



yaan bulshadooda dhaqaalahooda, ay kordhiyaan cilmigooda, ay kordhiyaan bulshadooda wanaageeda, sababta oo ah; waa xaq qofka aadamiga ahu inuu tabcado, laakiin waxay xaq sii tahay ama ay daawo yeelataa, marka uu garto in ay isaga ku xiran tahay kordhintaas iyo koriddaasuba, markaana mar kasta oo uu doonahayo inuu wax badsado oo cilmi badsado, dhaqaale badsado, caafimaad badsado, nabadgelyo badsado, in ay waajib ku tahay isagu inuu ku dadaalo ee uusan marna u maleynin, in ay si bilaasha isaga imaaneyso. Shaki iigama jiro haddii gaiaadka siyaasiga ah ee shaqaalaheenna iyo maamulkeennu uu hagaago, in dhaqaaluhu uu kordhayo, in wax soo saarkuna badanaayo.

Wuxuusan shaki iiga jirin, birtu meelbey iska taallaa, waxa wax ka dhaliyaana, sida iyadoo ciid ahba bir uu uga dhigay, waxa weeye, qofka aadamiga ah. Haddii marka qofka aadamiga ahi taas garanhayo oo uu leeyahay; markii horeetona ciid baan ka keenay oo bir baan ka dhigay, anigoo waddooyin badan soo dhex mariyey ama dhibab badan ka soo maray, markii kalena anigaa u hagaajiyey ama u qorsheevey, hab waxa aan la doonaayo ay iigu soo saarto. Waa markaas, haddana inuu gaaraa oo yiraahdaa : «waxa igu filanna waa in ay ii soo saartaa», oo hadba sida aynu u dooneyno ayaa wax uga soo baxaan, wax dhalkooduna kaa uun buu noqonhayaa. Fikradda saas ahi markii ay dhalato, wax soo saarkuna wuu dhalanhayaa, maxaa wacay waxaa dhalanahaya isla markaas, if-af garadka shaqaalaha, maamulka iyo madaxda kale ayaa dhalanhaya, istixgelintooda ayaa dhalaneysa, isxushmadeyntooda iyo isdhowriddooda ayaad garaneysaa, is-xaq siin tooda ayaa dhalaneysa. Mar haddii heerkaas ay gaarto fikradduna waxay isla markiiba fikradda nuucaas ahu ay la geleysaa, in ay qiimeyso maamulka iyo wax soo saarka.

Haddaba waxaan leeyahay, taasu marka ay iman kartaa waa markee? Waxa weeye, marka qof kasta oo shaqaale ah ee Warshad kasta kamid ahi uu garanhayo aaminona in waxa isagu uu xuquuq u leeyahayna ay dhowrsoon yihiin oo ay jiraan dad daafacahaya oo aan u oggoleyn in ay lu-

maan, wixii waajib ah ee isaga naftiisa saaranna uu garanhayo fulintooda isga oo aan baqeynin ama aan wax ku dooneynin, ee u garanhayo in ay waajib saaran tahay, saana ku fulinhaya. Markii taasu ay timaaddo ayaa marka waxa imaanhaya inta kaleeto oo waajibaad ah. Taasuna marka waxay ku imaan kartaa aqoonsiga qiimaa qofka aadamiga ah marka u horreysa, markii ay maamulka ka timaaddo, markii ay shaqaalaha ka timaaddo, markii ay hormuudyada ka timaaddo, markii ay kooxaha ka timaaddo, markii qof kastaaba uu aamino inuu qiimeyo qofka aadamiga ahu wuxuu galo iyo wuxuu gooyo, waana markaas marka caddaaladdu ay imaan karto.

Haddii warshadu ay gaarto heer dhaqaaleheedu uu ku fillaado oo iyadu ay koobto. Hadduu fiicnaado dhaqaaluhu yuu yahay kan faa'iidada ugu horreysa qaadanhayaa? Waxa weeye in wax loogu qabto dadka ka shaqeeya Warshadda dhaqaalahooda lagu wanaajiyo, caafimaadkooda lagu wanaajiyo, tacliintoodana lagu wanaajiyo iyo noloshoodaba. Sababtuna waa maxay? Sababtu waxa weeye iyagaa leh Warshadda, ma aha mid ay dad kaleeto uga shaqeeyaan; shibciga Soomaaliyeed ayaa isugu tegey, xoolaha Warshadda lugu sameeyey shicbiga Soomaaliyeed ayaa wada lahaa, markii uu dhisayna dad shaqaale ah oo koox ah ayaa ka shaqeeyey, iyagaana ku mushaar qaatay, laakiin shicbi weyne waa ka maqan yahay weli, xoolihii oo keliya buuna lahaa, waa in ay sidaa u gartaanniin. Markaasbaa maamulku wuxuu ka baxahayaa mid qof leeyahay oo uu takri fali karo, markaasuu u gudbahayaa maamul shaqaale hantiwadaag ah ee iyagu wixiisa sameysanhaya kuna mintidahaya, kuna dagaallamahaya, wixii ka maqanna kororsanhaya, birta habeenkii qorahaya iyadoon ciduna u dirsannin, isagoon ku dooneynin abaalgud, isagoon berrito lahayn haddee waxbaan qabtaye ha la i siiyo, laakiin u aaminsan bulshada Soomaaliyeed ee uu isagu ka mid yahay in uu waajib ka saaran gudanhayo u qabo.Taasbaana marka dhalineysa..

Warshado waa jireen dalka Kacaanka ka hor, kuwona ka gadaal bey dhasheen, Warshado bakhtiisnaana way noo-



laadeen, laakiin ma intaas beynu ku qanceynaa innagu? Ma ku qanceyno, waxaynaanna ugu qanceynin, dhaqaalaha waddankeennu ineynu ku qanacno inooma oggola, maxaa marka loo baahan yahay? Waxaa loo baahan yahay in Warshaduhu ay wax dhalaan, markaas anigu, Warshaduhu wax ha dhaleen oran mahayo ee waxaan leeyahay shaqaaluhu waa in ay wax dhalaanniin, waana iyaga waxa wax dhalin karaa.

Waxay ahaayeen tilmaanteennii iyo taladeenniiba, markeynu Warshadda dhiseyno in aynu niri waxaan isu geyneynaa xoogagga xoolaha an oo aynu hayno oo meel ku kala firdhi lahaa baan isu geyneynaa, warshad bireheed baanna ku soo gadeynaa, dhagixii iyo gurigiina «iskaa wax u qabso» ayaan ku dhiseynaa, ka gadaalna waxaynu geyneynaa dad shaqaale ah oo ka shaqeeya kuwaas oo iyaga xooggooda iyo fikraddooda wanaagsan ee maskaxdaa iyo xoolihii aan gelinnay ay dhalaan xoolo inoo oggolaada in aan Warshad kale ku sameyno oo inta suuqa joogta kaga kexeyno, dhaqaalaha waddankana aan ku xoojinno, saas baa hadalkeennii hore ahaa. waxana weeye waddada inoo bannaan oo keliya oo aan Ummaddeenna dhibka kaga saari karno amabase aynu ognahay maanta ineynu kaga saarnay in badan.

Waxaan taa uga golleeyahay in shaqaaluhu ay u gartaan iyagoo isku duuban oo maamul iyo gacan ka shaqeeye iyo maskax ka shaqeeye intaba leh in ay u gartaan waajibka ay ka gudanhayaan Warshadaha qiimihiisa iyo micnohooduba aad bey u qoddo dheer yihiin, aad beyna u micno weyn yihiin, markii loo eego Kacaankeenna amaba loo eegay taariikhda dib haddii loogu noqday; Kacaan kasta oo adduunka ka dhacay ee gaar ahaan hantiwadaag ah. Waxa weeye marka in ay xil gaar ah iska saaraanniin. Shaqaalaha xuquuqdooda, waxaynu niri Warshadaha iyagaa iska leh, Wakaaladaha laga shaqeeyona iyagaa leh, xoolaha iyagaa leh; iyaga kaligood malehe Soomaali weyn ayey kala dhexeeyaan, laakiin maamulkii Soomaali iyaga ayaa gacanta ugu hayaanniin. Haddaba markeynu saas leennahay, waa maxay waajibka maamulka? Waa maxay waajibka Wasaaraddu? Waxa weeye dadku wa-

xooda buug kuma maamulan karaaniin, waana lagama maarmaan in madax loo yeelo, madax ku xigeen loo yeelo, guddiyaal loo yeelo, agaasin loo yeelo oo waa in hawshii kala socotaa. Waxa weeye qofka shaqaalaha ah in xaqiisa la siiyo oo uu ka miteystay sharciga markaa yaalla iyo heerka dhaqaaluu ka marahayo, wuxuu xaq u leeyahay daawo, wuxuu xaq hu uu marahayo, wuxuu xaq u leeyahay taakuleyn kale, u leeyahay mushaar, wuxuu xaq u leeyahay taakuleyn kale, makhaayado ayaa loo sameeyaa, waxyaalo yar yar oo qofka noloshiisa gaar ahaaneed ka hayn kara ayaa loo sameeyaa. Marka waxyaalaha lagama maarmaanka ah oo uu xaq u leeyahay oo ama nolosha lugu ilaaliyo ama caafimaadkiisa lugu ilaaliyo, waxa weeye maamulku in uu sameeyo, sida kan waajibka ay ugu tahay inuu dhaqaalihii kordhiyo, kanna waajib bey ku tahay inuu ka fikiro wixii qofkaan xuquuqdiisa ahaa oo ama uu caafimaadkiisa ku badbaadin lahaa ama uu noloshiisa ku taageeri lahaa. Waa kee qofka markaa loo baahanyahay ? Waxa weeye qofka caaqilka ah oo shaqaalaha dantoodana garan kara, waajibka waddanigaana garan kara, noloshooda dambena sidii ay ku dhalan lahaydna kii tiimaan ka bixiya weeyaan, qofka caaddilkaa weeyaan qofka geesigaa weeyaan, qofka iimaanka qaba oo nadiifkaa weeyaan, qofka xanta aan aqoonnin weeyaan, waxa weeyaan qofka sheegi kara awoodna u leh in uu waxa xaqaa sheego. Qaldaan weeye ninka Xafiiska Siyaasadda ka warwareega oo ninkii hebel laga soo yiraahdo, oranaaya kaasu kheyr maleh, waxa imaaneysa isagaan kheyr lahayn isagaana bixi doona ee runta maaha mid beenlow ah wax uu soo dhoodhoobay, beenlow hadduu yahay kalsooni markii aan qabo, waxaan leeyahay: «Jaalle kani beenlow weeye» ee waa ku khatalantay baan leeyahay, Xafiiskuu toban jeer kuugu soo noqday markii shaqaalihii fiicnaa ay shaqeynayeen baan leeyahay. Anna ribood baan bixinahaya oo cuqdadi ima hayso aniga, laakiin inaad ka qabto waxakan la yiraahdo, sidii wax daaf ku dhacay oo basbaas indhaha looga shubay oo kaleeto, Xafiiska Siyaasadda, warbuu naga geynhayaa, oo maxaad qarsaneysaa? Waxa soow shicbiga Soomaaliyeed malaha? Soow Kacaanku male? Soow hore looma socdo? Soo dhaqaale iyo waxtar maaha? Waa maxay waxaad la dhuumaneysaa? Waxan qabaa in qof-



ka wax garadkaahi kalsooni uu isku qabo. Micnaha aan uga jeedahina waxa weeye : in ay isku xirmaan Wasaaradda Warshadaha; marka aan leeyahay Wasaaradda Warshadaha waxa weeye, Warshadaha, Wakaaladaha iyo wixii la mid ah iyo Xafiiska Siyaasaddu waa in ay hal noqdaanniin, waana in ay far la noqdaan oo la midoobaan Ciidanka nabad sugidda, haddaad iskhlaas waddanka u tahayna Nabad Sugidda waa in aad raacdaa oo boosta ka gashaa isagaa kuu hiilinahayee, haddaad khaa'in tahayna uu ku qabtaa Jaalle, haddaad khaa'in tahay waaba loo sameeyey inuu ku qabto, xaqiiqdana saas weeyaan. Marka waxa weeye afartaas xubnood in ay hal keliya noqdaan, waana lagama maarmaan saasu in ay dhacdaa, maxaa wacay waxaan ahay Kacaan hantiwadaag ah waana in aan jiirsiinnaa in uu gaaro meeshii uu doonahayey iyo waxa uu doonaayo.

Waxaan u leexan hayaa aqoontii, waxa aynu ka hadleyna waa Warshad, Warshaduna waa farsamo, farsamona aqoon bey u baahantahay, waxaana lagama maarmaana Warshad kastaaba iskool waa in uu ka dhex furan yahay, sidaa horeyna waan u iri, iskoolka ka dhex dhisanuna waa in uu yahay mid nidaam brograam leh oo qoloba ay mar gashaa, waxa weeye kan shaqada ku jira, waa in loo siyaadiyaa intii uu yiqiin, waana lagama maarmaan in loo siyaadiyaa, waa in ay noqotaa sidii lugtii gaarigu u wareegeysey oo kale, waana ay u wareegaan barashada cilmiga runta ah ee farsamada Warshadha lagaga shaqeeyaa. Haddeynan saas noqonninna Warshadaha iyo waxa aan ka hadleynaa been weeyaan, waxaan u qaadan kareynaa meesha aan mareyno oo Kacaannimada ah iyo halganka aan ku jirno aanna hubo inaan ku adkaan doonno, intiinna hadda Warshadaha ka shaqeysaan in aad macallimiin noqon doontaaniin, hoggaamiyeyaal keliya in aad noqon doontaaniin laakiin shaqaalihii runta ahaa berri inuu soo bixi doono, maxaa wacay Warshaduhu waa badan doonaan. Warshadaha ciidankii wax yiqiinnay xaggee looga keenahayaa, haddeydaan adinku haddeer barannin? Yacni fikraddeennu waa in ay tahay shaqaalaha maanta Warshadaha inooga shaqeeya waa in aynu ugu talo galnaa berri in ay

iyagu noqdaan mucallimiin iyo hoggaamiyeyaal Warshadaha dhisi doona, waa in aan ku sii tashannaa aqoontana waa in aan kordhinnaa si berri qofkaa aqoonta kororsaday uu mid kaleeto ugu gudbin karo ama uu ku hoggaamin karo Warshad kaleeto, waa taa himiladeennu in ay noqoto.

Haddaba, mabda'a hantiwadaagga haddaan soo qaato, isagaan u soo socdaye, ama dulucdu u jeeddaye, waad garaneysaan turjubaan badan in laga baxshey, waad garaneysaan in meelo badan haddadaadu uga timid, waad garaneysaan intii la qasi karo in la qasay, balse waxaan ugu imaanhayaa caddeys markii kasta oo aan isu nimaadnoba, hantiwadaagga waxa ay runtiisu tahay.

Afkii aan ku hadlahayey ee aan caddaaladda kaga hadlahayey ee aan aqoonsiga iyo dhowrmada insaaniya nimada aan kaga hadlahayey ee aan nolosha iyo dhaqaalaha iyo maamulka siyaasadda aan kaga hadlahayey, af hantiwadaag weeyaan, markuu saas yahayna, waxaan filahayaa inta qofka aadamigaahu jecel yahay beyna ahaayeen waxa aan ku hadlahayey, isla markiina waxay ahaayeen inta qofka aadamigaa uu xaq u leeyahay. Waa kaa hantiwadaaggu. Waxaynu goynay 5 sannadood iyo bar beynu soo goynay, shantaa sannadood iyo barkaana waxaynu ku jirney in aynu isku dayno ineynu hanuuninno dadkeenna, innagoo fileyney in balaayo muddo dheer maskaxdooda ku shaqeysaneysey, qalbigooda ku shaqeysaneysey, qeybineysey oo kooxkoox u kala taageysey, waajib beyna inagu ahayd ineynaan ku degdegin ee aynu hanuunnino, laakiin shan sano ka dib weli ma hanuunineynaa waxa weeye ninkii socon hayaana waa in uu socdaa, ninkii aan soconeyna waddankiisana ma rabo, Ummaddiisana ma rabo ee ha iska haro, hadduu dadkii inuu dhex ordo oo uu higsad oggolyabeena inoo huwado. Bacda shan sano kaan soconeynu waa ha haro, hadduu dadkii inuu dhexu ordo oo uu higsad oggolyahay, haddeerba bal lixda bilood waxay ahayd ha higsadee bal hadde u sii kaadiya, laakiin lixda bilood ka hor baan digay oo adinka ayaa iiga marag ah. Waa digay oo waxaan iri war shantii sano waa dhammaatay, u turid dambena ma jirto.



War nin walooba tasho baan iri. Marka dibusocodka metelan maamulka ku dhex jira, waxaan iri war tasho lix bilood ka hor, waxaa suurtowda weli in aan been sheegaayo in uu moodo, laakiin waa soo socdaahe bal ogoow.

Yacni waxa weeye shaqaaluhu ma gartay in aynu gaarnay waqtigii xaqa ahaa ee kala guurka ahaa? In shanta sano oo soo socota oo laga bilaabo Oktoobartii aynu soo dhaafnay dagaal ineynu u diyaar nahay ma gartay shaqaaluhu? Ma u diyaarbaa dagaalkaasi inuu galo? In uu daafaco dabaqaddiisa ma u diyaarbaa? Oo shaqaale uu daafaco, hantiwadaag inuu daafaco, sinnaan iyo caddaalad inuu daafaco, horukac inuu daafaco ma u diyaarbaa? Hadduu diyaar yahay, runtii dagaalkii sidaas baannu u bilaabeynaa, waana bilownay dagaalka mar hore. Dagaalkeennu waa caddaan, waana taagan, turid dambena malaha.

Waadna mahadsantihiin.

# DHISMAHA BULSHADA

## KHUDBAD JAALLE SIYAAD UU U JEEDIYEY BARAYAASHA DHAQAALAHA GURIGA
4.8.1975

**Marka ugu horreysa dhammaantiin waad salaaman tihiin.** Xaqiiqo ahaan waxaan qabaa shirkakan amaba tababbarkaan gaaban ee leydiin furay in ay intuba muhiim ay yihiin, mar haddaan ogsoonahay hawsha adinku aad ku qeybsan tihiin ay tahay dhismaha bulshada, in ay tahay midda ugu qiimo iyo qaaya weyn, run ahaantii. Taas oo ku sifeysan, waxa aynu dhiseynaa waa maxay? Su'aasha ugu horreysa haddaan isweydiinno, farsamada ama sancada ama tacliinta iyo wax kasta oo la qabtaaba. Wax kasta oo la qabtaana waxay leeyihiin biyo dhac iyo siyaasad ka dambeysa, siyaasaddaas oo damacsan in ay sameyso wax habeysma.

Innaga Kacaankeennu waxa uu u sameysan yahay oo siyaasaddeennu ay tahay bulshada in la dhiso oo laga soo qaado mugdigii ay ku jirtey lana keeno iftiin. Iftiinkaas oo ku hadbeysan nolosha dadka, caafimaadka dadka, garaadka hagaagsan, dhaqaalaha, aqoonta. Marka muxuu rabaa qofkasta? Qof kastaba wuxuu rabaa in uu noolaado, wuxuu rabaa caafimaadkiisa in la taageero oo uu habeysan yahay uuna fiican yahay, wuxuu rabaa dhaqaalihiisu in uu fiican yahay, wuxuu rabaa aqoontiisu in ay meel sare joogto oo tacliintiisu ay sarreyso oo fikraddiisa siyaasiga ah biseylkeedu uu sarreeyo, uuna kala garan karo wixii u dan ah iyo wixii u dan darro ah. Yacni qofku inuu yahay qof fikrad qof kale fahmi karta.

Taas oo la oran karo, iyadu salkii bey noqon kartaa, maxaa wacay qofkii wax gartay uun baa wax qabsan kara, qof aan waxba garanninuna waxba ma qabsan karo. Marka siyaasad ayaa ka dambeysa tababbarradeenna, siyaasad magaceeda la yiraahdo : «dhismada bulshada Soomaaliyeed» oo aan meel dhaafeynin, xubinna ha ku ahaatee, xubinna in ay dayacdo aan dooneyn, xubinna in ay illoowdo aan dooneynin.

Markaasna hadde dhismadiina waa fara badnaaneysaa oo waxay yeelaneysaa xubno badan. Xaggeebuu kaga jiraa dhismadaas amaba waajibaadkaas aynu gudaneynaa ahna guriga dhaqaalihiisa iyo xannaanada carruurtu? Waxaan moodayaa meesha ugu sarreysa in uu kaga jiraa oo uu abuurkii yahay, maxaa wacay wixii wax dhalaa waa hooyo, wixii dhashaana waa ilmo, waxa ay ka abuurmaanna waa guri, marka waxa weeye unuggii bulshada waa gurigii, haddii taas aan la gaarsiinnin, heerka wax tarka u noqon kara bulshada la dhisahayo waxa imaneysa in weligeed duleel jiro. Metelan aan ka soo qaado, yacni waxyaalaha aas aaska ah waxa ka mid ah dhaqaalaha, dhaqaaluhuna heerar badan buu leeyahay oo midu waxa weeye mid Dowladdu ay dhisto oo ay qorsheyso una dhigto xarriiqdin in la gaaro ay tahay, miduna waxa weeye waxa aad haysato oo aad dhaqaaleysan karto, oo yacni dakhligaaga ah oo aad u beekhaansato sidii uu kuu gaari lahaa, uuna kuugu gaari karo sida nacfi ahaan wax kuu tari karta oo aad dadkaaga siisaa amaba aad ilmahaaga siisaa ay noqdaan amaba wixii aad haysatey oo kuu gaarahaya ilaa waqtigii loogu talo galay ee aan dhexda ku kala go'aynin.

Hadalkaas marka la sheegahayo waxaad mooddaa hadal iska fudud, laakiin sidaa maahan uxaqiiqo ahaan anigu waxaan garan karaa aas aaskii dhaqaalaha in ay tahay. Maxaa wacay marka ugu horreysa qofku waa in uu isku fillaadaa. Haddee sidee isugu fillaan hayaa? Haddaan metelan anigu lababoqol oo shilin qaato oo labadii boqolba aan maalinta ugu horreysa ka baxo oo aan kaga baxo wax aan waxtar u noqonnin reerkii iyo ilmihii midnaba. Maxaa ka imaanaya



markaas? Waxaa ka imaan haya in aan tobankii maalmood ee hore kaga baxay, labaatankii dambena aan qadsanahay, haddii aan qadsanahayna waxay igu kallifeysaa in aan amaah doonto, qofkii amaah doontayna waa qof baryootamay, hadduu qofku mar amaah doontay qiimihiisu hoos buu u dhacahayaa, maxaa wacay waa ixtaad. Waxaana imaaneysaa mar haddii qofku ixtaad noqdayna waxa suuro gal ah in uu oggolaado wax kastaba.

Marka la leeyahay dhaqaalaha ama dhaqaalaha reerka micnihiisu waxa weeye in waxa uu leeyahay si beekhaansan oo macquul ah in loomasruufo, markaasna waxa weeye in wixii aan faa'iido lahayn saa'idse noqon kara in laga gooyo weeyaan. Yaase sameyn kara marka sidaas? Waxa sameyn kara hooyadii. Waxaan isleeyahay hooyadii marka saas bey qaali u tahay, macruufadeedii oo la siyaadiyaana marka sidaas bey qaali u tahay.

Taasu waa dhaqaalo. Maxaa soo raaca? Waxaa soo raaca caafimaadkii oo qofkii haddii macaruufadiisu ay sarreyso wuxuu ka fikirahayaa reerkii, hooyadii, aabbihii, ilmihii in caafimaadkoodu uu hagaago. Sidee ku hagaagayaa marka? Caafimaadku in la daaweeyo maahee waa in leysku dayo in la celiyo cudurku intii uusan imaannin. Xaggeebuuse cudurku marka hore ka yimaadaa? Cudurku meelo badan ayuu ka yimaadaa, gurigana waa ka yimaadaa, haddii qofka fikraddiisii ama aqoontiisii iyo caafimaadka ilaalintiisa uu dhab u yaqaanno, shaki kuma jiro cudurka in uu ka ilaalin karo guriga iyo wixii ku noolba oo metelan, gurigii, hurdadii, weelkii wax lagu cunahayey, kii wax lagu karin hayey, meeshii la seexan hayey iyo wax yaalaha aynaan ka maarmin oo metelan neecaawdu ay ka mid tahay oo qorraxdu ay ka mid tahay oo wax waliba ay ka mid yihiin, marka qofku uu garanhayo micnaha caafimaadku uus leeyahay intaas buu ku dagaallamahayaa oo nadaafaddii buu ku dagaallamahayaa.

Hadduu sidaa yeelona qofku cudurkii wuxuu la diriray boqolkiiba sagaashan, wixii soo raacaana waxa weeye, qofku markuu caafimaadka qiimihiisa garanhayo oo tacliintiisu ay

la dherer ekaan karto, waa ka digtoonaan karaa wax alla wixii cudur ka imaan karo, metelan dadka ayaa iska qaada, dabeysha ayaa keenta, cunnada ayey ka imaan kartaa, marka wuu ka digtoonaan karaa mar hadduu macariifo fiican u leeyahay. Micnaha waxaa dhici karta reerka qofka maamulayaa oo u ah hooyadu uu ku cilmi leeyahay asuu qof wax garad ahna yahay, wax tarna yahay in aan reerku bukoon baa dhici karta aad beyna u dhici kartaa oo boqolkiiba sagaashan iyo sagaal «99%». Waa dhici kartaa.

Haddii aynu aadno xaggii ilmihii, waxa wax ugu fiican waxa weeyaan ilmaha in ay xannaaneeyaan, ilmahana waxa ugu horreeyaa waxa weeye caafimaadkooda. Marka ay u jiitaan oo ay markastaba aykhatar ku jiraanna waxa weeye marka ay u baahan yihiin hooyada iyo guriga, waxa ugu horreeyaana waa caafimaadka, waxa kalena waa nafaqeynta, waxa ugu horreeya ilaalintoodii, waxa ugu horreeya tababbarkoodii, yacni ilmihii gurigii wax aad kaga hanuuniso ayuu hadhowto ku soo baxahayaa.

Kacaankaanu lix jir buu ku sii socdaa, lix jirkaasna waxaannu ku jirney baarid la yiraahdo : «dadka sidee lagu gartaa», innagu carruurta ayaan ka naqaan qofka Kacaan diidka ah iyo qofka Kacaanka ah, xaqiiqdii, in aad ogtihiin iyo in kale ma aqaan aniguye, markii ilmuhu ay afxumo ku hadlahayaanniin waan garannaa hooyada iyo aabbaha ayaa ba'san, si fududna wey inoogu muuqataa. Markii ilmuhu ay raacaan jowga dadweynahana, waan garannaa reerka ayaa fiican, yacni intaa oo keliya ayaa laga garan karaa, macaadallaahu qofkaanu aayaha dambe ilmahaanu waxa ay noqon doonaan, waxa abuuraa waxa weeye guriga oo ka koobma hooyada iyo aabbaha iyo walaalaha ka waaweyn. Abuurkaas marka qiimihiisii aadamiga ahaa ayaa abuurmahaya oo dhismahaya, waxa dhimeysa habkii uu ula noolaan lahaa bulshada iyo wixii uu citiqaadi lahaa oo dhan.

Wixii dhisi karaana waxa weeye xannaano hagaagsan oo gurigii uu ka helayo ruuxa carruurta ahi, hadde marka waa wax aadami ah danna u ah bulshada ka dambeysa oo dhismeysa. Bulshadii inaga dambeysey sideebaan ku dhiseynaa haddii fikraddeenna aynan ku jirin waa in dadkaanu ay ka mid noqdaan bulshada socota, waana in ay ka galaanniin meel fiican oo waxtar ay ku yihiin.



Haddaan u soo dego heerka macallimiinta marka, tii hore waxay ahayd hooyada intii laga rabey, laakiin kan macallinku waa ka ballaaranyahay. Maxaad hooyadii ku abuurtay oo aan ahayn farsamadii in aad bartay? Ma socon kartaa bulsho meel isugu timid oo aan wax isku abuureyni? Ma jirto mana suuro gasho. Waxa ugu weyn oo aasaaskii ahina waxa weeye laba xubnood oo ka waaweyn kuwaas, micnuhuna waxa weeye maaha farsamada keliya in aad bartee, waxa weeye jaahilnimada in aad ka bixisaa oo aad tacliin sare gaarsiisaa. Midda ugu weynina waa taa oo markii aad tacliinta barato ayuu wax garan karahayaa, markaasaadna ka furtay albaabkii jahaalada una furtay albaabkii garadka iyo aqoonta. Markaasna qofku wuu ku soconhayaa yacni markii tacliintiisa aad sare u soo qaadday waxa aad siisay sababtii uu isagu ku kororsan lahaa aqoontiisa.

Marka waa in aad adigu ku xisaabtantaa in aad sameysay rukun aad u qiimo dheer. Tan kalena waa maxay? Waxa weeye qofka maxaa hoggaamiya oo wada, Waxa hoggaaminhayaa waxa weeye fikradda iyo sida uu wax u garto, haddii kale qofku wuxuu noqon karahayaa maalin la nool. Meeshatan fikrad siyaasiya ayaa jirta, fikrad dhaqaale ah, wixii waa fikrad, fikraddii qofkii hadduusan garanna baranmaayo tegnikadiina baranmaayo amaba farsamadîi, maxaa wacay ma garan karo faa'iidooyinka uu ka heli karo, qiimaha ay leedahayna ma garan karo. Waxa weeye fikraddiisa siyaasiga ah, garadka ah, aadamiga ah iyo waddaninnimadaba ahi in ay ku beeranto weeyaan, si qofkii waxtar uus u noqdo, reerkiisa waxtar ugu noqdo, ilmihiisa waxtar ugu noqdo, bulshadiisana uu waxtar ugu noqdo. Asaaska ugu weyn waxa weeye garaadkiisa marka hore in aad la dirirto, sidii aad u waaajin lahayd, maxaa wacay qofka waxa hoggaamiya oo uu ku socdaa oo ah nuurka uu daba socdaa waxa weeye fikraddiisa siyaasiga ah, hadduusan fikrad siyaasiya lahayn wa-

xa weeye hawtul hamag iska soo jeeda, waxayna la mid tahay Kacaanka ka hor markii aynu joogney oo aan fikrad siyaasi ahi ayan jirin oo loo qabey dhowrkaas qof oo la soo doortay in ay fikradda siyaasiga ah wadaan, mana suuro gasho.

Waxa weeye bulshada jamac ahaanteeda in ay ka qeyb gasho markii ay ugu yaraato in ay garato fikradaha siyaasiga ee adduunka amaba nidaamka siyaasiga oo adduunka looga dhaqmo, waa in qof waluba kala gartaa mid waluba waxa ay tahay, markaan waa in uu awood u helaa in uu kala xusho oo midka dalkiisa iyo dadkiisa u dan ahna uu gartaa. Adduunku wuxuu ku jiraa isbeddel iyo hore u socod ee innagu meeshii miyaan taagnaaneynaa, soow innaguna hore u socodka in aan galno maaha? Hadde dhabbehee u marnaa si aan ugu toosno siyaasadda hore u socodka ah?

Waxa ugu weynu waxa weeye, qofka aad macallinka u tahay in aad hanuunnin taagan ah aad ku haysaa. Hanuunintaasuna waa in ay ku xirnaataa fikraddiisa siyaasiga ah, fikradda siyaasiga ahna micneheedu maaha meel iska taagan ee waa in uu awood u helaa in uu barto nidaamyada badan ee kala geddisan ee wax lugu maamulo, waana in ay shakhsi ahaan niyaddiisa taabataa: «nidaamadaas kee baa aadaminnimada u dhow», «kee baase aadaminnimada ka fog»? Keebaa, adigu aad niyaddaada jeclaan lahayd, maxaad jeclaan lahayd? Waxaad jeclaan lahayd in aad nabad ku joogto, waxaad jeclaan lahayd caafimaadkaagu in uu hagaagsanyahay, waxaa jeclaan lahayd dhaqaalahaagu in uu hagaagsanyahay, waxaad jeclaan lahayd nabad gelyo waarta in aad ku joogto, waxaad jeclaan lahayd caddaalad xumo ciduna in ayan kugu sameynin, waxaad jeclaan lahayd sinnaanu in ay jirto, waxaad jeclaan lahayd in aad ogtahay aadna gaarto heer xornimadaada iyo xuquuqdaada; aqalkaaga aad ku heli kareyso. Waana in heerkaa la gaaraa.

Mar-da'eebaa marka u dhowaan kara, markaad kala barato nidaamada siyaasiga ah amaba mabaadii'da adduunku uu ku dhaqmo? Adduunku iskama socdo oo hawtul hamag maaha oo adduunka waxa jirta mabaadii'i ninna uusan beddeli



karin oo mid la yiraahdo hantigoosad midna la yiraahdo hantiwadaag. Kuwa kale oo jiri karaa waa maxay? Waa kuwii ka horreeyey oo hantiwadaaggu wuxuu ka dhashay hantigoosad, hadduu hantigoosadku fiicanyahayna hantiwadaag ma dhasheen, micnuhuna waxa weeye hantigoosadku ma uu fiicneyn. Marka waxay noqotay in hantiwadaag ka guda dhashaa

Hantigoosadka maxaa ka horreeyey oo isaga hortiis jirey? Waxaa jiray boqortooyo, haddey fiicantahayna maxay u baaba'day? Yacni micneheedu waxay ahayd in ayan fiicneyn oo aan caddaaladu jirin. Waana baaba'day weyna luntay, waxaana ka dambeeyey hantigoosad. Marka boqortooyadana maxaa ka sii horreeyey? Kuwo kale ayaa ka sii horreeyey oo kuwo yar yar ah oo aan qiimo lahayn baa ka sii horreeyey. Yacni mar kastaba taddawurka aadamigu sidaas buu u socdey, mar walbana qofku wuxuu u dagaallamahayey caddaalad iyo sinnaan, wuxuu u dagaallamahayey dhaqaalihiisa oo kora, wuxuu u dagaallamahayey caafimaadkiisa oo hagaaga, wuxuu u dagaallamahayey aqoontiisa oo uu siyaasado, wuxuu u dagaallamahayey had walbaba inuu gaaro aadaminnimadiisa in aan ninna ku jowr falin oo uu helo waxa uu xaq u leeyahay aanna la dulminnin, qofku markuu hubo taasu in ayan jirin taddawur dambe iyo dagaal dambe oo uu sameynhayaa ma jiro, runtii maxaa wacay gaaryey wixii uu doonaayeyba, yacni himilada aadamiga ayaa sidaas ah, marka intaas oo dhami waa is wada beddeleen.

Waxaa is beddelaya marka waxa ugu dambeeya hantiwadaagga, midbana mid buu caloosheeda ka dhalanaayey. sababtuna waxay ahayd caddaalad doon, maxaa waxay aasaaskiis ayaa wuxuu ku dhisanyahay la dagaallan caddaalad xumo. Mar hadduu sidaa ku dhisanyahayna micnuhu waxa weeye caddaalad inuu u socdo. Waa hagaag. Laakiin innagu waxaan idin leennahay oo keliya oo aan sheegeynaa waxa weeye; haddaad macallimiin tihiin, si wax tarkiinnu uu mid qiimo leh uu u noqdo marka hore adinku kala bartan nidaamda adduunka lagaga dhaqmo. Markii aad kala barato oo aad kaa hantigoosadka wax ka akhrisato - amaba waa middii aad

ku soo jirtey - ee ka hantiwadaaggana markii aad wax ka akhriso oo aad macruufo u yeelato jaahilna aadan ka ahaannin oo ninna uusan kaaga sheekeyn, markaas baad waxaad heli kartaa awood aad labadaa isku reed dhigto oo kala doorato, isna tiraahdid: «keebaa adiga nafsaddaada u wanaagsan». Dersiga caadiga ah oo aynu haatan fasireyney, qiimihiisu in aad wax bartaan keliya maaha. Tan ugu horreysaana waxa weeye qofka shakhsiyaddiisa in aad dheehdo oo aad meeshii habaaska lahayd oo uu fadhiyey ka soo qaaddo ee aad keento meel sare. Sida aad ku keeni kartaana waxa weeye in aad fikrad siyaasi ah gasho.

Metelan innagu dalkeenna iyo dadkeennu waa firirsanaayeen, waana ba'sanaayeen, waana leyska hor jeedin jirey oo waa leysku dili jirey oo dhiigga iyo asayda iyo balaayooyin ayaa jiri jirey. Maxaynu ku dagaaleynaa marka? Waxaynu ku dagaaleynaa in aan dadkeenna ururinno, in asaydii harto, in dhiiggii haro, in dilkii haro, in eeddii harto, in xasadkii haro iyo in xaqirkii dhammaado. Oo sidee beynu ku dhalin karnaa, soow wax beddelkeedii geli kara in aynu abuurno maaha? Waxa weeye marka. Waa maxay tan kale oo abuureysaa? Waxa weeye qowmiyaddii iyo waddaninnimadii baad abuureysaa. Waddaninnimaduna waa maxay? Waddaninnimadu waxa weeye in aad dhisto bulsho isku dad ah, isku dal ah, isku dan ah, isku nolol ah, waxaana weeye in ay adiga kaa guurto in aad u kala eexato oo aad kala jecleysato. Adigu in aad yacni noqoto qof dhisan mabda' ahaan oo ka baxay ceeriinkii, shakigii ka baxay, wax kala xigsigii ka baxay, eexdii ka baxay, iimaan la'aantii ka baxay, aakhiro iyo adduunna qof yacni toosan oo hufan in aad noqoto.

Haddaadan adigu xornimadaas aadan helinna, ma dhici karto dad kale in aad xoreyso. Waxa weeye qofka fikraddiisu ay caaliga noqotay, aadamiga saxa ahna noqotay, caaddiilnimada ku sifoowday ee xumaanta iyo samaanta kala garanhaya, diidaayana waxa xumaanta ah, kuna dirirahaya waxa xaqa ah, qiimo kasta ha ugu fadhidee. Waana kaa qofka xorta ahu, waa kaa qofka nasabka ahu, waana kaa qofka gobta



ahu. Waxaana weeye in aad gaarsiiso heerkaas, ah aasaaskii ugu ballaarnaay.

Waa hagaag. Heerkaas macallinku doorkee ka ciyaari karaa marka? Wuxuu ka ciyaari karaa kan ugu weyn uguna sarreeya. Hooyona doorka ay ka ciyaari kartaana waa maxay? Iyadana waa doorka ugu sarreeya uguna qiimo dheer. Adduunku taddawur buu ku jiraa ee doorka macallinku meesha uu joogaa waa xaggee? Waa meeshaas sare, markeynu dhan kastaba ka eegno oo siyaasadda haddeynu ka eegno waa meel sare, tacliinta haddeynu ka eegno waa meel sare, caafimaadka haddeyn ka eegno waa meel sare, macallimiinta ama hooyooyinka amaba guryaha naftoodu waa meel sare, runtii. Maxaa wacay maahan oo keliya farsamada amaba tegnikali waana xaaraan markii aad sidaa oo keliya ku fikirtaa, qaybta ugu weynina waa in ay noqotaa farsamada daaweynta maskaxda iyo qalbiga. Markaas baanad tirsan kartaa tii shalay ku tuhmeysey, tii shalayto kaa xan qarsaneysey iyo tii kaa sii fogaaneysey in ay garato waxa aad u tahay, yacni qiimaha aad u leedahay iyo walaalnimada aad u hayso, waxa ayan hore u aqoonin markii aad bartona si wanaagsan ayey kuu xusuusan doonaan. Mana aha iyada keliya ee waxaad ka dhex dusisay reerkeedii oo dhan, carruurteedii, ninkeedii, walaalaheed iyo dadkii oo dhan. illeen qofkaanu macallim buu noqday, mutacallim buu noqday, waana dirirahayaa, isagii baana noqon haya hanuuniye, maxaa yeelay adigii macallinka u ahaa ayaa hanuuniyennimo u gudbisay, isagiina mid kale ayuu u gudbinahayaa, midkii kasta oo isagu wax baraana mid kale ayuu isaguna wax sii barahayaa.

Marka hanuun buu balllaaranyahay. Haddii waxtar ay tahay macallinnimada xannaanada guriga amaba hore u dhigidda dhaqaalaha gurigaahi intaa ma ku koobna. Qofka nadiifka ah qofka waddaniga ah, qofka aadamiga ah, qofka xildhibaanka ah, qofka ahelu sharafka ah oo qofka aadamiga ah micnihiisa fahmahaya oo keliya in macallinnimo la geeyo weeyaan.

Xuquuqda aan u gudbe. Waa in ay sinnaadaan xuquuqda

qofku iyo waajibkiisuba, maaha inuu xuquuq badan qaato waajibkiisana uusan gudannin sida ayna u noqon karin inuu waajibkiina guto xuquuqdiina laga xaqiro, mana suuro gasho oo kuma dhisna mabda'eenna. Mabda'annagana waxa ku dhisan qofkii wanaag dalkaan u geysta iyo dadkiisa, dalku ha u abaalgudo, qofkii dadka iyo dalkaba waxa u dhimana ha laga aarsado, kii aan waxna u tarin waxna u dhiminna waa wax aan jirine ha iska noolaado, maxaa yeelay waxna ma tarin waxna ma dhimin, bulsho fara badanna waa ku jirahayaa dad nuucaas ahu, marka abaalgudna waa inaanu ka sugin dalka ilaa wax ma tarine. Wax dhib dalku waa in uusan u geysan saa wax uma dhimine. Marka ha noolaado ayaan idin leennahay kaasuna.

Haddaba markii ay saas tahay, xuquuqdii markii aan nimaadno iyadoo aan ku leexin hayo Wasaaradda Wax Barashada iyo Barbaarinta oo xagga wax barashada ay tahay waajibkeeda in ay idinkala socdaan ama ay ka qorsheeyaan iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ay hoos yimaadaan Degmooyinka iyo Goballadu iyagoo ka shirahaya (Wasaaradda Wax Barashada iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha) waxa weeye xuquuqdana in la fariisiyo ayaa waajibku yahay. Mabda' annagu waxa weeye qof waluba intii uu shaqeysto ha la siiyo. Mar haddey tahay qof walba wixii uu shaqeysto ha la siiyona, micnihu waxa weeye qof la xaqdiyahayaa ma ay jirto, qof qof ku dul noolaanhayaana, ma jiro ee qof waluba intii uu shaqeysto ha qaato. Haddana wixii xuquuq ah oo aad leedihiin qolooyinkaasuna wey ka fariisan doonaan, innaguna waan ka war hayn doonnaa. Waana in xuquuqdii ay fushaa oo qofkii wixii uu yaqaan ee uu goosto qaataa.

Waxaan idin xusuusinhayaa, heerka aynu joognaahi waxa weeye qof waluba wixii uu goosto ha qaato, mar haddey saas tahayna isku dul noolaanu ma jiri karto. Haddii lacalla ay idinku jiraanniin dad aan hawshaa hanaan karinu waxa weeye waddanka hawlihiisa in ay meel kale ka qabtaan ee maaha in lugu hollaalo hawshaas. Haddii shaqo loo hayo ha galo hana-



la siiyo, haddii kalena shaqooyinka kale ha u tartamo. Laakiin yacni maslaxadda Ummadda badan uma aynu dili karno maslaxad qof leeyahay, waana xaaraan in aynu u dillaa, haddii kale hore u socod ma jiro, geesinnimo ma jirto, Lillaahi ma jirto, daacadna uma nihin waddankii iyo Ummaddii. Waa qofka iyo mujtamaca badan in uu mujtamaca badani fadli yeeshaa ee maaha qofku inuu fadli yeesho.

Tacliintu meel kuma istaagto ee waa wax socda. Qof kastaabana waa in uu maalin kastaba kororsadaa, waxa weeye sano walba in ay shir noqoto, shirkaasuna waa in uu ku lug yeeshaa, farsamadii oo dadka macallimiinta ah loo kordhiyaa iyo fikraddoodii siyaasiga ahayd oo la kordhiyo, in la isugu daro labadaas xubnood oo waaweyn, ka gadaalna xubnihii kale oo ka bixi karaa ha ka baxaane. Tan saddexaadna ha noqoto cilmigooda oo sare loo qaado intii laga gaarsiin karo. Iyadana taasu waa in ay noqotaa. Waajibkiina waxa tiriyey adinka amaba waxa tiriyey Wasiirka amaba aniga ayaa tiriyey waajibkaasuna mid ballaaran weeyaan, Ummadda Soomaaliyeedna aad bey ugu oomantahay uguna baahantahay. Adinku tiinnas waa in aad ka baxdaanniin.

Waxaan filayaa, meesha wax tarkiinnu aad uga hagaagi karo in ayan ahayn Iskuullada keliya, haddaad fahmi kartaan; waase haddii aynu dooneyno in aynu si degdeg ah sare ugu soo qaadno aqoonta dadkeenna. Waxa weeye Goleyaalka duruus in aad ka bixisaaniin, waana lagama maarmaan, dhib kastaa ha ku hayo culeys kastaa ha ku hayo, laakiin waa haddaad dooneyso mujtamicii amaba bulsadii adigu aad ka dhalatay in ay mugdiga ka soo baxaan. Mana aha dad yar oo Iskoolka tegi kara ee waxa jira kuwo aan tegeyn, kuwa aan tegeynnina waa in aynu xusuusinnaa sidii ay ku macaansan lahaayeen waa in aan meeshooda ugu tagnaa.

Marka waxa weeye in aad duruus ka bixisaan Goleyaalka Hanuuninta Dadweynaha oo aad habeenkii wax ka bixisaan. Waxaan filayaa in ay leeyihiin meel haweenku. waxaana weeye in aad ku bixisaan intii imaan karta oo aad tabarruc ugu bixiso adigoo dadkaaga ku daryeelahaya. Sababtuna wa-

xa weeye intii hooyo ay wax garataaba, waxa weeye bulshadeennii oo aad u dhismeysa, intii daafacaadda caafimaadka aynu garansiinnaa qofba waxay la mid tahay innagoo kumanyaal qof daafacnay oo kale, intii aynu tabta beekhaamiinta iyo dhaqaalaha waxa aad haysato is gaarsiintooda aad barataaba, waxa weeye guul aynu gaarnay oo Ummadda Soomaaliyeed ay gaartay, inta aynu u sheegnay habka wanaagsan oo ilmaha khatarka looga celiyo ama loo xannaaneeyo aynu barnaaba waxa weeye guul weyn oo aynu gaarnay.

Waxa aynu daaweynaynaa amaba aynu taageereynaa waxa weeye boqollaal kun oo carruur ah, marka fikraddeennu taa in ay u jeeddo weeyaan. Shaqadaas yaa qaban kara? Waxa qaban kara qofka u guntan amaba garansan bulshada dhalaneysa, waxa weeye in ay fikraddeeda ay ku dheehantaa bulshada Soomaaliyeed ay maanta geeddi tahay, qofkii ka haraan higsad uusan ku soo gaareynin. Marka geeddi weeye waa la socon hayaa, xaggeese geeddi u tahay? Waxay u geeddii tahay, mid aan sidii aan u timaamahayey ay ku degto xero ay yaallaan caddaalad iyo sinnaan dhaqaalo nabadgelyo, aqoon caafimaad iyo ladnaanta aadamigu uu u halgamo inta uu adduunka joogo. Marka waa in aad uga gargaartaa qofna innuusan ka harin qofka kale, maxaa wacay wax qiimo aan lahayn hadduu ku wareega caddeeyo, waxaad garaneysaa in uu ka harayo geeddigii, hadduu ka harona higsad kuma gaari karahayo oo weynaagii joogney qof walba itnii uu goostay ha qaato.

Qof qof badan oo wax badan goosan kara ayaa jira haddii la soo hagaajiyo quluubtiisa iyo fikraddiisa oo dulliga isaga ku jira iyo liciifnimada garad varida ah iyo hooseynta haddii laga saaro noqon kara qof qiimo leh, dadkiisana barbar ka raaci kara waxna tari kara.

Macallimadda fiicanu Degmada ay ka timid baannu ka garan doonnaa Jaalle. Waxaan helnay tabooyin badan oo lagu garto qofka, waxaan ka garan doonnaa hooyooyinku sida ay isu raacsanyihiin, waxaan ka garan doonnaa farsamada qodobkeeda fikradda is raacsan baa dhali doonta amaba dhali kar-



ta, maxaa wacay qofka xiiso ayaa geleysa iyo jeclaan, wixii qofka jecleysiin karaan, qofkee weeyaan? Qofka wax garadka ah weeye qofka wax jeclaysiin kara qofka kale, haddii aadan jecleysiinna waxa weeye in uu garaadkaagu yar yahay amaba daacaddaada ayaa yar.

Waxa marka loo baahan yahay, doorka aad ka ciyaareysaan waa ballaaran yahay, waqtigii hawtul hamaggana waan moodnay oo waqtigii xisaabta ayeynu joognaa oo sanadu markii ay dhammaato waa la xisaabtama hayaa. Dad badan baana sanadii walbaba duula, in aad weli u fiirsateen iyo in kale ma aqaan aniguye, mase qabo in aad u fiirsateen. Laakiin sanadii walbaba qaar waa in ay duulaan, qaar kalena waa in ay soo koraan, qaar meeshii ay joogeen waa in ay ka sii koraan oo meel sare ka sii maraan, qaarna dhulka in ay aadaan weeye Jaallayaal. Micnuhuna waxa weeye, yacni xisaab marka la sameynhayo waxa lagu xisaabtamahayaa waxa weeye; maxaad u tartay bulshada? Wixii aad u tartayna qaado weeyaan. Haddii aad wax badan u tartay waxa weeyan micnuhu kor sii aad, yacni garaadkaaga iyo kartidaadu wey ka weyn yihiin meesha aad joogtee. Haddii aad hoos u degtona; «jaalle ma mudnide hoos u deg weeyaan», waana inuu hoos u degaa. Hadduu intiisa la dhererer egyahayna meeshiisa ha ku walacwalacleeyo oo ha iska joogo, maxaa yeelay waajibkii oo keliya ayuu gutey.

Haddii uu ku muuqday inuu wax baabba'sheyna waa inuu baabba'aa isaguna, mana leysu turahayo oo waad ogtihiin in aan leysu tureynin. Marka xisaab ayaa jirta, qof walbana waa lala xisaabtamahayaa, waxana la weydiinayaa waajibkii la saaray muxuu ka dhaliyey? Anigu ka yeelimahayo in uu i yiraahdo intaas ayaa gudubtay carruurtii. Waa inuu keenaa: «qofkakan macallinkaahi muxuu keenay xisaab ah», yacni waa in ay jiraan buug uu ku dhigan yahay macallin kasta iyo maamule kasta iyo kormeere kasta, wixii la sameeyona waa in la soo sheegaa oo waa in buuggaas wax kastaba ay ku cad yihiin, si sannad kastaba loogu xisaabtamo. Qof wax ma tare xun ah iyo qof wax tar ah maxaan isugu dul xireynaa amaba isugu dul hayneynaa, wax taruhu inuu

hore u socdo weeyaan; wax ma taruhuna in uu gadaal u haro weeyaan. Waa taa yacni meesha aynu u soconnaa.

Bacdamaa innagu markii aynu fikireyno, aynu ku fikireyno khariidadda amaba maabka Ummadda Soomaaliyeed iyo Ummaddiisii oo ku dhex jirta kana dhex madmadoow oo madaxyadoodu ay isu muuqdaan iyo qofka geesta ka muuqda oo wax u taray oo qiimaha weyn u geystey oo ay tahay in ay u abaal gudaan kuwaas maabka dhexdiisa ka muuqmuuqdaa, iyo midkii wax u dhimay oo markaas durbadiiba ay maskaxdaada ay ku soo dhaceyso, ma waxaad daryeeshaa kaa keliya mise milyankaas kharidaddaas dhexdeeda ka muuqda miyaad daryeeshaa? Runtuna sidaas bey u kala go'an tahay, qaladna ma jiri karo markaas. Waxa inoo muuqda khariiddadii iyo Ummaddii badneyd iyo qofkii. Qofkiina qiima inooma laha innaga markii aynu sidaas u fikireyno, haddii uu xumeeyey. Haddii uu wanaajiyeyna waxa weeye qof intaas oo dad ah wax u qabtay. Marka qiimihiisu imisaa buu la ekaanayaa, abaal gudkiisuse imisaa buu la ekaanhayaa, ammaantiisuna imisaa bey la ekaan kareysaa. Wax Ballaaran bey noqoneysaa, hadduu wax u dhimona intaas ruux eed u geystay weeyaan.

Intaas eeddoodu imisaa bey la ekaaneysaa? Yacni waxaan ku soo gebagebeynhayaa; Jaallayaal hawl wanaagsan, waxaanna idiin rajeynhayaa kuwii liibaanay adinku in aad noqotaan, waxaan rajeynhayaa kuwii u gartay in ay u nool yihiin una joogaan bulshadooda ee iyagu keligood aan isu nooleyn aad noqotaan. Waana falsafad dheer, isu noolaaw adigu iyo bulshadaada u nooloow, waana laba xaajo oo aad u kala fog aadna u kala qoddo dheer.

Midda isu noolaadka ahina waxa weeye, adigu mushaarka ka fikir, carruurtaadana iska korso, noloshaaduna adiga iyo wixii kugu wargeesan ha noqoto. Midda kalena waxa weeye habeenkiina aad ku seexato, maalintiina aad ku seexato bulshada in aad wax u tarto. Oo tiraahdid : «anigu bulshada ayaan u noolahay iyada ayaanna wax u tarahayaa. Waxaan u joogaa bulshada, yacni Ummadda Soomaaliyeed baan u joogaa iyadaanna u noolahay.



Tan kale waxaan rajeynhayaa in aad noqotaan kuwii bulshada u nool, bulshada u jooga, bulshada u shaqeynhaya, garanhayana qiimaha ay leedahay Ummaddaas faraha badan leh oo aad ka dhalateen aad iyo aadna idiinku baahan idiinkuna ooman. Waajib beyna idinku tahay, haddii si kastaba ha idinku noqotee adinka fikraddiinnii ama waajibkii idiinka imanhayey hawshiina uu xil gaara idin saaray, kuwii xilkaas gutay in aad noqotaan, baan idiin rajeynhayaa.

Isla markiina, shaki kuma jiro sidii aan u sheegahayey in aad adinkuna ka faa'iideysan doontaan. Haddii aad kolleyba bulshadiinna aad ku dhexnooshihiin aad u faa'iideysaan kolleyba adinkuna wax uun baad ka faa'iideysaneysaan.

Aan ku soo ururiyo ; Soomaaliya ha noolaato, dibusocodku ha dhinto, isticmaarku ha dhinto, kan taageeraana ha dhinto, qabiyaaladdu ha dhimato, goballeysigu ha dhinto, eexdu ha dhimato, hudhudku ha dhinto, beenloowgu ha dhinto, afmiinshaarku ha baxo, Soomaaliya ha jirto oo ha joogto. Waad mahadsantihiin.

# Waa inay Soomaaliya fikradda ka xorowdaa

KHUDBAD JAALLE SIYAAD UU U JEEDIYEY HOBOLLADA WAABERI 1.2.1975.

Sanooyinkii horeeto waxaa dhici jirtey markii go'aan uu dhaco oo uu ka dhaco labada gole, go'aankaasuna uu yahay mid daryeelahaya Ummadda weyn danteeda in aad la boddaan oo markaas adinku aad noqotaan kuwa u tebiya dadka, barbar gabay, barbarka kaleeto hees, barbarka kale ruwaayad, barbarka kaleeto metel kale oo masawir ah, boqol kanuuc in aad u kala geddiyi jirteen. Ayaamihii horeeto oo Kacaanku dhashay waan xusuus nahay waxaan aad isugu dayey dadka fannaaniinta ah, dadka mu'allifiinta ah iyo heesaabaha ah, in aan geesinnimo geliyo oo sida shicbigoodu u haysan jirey si aan ahayn aan ugu muujiyo, iyagana in aan kula ballanno ama aan tusaaleyno oo aan ku geesinnimo gelinno in uu ahaado citiqaadkoodu qiimohoodu intuu la egyahay oo iyaga naftoodu ay isu citiqaadaan ee citiqaadkii liidka ahaa oo iyaga naftoodu ay isu qabeen in uu ka baxo, citiqaad kalena ay iyaga naftoodu isu yeeshaan.

Xaqiiqo ahaan, markii aan dib u sii raaco amaba ay ku muuqato shahaadooyinkii abaalgudka ahaa, ama billadihii Wasaaraddu ay qaadatay, yacni wey ka jawaabeen baan isleeyahay qaayihii aad la dooneysey iyaga naftooduna in ay sare isu qaadaan. Waxaa isticmaarku oran jirey aadna ugu doodi jirey sebeenkiisii hore, Soomaalidu waa sida xunbada oo kaleeto oo ayaan bey kartaa ka gadaalna waa shuuqdaa oo sida

xunbadu u shuuqdo ayey u shuuqaan. Iiga marag baad tihiin anigu in aan diidi jirey oo taas beenin jirey waxaannu ogsoonnahay in waxa wax taraa ay yihiin qofka aadamigaa, waxtarkiisuna wuxuu weligii la egyahay inta fikraddiisu ay la egtahay. Markaas ma aamminsani qolo u dhalatay in ay jirto in ay marna kacdo, marna danto. Laakiin waxa weeye sidii loo tababbaray ama loo soo abaabiyey ayey noqotaa.

Haddaba haddii caado ay saas uga dhigeen, innagu waxaannu leennahay si kale ayaan caado uga dhigeynaa oo wax demaaya iyo degaaya midkoodna ma jiri doono. Waa naqaan meesha aan u soconno, waxa aan dooneynona waa naqaan. Marka haddii ay taa joogto, waxa aan dooneyno jeer aannu helno ma joogsaneyno weeye innaga hadalkeennu oo dhabbihii baannu hayneynaa iyo u jeeddadannadii dheereyd.

Kacaankeennu waa hantiwadaag, waana laga been sheegaa, wax badanna waa leysku dayey in laga been sheego, wax badanbaana leysku dayey in la kufiyo, wax badanbaa leysku dayey in ciidan loo soo ijaarto, waxa laga soo galay diin, waxa laga soo galay qabiil, waxa laga soo galay Gobol, waxa xataa laga soo galay luuqo oo tacliintii baa laga soo galay in dadka Soomaalida ah loo kooxakooxeeyo : «iskoolkeed ka soo baxday». Haddii ay intaa ahayd maxaynu soo marnay? Innaga Golaha sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayeyaashuba, taladannadu waxay ahayd maalin walba go'aankii kastoo la qaato, dembi xaaraan ah ee Ummadda Soomaaliyeed danteeda caamka ah hortaagan loona dhisay iney hortaagnaato ay dumiyaan derbigaa. Waxay ahayd maalin walba iney soo saaraan qaraar ka hor imaanaaya isticmaarka, dabadhilifka iyo biiri qaataha dhiigyacabka dantiisaa ee taageeraaya danleyda oo keliya, taageerahaya dadweynaha maslaxaddiisa, taageerahaya aayaha dambe ee Ummadda Soomaaliyeed; waxaynu u gudbi jirney oo afkeenna iyo ficilkeenna iyo siyaasaddeennana Afrika ayaan u gudbin jirney. Xaqiiqo ahaan hadda markaad saas u sii eegto dagaalkeennii dheeraa oo aynu hayney, horeyna aan u guddoonsannay in-



eynu hayno, inuuba aad uga fidahayo Afrikada gudeheeda, waxaan uga jeedaa kuwa ku dhex wareegahaya Xamar dhexdiisa ee Soomaali in ay leexiyaan doonahaya, innagana hawadeennu waxay tahay in aan Afrika oo dhan dabkaan gelinnaa uu geesta kale u dhaafo ilaa uu xornimadooda runtaa gaaro. Musambiik iyo Angoolaba xornimadoodii soow ma gaarsiin baannu leennahay jaallayaal. Soow kuwa haatan xoroobay maaha? Maxaa ka haray?.

Aad baa siyaasaddeenna iyo horusocodkeennu uu uga qoddo dheer yahay midkii ayaamihii horeeto, haddii loo eego xag dhaqan iyo Ummad, haddii loo eego xag Soomaali iyo nolosheeda, haddii loo eego xag mabda'a, haddii loo eego dagaalka xaqa inagu ahaa ee cadawgeenna khaaskaa sidii aynu ula diriri lahayn, haddii loo eego dibusocodka iyo fikraddiisii xumeyd ee isticmaarka ku xirreyd. Aad bey uga sii qodda dheer tahay, shakina kuma jiro, maalin walba maalinta ka dambeysa derbiga yar oo u haray waannu dumineynaa ama ha jeclaadeen ama ha nebcaadeene. Waxaan u dumineynaa, iyagoo mid ku buuqaaya kan kaleetona waannu ka dabakeeneynaa, wayna inoo fududdahay maalin walba, rajciyaduse ma garato iyo iimaan laawaha iyaga ku ag wareegaba. Iyagoo hadlahaya maalin walba go'aan baan keennaa hadalkoodii sandulle ku beddela oo sheeko kale ku keena.

Waxaan uga socdaa oo aan idin xusuusinhayaa, tirsada intii qaraar ahayd oo ka soo baxday Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayeyaasha. Tirsada intaas oo go'aan ahayd caddadkooda bal horta u fiirsada oo tirsada, mar labaadkana tirsada yey daneynayeen mar kastaba oo maslaxad u ahaayeen yey duminhayeen oo halleynhayeen, waxaan idiin leeyahay xisaabtama oo ku xisaabtama qaraarka la qaatay yuu u ahaa maslaxad, yuuse dantiisa ka horjeeday run ahaan.

Mar walba saan innagu u arkeyno aannuna hubno in ay runtii saas tahay, mar walba ka horjeeday isticmaarka iyo cawaankiisa dhiig miiratada ah, wuxuu ka horjeeday afmiinshaarkoodii ay dirsan jireen oo ay kumiyaal siin jireen. Yuu daneynhayaa, wuxuu daneynhayaa Ummadda Soomaaliyeed

guud ahaanteed khaas ahaanna danleyda, shaqaaluhuu daneynhayaa, dadka la xasdi jirey buu daneynhayaa, wuxuu daneynahayaa aayaha dambeeto ee Ummadda Soomaaliyeed guud ahaanteed, wuxuu daneynhayaa midka addoonka ah maanta iyo midka xortaa ayuu daneynhayaa, wuxuu daneynhayaa Afrika oo dhan, wuxuu daneynhayaa inta weliba hurudda oo maskaxdoodu jiifto oo lagu dul adeeganhayo. Innaga waajibkeennu wuxuu ahaa ineynu teennana aynu qaadno oo u qaadno una hanannno innaga oo xaqii marinsiineyna meesha meel ugu qaraar xataa haddii loo baahdo. Ta kale oo adduunweynaha aynu kala xiriirnona ama Afrika aynu kala xiriirnona, innagoo maalin walba u baaqeyna meesha aynu u jeedno. Xaggee u jeednaa? Maxaynu rabnaa oo dadkeenna la rabnaa, dalkeenna maxaynu la rabnaa?. Yacni xaqiiqadeennu waa maxay, waxaynu rabnaa Soomaaliya gudeheeda in aynu ka abuurno bulsho caafimaad qabta, waana iney ahaataa Soomaaliya meel ay joogtaba fikraddeeda iyo xooggeeda iyo xooleheedaba waa in ay midoobaan iyo siyaasaddeedaba; waa in ay Soomaaliya midoowdaa. Marka aan saa leeyahay, ma ku socdo keli ahaan, kuwa gunta ahi in ay xoroobaan, waa in ay xoroobaan kuwaayu. Kuwa kalena waa inn ay maskaxda ka xoroobaan, maana in ay ku raftaan meel hoose weligool, waa in ay u xoroobaan iney u gudbaan Ummadda garaneysa qiimaha lagu helo xornimada runtaa. Xornimadaasu maxay noqon kartaa? Fikradda waa in ay ka xoroobaan, fikraddooda xorowdayna waa in ay siisaa quwad muruqooda, waa in ay siisaa qiimo aragtidooda siyaasigaa, labadaasuna waa in dhashaa waxa qofku uu doonahayo ee uus u baahan yahay, muxuu doonahayaa? Wuxuu doonayaa cunno ku filan, wuxuu doonayaa caafimaad ku filan, wuxuu doonayaa aqoon ku filan iyo aadaminnimadiisa. Qofku wuxuu u hanqal taagoo idilu, waxa weeye intaa. Wuxuu doonayaa xornimo ku filan oo uu ku qabo kalsooni uusan ku nooleyn hayaanad iyo hujuum iyo xumeyn iyo gujo iyo dhabar ka wareen midna uusan ku jirin ee uu aqalkiisa ku tago isagoo qaba niyadsami iyo xornima buuxda niyaddiisa ka qaba. Sidee lugu helaa intaa marka? Ma waxa



lugu helahayaa qabiil qabiil, iyo qeyb, ma waxa lugu helayaa dul ka wareen walaalkaa aad dusha ka wareento miyaa lugu helahayaa, ma waxa lugu helahayaa hilibkiisa ood cunto oo xamato, ma waxa lugu helahayaa xasad aad xasaddo, ma waxa lugu helahayaa qofkii oo aad ogtahay inuu qiimo leeyahay adigu aad tiraahid mayee waa billaashkiisa oo anaa ka fiican. Maaha saas sida lugu helahayaa. Waxa lugu helahayaa waxa weeye maskaxdaadu in ay u bislaato siyaasadahaan iyo iimaan ahaan in qofkaasu waxa uu leeyahay aad u oggolaato, haddaad taageeri kartona inaad siiso inta ka dhimanna adigu aad gaarsiiso, middaasu markii ay maskaxdaada ku ballaarato, markaas baad waxa aad dooneyso dhabbohoodii haysaa waana aad gaareysaa oo shaki kuma jiro. Laakiin intaad taas ka leexleexaneyso ama aad ka iimaan xuntahay, waxba ma gaareysid; waad dooneysaa adigu in aad heshid waxyaabaha aad dooneysid in aad heshid, laakiin waxba helimeysid, taariikhdaa saas sheegeysa, cilmigaa saas sheegahaya, aqoonta dheerbaa saas sheegeysa, Ummadaha hore u kacay ayaa dhabbahaas soo maray, markey ka tanaasuleen keliya ayaa wax u qabsoomeen, yacni fikradahaas.

Waxaynu tilmaansannay ineynu helno intaas oo qof kastoo Soomaali ahu helo intaa. Habka aynu ku heleynaana inuu noqdo dagaal dheer oo aynu ku qaadno maskaxdeenna. Jeereynu maskaxdeenna daaweynona ma dhici karto. Ma ay dhici karto. Intaad adinku Ummadda Soomaaliyeed afhayeen u tihiin adinkuna ineydinnaan marka hore biskoonnin. Ma ay dhici karto inaad is kooxa kooxeysaan oo Soomaali sidaas kuma xoreyn kartaan. Bal horta idinku iska bilaaba, markaasna waxaad awood u heleysaan in aad gudbisaanniin.

Waxaan taa uga golleeyahay waxa weeye in aynu u fahamno, sidaan u sheegahayey, waxa aynu dooneynaa ma aha wax maalin iyo labo iyo sano lagu dhammeyn karo ee, dhabba dheer baa loo qaadahayaa, muddo dheer baa loo sii oomahayaa oo loo sii hiranhayaa, maxaa wacay waxa aad dooneyso ayaa weyn, dhabbaha aad u qaadeysaana markaa waa inuu dheeryahay, dhibaatada kaa hor imaaneysaana

waa in ay badantahay oo ballaarantahay, wax weyn oo ciyaar lugu helaana ma jiraanniin ama fudeyd lugu helaa. Marka waxad mooddaa haddii aynu eegno dadkeenna in ay la tahay maalin keliya ama habeen gudihiis in lugu gaarahayo. Ma suuro gasho Jaalle, taariikhdu saas ma rabto, waxa wax sameeyaa, saan horeba u iri; waa qofka aadamigaa. Qofka aadamigaahina siduu ku sameeyaa waxa weeye caamiyad iney u badato in ay saas u fakarto, markey saas u fakarto kaddibbaa waxa ay doonayaan ay sameysan karaan. Hadda imisaabaa madaxooda lugu beddelahayaa? Kii aynu iskoolka u furnay oo bilaasha ku siinnay wuxuu yiri: «tacliinu ma jirto», soow tii carruurtaadu suuqa dhoobnaan jirtey maaha oo meelna aan jiri jirin, asagiibaa tacliinu ma jirto leh. Waxyaalaha yaabka kuu keenayaa waxa weeye, bal haatan ninkaan dhiigmiiratada ah garannay, kan dhiigmiiratada geesta ka fadhiyi jirey oo wixii ka dhaca ka qaadan jireyna garannay afmiinshaarkiisa, kii suuqa yiilley oo shaqaalaha ahaa oo waxaad arkeysaan leh: «Wallaahi meeshii kheyr ma jiro oo innaga wax nooma muuqdaan», war xaggeebaad u xuslineysaa? Ma hoggiibaad ku socotaa? Waa kii la rabey inuu kifaax iyo dagaal ku jiro oo dhaho haddaanba neecaaw xora neefsaday waa ii dan, haddaanba citibaar iyo sharaf iyo dad ku dhex jirba haddaan yeeshay, waa ii dan. Geeddiga la sheegahayoo oo loo socdaa waaba ii dan in la gaaraa. Waa kii dagaalkiisa dheer isagu inuu galo la rabey. Xaqiiqo ahaan mar marbaad la kulmeysaa nuuc caynkaas ah oo dadkii aad u liitey weliba oo haddana ay rajciyaddii ay ku shaqeysaneyso. Markaasaa su'aaluhu kaa badanhayaan oo leedahay war ninku ama gabadhu xaggee la'dahay.

Haddaba aan u soo laabto. Waaberi wuxuu taray aad bey u badan yihiin waana been wixii ka been sheegaa oo wax ma ay tarin yiraahda. Been buu sheegayaa, mu'allifiintiisu wax badan bey tareen waana kuwa mabaadi'da fuliyey fidiyeyna, waa kuwa siyaasadda runtaa fidiyey, waa kuwa xaaraanta iyo xalaasha kala tilmaameen.



Waxaan rabaa in aan idiin sheego siyaasadda waddanku meesha ay maanta mareyso iyo meesha ay u socoto anigoo uga golleh in aan idin siiyo raashinkaad ku shaqeyn lahaydeen.

Kacaanku shantii sano ee horeeto wuxuu ku soo dhismahayey in uu dadkaan Soomaalida ah fahmo habkii ay dhisanaayeen, habkii ay u daqmi jireen, xeerkoodii iyo xamaaskoodii, intii dhibaato ahayd oo sheydaanka isticmaarka iyo dhiigmiiratadiisu ay u geysteen, markaasna ayan xaq ahayn in lagu boodo qofkii kasta oo qalloocda, laakiin in la taakuleeyo oo la waaniyo, in la hanuuniyo iyo in leysku duwo. Waxay ahayd in wixii dembi ka gelahaya in laga qabto oo si caddaana looga qabto, waxay ahayd in leysku dayo in la heshiisiyo Ummadda Soomaalidaa oo waxyaalihii ay dhibaatooyinku ka abuurmi jireen la baabba'sho, waxay ahayd woxooda in la aaminsiiyo in ay ku yimaadaan si xaq ah in loogu maamulo ee aan laga tuugeysannin ama aan beero lagaga sameysannin ama aan daaro looga dhisannin ama aan loogu qraaba kiilin, kaan waxba u qabannin iyo kii wax qabtay, yacni tilmaantu halkaas ayey ku socotey. Shan sano markeynu gudubnay, waa maxay Kacaanka siyaasaddiisu? Kacaanka siyaasaddiisu waxa weeye inuu si caddaana u jeexo marinka hantiwadaagga, inuu u qeexo dalka iyo dadkaba inuu hantiwadaageeyo. Hantiwadaageyska micnihiisu waa maxay? Waxa weeye in hantiwadaagnimadaasu ay ku fooradho Ummadda Soomaalidaa ee badan, maslaxaddeeda inaan loogu aabayeelin qofkii ku jowr falahaya ee laga qabto, yacni in aan beenloow, fikraddii ahayd maanta waani, beerrina canaano, saaddabena u dig inaannu deyno.

Wax loo digahayaana ma jiraanniin, maxaa wacay waqti ku filan waa qaatay, haddii intaasu wax tari weydey, inta dambe oo soosocotana wax dambe uu tari doonaa ma jiraanniin. Waxa weeye Jaalle, waa kaa dhabbihii shan sano ayaanna kuu tilmaameyney ee qaad, Ummadda Soomaaliyeed danteeda.

Waxay u dhutineysaa, marka Kacaanku inuu orod dheereeyo oo tillaabo adag oo cad uu ku socdo ee uusan gurguurannin. Gurguurashadiina marka in laga daayo, gurguurasho

dambena ma jirto. Markaas maxay u dhici kartaa? Hadalku saan u leeyahay aad buu u yar yahay, laakiin haddii la fasiro aad buu u ballaaran yahay. Waqtiyaalka foodda Inagu soo haya ayaanad ka arki doontaan ishaaradooda· Waxa weeye in loo dhaqaaqo dhaqaale jaan go'an oo la yaqaan lana yiraahdo dhaqaaluhu waa kaas, bishaasna waa kaas, sanadaasna waa kaas, nin ka dambeyn karaana ma jiro, kii fulin waaya awaamirtaasuna in uu ku gubto, laakiin in ay baxdo oo la yiraahdo : Jaalle hawshii luguu dhiibay waa taas ee ka soo bax, hadduu ka soo bixi waayona waa in la yiraahdo Jaalle suuqaaqa orod oo ku biir, afmiinshaarrada ku biir, dhiigmiiratada ku biir, isticmaarkaaga haddaad doonto ku biir, laakiin maamul Soomaaliyeed haynmeysid in la yiraahdo oo caddaan ah. Saas weeye.

Waxa weeye tacliintiisa in la jaangooyo in la yaqaanno ilaa ubaxa ilaa Jaamacadda iney si isdabayaal ah ay u dhisanto musuq maasuq ku jirin, garab qabad inuusan ku jirin, eexuna ayan ku jirin.

Waxa weeye in tacab, waqtigaan haatan loo jeesto, matalan abaar aad u adagbaa dalkeenna qabatay sanadatan, khasaaro badanna inoo geysatey, laakiin maxaynuu ka faa'iideysannay innagu? Waxaynu ka faa'iideysannay bal awalen ineynu ku kala baranno saaxiibkeen iyo cadawgeen, mar labaadkana waxaan barannay taagteenna inta ay la egtahay, mar saddexaadka tanoo kale wey imaan doontaaye maxaan kaga gaashaamaneynaa. 3 bilood oo isku xiriirta shilin waxa ina siiyey ma ay jirin, innaga taagteenna ayaannu ku fakinnay Ummaddeenna nolosheeda· Maantadatan aan saaka taagannahay 170.000 baa xero ku ijrta oo waddanku uus masruufahayaa oo intaasu ay cunno rabto, oo ay daawo rabto, oo ay jiif rabto, oo ay huwasho rabto, oo ay biyo rabto, oo ay wax kasta rabto, oo dhaqtar rabto, oo ay maamulid rabto. Yacni qiimaha ay ku fariisan karaanniin imisaabuu imaan karaa? Yacni saas ay tahay waxay ina bartay xaqiiqadeennii, yacni innagu qoowmiyad ahaan, Ummad ahaan maxaynu ka faleynaa, dadnimadeennu intee la egtahay, ilaa



heerkee beynu gaari karnaa? Oo aynu daafici karnaa dalkeenna iyo dadkeenna? Waxan oran karaa, kolleyba aniga naf ahaanteyda waxaan leeyahay tacliintaan ka qaadannay iyo khasaaraha innaga gaaray dad iyo duunyoba haddii leys garab dhigo, keebaa aayaha dambe ee Ummadda Soomaaliyeed u dan ah. Dhibaatadii kastaaba waxa weeye macallin ku barahaya noloshaada sidaad u taakuleyn lahayd, waxay ku bareysaa sidaa hadhowto uga tabaabusheysan lahayd, yacni waxay ka mid tahay jitaabo cusub oo aynu gallay aynuna ku caddaynay Ummad ahaanteenna, sida aynu isugu ururisannahay iyo sida aynu u qabsanno.

Waxaan leeyahay marka, saas baa maalin walba wax u imaanhayaan, laakiin maalin walbana loogu baahanyahay ineynu dagaalkeenna ku qaadno.

Haddaba waxaan ku socdey siyaasaddii cusbeyd, siyaasadda cusubina waxay marka u socotaa in aynu toos ahaan hantiwadaagga ugu dhaqaaqno. Hantiwadaaggeennu waxa weeye hantiwadaag cilmi ku dhisan oo aan meel ka leexleexaneynin. yacni maaha mid diin la dirirahaya, mid diintiisii wata weeye. metelan haddeynu muslim nahay, waxyaalaha rukun ahi waxa weeye kitaabka quraanka ah iyo xaddiiskii Nabiga weeyaan, bal xaggee bey kaga taalla meel hantiwadaagga cilmiga ku dhisan lagu diidahayaa baalka ay kaga taalla waa kee Jaalle? Waa kaa innaga hantiwadaaggeennu, habka uu ku soconhayaana waxa weeye in uu siyaasad ahaan, dhaqaale ahaan, bulshho ahaan uu dhabbahaas cad oo macruufka ah uu ku hoggaamiyo Kacaanka hantiwadaagga ah ee Ummadda Soomaaliyeed.

Ayaan dhoweyd waxaannu gaarnay qaraar, go'aan baannu gaarnay oo aannu leennahay Soomaalidu waa in ay xorowdaa, waa in ay midoowdaa, waa in ay sinnaataa, waa in ay tacabtaa oo caddaalad ku dhaqataa waxeeda. Oo hadalku iska hadoof miyuu ahaa? Ma saasbaa maskax gaabku u qaatay? Maya, xubintii kasta oo aynu niraahno waa in aan ka sal gaarno ee aynu sii dhisnaa. Waxaynu soo gaarnay oo qaraarku uu ahaa dadka Soomaalida u dhashay in

ay dhammaantood isku xaq noqdaanniin, mabde'eennaana sidaa ku dhisan. Wuxuu ahaa go'aan siyaasiya. War xaqa ibnu aadamka ha la simo ilaahay ma diidin, ayaannu leennahay ee beentood weeye, iyagaana diidahaya, kuwa ka dan leh ayaa diidaaya, isticmaarkaa diidahaya, sinnaanta inta neceb baa diideysa, beentood weeyaan. Marka wuxuu la mid yahay intii go'aanno ahayd oo siyaasiga ahayd oo aannu qaadaneyney. hase yeeshee: weedna iyo naasa adag maxaa kulmiyey» buu yiri, war dadka xaqiisa ha la simo iyo diintiibaad wax u dhinteen maxaa keenay, intii kaleeto diintaad wax u dhinteen maxaa loo dhihi waayey. yacni shicbiga Soomaaliyeed nama dhihin, culumaduna nama dhihin, kitaabkuna nama dhihin, waana naqannaa midka na yiri, waana aan ogeyn markii aan sharciga u dhigeyney oo aad baannu u niqiin, waxa aannu niqiinnay isticmaar iyo dhiig miiratadiisu iyo dabadhilifka ay dirsadaannin in ay marba soo kici doonaaniin waan ogeyn. 70kii baannu sharciga dejinnay, 75tii ayaa khiyaanadeedii soo baxday yaa noo sheegay, waan ognahay marka. inta weli u dhiman oo ay soo laba kacleyn doonaan weynu ognahay, intii sharcigoodu yahayna wey u yaalliin, ha soo qaadeen baannu leennahay haddey rabaaniin, maxaa yeelay horeybaan ugu tala galnay. waa isticmaar iyo caadadiis weeyaan, horusocod iyo dibusocod caadadooda weeyaan in ay waranka isu haystaan, wax yacni cusubina ma ay jiraaniin, maalinba meel bey kaa soo gelahayaan meesheeda kale waa inaad u diyaar ahaataa, waxaana weeye hujuum iyo daafac. Meelaha marba laga soo dusahayo waa in aad ka digtoonaataa, mar qabiil ha ku soo gabbado, mar mahdi'ii ha ku soo gabbado, mar hantigoosadnimo ha ku soo gabbado, mar qaraabakiil ha ku soo gabbado, marba mid ha lala koco, Kcaanku ma daalin, ma kibrin, ma leexan oo mabda'u aad buu u sii qoto dheeryahay. waana inuu gaaraa meesha uus u jeedo, waana inuu abuuraa bulshada Soomaaliyeed ee xasaasiga ah, sandullena waa in uu ku abuuraa, maalinteey u gaartona Soomaaliya in ay baryootanto way ka bixi doontaa, maxaa wacay waannu ognahay qiimaheeda dad ahaan runta markii la fiiriyo, ma aha garadka



siyaasiga ah, ma aha farsama aqoon iyo tacliin ay sare ugu kaceen, maya; laakiin runtooda waa naqaan, dalkooda waxa ku jirana waa naqaan, adduunku wuu u baahandoonaa haddeyan baaqannin mana qabo in ay baaqan kareyso ujeeddadoodaa dheer ee Kacaanku, mana baqan doonto, mana baaqaneyso ayaan leeyahay.

Markaan sidaa carrabka ku dhejinhayo, waxaan ogahay wax sii qota dheer maan gaabkuse uusan ku xisaabtameyn mana garan karaanniin hulka uus sii xulahayo. Ma soo noqon doonto, taariikh ahaanna ma soo noqon doonto, xaqiiqo ahaanna ma soo noqon doonto, yacni micnuhu waxa weeye, wax ugu garaad roon qofkii yiraahda dabeyshaani waa teydii, qofkii uriya uun baa garan kara, kaa baa noqon doona ninka ka faa'iideysta.

Haddaba afmiinshaaar baan u noqonhayaa. Afmiinshaar waa ayo? Afmiinshaar waxa weeye midka yiraahda : wallaahi baarkaa laga laha, magaaladaa laga sheegahayey. kaa weeye oo meel la qabto malaha oo waa dabeysha oo kale. waxaannu leennahay Jaalle dabeyshu ma hadasho, baararkuna ma hadlaan, magaalalan dadka deggan baa hadlee iyadu ma hadasho. waa magaalo aqal lugu hoydaana ma hadlo, laakiin qoka ku hoos jira ayaa hadla, waayo kuwaasu. waxa weeye inta ku nool Ummadda Soomaaliyeed nolosheeda oo dhiiggeeda iyo dhacaankeeda ku nool, inta ku dhaqata weeyaan. Maaha midka suuqa jooga ee gaajada u baqtiyahaya Jaalle maaha oo kaasu waddani weeyaan. Yuu dilahayaa, yuu wax u dhimahayaa? Wuxuu wax u dhimahayaa isaga dhashiisa, isaga dadkiisa, isaga dalkiisa, mana garto maxaa wacay horeybaa isticmaarkii u la dhaqmi jirey baa iimaanka hore uga qaaday, isticmaarkii isaga wax baray baa iimaanka hore uga qaaday qowmiyadda Ummadda Soomaaliyeed way ka tirtirantahay Jaalle. Ma aannu oraneyno waa dhammaantood, xaasha imisaabaa ku jirta oo u diyaar ah naftooda xataa in ay u baxshaanniin kana caaggan kana soomman xaraanta iyo dulunka dalka iyo dadkiisa waa badanyihiin Jaalle. Haddey moodahayaan in aannaan ogeyn waan ognahay. Laakiin waxaad ii soo celin doontaan,

oo maad ka qabatid? Soomaalidu waxay tiraahdaa: **kaadi badane waa loo gogol badiyaa, shantii sano waan u gogol badineyney**, waana u dhukuseyney, waa baraneyney, waana waanineyney oo bal ha soo noqdo ayaan islahayn.

Waxan idin leeyahay, siyaasaddu hadba go'aankii la gaaro in aad la socotaan oo aad gaarsiisaan dadka Soomlaaiyeed taasu waxay dhali doontaa in fanka ummadda soomliyeed u suu u socdo gaaro heer uu u qalmi karo, xubinta uu kaga jiro dhismaha waddankiisa iyo halgankaas horusocodkaa ayuu gaari doonaa. Waxtarbuu dadka u noqon doonaa, laakiin ma maqnaan doonto qofka iyo waaxdiinna in ay iyagana waxtar u noqon doonto. Markii tillaabo kheyr leh la qaadoba, tillaabadaasu waa saameyneysaa Ummaddoo idil.

Waxaan idinku baraaruijn hayaa, waddaninnimadiinna maanta maalin looga baahi weynyahay ma ay jirto ee in aad ku toostaan baan idinku baraarujin hayaa.

Balse guud ahaan markaan uga hadlo, in aad garataan heerka aynu mareyno maanta oo ah heer loo baahanyahay innagakanu ineynu noqonno dadka horseedka ah, marka ineynu innagu u noqonno dadka metal lugu daydo oo xuquuqdeenna qaar ka tanaasulno. Markeynu ka tanaasuleynona maaha inaan qolo kale in ay qaadato uga tanaasulno, laakiin ineynu ku taakuleyno kuna taageerno kuwa ama suuqa yaalla ama weli aannaan shaqo u helin ama kuwa gaajeysan oo abaaruhu ku dhaceen ama aynu ugu dhisno aqalkii berrito dhasheennu ku noolaan lahayd iyo kii innagu markeynu duqowno aynu ku hoyan lahayn. Marka innagu ineynu xuquuqda la orodno, waxaan filayaa weynaga xaaraan maalinkan maantaa. Sababtuna waxa weeye ma ay suuro gasho ineynu Soomaali abuurno caafimaad qabta, mid ah, xor ah, simanna ee shaqeysata oo isku fillaata ka gadaalna ku dhisan caddaalad iyo sinnaan, Jaalle ineynu abuurno iyo ineynu innagu marka horeeto dheregno ma isku keeneyno, waxa weeye ineynu tanaasulno inagu dadkeenna haatan joogaa oi isu xilsaaray in ay dhaliyaan Kacaan hantiwadaag ah, dhaxalsiiyaana ummadda soomaaliyeed barwaaqo iyo ba-



raare, ma u suuro gashaa qof inuu damco in uu xoolo badan helo oo mushaar badan helo, uma suuro gasho haddii maskaxdiisu ayan weli ku xirneyn hantigoosadkii iyo dabaqooyinkii kala sarreeyay, haddey taas ku xirantahay oo isagu shaqaale badroonigiisa u adeega haddaad tihiin, marka saas in ay dhacdo oo aad ku dacwootiin xaq weeye, laakiin haddaad isu citiqaaddaan, runtuna saas weeye oo waa tihiine, aadna u garataan horseedihii halganka ugu horreeyey barwaaqeynta Ummadda Soomaaliyeed bilaabay, haddaad isu citiqaadday way kugu filantahay, markaas hal cantuugo oo aad harkiina qaadato habeenkiina qaadato. maxaa wacay waxa ku hoggaamiyaa damiirkaaga weeyaan. markii damiirkaaga kalsooniyu ay ku jirto, waxaaga adigu in aad leedahay haddaad boobtona adigu inaad iska dhammeyso, haddaad yarayareysatona ay kuu dhaqaaloobayaan. xaqiiqo ahaan way kugu fillaaneysaa inta yar oo aad haysatana, haddii kale ma ku deeqeyso. Haddaad isu qaadato in aad tahay kan waajibku saaranyahay bulshada aan sheegahayo inuu abuuro waxaagu wey kugu fillaanayaan, laakiin haddaad isu qaadato qolo kale inaad u adeegto ma kugu fillaaneyso.

Markii aan u noqdo xagga tacliinta, fanka iyo muusiggana waxaan ka rabnaa ma noogu fillaan karto saddex iyo afar qof oo la dirayo, mana aan aamminsani waxaan bannaanka u doonannay in aan ka dhergi kareyno, laakiin waxaannu ku dagaallami doonnaa oo aan tacabkeeda annaga iyo Wasaaraddu aan geli doonnaa in macallimiin haddii loo baahdo la cagtannada aan ku gadanno inaannu keenno, qiimo kasta ha noogu kaceene, waana waajib.

Dagaalkeennu xaggee buu u socdaa? Runtii waxa ina hor yaalla dibusocod caalamiya iyo mid waddaniya intaba, yacni tilmaan fikradeed oo ah himilo iyo fikrada ku qiyaasan aadaminnimo, wadaninnimo iyo xornimo. Waxaan idinka sugayaa Kacaanka labaad ee toowraddeenna hantiwadaagga ah waa inaad ka soo dhalaashaan, markii aan ka soo saarnay Wasaarooyinka Golaha Sare ee Kacaanka aynuna abuurnay guddiya iyaga shaqadoodu ay noqoto iney hindi-

saan, iney jaangooyaan, baaraan, si kasto u fatashaan, markaasna jaangooyaan ama qorsheeyaan, danta caamka ah, xagga dhaqaalaha, xagga siyaasadda, xagga bulshada, xagga nabadgelyada.

Waxan rajeynhayaa Kacaankaas rogaal celiska ah bilawdayna sanadii lixaad ee Kacaanka in ay idinka muuqato. Waxan idinka rajeynayaa in rajciyada iyo waxaan la sheegsheegahayaa, micno kuma fadhiyaane, kuwaasu waana dhinteen adinkuna inaa sii khaarijisaan baan idinka rajeynhayaa.

Intaas markaan iri; aan ku xiro: «Soomaaliya ha noolaato, hantiwadaaggu ha jiro oo ha joogo, Ummadda horusocodka ahi hore ha u socoto, isticmaarku ha dhoco, dabadhilifkuna ha dhoco».



# Haddii Kalsooni la helo waxaan suuro geli Karini ma ay Jiraanniin

KHUDBAD JAALLE MAXAMED SIYAAD BARRE UU KA JEEDIYEY DEGMADA KURTUN-WAARREY. 20.7.1975.

Marka ugu horreysa anigoo ku hadlahaya magaca Jaallayaalka aan safarka ku wada jirney aan ku soo booqannay Xaruntiinnatan, kan Golaha Sare ee Kacaanka, kan Xogha yeyaasha iyo dadka Soomaalida ah oo niyadsamida weyn u qabaan walaalohooda dhibaatadu ay gaadhay, waxaan aad iyo aad idiinku mahadinhayaa sida diirran ee Jaallennimada ah, Soomaalinnimada ah, garashada waqtiga aynu mareyno iyo duullaanka aynu ku jirno amaba heeganka aynu u nahay aad inoogu soo dhoweyseen, markii adinkoo aan ina filaneynin xaruntiinna nimid.

Sida habsamida ah oo ilaa maalmihii ugu horreeyeen oo xeryaha ciidda aad gasheen aad u garateen baaqii iyo digniintii, iyo isla markiiba tilmaanntii aad kula diriri lahaydeen cadawgiinna, taas oo aydnaan ku hagrannin dadkii walaalihiin ahaa oo idiinku yimid gargaarka amaba garab qabadka ee adinkuna geestiinna aad ka qabsateen, adinkoo ahaa quwaddii weyneyd oo dhibaatadii tiilley badankeedii baajisay. Aad iyo aad baanna idiinku ammaanahayaa sidaa aad yeesheen.

Waxaan misana aad iyo aad u ammaanayaa shaqaalaha Soomaaliyeed, derejo kasta ha lahaadeene ee ilaa maalintaas abaartu ay dhibaatada weynu ay soo muuqatay oo aan filayo

hadda in laga joogo siddeed bilood (8), heegannimo ugu dhaqaaqeen in ay badbaadiyaan nolosha walaalohood, iyada oo wax ay ku doonahayaannu aynan jirinnin, iyadoo wax dheeraad ah oo lagu siinhayaana aynan jirin, iyadoo xaasaskoodii iyo iyagu ay kala tageen, iyagoo guryohoodii ka dheeraadeen. Kuwaas oo u qeybsanaa Ciidamada qalabka sida, dhaqaatiirta iyo kaaliyeyaalkood, macallimiinta, ardada, guulwadeyaal, qoloda loo yaqaan Bisha Cas, anigoo xaqiiqo ahaan kala qeyb qeybin kareynin, intooduna ay ku maqanaayeen amaba ka maqnaayeen dadkoodii iyo wixii xaq ugu lahaa in ay xannaaneeyaan, iyagoo u hurahayey in ay adinka idin garab qabtaan iyo kuwa kale oo aan maanta halkan fadhiyin, laakiin aan uga tebin hayo miikroofoonkaan gudihiisa hadalka aan idiin jeedinhayo. haddaba iyagana mahaddaas iyo ammaantaas baan u naqahayaa.

Waxaan mahad iyo ammaan labadaba isugu darahayaa, madaxdii xeryaha amaba xeryihii abaarta ama kan soo raridda amaba midka dejinta maamuleysey, maxaa wacay haddii aan madaxdu maamulka hagaajinnin ma ay suuro gasheen in hawl wanaagsanu ay socoto, mana ay suuro gasho in aan cadawgeenna ka adkaanno. Markaas iyagana meel kasta ha jireene amaba halakanba ha joogeene, waxaan u tebin hayaa ammaan ballaaran anoo hubo qof kasta oo Soomaali ahu inuu taa garanhayo, haddana aan hubo isla markiiba in aad adinkuna ammaantaas aan u jeedinhayo aad igu waafaqsan tihiin.

Taa haddaan ka imaado, waxaynu mareynaa dhibaatadii abaarta ka timid adinkuna aad soo marteen; innaguna hawsha waxaan u qeybinnay dhowr xubnood, xubinuna waxay ahayd maalintii abaartu ay dhacday ee ay noqotay waajib in talo laga goosto sidii laga yeeli lahaa ama cadawgaas loo food saari lahaa loogana badbaadin lahaa nolosha Ummadda Soomaaliyeed.

Taasuna waxay ahayd xubintii ugu horreysey.

Xubintii labaadna waxay ahayd markii ay ku dhammaatay taladii in duullaan la galo weerarna lagu qaado cadawgaas ilaa wixii kartida aadamiga ahi inoo oggoleyd in aannu ku duulno aanna niyada ku qabsanno in aan ka adkaan doonno. Waxa aannu lcenahay waxa aynu innagu kari karin waxay ahaayeen metelan in aynu badbaadinno xooleheennii oo idil amaba aynu roob soo daadinno. Laakiin waxa in la badbaadiyo loo baahnaa yaa ugu qiimo badnaa, yaana ugu fiicnaa, yaana ugu qaalisan. Markii aannu is niri ee aannu ku soo dhameynay dadka ayaa ugu qaalisan oo ugu qiimo badan, isagaana ah aas aaskii nolosha iyo jiritaanka Ummadda Soomaaliyeed.

Sidaas darteedna, waxa lagama maarmaan noqotay in naftooda la badbaadiyo, waad xusuusan tihiin baan filahayaa in duullaan adag oo aan loo kala harinn lagu dhaqaaqay. Taasuna waxay ahayd wejigii labaad amaba dhankii labaad.

Dhankii seddaxaadna wuxuu ahaa markii la dejiyey dadkii iyadoo laga soo guray bannaanka iyo meelihii ay ku dhibaateysnaayeen. Taasuna waxay u baahatay marka ciidan badan oo noloshii la xiriirtey. Waxayna ahayd waqti yar oo xasaasi ah oo laba toos dhibaatadu u badneyd in dhibaato nuucaas ahu aynan ku imaannin hadda ka hor Ummadda Soomaaliyeed, marka ruux kasta oo hawl ka galayba ay u ahayd wax ugub ah oo aan hadda ka hor dhici jirin. Markaana shaki uusan ku jirin qar jabnaantu in ay badneyd, laakiin haddana niyad samiyu ay meeshii jirtey, kolleyba guul tii laga gaaro weeyaan. Marka taasuna waxay ahayd wejigii seddaxaad.

Wejigii afraadna wuxuu ahaa markii, dagaal kale lugu qaaday abaartii dadkii ay dhaawacday xeryihii ay ku jireen, haddana in laga soo raro taas oo ahayd weji kale oo cusub oo kii afaraad loogu yeeri karo. Waxayna ahayd geeddi amaba hayaan loo soo koco.

Waxaan jirey markaas oo hubaal ah in adinkana walwal badanu uu idinku jirey ha ahaato inta haatan soo guurtay amabase ha ahaato inta hadda ka dib soo guuri doontee, shakina kuma jiro in Kacaanka welwel badanu uu ku jirey isagoo is leh «sidee bey u hirgeli doontaa?». Waxayna ku soo

dhammaatay haddii sidaasu go'aan noqotay in la dhaqaajiyo markii la dhaqaajiyona in laga guuleysan doono.

Welwelkii haddaan dib ugu noqdo, in kastoo geeddigii uu hagaagay, innaga welwelka nugu jirey muxuu ahaa? Adin ka welwelka idinku jirey wuxuu ahaa: «Xaggee baa leydin geyn doonaa, maxaad la kulmi doontaa? Ma waxa Raadiyo Muqdisho amaba madaxduba ay sheegayaan ayaad la kulmi doontaa mase si kale ayey noqon doontaa, maxaase ka run noqon doona.

Innagana kii nugu jirey wuxuu ahaa, hadii meel ay ku noolaan karaan la geeyo ma yaqaanniin farsamadii meesha looga shaqeysanaayey laakiin imisaa bey la ekaan doontaa niyaddoodu Lillaahida ahu? Imisaa baa hawl karnimadoodu la ekaan doontaa, imisaa baa xil kasnimadoodu la ekaan doontaa, imisaa bey aamini doonaan muruqooda iyo maskaxdooda in ay wax kula soo baxaan? Waxaan aad iyo aad farxaan ugu ahay haatan oo adinku aad mareysaan xubintii shanaad in warbixinta leygu siiyey in aad si habsami ah aad u socotaan oo aad hawshiinni gudogasheen aadna ku gudagasheen si kalsooni ah. Taas oo muujineysa: «qofku wixii uu doono ayaa Ilaahay siiyaa oo niyaddiisa ayaa Ilaahay ka war qabaa», wax aan suuro gelin oo aan la qaban karinuna in ayan jirin cilmi baan ku leennahay.

Haddaba markii ay timaaddo rabiddu amaba waxa aad dooneysaa oo adigu waxa aad la dirireysona aad taqaanno, markaas bey kuu suuro gashaa wixii aad rabtey in aad hesho, waxay kuu suuro gashaa markii aad garato cadawgaaga iyo markii aad garato saaxiibkaaga, markaa aad garato dantaada iyo meesha aad u doonaneyso.

Haddaba bilowga ugu horreeya Degmada halkan ahu waxay ahayd in aad niyad la timaaddaan, isla markiina adinka oo kaalmaysanahaya shaqaalaha Ummadda Soomaaliyeed iyo dhallinyaradeenna aqoonyahanka ah, adinkoo kaalmeysaneysaan madaxdiinna in aad tilmaansataan habkii aad noloshiinna cusub u dhisi lahaydeen, iyadoo iyagu wixii ama farsamo ah amaba aqoon ah ah idinku horkacahaya. Waana aan ku



kalsoonahay Ummadda Soomaalida ah oo aynu ka dhalannay bey caado u tahay markii ay galaan dagaal, haddii ay helaan hoggaan hagaagsan in ay kaga lib keenahayaan. Koowna ma aha, haddana uma horreyso marka aynu xaajo adag amaba dhibaato ballaaran ay inta inagu soo furantay aynu duullaan ku qaadnay, isla markiina aan kaga guuleysannay.

Kacaanku intuu jirey waxaynu soo marnay jarribaado badan ee ruux inoo maleynahayey in aynu ka bixi karno ama nin inoo quurahayey uusan jirin, ayeynu gudannay gudubnayna. Laakiin qof kastoo adinka ahu, bacdamaa waqtigaa uu joogey kuna cilmi leeyahay garanna karahayo. Tanu maxay ka tahay dhibaatooyinkaas inala soo gudboonaadey ee aynu duullaanka ku qaadeyney, aynuna ka guuleysaneyney. Waxa keliya oo ay kaga duwantahay waxa weeye dad dal aynan aqoon yimid, dad noloshii ay u barteen mid ka duwan hadda food saarahaya, dad wixii ay rabaan ku gaari kara had walbaba niyaddoodu inta ay la egtahay, geesinnimadoodu inta ay la egtahay, xil kasnimadoodu inta ay la egtahay, qiimohoodu inta ay la egtahay. Waan hubaa dhiifoonaanteenna, waan hubaa garashada amaba waayo aragnimada aynu soo marnay, tanuna in ay noqon doonto middii si fudud aynu uga gudubno. Shaki kuma jiro in aynu ku kabnaa geesinnimadeenna, niyad samideenna, midnimadeenna iyo dadnimadeennaba. Haddii cagafcagafyadu yaraadaan war ma muruq baan weyney? Ma yaambo ayaannu weyney? Ma waxaannu weynay fikrad iyo xoog ? Sidee u dhici kartaa in aan sugno cagaf cagaf ayaan Warshaddii soo saari lahayd haysannin oo gaajo ugu ag baqtinno dhulkii oo barwaaqo ah iyo biyihii oo daadahaya. Mise taasbaannu oggolaan karaynaa.

Soomaalidu maanta waqtigii ay gaajada ugu ag baqtiyi jirtey kheyraadka dalkeeda miyeeyan ka gudbin? Anigu waxaan qabaa in ay ka guurtay halkaas. Marka waxa aan leeyahay dulduleelka yar yar oo soo bixi doona waxaynu ku buuxineynaa dadnimadeenna, adkeysigeenna, geesinnimadeenna iyo Ummad ahaanteenna. Garashada cadawgeenna aan garaneyno in aan la dirireyno iyo tacabka nolosheenna iyo kheyraadkeenna dhasheenna, iyo ilmaheenna iyo aayeheenna dam-

beba ahna waa in aan si xeel dheer u fahamnaa. Waana in aan sidaa ku fikirnaa.

Waxaan filayaa in ayaamihii aad timaaddeen Kurtun-Waarrey waqti roobeed aad la kulanteen, waxaan haddana filayaa in aad raadkeeda aragteen go'aankiina uu ku dhammaaday in godad waaweyn bannaanka laga qodo ka gadaalna loo jeexo waddo yaal biuhu ay raacaanniin, ilaa biyaha laga dhammeeyo xerada, meesha Degmadu ay deggan tahayna waa god, sidaa darteedna wax aan suuro gelin oo aadamigu uu doonahayaana ma jiraanniin; waase haddii isagu uu isku kalsoonyahay waxa uu qabanaayona uu iyagana ku kalsoonyahay, xaqiiqo ahaan haddii biyuhu ku sii jiri lahaayeen waxaynu gaari lahayn in aan ka dhammeyno guryaha dhexdooda maxaa wacay dagaal biyo, mid cadaw iyo mid gaajoba wey wada siman yihiin oo hadba kii ku dhibahaya waa cadawgaagii. Waana in aad iska qabataa.

Waxaan aamminsanahay, wax badanu in ay idinka maqan yihiin sidii Degmada habsamidaa ahaan lahayd iyo heliddii danaha dadku ay u baahan yihiin. Waxaanna idin leeyahay dhammaantood wey dhammeystirmi doonaan. nidaam baana leydiin sameynhayaa sharci ah ee aan ahayn nidaam ninkii rabaa beddeli karo, laakiin ah mid sharci ah. Kaas oo ku fariisan doona in habka aad u noolaaneysaan iyo habka aad wax u tabcaneysaan iyo habka aad wax u qeybsaneysaan iyo midka uu dhaqankiinnu uu noqon doono, dhammaantood wada tilmaamahaya isagoon meelna ka tegeynin.

Maamulkaasuna wuxuu noqon doonaa mid aad uga duwan kii innaga Soomaalida ahi aynu dhammaanteen u barannay oo ahaa qof waliba geestiisa in uu keligii u socdo. Maamulkeennu wuxuu noqon doonaa mid aynu dhammaanteen isku duubannahay, ka gadaalna koox koox isugu duubannahay, cuntubyo ka sii waaweynna aan isugu duubannahay, ilaa guudka sare uu ka yimaado. Wuxuu noqon doonaa maamul kala goyn doona qof waliba uu ku xiran yahay oo uu markaana xuquuqdiisa ka helahayo, waajibkiisana uu ku gudan hayo.



Anigoo ku kalsoon amaba aan hubo, aad hadda ka horna metel ku bixiseen xeryihii aad joogteen, waxa rejadeyadu tahay in aad nidaamkaas si hagaagsan u fulisaan, nidaamkaas oo ay ku jiri doonaan dadka ka mid noqon doona beeraleydatanu sida ay ku imaan doonaan, dadka beeraleydatan ka mid ahu sida ay u qeybsami doonaan oo metelan ay ka mid noqon doonto dad beerihii ka shaqeeya, dad dadka dhaqaalihiisa iyo cunnadiisa ka shaqeeya, dad gawaarida aad yeelan doontaa ka shaqeeya, dad cagafcagafta ka shaqeeya, dad maadaama xoolo jiri doonaan xoolahaas ka shaqeyn doona, dad digaag ka shaqeeya, dad caafimaadka ka shaqeeya, dad tacliinta ka shaqeeya, micnaha qof kastaaba hawl u khaas ah ayuu yeelan doonaa, qof bilaash u fadhiyi doonaana ma jiri doono.

Markaasna waxaa jiri doona oo loo baahan yahay, hadde weynagii xoogaa xoolo ah iyo jees weynagii lahaan jirney oo inta duurka galno dhihi jirney car yaa ii soo gala. Hadde waa in aan taa illoownaa, oo marka haatana garannaa in aan nahay dad Hawl iyo Hantiwadaag qaatay, micnuhuna waxa weeye hawsha waan wada qabsaneynaa, hantidii aynu tabcannona si xaq ah ayaan u qeybsaneynaa oo kala xadimeyno. Waana in aynu garannaa mabda'a ah : «qof qof kale ku dul noolaadaa ma jiri doono», micneheeduna waxa weeye qofkii kasta oo innaga ahu waa in uu hawl qabtaa, hawsha uu qabtona intii uu goosto oo xuquuq ah waa in aan laga xadin, loona diidin, lagana bursan ee la siiyaa. Waa kaa micnuhu oo waa : «hawl wada qabsasho iyo hantidii la tabco oo la wadaago».

Bacdamaa aynu ogaannay muddadii dheereyd oo aynu hadda soo soconney oo Kacaankeennu jirey, innaguna aynu ku oran jirney maahmaahyadeenna : «wadajir baa lagu wada weyn yahay». Wax badan beynu sheegnaa oo cilmi dheer ah laakiin haddana aynaan ku dhaqmin; marka wadajir baa lagu wada weyn yahay micneheedu waxa weeye : «wadajir baa lagu wax dheef badan yahay» ayeynu maanta mareynaa; wax dheefkuna wuxuu joogaa oo wax soo saarka iyo wax tabcashadu waxay faa'iido badan tahay markii Ummad badanu ay wax wada qabsato. Marka waxaan rajeynhayaa taana in aad u

hoggaansantaan aanna jeclahay. Hadal iyo dhammaantii waxay u soo dhammaan doontaa, hadda waxa idinla jooga Guulwadeyaal Degmooyin ka yimid, waxayna u joogaan keli ahaan in ay idin kaalmeeyaan intii aad ka luxus baxeysaan oo degmooyinkiinna ayaamaha hore aad degeysaan oo luxus bax Soomaalidu u taqaanno.

Waxaana weeye micneheedu Jaallayaal soo dhowaada, walaalihiin idin sugahaya ayaannu nahaye, ayna wax idiin sheegaan. Waxa kale oo idinla jooga hooyooyin, dhallinyaro iyo dad kale oo degmooyinka ka yimaadeen iyo tuulooyinka intaba oo iyaguna in ay garab idin siiyaan oo idinku soo dhoweeyaan dalkii iyagu ay ku noolaayeen idinku yimaadeen amaba ay gargaarka hore idiin fidiyaan. Waxa idinla jooga dad ciidamada qalabka sida ka socda iyo dad kale oo dhallinyaro Jaamacadda ka socota iyo in kaleba leh iyo shaqaaleba. Hadde intaasu ma wada joogi doonaan? Jaallayaal maya. Waxa loo jeedaa waxa weeyaan adinku in aad isku fillaataan, waxa adinku hari karaana waxa weeye waxa adinku aydnaan yeelan karin. Oo maxaa ka mid ah metelan? Waxa ka mid ah nin dhaqtar ah oo ay tahay in ruux dhaqtar ahi uusan idinka soo bixi karin, sidaa daraadeedna waa in uu idiin joogaa.

Laakiin dhaqtarkaas waa in ay noqotaa in uu diyaar gareeyo dadkii ahaan lahaa kaaliyeyaalka taqaatiirta, waana in uu adinka dhexdiinna ka diyaar gareeyaa waana in uu muddo gaaban idinku gaarsiiyo. Waxa kale oo ka mid noqon kara kuwa cagafcagafyada iyo wixii la mid ahi haddey hallaabaan hagaajiya. Maantana ma aad yeelan kartaan, laakiin berri iyo durbadiiba waa in aad yeelataanniin. Micnuhuna waxa weeye Degmadatanu waa in ay iyadu is xukuntaa, waana in ay iyadu madaxdeeda yeelataa, waa in ay iyadu shaqaaleheeda yeelataa. waa in ay iyadu farsamayaqaankeeda yeelataa, waana in ay madaxdeeda yeelataaa oo ay gaartaa aakhirutaanka dambe xataa dhaqaatiirteeda iyo macallimiinteedaba. Waana laasuman in ay gaartaa taas.

Intaas goormey gaareysaa? Waxay gaareysaa markii aad adinku aad geesinnimada aan idin weydiinhayo in aad la



timaaddaan iyo kalsooni naftiinna ah iyo mid dalkiinna ah, kalsooni ciiddiinna ah iyo kalsooni muruqiinna iyo maskaxdiinna ah. Markaas beyna suuro geleysaa?.

Goormaa kale oo ay suuro geleysaa? Waxay suuro geleysaa markii aad ku dadaashaan oo u dagaal gashaan in aad dhaqaalihiinna durbadiiba sare u qaaddaan. Oo micneheedu waa maxay? Dhaqaalaha halka looga baahan yahay waxa weeye in aad dhulka kala soo baxdaan barwaaqada ku daahan, khasbanna aad ugala soo baxdaan Iyada marka waxay dhaleysaa iskoolkii, iyadaa waxay dhaleysaa taclüntii, iyadaa waxay dhaleysaa wax kasta, iyadaa waxay dhaleysaa waxa aad dooneysaan oo idil.

In dhaqaale aad la soo baxdaanna, sidii aan u sheegay goormey suuro geleysaa? Waxay suuro geleysaa markii aad ku shaqeysaan midnimo iyo sinnaan, markii dhexdiinna ay ka dhammaato fikraddii xumeyd oo aynu hadda ka hor ku dhaqmi jirney oo ahayd tan xun oo qaraabannimada iyo qabiilka iyo weji aqoonka, markii qof kasta oo Degmadatan ka mid ahu uu garto in qofta kale tahay walaalkii oo uu jaallahaa yahay iyo in aad cadaw qura aad leedihiin, in aad saaxiib qur ah leedihiin, in aad dad qura leedihiin. in aad naftiinna iyo aayihiinna dambe oo isku mid ah u dadaashaan, maalintii aad u garataan ayaad gaari doontaan waxa aad u baahan tihiin oo dhan.

Jaallayaal waan ku cilmi leeyahay meelaha amaba miyigii aad joogi jirteen in noloshii tiiley ay ahayd mid halgan ah; dad baa moodahaya in raaxo lagu haystey. halgankaasu noloshii uu la dirirahayey waxay tusaaleyneysey, in aad ku fiirsato garab qabasho iyo qaraabo ayey u baahneyd. In leysugu garab taagleeyo qabiyaaladda ayaa jiri jirtey, in aad loo dhiifoonyahay looguna xoog weyn yahay, looguna qab weyn yahay qabiyaaladnimada ayaa jiri jirtey.

Jaallayaal bal aan isa su'aalo; maxay tari jirtey qabiyaaladdu, maxaase sabab u ahaan jirey? Waxaa sabab u ahaan jirey in aad noloshaada ku dhowrato oo dil ka baxsato, in aad hayaanad ka baxsato, in aad ciishood aad ciishooto ka baxsa-

to. Marka ma loo baahan yahay halkaan? Waddankaaga ayaa garab kuu ah, isagaa nolol kuu ah, isagaa dhaqaale kuu ah, isagaa wax tar kuu ah, qofka aad meesha ku wada nooshihiin ayaa kula dad ah, isagaa kula noolaan doona, isagaa iyo adigubana wixii aad qabsataan ayaad wada heli doontaan.

Marka waxaan hadalkaas ugu sii tiiqtiiqsan hayaa, qabiyaaladdu waa dembi, waxayna dembi u tahay sida tuugannimadu ay dembi u tahay, sida qaatilka dadka dilaa uu dembiile u yahay. Waxaana loo baahan yahay in ayan idiin dhuumannin, maxaa yeelay qofkii qabiyaalad isagoo maamulahaya lagu helaa wuxuu ku dhacahayaa xarig dheer oo nin ka saari karaana uusan jirin. Markii aan ka sheekeeyey foolxumada qabiyaaladdu ay lahayd, aakhiro beelkii ay lahayd, maxaa wacay qof islaama ayaad xaqdiyeysey, adduun beelka ay lahaydna walaalkaa ayaa iska dileysey, ceebta iyo foolxumada ay lahayd maxaa wacay qof xumaan iyo eex faraha kula jira ayaad ahayd.

Markii aynu dib u sii eegno xagga Soomaalinnimadana ama waddaninnimadabana foolxumadii ay qabiyaaladdu foolxumadii ay lahayd oo nin ama qofkii qiimo u lahaa dalkiisa ama ka dilay amaba ka hayaanadeeyey, qof lugta ka gooyey waddanka ayuu la mid ahaa. Markii aan dhan kastaba u eegnayna sidaa ayey u xumeyd. Haatanna waxaan u eegeynaa : «qofkii ku dhaqmaa ma ku nabad gelahayaa»? Jawaabtu waa maya mana ku nabad geli doono. Maxaa wacay waxa aan aaminsannahay qabiyaaladdu in ay tahay cudurka Ummadda Soomaaliyeed midnimadeeda, cifashadeeda, hore u kiciddeeda, dhaqankeeda iyo aayeheeda dambe ee wanaagsan hortaagan oo cudurka qaaxada ah amaba kan ka sii xumi in uu qabiilka yahay baan aaminsannahay, mana jiro cudur kale oo aynu la dirirnaa haddii la sii eego.

Jaallayaal, adinkoo ii wakiil noqon doona wax kastaba waxaan si fiican u rajeynhayaa in aad ka faa'iideysataan, muddada gaaban oo ay idinla jirahayaan, dhallinyaradaan Jaamiciyiinta ah oo uga soo kacday tacliintoodii iyo noloshoodii ka fiicneyd midda hadda ay ku jiraan ee wixii aad qabataanna idinla qeybsanhaya, in aad maamuleyaalka idinku simahaya intii aad isaga fillaaneysaan ka faa'iideysataan, in aad ka faa'iideysataan shaqaalaha hore aydnaan u aqoon jirin, xoolo aad siiseenna aynan jirin, habka niyad samida ah, walaalnimada ah iyo Soomaalinnimadaba ah oo ay idiinku gargaarahayaan in aad garataan oo qiimeysaan, isla markiina aad wixii tacliin ah oo loo baahanyahayna ka qaadataan kana faa'iideysataan, waana in aad si gaaban uga barataan maamulka iyo wixii la mid ah, si aad u kaftoontaan.

Ugu dambeystiina waxaan oranhayaa Jaallayaal, Kacaannimada furaha lugu furaa oo albaabkeeda lagu galaa waxa weeye daacadnimada, waxa weeye runloownimada, waxa weeye toos u socodka, waxa weeye ka fogaadka musuqmaasuqa, waxa weeye ka fogaadka tuugada, waxa weeye ka fogaadka beenta, waxa weeye ka fogaadka fusuqa, waxa weeye ka fogaadka islaam darrida, waxa weeye ka fogaadka aadaminnimada xun, waxa weeye ka fogaadka masabidka, waxa weeye ka fogaadka khiyaanada, waxa weeye ka fogaadka dhabar ka wareenka, waxa weeye ka hor tagga la dagaallanka cad oo isticmaarka iyo dabadhilifkiisa iyo amfiinshaarkiisa lagula diriro; weeyaan Kacaannimada fureheedu.

Waxa idiin imaan jirey markii aad dhibooneydeen kuwo nugu yaaqyaaqahayey, adinkana sidoo kale idinku yaaqyaaqahayey oo markaa lahaayeen ma waxaas baa socon doona waa beentoode, ma Ummaddaas bey wax u tari doonaan, xaggee wax uga keeni doonaan, waabeen waxa ay sheegahayaanuye iyo Ummadda ayey luminhayaan? Waxa jira markaan haatana oo aan ku tashannay in aan idin soo rarno oo dal aad ku noolaan kartaan idin keenno. haddana kuwo nugu yaaqyaaqahayey, lahaana ma u suurtoobi kartaa in ay saas gaaraan? Waa beentood iyo afmiinshaarnimadoodii maxay hayaan? Waxa ay sheegahayaan waxba kama jiraanniine.

Kuwo xun xun oo sidaas oranhayey baa jira Jaallayaal hadda oo aad fiicnaateen ayeyna idiin imaan doonaan kuwaasu. qaraabannimona waydinku soo geli doonaan. Soomaalinnimo ayey idinku soo geli, culumonnimo ayey idinku soo geli.

caalinnimo iyo aqoonna weydinku soo geli doonaan. markii ay ku ogaadaan in aad u dheg laallaadineysona qurunkoodii ayey shubi doonaan ee maxaad fali doontaan? «Nin i xooray waagii aan xumaa, aniga oo xaas ah, ka xiltiray xannaaniyo wanaag aniga oo xoog leh». Bal maxaad ku fali shalay ayuuba kaa dhuuntaye? waxaan idinka rajeynhayaa adinkoo xarig dacay ah ku wada in aad inoo keentaan. Waxaan halkaan ka guddoominhayaa, makhaayad, dukaan, beecusharo qof gees u yeelanhayaana ma jiro. qof bannaanka ka keenay oo dhexdiinna ka sameyn karaana ma jiro ee adinka ayaa sameysan doontaanniin waana idiin dhexeyn doonaan oo wax idiin dhexeeya ayey noqon doonaan, Dowladda ayaana bilaabeysa idinkuna waad ka shaqeysaneysaan. Noloshiinnuna waxay noqoneysaa midda la yiraahdo dadka badan ee nolol wadaagga ah, shaqo wadaagga ah iyo qeyb wadaaggaba ah oo aad noqon doontaan.

Waxaan idiin rajeynhayaa caafimaad san. Qofkii iska garta inuu xanuunsan yahay amaba ilmihiisu xanuunsan yihiin yuusan ku dayin wax kale ee ha u geeyo dhaqtarka isagoon kala laallaabannin. Markii dhibaato ay idinla kulanto amaba war aydnaan jecleysan amaba aad dareentaan u imaada isla markiiba madaxda oo ha qarsannina, ogaadana in ayan ceeb ahayn in la sheegto dhibaatooyinka jira, cudurkii jira in leyska daaweeyo ceeb maaha.

Waxaan la hadlahayaa haddana gaar ahaan haweenka waxanna jeclahay haweenku in ay dhab ii dhugsadaan, waxaanna taabanhayaa hadal uu wax ma garadku uu ka xishoodo, laakiin danta ah, waxana weeye sida qaalibka ah haweenka Soomaaliyeed cudurro gaar ah ayaa ku dhaca, wayna qarsadaan sida qaalibka ah, markaasna waxay u badan tahay in ay u dhintaan, waxayna aakhirka noqotaa dhashii dhalan lahayd in ay halkaas ku baaqato, waxa dhacda noloshedii in ay baabba'do, mana aha in aan ka xishoonno oo joogno waagii aan galtiga ahaan jirney, maantana ma xishooneyno ee waxaan idin leennahay taga dhaqtarrada. Waxaan idiin soo direynaa haween dhaqtarro ah oo loo baahan



yahay in aad u tagtaan oo aydnaan ka xishoonnin, haydinka daaweeyeen cudurrada nuuc kastaba ha ahaadeene aadna la xishoon kareysaanniin.

Marka aan saas leeyahay waxa i khuseeya noloshiinna waxaana i khuseeyo dhasha Soomaaliyeed oo dambe, qofkii buka ilmo buka ayuu dhalaa, qofkii caafimaad qabaana qof caafimaad qaba ayuu dhalaa, Ummadda Soomaaliyeed oo berri u cifaneysaana sidaas in ay ku socoto ayaan dooneynaa.

Jaallayaal intaas markii aan idin iraahdo, aan marka ku qatimo in aan idin iraahdo : walaalayaal ahaada kuwii guuleysta, kuwii caafimaad ku waara, kuwii hela xornimada nafsiga ah, maskaxdoodu kuwii ay caafimaad u hesho, kuwo niyadoodu ay u xorowdo, kuwa xornimada maskaxda iyo xornimada nafsiga ahu ay siiyaan quwad xoog badan oo ay cadawgoodana ku jebshaan noloshoodana ay ku tabcaan.

Waxa kale oo aan ku soo xirayaa, Soomaaliyu waxay ku jirtaa geeddi dheer, geeddiga dheerna waxay ugu jirtaa in ay dooneyso in ay xorowdo. Calankaan cirka u eg xiddigta cadina dhexda kaga taal wuxuu tilmaamahayaa xornimadeenna iyo midnimadeenna, laakiin keligii markii uu yahay ee xornimadii ayan dhaqaalaha ku ijrin, Ummadduna garadka waddaninnimada ah ayan garannin wuxuu la mid noqonhayaa gabar labaatan jir ah oo inan ah oo cadaw la dul taagay, una doodeysa amabase dooneysa waddankeeda iyo dadkeeduba in ay maro saaran cadawgana ay ka eryaan.

Haddaba maxaa loo baahan yahay? Markeynu tabcaneyno, markeynu wax baraneyno, markeynu tashaneyno, waa in aan u tashanaa, innagoo u hubsameysaneyna xuquuqdeennii inaga maqneyd sidii aan ku soo dhacsan lahayn. Ruux aan xoog lahayn xoolo lahayn, xirfad lahayn. cilmi la'aanna ahi waxba sooma bixin karo. «Naftii gebe naf kale ma kalkaalo» ayaa la yiri. Waana in aynu teenna aan si degdeg ah oo fallaartu sida ay u duusho oo kale ka orod dheer u dedejinnaa tabcashadeenna.

Waxaan uga golleeyahay taas, waxa aad qabaneysaan waa in aad ficil ku dartaan, dhibaatooyinka idinka hor imaan karana waa in aad ficil ugu dul qaadataanniin oo Ummaddeenna jahaalada ka saarnaa, Ummaddeenna gaajada waa in aan ka saarnaa, cudurka waa in aan ka saarnaa, addoonnimadana waa in aan ka saarnaa. Innagaana mas'uuliyaddaasu ina saarantahay.